

**Good Local Governance and Leadership Training  
Programme (GLTP)**

**Hab-xukunka Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka  
Tababarka Hoggaamineed**

# **DHISKA BIRIISHYADA**

**U DHEXEEYA MUWADINIINTA IYO DAWLADAHА  
HOOSE SI AY SI TAYO BADAN U WADA  
SHAQEЕYAAN**



## **TUBTII**

MAARAYNTA ISKU DHACA IYO IS AFGARANSHAWAAGA.

## **QAYBTA 1aad**

FIGRADO IYO ISTARAATIIJIYO



---

Waxa qoray

FRED FISHER

Waxaana ka qayb qaataay khubaro ka tirsanaa

- Asxaabta reer Hungary
- Asxaabta reer Slovakia
- Asxaabta reer Romania
- Asxaabta isbedelka dimoqraadiga ah ee Caalamiga ah.
- Jaamacadda Texas ee ku taal Arlington.
- Xarunta Qaramada Midoobay ee Dad Dajinta UNCHS (Habitat)
- Machadyada Tababarka ee Dalalka CEE/SEE.

---

Asxaabta fadhiga Romaniya ee horumarinta bulshada (FPDL) ayaa maamulayay diyaarinta buuggan iyaga oo ka helay taageero maalgalin ah:-

- Barnaamijka gogol xaadhka dawladda hoose (LGI) ee machadka bulshada madaxa bannaan.
  - Xarunta Qaramada midoobay ee dad dajinta (Habitat), Barnaamijkeeda tababarka hoganka iyo maamulka ee ay maal galisay xukuumadda Netherlands.
- 

Qaabaynta Buugga: PAUL POPESCU.



# TUSMO

<b>Aqoonsi</b>	4
<b>Hordhac</b>	5
<b>Gogol-dhig</b>	7
<b>Cutubka 1.</b> Hordhac	13
<b>Cutubka 2.</b> Fahamka Xaaladda isku dhaca	25
<b>Cutubka 3.</b> Sharax Guud istiraatiijyaddaha lagu maareeyo isku dhaca	40
<b>Cutubka 4.</b> Farshaxanka wada hadalka iyo xirfadda kale oo Muhiim ah oo xidhiidhdka Hoose ku saabsan	53
<b>Cutubka 5.</b> Gorgortanka- sidii natiijo loo heli lahaa iyada oo aan cid saddexaad Idin soo dhex galin	67
<b>Cutubka 6.</b> Dhex dhexaadinta	87
<b>Cutubka 7.</b> Mawaadiic kale oo la xidhiidha maaraynta isku dhaca	108
<b>Cutubka 8.</b> Mustaqbalka loo jeedo iyo talaabooyin soo jeedin ah	120
<b>Eray bixin</b> (Glossary)	131

## AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee “dhiska biriishyadaka u dhexeeya muwaadiniinta iyo dawladaha hoose si ay si wax – ku - ool ah oo wada jir ah u wada shaqeeyaan iyada oo la adeegsanayo maaraynta isku dhaca iyo is afgaranshawaaga” waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hogganka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EU), isla markaana uu fuliyay Xafis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee buugan, waxa ka hawl-galay Mr. Maxamad X. Maxamuud oo tarjumadda iyo tifaf-tirka ku xeel dheer. Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degaalmaha Aadama (UN-HABITAT) laanta Hargeysa ku taal ayaa gacan ka gaysatay hirgelinta hawshan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhixe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariiyat tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at [www.unhabitat.org/roaas](http://www.unhabitat.org/roaas).

## HORDHAC

Waxa ay buugagan taxanaha ahi la kulmeen oole caalami ah oo ay qaaday Qaramada midoowday xarunteeda dad dajintu (UNCHS) kuna saabsanaa xukunka magaaloooyinka. Mawduucan ah "cid kasta xera galin" oo milicsanaya ololaha aragtidiisa iyo istiraatijiyyadiisu waxa uu si qoto dheer gundhig ugu yahay mawduucyada iyo istiraatijiyyada waxbarashada ee ku xusan buugagan waxana loo qorsheeyay buugagan loona qoray in ay u adeegaan baahiyaha horumarinta ururada aan dawliga ahayn iyo ururada bulshada, hogaankooda iyo shaqaalahooda waxana ay fulinta waxbarashadu ku gudbaysaa iyada oo la joogteeyo lalana yimaado niyad dhab ah oo ku dhisan wax wada qabasho ballaadhan.

Waxa jira caddayn isa soo taraysa iyo aqoonsi kordhaya oo tusaya in ay jiraan mawaadiic dhawr ah oo qeexaya, qaabaynayana ajandaha xukun magaaleeedka ee qarnigan cusub ama kunkan sanadood ee cusub. Arinka u horeeya ee xera galin ahi waxa uu ku saabsanyahay in dawladaha hoose iyo bulshooyinka doonaya in ay noqdaan darafka hogaaminaya isbedelka bulshada iyo dhaqaalaha, waa in ay qiraan in ay muhiim tahay in ay cid kasta ka qayb galiyaan, iyaga oo aan eegayn hantidooda, jinsigooda (Lab iyo Dhedig) da'adooda, haybtooda, diintooda. Marka la gaadhayo go'aan raadayanaya xaalada noloshooda guud.

Waxa labaad ee in la qiro ay tahay waa hoggaanka la wadaago, oo ah mid dhex qaadaya xidhiidhadii alkumyada jira iyo bulshada, sida fiican iyo golayaashaa hoggaan wadaaga ahi ay ku dhisanyihii is aaminaad dadka dhexdooda ah, ra'y iwaydaarsi xor ah oo dhexyaal dhamaan dadka meesha wax ku leh, iyo istiraatijiyo ballaadhan oo fikradihii wanaagsanaa iyo aragtidii la wadaagayay loo bedelo ficol la taaban karo.

Sida lagu qeexay gogol dhigga, taxanahan qalabka fulinta waxbarashadu, wuxuu ahaa awood ay iska kaashadeen ururka asxaabta Romania ee horumarinta bulshada, iyo Qaramada midoobay ee UNCHS (Habitat).

Iyo machadka bulshada ee madaxa banaan. Wixaana qaybta wayn ee maalgalinta mashruucan bixiyay barnaamijka machadka madaxa banaan ee Dhiska dawladda hoose, iyada oo taageero dhaqaale oo kale ay gysatay Qaramada Midoobay UNCHS (Habitat) iyo xukuumadda NETHERLANDS. Halka ay asxaabta Romania ka maamuleen isaga oo hoos imanaya barnaamijkoodii wax qabad kobcinta ee ku saabsanaa xukunka iyo hoggaanka bulshada ee bariga iyo badhtamaha qaarada Europe. Wixa masuuliyadaha ka mid ahaa in lagu sameeyay tijaabo goobeed buugagii qorshaynta ka qaybqaadashada iyo maaraynta isku dhaca iyo is afgaransha waaga oo ahaa barnaamij tababarayaasha lagu tababarayay, kuna saabsanaa 18 qof oo ka qaybgalayaal ah, kuwaas oo ka kala socday 13 dal oo bariga iyo dhexda qaarada Europe ah. Iyo xubno ka tirsan barwaalo sooranka dawladaha madaxa banaan.

Ku dhaqaaqidda buugagan tababarka ah waxa uu bilawgoodii ka yimid laba gobol oo kala duwan oo adduunka ah. Guidda hogaamisa barnaamijka kobcinta wax qabad goboleedka bariga iyo dhexda qaarada Europe oo tilmaamay in maaraynta isku dhaca iyo qorshaynta ka qayb qaadashadu ay yihiin laba baahiyood oo gobolkoodu tababar ahaan u baahanyahay, tan oo ay ku soo qaadeen wada tashigoodii 1977. iyaguna kooxo kale duwan oo ururo aan dawli ahayn (NGO) iyo Ururo bulsho (CBO) iyo madaxda dawladda hoose ee ka tirsan dhul ballaadhan oo ah dhulka saxaraha afrika ka hooseeya ayaa kulmay 1998kii, iyagaana tilmaamay muwduucyadan, iyo qaar kale oo uu taxanahani ka hadlay una arkay inay yihiin baahiyoo tababarkoodu muhiim yahay.

Ugu danbayn, waxa aan rabaa in aan u mahad naqo Fred Fisher oo ahaa Mu'alifkii u mudnaa qoraayaga taxanahan iyo kooxdii kala qayb qaadatay ee heerka sare ahayd, isagaana (waa fisher eh) isku xidhayay si loo farsamo diyaariyo qalabkan. Wuxaan kooxdaa ka mid ahaa: Ana Vasilache, Agaasimihii Asxaabta Romania, oo ka hagayay geedi socodka Romania, King Goncz iyo Dusan Ondrusk, oo ka horena yahay agaasimihii asxaabta Hungry, ka danbana yahay agaasimihii asxaabta Slovakia; David Tees oo sanado badan ka qayb qaataay buugag iyo qoraalo badan oo hay'adda UNCHS ay so saartay; tababarayaashii ka qaybqaatay tijaabo goobeedkii qalabkani iyo koox shaqaale xirfadley ah oo hay'adda UNHCHS ah oo uu madax u ahaa Tomaz Sudra Kuwaas oo khibradoodii wax ku oolka ahayd galiyay qalabkani si waxa soo baxayaan mid saafi ah u noqdo.

Anna Kajumulo Tibajuka.  
Under Secretary General and  
Executive Director, UN-HABITAT

## **GOGOL DHIG**

Sheeko ayaa ka danbaysay diyaarinta qalabkan. Wuxaan ay mudantahay in waxoogaa aad nala wadaagto sida ku xusan hordhaca, mashruucan gaarka ihi waxa uu xidhiidhkiisa bilowga ihi ku arooraa laba gobol oo caalamka ka mid ah oo waawayn, bariga iyo dhexda qaarada Europe iyo dalalka ka hooseeya lama degaanka Afrika. Hase yeeshii diyaarinta iyo faafinta qalabkan ay barashadiisu sahlantahay waxa uu bilaabmay sanado badan ka hor iyada oo xarunta dad dajinta ee Qaramada Midoobay ay balan qaaday inay siiso qalab tababar saraakiisha dawladda hoose ee dalalka soo koraya.

Waxa si gaar ah u caan noqday buugagtii hay'adda UNCHS ee taxanihii tababarka hoggaanka iyo maamulka dawladda hoose. Waxana uu ka koobnaa 13 buug oo loo qorsheeyay in ay caawiyaan saraakiisha dawladda hoose ee la soo doortay sidii ay u kordhin lahaayeen aqoontooda iyo xirfadooda dhinaca kaalmaha muhiimka ah ee hoggaanka iyo masuuliyadaha, taxanahaa oo lagu qoray in ka badan shan iyo tobantaf, caalamka oo dhan ayaa lagu isticmaalaa, kumana eeka isticmaalku saraakiisha dawladda hoose ee la doortay, ee waliba waxa isticmaala ururada bulshada iyo kuwa aan dawlighay, taxanahaasi oo ka hirgalay xagga bulshaduna waxa uu ku dhiiriyyay hay'adda UNCHS (Habitat) inay bilowdo taxanahan kale.

Arimo dhawr ah ayaa ka qayb qaataw guulaysiga qalabkan waxbarasho. Ugu horrayn, waa mid cid kasta fahmi karto. Tababarayaashii ayaa muddo laba wiig ka yar qalabka isticmaalkisa lagu tababarayaa, iyagoo wiigga labaadba siinaya aqoon is waydaarsiyadii saraakiisha la soo doortay ee ka socda dalka martida loo yahay ama dalalka ay tababarayaashu matalayaan. Ta labaad, UNCHS waxa ay dhiirigalisay la qabsiga qalabkan wax barasho iyadoo tidhi ha la milicsado dhaqanka, afka iyo waxyaalahalee kale ee lagu kala duwan yahay ee khuseeyaa bulshada isticmaalaysa. Waxa kooxaha isticmaalaya lagu dhiiriyyay in ay qoraalka wax ka badalaan, ama qaabka tababarka iyo sida la soo jeediyay in loo gudbiyo, si ay ula jaan qaado baahiyaha cidda halkaa dagan. Way yartahay, in la siiyo dadka la filayo inay qalabka waxbarasho isticmaalaan, madaxbanaani cad si ay u waafijiyaan una badalaan kaydka waxbarasho iyaga oo eegaya waafajinayana-baahiyaha dadka deegaanka. Ta saddexaad, wacyi galinta uu qalabkani ku horumarinayay xirfad gacmeedku waxay soo jiidataf fiiradii dhegaysatayaal kale. Hogaamiyayaasha qaybaha bulshada e matalaya ururada aan dawlighay (NGO) iyo kuwa bulshada (CBO) ayaa iyana u arkay waxtar buuxinaya qayb ka mid ah baahiyihii shaqaalahooda horumarintoodii.

Iyada oo la tixgalinayo sidii ay u isticmaashay qaybta bulshadu qalabkii (buugagii) hoggaanka la soo doortay iyo codsiyadoodii soo noqnoqonayay ee ku saabsanaa taageero tababar, waxa uu barnaamijka Habitat ee tababarka hoggaanka iyo maamulka buslhadu iskugu yeedhay madaxda kooxo loo dooray oo ah ururo NGO/CBO oo ka kala socda 15 dal oo ka hooseeya lama degaanaka Afrika (Muddadii 23-28 November 1998) si ay ugu sheegaan hay'adda Habitat baahiyahooda xagga tababarka. Wuxaan ku soo biiray tiro maamulayaal dawladda hoose ah oo dawladda Kenya ka socda iyada oo mawduuc soo noq-noqday oo ku saabsanaa tayada hoggaanka iyo maamulka ururada NGO/CBO uu si gaar ah u khusaynayay xidhiidhka (reer Keenya) ay la leeyihii dawladaho hoose. Ka qaybgalayaashii fadhibaa shaqo oo ku kulmay meesha Nakuru, Kenya, waxa ay isku raaceen arin ay rumaysteen in uu yahay baahidii

horumarinta maamulka ururadooda. Taasi oo ka dib loo badalay bartilmaameedyo lagu samaynayo manhaj qeexan, kaas oo mustaqbalka loo raadin doono maalgalin.

Muddo sanad ka badan oo ka horaysay aqoon iswaydaarsigii Nakuru waxa ay tilmaamtay gudidii hoggaanka barnaamij goboleedkii wax qabad kobcinta xukunka iyo hogaanka dawladda hoose ee dalalka bariga iyo badhtamaha.

Europe, (Waxay ay guididu tilmaantay) in labada arin ee ah qorshaynta ka qayb qaadashada iyo maaraynta isku dhacu yihiin kuwa ugu mudan baahiyadooda tababareed. Inkasta oo kuwa loola jeedo barnaamijka ay ugu horeeyaan dawladaha hoose, haddana baahiyaha tababareed ee ay sheegteen waxa iyana sheegtay qaar ka mid ah Alkumayada (NOG/CBO) ka qayb qaadanyay aqoon iswaydaarsigii istiraatiijiyada wax qabad kobcinta dalalka Afrika ee lama degaanka ka hooseeya.

Kol hadii hay'adda UNCHS ay la shaqayso dhamman Alkumaydaa, waxa micno samaynaya in la isu geeyo labada awoodood. Markaa laba buugaga ka mid ah taxanaha waxa qayb wayn maalgaliyay (machadka bulshada ee madaxa banaan ee fuliya habaynta dawladda hoose iyo adeegga bulshada) isaga oo kaalmo ka helay xukuumadda Netherlands. Waxqabashaduna waxa ay soo martay dhinaca UNCHS.

## **SIDII DIMOQRAADIYADDU AY UGA SHAQYAN LAHAYD HEERKA DAWLADDA HOOSE.**

Sida diyaarinta qalabkan waxbarasho loo soo bandhigay waxa ay caddaynaysaa waajiyio badan oo kasocda caalamka guud ahaan. Ta hore fursadihii dhab ahaan loo xaqiijin lahaa xaalad bulsho is xukun adduunka daafihisu may noqon mid ka soo raysay. Xukuumadihii xukunkoodu xagga sare uuun ka imanayay ee tooda uuni ay soconaysay kana jiray qaybo badan oo caalmka ka mid ihi si dhakhso ah ayay u burbureen markii ay tobanaan sano maamul xumo iyo khiyamo ku shaqaynayeen. Markay dhaceen xukuumadahaasi bulshadii fursado ayay heleen dib u habayn ah si loo sameeyo is xukun bulsho oo ay gacanta ku dhigaan aayihii goobtii ay lahaayeen ee dalkii hooyo. Hadaba asxaabta Romania tallaaboodoodani waxa weeye in la kobciyo shaqadii dawladda hoose iyada oo tababar la adeegsanayo, tan oo la jaanqaadaysa isbedelkaa ku yimid qaab siyaasadeedkii gobolladaa, waxa kale oo ay sidani qiraysaa muhiimka ay tahay isku xidhka dawladaha hoose iyo Alkumyada bulshada ka soo jeeda (Sida NGO yada CBO yada) si looo xasiliyo geedi socodkii is xukunka bulshada iyo wanaagii dimoqraadiyadda.

Qaybaha kale ee adduunka, ee dawladaha hoose inta badan ku qoranyihiin uun warqadaha, hase yeeshi dawladaha dhexe si wayn gacanta ugu hayaan geedi socodkii oo dhan una diidayaan inay (Dawladaha Hoose iyo bulshadii) khayraadkii gacanta ku dhigaan, waxa ay noqdeen muwaadiniintii qaar aan degenay oo kacsan. Waxana si badan muwaadiniintu u doonaaan inay awood badan iyo cod badan ku yeeshaan sida ay bulshadoodu u shaqaynayso. Dawladihii dhexena waxa ay dabciyeen gacantii ay ku hayeen geedi socodka xukunka iyaga oo qiraya fashilaadooda xaggii ballanqaadayadii, iyo cidhiidhi xoog leh oo ku yimid si ay ugu soo celiyan awoodda iyo khayraadka dawladaha hoose iyo shabakadaha la shaqeeya ee ururada bulshada. waxana ay ahaayeen ururada aan dawliga ahayn iyo kuwa bulshadu qaar si tayo leh u taageerayay hawlgalkii loogu soo celinayay goobo badan oo caalamka ka mid ah is xukun bulsheedkii. Mashruucanina waxa weeye mid lagu qirayo xidhiidhka faa'iidada leh ee inta badan dhexyaala Alkumayada dawladaha hoose iyo shabakadaha ururada bulshada NGO/CBO ee heer bulsho.

## **DHAGAYSTAYAASHA LOO JEEDO.**

Waa in ay imika cadahay in dhagaystaayasha loo jeedo ee qalabkan waxbarasho khuseeyaa ay kala duwanyihiin. Waxa cad inay ugu horrayn ay ku jiraan. Ururada bulshada NGO/CBO iyo dadka ka haya shaqooyin hogaan ama maamul. In badan oo ah waxa ku jira buugagan taxanaha ahi waxay ku haboon yihii oo kale waxna ka tarayaan baahiyaha tababareed ee dawladaha hoose ee saraakiisha la soo doortay ama xilka loo dhiibay iyo shaqaalahooda xirfadlayda ah ama farsamo.

Waxa isna jira dhagaystayaal dadka u dhexeeya oo muhiim ah oo aanu jecelnahay in aanu iyana diirado saarno. Waa shabakada bixisa tababarka, kuwaas oo u adeega dawladaha hoose iyo ururada bulshada, waxaana kuwaa ka mid ah Alkumyo u qaabaysan tababarka dawladaha hoose, Alkumyo aan dawli ahayn oo ah dalaayad taageero, ururada bulshada ee aan dawliga ahayn ama kuwa bulshada ee arka in kaalintoodu tahay in la siiyo dadka kale khibrad shaqo kobcin ah, ururada tababarka

siiya mulkiilayaasha (Shaqooyinka) gaarka ah iyo waliba dadka iskood tababarka u bixiya ama ah la taliyayaal.

Fariinta aanu u dirayno dhammaan dhagaystayaasha in ay ka faa'idaystaan laga yaabo, waxa weeye: waa in uu noqdaa mid wax dhisaya, xaga isticmaalka iyo tilmaamidda fursadaha waxbarasho si uu ugu adeego kooxaha aasaasiga ah ee kor lagu sheegay. In kasta oo qalabka waxbarasho ee sida kan oo kale loo arko dhagaxdii dhiska ee ugu horeeyay xagga qorshaynta iyo gudbinta aqoon iswaydaarsi xirfadeedka, haddana arimaha ku jiraa intaa in badan ayay ka waynyihii. Tusaale ahaan buugagii qorshaynta ka qaybqaadashada iyo maaraynta isku dhaca waxa loo qorsheeyay inay fududeeyaan isbedel qorshaysan oo bulshada ah. Buugaga kale ee taxanahu waxa ay noqon karaan qalab wax tar ah oo caawiya hogaanada ururada aan dawliga ahayn NGO iyo ururada Bulshada CBO sidii ay u fulin lahaayeen barnaamijiyadii horumarinta ururada. Tababaraha la taliyaha wax curiyaha ahina wuu arki doonaa in taxnaahu yahay qalab adeegsi balaadhan oo uu u isticmaali karo (Qofku) siyaalo kale duwan si uu u qaabeeeyo arimaha la galayo heerarkooda kala duwan ee bulshada, si loo fuliyo baahiyihii cidda lala macaamilayo.

Ugu danabayntii wuxuu taxanuhu ka yimid ururada hoose iyo hogaamada oo kartida ay u leeyihiin in ay u adeegaan bulshadu ay si toos ah ugu xidhantahay sida ay u joogteeyaan waxbarashada. Waxa iyana sidaas oo kale muhiim ah in la qiro in ururada NGO, CBO iyo dawladaha hoose masuuliyadi saarantahay si ay u caawiyaan in dadka kalena wax barto. Suuqaanta maamulka waxa ka buuxa raad raac tusaya Ururada waxbarashada. Waxa aanu dhamaan idinku boorinaynaa (dadka ka qaybqaadanaya xogta iyo fikradaha ku xusan taxanahanow) in aad ka fikirtaan fursadaha iyo masuuliyadaha aad haysataan loona baahanayahay inaad bulshada ka dhigtaan mid wax baranaysa. Ka bilaw inaad abuurto fursadihii ay idinla isticmaali lahaayeen qalabkan waxbarasho kooxaha maamulka, kooxo hawleedka xaafada, ururada yar yare e aan dawliga ahayn, iyo muwaadiniinta qof-qof, cidii donaysa in ay bulshada si tayo leh wax ugu qabato.

## **BUUGAN ARINKIISA**

Ujeedada buugani waxa weeyi n la eego wxyaalaha lakala dooaranayo ee caawinaya qofka, kooxaha, ururada, bulshooyinka iyo dawladaha hoose si ay u xaliyaan khilaafaadkooda inta aanay noqon qaar faraha ka baxa oo wax bur burinaya. Waxaan loo isticmaali karaa buugan;

- Tababarka saraakiisha dawladda hoose, hogaanka iyo shaqaalaha ururada bulshada, iyo muwaadiniinta danaynaya geedi socodka asaaska gorgortanka, dhexdhexaadinta fudaydinta go'aan qaadashada;
- In la kordhiyo aqonta iyo xirfadda dadkii horeba uga shaqaynayay kaalamahan ee rumaysan inay faa'iido ugu jirto tababarkan dheeraadka ah;
- In loo qabto fadhiyo waciyo galin ah saraakiisha iyo muwaadiniinta doonaya inay wax badan ka ogaadaan fursadaha lagu maareeyo isku dhaca ururdooda iyo bulshooyinkooda iyo,
- In la tababaro tababarayaasha si ay iyana ugu tababaraan dadka kale aqonta iyo xirfadaha la xidhiidha shaqooyinka isku dhac maaryanta.

Fursadaha isticmaalka qalabkan waxbarashao wawa ay ku koobanyhiin oo kaliya ciddii maskaxda gashata ee goosata in ay fuliso. Isku dhacu wuu fadiyaa bulsho kasta gudaheeda iyo xaalad kastaba. Hase yeeshay dhaqankaa uu ka jiro isku dhacu ayaa u baahan si gooni ah ama si duwan oo loo xaliyo, isla markaana waxoogaa badal ah lagu sameeyo fikradaha iyo qalabka adeeg ee buugan ku xusan, waxana aanu kugu boorinaynaa inaad ka fikirto sidii aad u isticmaali lahayd ee ay kuugu faa'iidayn lahayd fikraddan iyo qalabkan adeeg.

Dhinaca tuhunka ah inaad loo fududeeyay lagana dhigay wax sahan barashadan adag iyo fulinta hababka isku dhaca lagu maareeyo, wawa aanu rabnaa inaan tilmaano arin soo maray dhawaan mid qorayaasha ka mid ah. Wuxuu booqday dugsi hoose oo tuulo ku yaal waxana uu ogaaday in hablo iyo inamo 12 jir ah lagu tababaray in ay noqdaan dad isku asaaga ah oo dhexdhedaadiya isku dhaca ardayda dhexdooda ah. Marka ardayda dhexdhedaadiyaasha ahi ay diyaar u noqdaan dhamaysiga iskuulka ee ay ka waregayaan waxay tabaabaraan ciddii badali lahayd. In kasta oo aan caruurga laga filayn in ay khibrad dhakhso ah u yeeshaan xalinta isku dhacyada adag e garoonka ciyaaraha ka dhaca ama bulshada gudaheeda, hadana arinkan laba war oo muhiim ah ayaa ku sugar. Ugu horayn waxa uu tusayaa oo uu xambaarsanyahay, suurto galaka ah in khilaafaadka wada hadal iyo dood lagu xalin karo. Waxa ka muhiimsan oo tani ay abuuraysaa hababkii lagu xalin lahaa isku dhacyada xiliga iyo goobaha ay ka jiraan, kana faa'iidaystaan dadka ay khusayso ee iksu dhaca qaybta ka ihi. In dhalinta dhexdooda lagu abuuro hababkii iyo xirfadhihi lagu xalin lahaa isku dhaca waxa ay u eegtahay kayd macquul ah oo mustaqbalka wax taraya.

***Qaybta 1aad:***

Waxa ku jira eegid ballaadhan oo la xidhiidha wajiyoo dhawr ah oo la aqoonsanyahay oo lagu maareeyo isku dhaca iyo khilaafaadka dawladda hoose iyo bulshada. Warqada foomka ah ee qaybta 1<sup>aad</sup> waxa ay kuu soo jeedinaysaa inaad istaagto oo aad xilligiiba mar milicsato wixii aad soo akhriyaysay iyo sida aad u isticmaalayo fikradaha iyo aragtiyihii. Milicsigaasi wuxuu la mid yahay adoo waddo haya oo istaaga si aad u ursato ubaxa wadada hareeraheeda ah.

***Qaybta 2aad:***

Waxaa loo qorsheeyay inay kaa caawiso sidii aad u fulin lahayd fikradaha iyo aragtiyaha iyo istiraatiyadaha. Waxana ku jira qorshayaal tababar ah oo adiga iyo dadka kaleba ka caawinaya barashada sida loo maareeyo arinkan xiisaha leh, adiga oo aan cidhiidhi daremayn guul badanaa Soo hoynaya. Waxa kale oo ku jira qalab adeeg oo aad isticmaali karto si aad u maarayso siku dhaca iyo khilaafaadka xaaladaha kala duwan.

Tusaale ahaan isku dhaca ama khilaafku wuxuu dhex mari karaa dad ama waaxyo shaqo oo urur ka mid ah, dawlada hoose iyo ururo bulsho ama kooxo kala duwan oo muwaadiniin ah. Siyaalahu uu isku dhacu ku iman karaa waxa ay u egtahay in aanay dhamaan lahayn. Nooca isku dhaca ayaa dooraya nooca qalab adeeq ama qalabyo adeeg ee aad isticmaalkoodu u baahantahay markaa waxa aanu kugu boorinaynaa inaad noqoto mid wax kale doorta.

## **WAXA AAD KA SOO QAADAA KANI SAFAR BAADHITAAN**

Waxaynu jecelnahay in aynu ka fikirno barashada safarka baadhitaanka, sida safarada oo dhan, kani waxa uu ku gayanaya dhulal cusub. Xilligiiba mar ayaanu kuu soo jeedin doonaa inaad meelaha qaaar ka leexato si uu safarkan wax soo saarkiisu u bato kuuna xiiso galiyo iyada oo la eegayo dhinaca aad adigu wax ka eegto iyo baahiyahaaga. Ama wax aad goosan kartaa in aad ka boodo goobo safarka ka mid ah, anagu waxba kama qabno. Waxa noo daran uun in aan rakaabka nala socodaa aanu qulbin.

Si aad faa'idada ugu badan uga hesho safarkan baadhitaaneed, waxa aanu waqtigiiiba mar soo saari doonaa "safar tilmaamayaal" kuwaas oo looga jeedo inay kugu baraarujiyaan xaaladaha qaar oo aanu ku ogaanay khibrad iyadoo qalabkan lagu sameeyay tijaabo goobeed iyo talooyin aanu ka helnay dad badan oo naga caawiyay soo saaritaankii u danbeeeyay ee buugaga kale ee taxanaha ka mid ah. Waxa aanu rajaynaynaa in uu ku cajabiyo safarkan baadhitaan.

**TILMAAMAH SAFARKU WAXAY U EEKAAN DOONAAN SIDAN:**


Ugu danbayntii waxa aanu u mahad naqaynaa dhammaan ka qayb galayaashii, kuwaas oo saxeexyadoodii aad hoos ku arki doonto kana qayb qaatay barnaamijkii tababarka tabarayaasha ee June 2000. si buugaagtan loogu sameeyo tijaabo goobeed

Fred Fisher

# HORDHAC

Cutubka

1



Isku dhaca iyo Dimoqraadiyadda	15
Farshaxanka Dimoqraadiyadda	17
Muxuu isku dhacu muhiim ugu yahay dimoqraadiyadda isxukunka ah	17
Maaraynta isku dhaca iyo qorshaynta ka qayb qaadashada	18
Gor gortanka iyo dhex dhedaadinta	19
Miyaad wareersantahay?	20
Arimaha awoodda iyo dhaqanka	21
Nuqdado (qodobo) muhiim ah	23
Raad raac	23

Isku dhacu waxa ay u egtahay in uu meel kasta yaalo. Waxa aynu ku arkaynaa

Haddii kani uu yahay markii u horaysay ee aad la kulanto tilmaame safar, oo aanad hubin waxa uu u jeedo, waxa aanu kugula talinaynaa inaad u noqoto bogga hore halkaa oo aanu isku daynay in aanu ku sharaxno sarbeebtan qunbulada ah ee socdaalkaaga baadhitaan.

Imikana bal aynu eegno tilmaamahayagii safarka ee u horeeyay: Isku dayga in loogu babac dhigo buug tababar ah oo gaaban arinka maaraynta isku dhacyada iyo khilaafaadku way adagtahay. Marka hore waxa jira iskuulo badan oo xagga aragtida ku kala duwan maaraynta isku dhacyada, iskuuladaasina waxa muuqata in ay dhakhso ugu sii kala jajabayaan laamo ay qolaba fikrad haysato. Waxana aanu isku daynay in aanu soo bandhigno wadooyinka ugu muhiimsan ee maaraynta isku dhaca.

Ta labaad: waxa aanu si aanu u kasnay u isticmaalnay ereyada ah “maaraynta isku dhaca iyo khilaafka,” halkii aanu ka odhan lahayn xalinta isku dhaca, maxaa yeelay waxa aanu rumaysnahay in isku dhaca iyo khilaafku yihii calaamado muhiim ah oo tusaya urur ama bulsho dhaqdhaqaaqaysa. Waxana ay u taaganyihiin xamaasadii inagu taageeraysay in aynu ka xoog roonaano xaaladda taagan oo aynu socodka wadno. In la xaliyo isku dhaca iyo khilaafaadka inta aanay dhicin ka hor waxay keeni kartaa maax dumin. Dawladaha iyo ururada xooga wax ku maamula ayay caado u tahay in ay waxyaalahaa u diidaan muuqashada. Waxa iyana nasiib daro ah in isku dhacyada iyo khilaafaadku ay wax bur-burin karaan. Hase yeeshee waxa la karaa xaaladaha inta badan in si tayo leh loo maareeyo.

Ugu danbayn, buugan looma qorshyan in loo diyaariyo akhriyaha in uu dhex dhexaadiyo isku dhac ka dhex aloosan shaqaale diyaaradeed iyo budhcad wax af duubtay oo tobantun oo mitir dhulka ka sareeya ama isku dhacyo xamaasadsan oo isir ka soo jeeda oo xuduudo wadano dhexyaal. Arimaha caynkaas ah waxa – sida fiican – looga tagay xirfadlayda dhex dhexaadinta iyo gor gor tanka.

Hadaba marka aanu digniinahaa bixinay ka dib, buugani wuxuu leeyahay saddex ujeedo:

- 1) in maamulayaasha iyo dadka kale ee horeba ugu hawlanaa in ay maareeyaan isku dhacyada la tuso siyaalo sidoodii ka fiican oo ay wax u qabtaan.
- 2) In laga caawiyo akhristaha inuu si fiican u fahmo waxyaalaha uu kala dooran karo ee uu haysto si uu u maareeyo isku dhacyada iyo khilaafaadka xaaladaha kala duduwan.
- 3) In la caawiyo kuwa wax go'aamiya si ay u helaan taageero xirfadysan, sida adeega dhex dhexaadiyayaasha, si ay u arkaan waxyaalaha ay kala dooran karaan aqoona u helaan marka ay wax go'aaminayaan, ka dibna u kormeeraan wax qabadkii.

Waxa aanu rajaynaynaa in wixii aanu ka rumaysnayn mawduucan adag iyo awooddii aanu isku daynay in si wax ku ool ah looga hadlaa, ay sidii aad u filaysay noqon doonto, haddii ay sidaa noqon waydo dib ayaad uga fikri kartaa safarkan baadhitaan waxaanad gaar ahaantaa raadsan kartaa cid kale oo socodkaaga kuu tilmaanta.

nolosheena gaarka ah ee guriga, Aabaha iyo ilmihisa, labada xaaska ah ee wada jooga. Waxa aynu ku arkaynaa goobta shaqada, kii meherada lahaa iyo kii shaqaalaha ahaa, wuxuu dhex maraa raggii iyo haweenkii. Diintii iyo diin kale, umaddii iyo umad kale. Waa mawduuc asaasi ahaa dhammaan taariikhda aadamaha. Iyada oo hadaba ay korodhay adkidii nolosha aduunku, dadka tiradiisuna aad u kordhayso, aynu haysanana hub argagax leh, oo keeni kara bur bur dhinac walba ah, waxa isku dhicii uu noqday arin xilligan khatar ah.

**Thomas F. Crumm**

Crum isaga oo hadalkiisii sii wata waxa uu yidhi: Ma aha arinku isku dhac ma jiraa noloshaada, ee waxa weeye maxaad ka yeelaysaa isku dhacaa, arinka micnaha lihi waa kaa<sup>1</sup>. Buugani waxa uu caawinayaa cidda isticmaalaysa inay si buuxda u fahmaan wuxuu isku dhacu yahay iyo sida si tayo leh loogu xalinayo. Waxana hadalku u jeedaa dhagaystayaal aad khaas (gaar) u ah. Waa kuwa doonaya in ay dhisaan bulsho nolol iyo wax soo saar diyaar u ah. Waxa aynu ka hadlaynaa bulshooyin qimaynaya kala duwanida, ku dhaqma cid kasta ururin (xera galin), dhinaca dadka iyo khayraadka kalaba, oo kobciya dhaqanka dimoqraadiga ah. Si gaar ah waxay dhagaystayaashan gaarka ihi ka koobanyihii kuwan:

- Saraakiisha loo doorto ama loo xilsaaro dawladaha hoose, dadka loo dhiibtay maamulka khayraadka bulshada.
- Hoggaanka iyo xubnaha ururada bulshada, iyo ururada aan dawliga ahayn iyo ururada aasaaskoodu bulshada yahay, iyo qaar kale.
- Muwaadiniinta, ama ha ahaadaan qof qof ama kooxo is xil saaray oo raadinaya in ay is bedel ku keenaan bulshadooda, iyo
- Dadka qaaday masuuliyadda caawinta dadka kale sidii ay u maarayn lahaayeen isku dhaca, laga bilaabo xirfadlayda dhex dhexaadinta ilaa kuwa wax fududeeya, ururada bulshada iyo ururada magaalooyinka ilaa maamulayaasha iyo saraakiisha la doortay ee wax daneeya.

Xilligii  
milicsiga

**Fiiro gaara:** waxa aanu kaa codsanaynaa xilligii mar ina aad akhriga joojiso waxoogaa oo laba shaqo oo yar aad qabato: 1) In aad milicsato wixii aad imika akhriday iyo 2) inaad waxoogaa qoraalo xasuus ah dhakhsu u qaadato adoo eegaya sida ay tani khibradaada guud ahaaneed ula xidhiidho. Waxa aanu kuwaan nidhaa milicsigii wadada soo oodanta, si aad u eegto goobaha aad u leexan karto, ee waxoogaa aad is taagi karto, oo aad ka fikiri karto qaybta socodka ka mid ah ee aad imika uun dhammaysay. Kii ugu horeeyay ee milicsiyada ka mid ahaa ayaa imika soo socda:

---

**Isku dhacu waxa uu leeyahay sumcad xumo. Waxoogaa joogso oo ka fikir sida aad adigu u dareemayso isku dhaca. Marka aad aragto ereyga isku dhac, ama aad maqasho iyadoo la sheegayo, maxaa isla markaa maskaxdaada ku soo dhaca? Dhakhsu uugu qor halkan banaan ereyo kooban oo aad fikradaada iyo dareenkaaga ku sharaxayso.**

---

Dareenkaaga ku saabsan ereyga isku dhacu waxa uu u badanyahay sida dadka badankiisa mid murugsan. Waxa aynu ognahay in isku dhacu yahay lama huraan iyo mid dabiici ah, amaba ah muhiim si uu isbedel u yimaad. Hase yeeshay dhaawac ayuu gaysan karaa, xidhiidhada ayuu dhaawici karaa, wuxuu inagu dhalinaya warwar,

waxaana uu ku dhamaanayaa xaalado liibaan ama khasaara ah. Liibaan ama khasaare: taasi waxa weeye waxa dhaca marka isku dhacyadu ay maxkamadaha galaan, ee geedi socod sharchiyeed khilaafka lagu xaliyo. Qof wuu liibaanayaa, qofna wuu khasaarayaa haddaba waxa jira arin qudha oo ka xun khasaaraha ka dhasha isku dhaca. Waxa weeye guusha. Qofka guulaystaa waa in uu ishiisa garabkiisa uu ku hayaa, isaga oo filaya aar gudasho. “ Ha cadhoon, is daji ”. Taasi waa talada aanu usoo jeedinayno cidda khasaarta.

Inta badan wadadeena ayaynu ka leexanaa, si aynu iskaga jirno isku dhac. Waxa aynu dhaqaynaa dad kala diin ah, kala isir ah, kala midab ah kala jeeb roon, waxana aynu ku haynaa qoobado si ayna isugu dhicin. Haddii aynu nahay maamulayaashii, waxa aynu ka shaqaysiinaynaa dad aan “samaynin mawjado”. Edeb ayaynu kula dhaqanaa madaxdeena marka ay diidaan fikrad wanaagsan, markaa ayaynu gurigii la tagnaas cidhiidhiga iyo cadhada inaga oo ula tagayna qoyskii. Imika waad heshay sawirkii isku dhacu waxa kale oo uu leeyahay sumcad wanaagsan. Waxa uu kobciyaa isbedelka, waa waxa inagu taageera in aynu tartan cusub galno, fikrado cusub curino, samayno xidhiidho cusub. Isku dhacu waa arin dabiici ah, xumo iyo wanaag midna laguma sheegi karo. Waxa weeye uun tartan, ama la macaashayo ama la khasaarayo, marka aynu sidaa u dhigno. Aduunkeenan caadiga ah waxa qaabeeyay isku dhac, mawjadaha tamarta ah ayaana qaabeeyay buuraheena, xeebeheena, midabka u yeelay cirkeena. Isku dhacu waa hadiyad awood ah oo aynu ku samayn karno arimo cusub oo suurta gali kara, iyo bilow cusub. Isku dhacu ma aha mid inta badan ku saabsan khalad iyo sax. Waxa weeye mid ku saabsan garawsiga iyo mahadinta kala duwanaanshaha. Farshaxanimada dimoqraadiyaduna waa isku dhacii oo shaqaynaya.

### **Isku Dhaca Iyo Dimoqraadiyada**

Francis Lappe iyo Paul Dubois ayaa tagay miyiga maraykan si ay u eegaan sida ay dimoqraadiyadu u shaqaynayo maalin kasta. Waxa ay heleen bulsho sida ay sheegeen, “Cidhifka u saaran is bedel hor leh mahadinayana ka qayb qaadashada dadka ee maalin layda ah si loo xaliyo dhibaatooyinkii bulshada”<sup>2</sup>. Waxa ay arkeen muwaadiniin xilkii qaaday oo dib u eegid ku samaynaya waxa u hir gali kara. Waxa kale oo ay ogaadeen in bulsho badani aanay garanayn sidii ay isugu iman lahaayeen si ay mashkaladahooda u xaliyaan. Waxase aanu rajaynaynaa, in buugga tilmaamaha ah ee “Biriishyo dhiska iyada oo loo marayo qorshaynta ka qayb qaadashada”, uu ka hadli doono arinkan isaga oo eegaya qaybaha kale ee caalamka oo arinkani yahay mid soo food saaray.

Waxa kale oo ay heleen ismaandhaaf. waxa jira dad rumaysan in nolosha bulshada iyo iyada oo si tayo leh loo dhex galoo arimaha bulshadu ay tahay iska hor imaad. Qaar kale waxa ay yidhaahdeen nolosha bulshadu waa xeradii lagu ogaanayay ee lagula kulmayay waxyaalaha kala duduwan, lagana helayay fikrado cusub oo ku saabsan nafaheena, heleynayna siyaalo kale oo dhibaatooyinka loo xaliyo. Xukunka dimoqraadiga ihi, marka uu si fiican u shaqaynayo, wuxuu kobciyaa oo uu sharchiyeeyaa tartanka iyo bulshada oo foodda is darta. Dimoqraadiyadu waxa weeye in la sameeyo waxyaalo la kala dooran karo oo aynu ogaano dad ahaan iyo bulsho ahaan waxa aynu nahay iyo dhinaca aynu doonayno in aynu u guurno. Geedi socodkaa ayayna ka dhalanaysaa in foodda ay is daraan fikradaha, waxa la qiimeeyo, iyo aragtiyaha laga qabo waxa mustaqbalu la imanayo.

Saddex sanadood markii ay labada qof ee kala ah Lappe iyo Du Biou ay ku qaateen dhex galka micnaha dimoqraadiyada dalka maraykan gudihiiisa, waxa ay ku sharaxeen wixii ay ku arkeen in ay ka dhacaysay nolosha bulshada gudaheeda (waa ka qayb qaadashada muwaadiniinta, ururada bulshada iyo Alkumyada guud) taas oo keentay in la siticmaalo xirfado cusub xaggii go'aan qaadashadii iyo mashaakil xalintii. Waxana ay ku magacaabeen xirfadahaa "tobanka farshaxan ee dimoqraadiyada". Shan ka mid ah ayaana si toos ah xidhiidh ula leh waxan aynu doonayno inaynu kaga hadalno buugan. Isku dhaca oo si guul leh loo maareeyo. Isku dhaca iyo dimoqraadiyada lama kala sooci karo. Iyaga oo isla jiraana waxa ay abuuraan xeradii tamarta dhaqaajisa isxukunka iyo isbadalka wax soo saarka leh. Waxana aynu rabnaa in aynu ku soo noqono shantii farshaxaneed waxoogaa, si aynu usii baadhno muhiimnimadooda iyaga oo ah xirfado lagu maareeyo isku dhaca laguna ilaaliyo dimoqraadiyada. Hase ahaatee bal aynu eegno ugu horrayn isku dhaca iyo dimoqraadiyadda, inaga oo eegayna dhinaca dalalka maraya marxaladaha kala guurka ah iyo bulshoyinka isbadalaya. Waaba mid dhammaanteen aynu soo wada galayno.

Raymond Shonholtz, ninka aasaasay ee madaxa ka ah Asxaabta isbadalka dimoqraadiyadeed, ayaa usoo bandhigay dawladihii shuuciga ee hore ee ku yaalay bariga iyo badhtamaha Europe fikrado iyo xirfado cusub oo lagu isticmaalo isku dhaca si loo hirgaliyo "Mabaadiida" iyo "Qiyamka" dimoqraadiyada.

*Dimoqraadiyadu waxa ay sharciyaysaa isku dhacyada kuwaas oo si nabad ah loo muujiyo si nabad ahna loo xaliyo. Soo bixitaanka afkaarta dimoqraadiga ahina waxa ay ka yeeshay muujinta isku dhaca mid fikrad ahaan laga ogolyahay dhinaca dalalkan dimoqraadiga ah ee isbadalka ku jira. Bulshada dimoqraadiga ah wuxuu isku dhacu u suurto galinayaa keenista baahida in la qaato xeerar caadi ah oo cusub oo bulshadu ku shaqayso xag wacyi ahaaneed, mana aha in wacyigaasi ka hirgalayo dhinaca kooxihiis khilaafsanaa oo qudha, hase yeeshi wuxuu saamaynayaa bulshada dhammaan.... Haddii la iska dhaafo baqihii laga qabay isku dhaca ee ay abuurayeen xukunadii gaboobay, waxa ay muwaadiniin badan iyo madaxi, gaar ahaan dadka laga tirada badanyahay dadka u dhaqdhaqaqaqa, iyo kuwa difaaca qunyar socodka madaxa banaan iyo madaxda ururada aan dawliga ahayn ay fahamsanyihiin in dimoqraadiyadu tahay dajinta xeerar caadi ah iyada oo la isticmaalayo isku dhaca si is badal habaysan loo sameeyo.<sup>3</sup>*

Xidhiidhka hoose ee ka dhexeeya dimoqraadiyada oo ah hab nololeed siyaasadeed iyo isku dhaca oo ah gaadiid dibu habayn wax dhisid ah wada si isbadal loogu keeno diimoqraadiyaddan kala guurka ku jira ee dalalka Europe ta bari iyo dhexe ah, ayaa waxa ay asaas u ahayd shaqadan xoogeeda oo ay wehelinaysay ka qayb qaadashadii qolooyinkaa asxaabta ah ee isku xidhan. Waxa diirada la saarayay in loo jeediyo ururada bulshada iyo madaxda dawladaha inay qiimeeyaan isku dhaca oo u arkaan in uu qiimo leeyahay xagga bulshooyinka dimoqraadiga ah, iyo in la siiyo qaabdhiskii loo baahnaa si loo maareeyo isku dhaca iyo isbadalka, iyo xirfadihii la xidhiidhayay gorgortanka wax wada qabadka ah iyo dhibaatooyin xalinta. Waxa badan ee lagaga doodi doono buugan waxa ay ka yimaadeen khibradii asxaabta ka qayb qaatayaasha ah iyo ururada la midka ah awoodahoodii ay isku dayayeen in si wax dhisaysa ay u maareeyaan isku dhacyo bulsho oo badan oo kala qaab ah.

## FARSHAXANKA DIMOQRAADIYADDA

Waxa aynu hore u sheegnay ina aynu waxoogaa ka dib ku soo laaban doono farshaxanka dimoqraadiyada, sida ay u sharaxeen Lappe iyo Dubois. Farshaxanadaasi ama xirfadahaa la tijaabiyay wixa ay inaga caawinayaan fulinta wixii lama horaanka ahaa iyo xidhiidhii wax soo saarka lahaa ee ka dhexeeyay dimoqraadiyada iyo isku dhaca. Shan ayaana doodan la xidhiidha.

- **Dhab isu dhagaysi:** xirfadani wixa ay u tahay udub dhexaad maaraynta isku dhaca iyo khilaafaadka. Haddii aanay dhammaan kooxaha isku dhaca iyo khilaafku ka dhexeeyaa aanay diyaar u ahayn, karayna inay si dhab ah isu dhagaystaan, rajadu way yartahay in la helo gogol dhig xal raadis.
- **Isku dhac midho leh:** mid wax dhisaya, daacad laysu waajahayo oo la xeerinayo meelaha la isku dhaafsanyahay oo la abuuero deegaan lagu sheegan karo wixa laysku dhaafsanyahay, halkaa oo la muujinayo wixii la isku dhaafsanaa oo diirada la saarayo sidii loo xalin lahaa.
- **Dhex dhexaadintu:** iyada oo aynu si cad u sheegayno dhex dhexaadintu waa dhalagsato dhex ah oo fulinaysa kaalin fududayn ah. Ama sida “Edward do Bono” uu ku sharaxay, waa geedi socodka la isticmaalayo cid saddexaad “si loogu badalo dagaalkii labada waji lahaa baadhitaan saddex geesood ah oo keenaya qorshaynta natijjo la gaadho”<sup>4</sup>. dhex dhexaadintu waa dhaqan la barto, farsamada geedi socodkeeda iyo xirfadeheedana si qoto dheer ayaynu mar dambe uga hadli.
- **Gorgortanka:** tani waa mushkilad xalinta oo la eegayo baahiyaha u muhiimsan ee koox kasta. Dhammaanteen gorgortan ayaynu ku jirnaa maalin kasta oo nolosheena ka mid ah. Waana aynu ku kala wan wanaagsanahay. Dimoqraadiyadu wixa ay siinaysaa xero siman oo lagu ciyaaro ciddii doonaysa inay gasho gorgortan mabda’leh mar dambe ayaana arinkan waxbadan laga sheegi.
- **Wada hadal bulsho:** Bulshada oo wada hadashaa wixa ay keenaysaa dood bulsheed, halkaa oo lagu qiimeeyo waxyaalihii lagu kala duwanaa ee ku saabsanaa arimaha ina wada khuseeya. Wada hadalkaa bulsheed wixa uu wax soo saarkiisu badanayaa, marka dhex dhexaadigaal dhex ah la isticmaalo<sup>5</sup>.

## MUXUU ISKU DHACU MUHIIM UGU YAHAY ISXUKUNKA DIMOQRAADIGA AH

Doodeena ah maaraynta isku dhacu wixa ay u dhacaysaa wajiga ah dawlada hoose iyo bulshooyinkii oo si tayo leh u wada shaqaynaya. Halkan wixa aad ku arki qaar ka mid ah sababaha isku dhacu muhiimka ugu yahay geedi socodka dimoqraadiyadeed.

- Isku dhacu wixa weeye daneeyayaal kala duwan oo danahoodii ay wax kaga jiraan miiska go’aan qaadashada.
- Wuxuu isku dhacu caawinayaan inuu ciidda ka xaadho wajivo cusub iyo in loo babac dhigo arimaha aragtii ahaan dhinac kaliya laga eegay, isku dhacu wuxuu inaga caawinayaan in aynu aragno natijjadii aragtideena inaga oo ka arkayna xagga indhaha iyo aragtida dadka inaga soo hor jeeda.

- Isku dhacu waxa uu inaga caawinayaa in aynu si fiican u fahamno siyaalaha aynu dhibaatooyinka u sharaxno iyo natiijooyinka xalalka aynu soo jeedino.
- Isku dhacu wuxuu abuuraa waxyaalo cusub oo wax lagu badali karo iyo arimo badan oo lakala dooran karo.
- Isku dhacu wuxuu si qoto dheer u dhisaa hoggaanka bulshada iyo wax qabadka.
- Isku dhacu wuxuu diirada saaraa arimaha ka hadalka u baahan si loo dhiso bulsho aad u soo jeeda oo jiri karta.

Waxa ku horyaalaa waxa weeye inaad si qoto dheer u fahamto, xirfad u leedahay bulshadii, si aad u hubiso in isku dhaca loo maarayn karo sinaan iyo caddaalad oo ay taasi noqoto sida joogtada ah ee hawsha loo qabto.

## **MAARAYNTA ISKU DHACA IYO QORSHAYNTA KA QAYB QAADASHADA**

Buugan iyo buuga kale ee la jira ee ah “qorshaynta ka qaybqaadashadu” waxay xagaafayaan caro isku mid ah. Waxa labaduba danaynayaan xidhiidhka wanaagsan, go'aanada wanaagsan, iyo in xaalado badan la isticmaalo cid dibada ah oo “takhasus” leh oo caawisa horumarinta geedi socodkii go'aan qaadashada iyo xalinta dhibaatooyinka. In kasta oo xuduuda u dhaxaysa labada buug noqonayaan qaar ceeryaamo qarisay oo kalmahoodii uu haydh- haydh daboolayo, haddana wax ayaa u dhexeeya.

Kala duwanida u horaysaa waxay ka imanaysaa xaaladaha buugagan keenay: Qorshaynta ka qaybqaadashadu waxa ay xidido ku leedahay baahidii loo qabay in la kordhiyo in bulshadu ka qaybqaadato xukuumadda. Ka qaybqaadashadu waxa ay ahayd, walina tahay, sharax ahaan, dawladaha hoose qaarkood xidhiidh wanaagsan oo ka dhexeeya labada dhinac ee kala ah saraakiisha la doortay (ama xilka loo dhiibtay) iyo muwaadiniinta. Ka qaybqaadashadaayaana koobaysa siyaalihii xogtu uga baxaysay bulshada ee xogta looga helayay muwaadiniinta ee ay usoo galaysay geedi socodkii xukunka. Xogta ka tagaysa dawladda hoose ee u tagaysa muwaadiniinta taag tiig ayaa caawin kara oo la adeegsan karaa sida iyada oo la yidhaa: Bulshadii oo la wargalinayo, shirar bulshadu leedahay, war daabacan oo la soo saaro ama goobaha war is gaadhsinta oo la isticmaalo, siyaasadda albabka furan oo la isticmaalo. Markaa bulshadii ayaa ku xidhnaanaysa dawladaheeda hoose, halkaa oo bulshadii la dhegaysanayo, la baadhayo ra'yiga muwaadiniinta, la samaynayo gudiyo iyo kooxo la taliyayaal ah, kooxo wax dhugta, iyo in la isticmaalo qolooyin cabashada bulshada qora ama xarumo loo gudbiyo cabashooyinka.

Waxyaalahan la soo ururiyay oo aasaas ahaan ah geedi socodyo xidhiidhka ku saabsan oo dhinac kaliya u jeeda, muhiimna ah, hase yeeshay way yartahay inta isbedel la taaban karo ay ku samayn karaan habka dawladda hoose u shaqayso. Mana dhiiriyaan iska horimaadka. Waxay yihiin oo kaliya wadooyin dareenka ilalinaya oo dhinac kasta warka laga siiyo. Awoodo u baahan inay iskaashadaan ayaa yaala meel dhexe oo u dhaxaysa hadal - maroorsiga loo dhigayo sidii uu wada hadal jiro iyo iska hor imaadka. Awoodahaasiayaana keenaya isku xidhka, laga bilaabo golaha tala bixiyaha ah iyo hay'adaha (arimaha gaarka ah daneeya) ilaa ururada gobolada, halkaa oo

sawirka si balaadhan loogu micnaysto nooca nolosha ee ka jirta qaybaha bulshadooda. Farsamooyinkaa bulsho ka qaybqaadashadu waxa ay bilaabaan in la qaybiyo awooda go'aan qaadashada oo laga gudbiyo gidaarada nidaamka dawladda hoose.

Geedi socodka qorshaynta ka qayb qaadashadu, wuxuu siinayaan wada hadalka bulshada awood suldadeed. Inta badan qorshayaashaa la iskudayayaa waa qaar ujeedooyin ay hagayaan, oo matalaya dano kala duwan, oo haysta awood oo rasmi ah si talooyin loo gaadho, isticmaalayana dad dibada ah oo aqoon gaara leh si ay uga caawiyaan kooxda qorshaynta gaadhitaanka go'aano caafimaad qaba oo sababaysan. Dadkaa dibada ah ee aqoonta gaarka ah leh magac badan ayaa lagu sheegaa, oo mararka qaar aan xishmad lahayn, hase yeeshie inta badan waxa aynu ku sheegi fudaydiyayaal.

Haddii abaalgudkoodu maalintii ka badan yahay inta maayarku qaato, waxa aynu ku magacaabaynaa khuburo la taliyayaal ah. Fudaydiyeyaashu waxa ay dooda galiyaan xirfado iyo khibrado la xidhiidha geedi socodkii kooxaha, oo ay ka mid tahay sidii koox loo dhisi lahaa, sidii mushkiladaha si wada jir ah loogu xalin lahaa, sidii loo gaadhi lahaa heshiis loo dhanyahay, iyo sidii meelaha ad adag looga gudbi lahaa.

Qorshaynta ka qaybqaadashadu waxa kale oo ay gali kartaa dhinicii isku dhaca. Fudaydiyayaasha khibradda u leh geedi socodka kooxaha, dhaqdhaqaaqa dadka dhexdooda iyo kooxaha dhexdooda, iyo hababka horumarinta ururka, ayaa inta badan ku wanaagsan maaraynta xaaladaha isku dhaca, taas oo ah qayb muhiim ah oo adeegooda xirfadeed ah. Mid ka mid ah iskuulada fikradaha lagu xaliyo isku dhaca oo hirgalay, ayaa ku leh xidido maamulka iyo horumarinta ururada, isagoo la wadaaga qaar badan oo ah xirfadaha iyo qiyamka kuwa aynu ku arkayno qorshaynta ka qaybqaadashada. Waxa laga qabtay maaraynta isku dhaca waxa aynu ka doodi mar danbe, marka aynu eegayno wajiyada gaarka ah. Inta aynaan taa u tegin, bal aynu wadno doodeenii meelaha ay iskaga egyihii ama ku kala duwanyihii qorshaynta ka qaybqaadashada iyo wajiyada inta badan la isticmaalo si isku dhaca loo maareeyo.

## **GOR-GORTANKA IYO DHEX-DHEXAADINTA**

Waxa jira laba kaalmood iyo nidaamo gaar ah oo u sharaxa goobta maaraynta isku dhaca si ka badan siyaalaha kale. Waxa weeye dhex-dhexaadinta iyo gorgortanka. Mid kasta oo ka mid ah wajiyadan isku dhac maaraynta ku saabsan waxa aynu ka helaynaa aragtiyo sii balaadhanaya iyo talooyin la xidhiidha sidii loogu dhaqmi lahaa. Inaga oo uga doodi doona mid kasta si tafa tiran mar danbe, halkan waxa aynu doonaynaa in aynu si kooban ugaga hadalno.

Dhex-dhexaadiyayaasha waxaa loo sameeyay ina ay caawiyaan xalinta isku dhacyada. Sida caadiga ah waxa ay yimaadaan xaaladaha qolooyinkii arinku khusaynayay ay caddysteen mawqifyadoodii, ee ay iyagu gaar ahaantooda u taag waayeen ina ay horumar sameeyaan si ay u gaadhaan go'aan ay ku heshiyaan oo ay qaataan. Dhexdhexaadiyayaashu waxa ay ku tiirsanyihii ina uu dhaco isa soo horfadhiisi toos ah oo wax la isku waydaarsado in kasta oo lagu yaqaano in ay galaan "siyaasad ah u kala socod" marka ay adagtahay in la soo wada fadiisiyo miis kaliya qolooyinkii u muhiimsanaa ee arinku khusaynayay. Dhexdhexaadiyayaal badani waxa ay raacaan hab inta badan wax tilmaamid ah marka ay fulinayaan xirfadhooda isku dhac xalinta, halka ay fudaydiyayaasha wax qorsheeya ay kaalintooda ku qaataan eegida

fikrada badan iyo fulin. Sharaxani waxa uu kala kulmayaa cadho qolooyinka ka tirsan iskuulada soo kacaya ee fikradaha dhex-dhexaadinta, hase yeeshie aragtidaasi waa mid wali wax ka jiraan. Inta badan dhedhexaadiyayaasha ay bulshadu aasaaskooda tahay, kuwaas oo mataalaloo kooxda xudunta u ah maareeyayaasha isku dhaca ee aanu ka hadlayno, waxa ay raacaan hawgalkooda inta badan hab tilmaamid ah.

In kasta oo dhedhexaadnimadu ay ahayd mid ka mid ah dhaqanada xudunta ah ee sharaxaya geedi socodka dhedhexaadinta, su'aalo ayaa sanadadan danbe dhaqankaa ka taagnaa. Mar danbe ayaynu soladaa muuqata usoo noqon, waa marka aynu si qoto dheer uga hadlayno dhedhexaadinta. Mid ka mid ah xoogaga cimri dhererka siiyay dhedhexaadinta, in kasta oo mudadan danbe muran ka jiro, waxa weeye (caddaysiga) dhedhexaadnimada marka loo adeegayo dadka isku dhacay. Gorgortamayaasha waa uu cadyahay mawqifkoodu waxana ay matalayaan cidda soo diratay, maxaa yeelay sida caadiga ah iyaga waxa loo qortaa ina ay matalaan dhinacyada is haya mid uun geedi socodka arinkan. Hase yeeshie waxaad arki gorgortamayaal la xiganayo oo isku keena kooxihiis isku dhacay iyaga oo aan dhinacna matalayn.

Waxa dhedhexaadiyaha laga filayaa ina uu caawiyo xalinta isku dhaca sida u fiican ee danaynaysa dhammaan dadka la xidhiidha geedi socodka dhedhexaadinta. Marka taa la eego qofkii la soo qortay isna isku dhicci waa ku jiraa. Fudaydiyayaasha iyo gorgortamayaashu iskuma hawlaan dhedhexaadnimada (ama shakliga dhedhexaadnimo) waxana ay diyaar u yihiin inay caddeeyaan dhinaca ay la jiraan haddii aan dadka lala hadlayaa aanay iyaga hore u aqoon. Waxa laga yaabaa xaaladaha qaar ina ay qadiyad difaacyjaan ama aragtii ama mawqif. Ama iyaga oo matalaya qayb saddexaad ayay cid ama urur dan cad goobtaa natijadeeda kaga jirto u shaqayn karaan.

## **MIYAAD WAREERSANTAHAY**

Haddii arinku sidaa yahay waa la fahmi karaa marka doodu halkaa marayso. Xataa dadka khibradda leh ayay ku adagtahay inay sawiraan khadad cad oo u dhexeeya qalabyadan iyo nidaamyadan. Dhab ahaantii dhammaanteen nolosheenna caadiga ah waxaynu si uga qayb qaadanaa kaalmahan ku saabsan fududaynta, dhedhexaadinta, iyo gorgortanka, waa haddii aynaan ahayn qaar ku cibaadaysta gasiirad cidla ah ama buur dusheed.

Bal aynu eegno in aynu ku soo ururino ereyo kooban ujeedada kaalmahaa kala duwan iyo sida ay u sheegtay cid saddexaad oo u ololaysa isku dhac maarayntu. Waxa aynu rumaysanahay in dhammaan arin kasta oo si guud loo sheegaa oo ku saabsan arimaha tani ay ku jirto ay cid uuni u arki doonto khalad.

- Dadka difaaca ka qaybqaadashada bulshadu waxa ay arkaan in kaalintooda wayni tahay ka hortagga isku dhaca bulshada iyada oo la adeegsanayo balaadhinta go'aan qaadashada iyo awooda oo la wadaago. Mararka qaar waa loo yeedhaa si ay isku dhac u xaliyaan waxase ay door bidaan in waxa dhacaya ay la socdaan si loo xaliyo.

- Sida caadiga ah dhexdhedaadiyayaasha iyo xirfada dhexdhedaadinta waxaa loo adeegsadaa goobta uu isku dhac ka jiro. Halkaa oo qolooyinka u yeedhay mid kasta meeshiisii uu aad ugu dhaganyahay oo ay rabaan in laga caawiyo in khilaafkooda la xaliyo. Waxa ayna rumaysanyihin ina ay u baahanyihin cid saddexaad oo ka badbaadisa maxkamado in laysla galoo, halkaa oo gacantooda uu ka baxayo geedi socodki arinku oo wixii ka soo bixi doonaa aanu gacantooda ku jirin.
- Gorgortamayaasha waxa laga filaya in ay u soo helaan dadki qortay xalka ugu fiican ee ugu khasaaraha yar imika iyo bari danbaba. Waxana loo keenay in ay xaliyaan khilaafaadka oo ay yareeyaan isku dhacyada mustaqbalka.

## **ARIMAH AWOODDA IYO DHAQANKA**

Waxa jira laba arin oo qoraalka buugan si gaar ah uga dhigaya mid muran leh, mararka qaarna mid aad u adag. Ta hore waxa weeye arin jira oo ah kala duwanida ilaha awoodda iyo sidii loogu isticmaali lahaa xaaladaha isku dhacyada. Iyada oo awoodda lagu sharaxay kartida wax lagu qabto. Sharaxaasi waa mid aad wax u sahlay marka la doono in cadaalad loo sameeyo waxyaalo aan looma qaatan ah oo isku jira oo is badbadalaya kuwaas oo isku dhac kasta la filayo in ay ka jiraan. Gabadha MARY CAVANAUGH oo samaysay baadhitaan qoto dheer oo ku saabsan dhinaca awoodda u socoto sida ku sugar suugaanta qarniyo badan, waxa ay awoodda ka eegtay kuna sharaxday (ku sharaxday) shan waji oo kala duwan.

1. In ay tahay dhaqan uu qofku leeyahay, oo ka imanaya wax qofka dhaqaajinaya, iyo qofkii oo u heelan isbedel
2. Xaalad xidhiidhka dadka ku saabsan, sida kartida qof u leeyahay in uu dhaqaajijo xoogaga cid kale jira.
3. Waa badeecad oo kale. Wax la gadan karo oo la isaticmaali karo, oo la xidhiidha iib, qjime, iyo natijjooyin.
4. Wax iska jira halkaa oo awooddii galayso dheelitirka sabab timid iyo natiijo ay keentay.
5. Arin falsafad ah, oo ka hadlaya arimaha akhlaaqda, qiyamaka, iyo xidhiidhka ka dhexeeya awoodda iyo masuuliyadda<sup>6</sup>.

Iyada oo ay jirto siyaalo badan oo aynu u diyaarin karno sida aynu u aragno awooda, bal indhahaaga yara xidh oo yara malee isku dhac yar oo dhawaan ku soo maray. Ka fikir awoodda dhinac kasta dhaqaajinaysay si loo xaliyo isku dhicii ama ay dhici karto in la doono sii socodka isku dhaca, dhaq-dhaqaaqii xidhiidhyada dadka gudihiisa ahaa ee kala duwanaa iyo sida ay natijjadii u raadeeyeen.

Tusaale ahaan miyuu qofkaa isku dhacdeen kaa sareeyay mise adaa ka sareeyay xagga darajada ama shaqada? Bal ka waran awoodda lacageed, dareen ahaaneed iyo kharashyada kale ee ku baxay sii socodka ama xalinta isku dhacii, iyo awoodda qiyamkii khatarta galay markii go'aanka la raadinayay, bal ka waran awoodda wax qabad la'aanta haddii aan isku dhicii looba dhaqaajin. Mararka qaar istiraatiijiyadan ayaa noqon karta mid aad u awood badan.

Xilligii  
milicsiga

Kala duwanida arimaha “awoodda” marka la dhexdhetaadinayo khilaafaadka iyo isku dhacyada u dhexeeya dad, ururo iyo kooxo bulsho, waxa ay noqotay arin wayn oo ay daneeyaan dadka wax dhexdhetaadiya, iyo waliba kuwa baadha ee waxna ka qora dhexdhetaadinta. Baryihii hore markii ay dhexdhetaadintu ahayd geedi socod ay doortaan kuwii lahaa waxa jira istiraatijiyo khilaaf xalin ah oo kala duwan waxaa si balaadhan loo qaataay dhexdhetaadnimadu inay tahay mid ka mid ah qiyamka iyo dhaqanada dhex dhexaadinta. Waxa soo kordhayay in “kaadhkaa sharafta ihi” uu noqdo mid la is waydiyo. Iyana sida tayada leh ee qolooyinka is hayaa u isticmaalaan awodo dhawr ah oo kala duduwan ayaa noqotay xudunta muranku ka taaganyahay. Arinkan oo ballaadhan mar danbe ayaynu ka hadli.

Arinka kale ee wayn ee ka dhigaya wax adag qoritaanka buug ka hadlaya “sidee loo qabanayaa” maaraynta isku dhaca waxa weeye dhaqamada: oo ah wax ururay oo qiyam, caadooyin, fikrado, iyo dhaqano ah oo sharaxaya cidda aynu nahay xilli kasta kuwaas oo keenaya sharaftii, dhinacii aynu ujeednay iyo dareenka ah in aynu nafaheenna ku abtirsano.

Haddii aynu ka fikirno in buugani uu safar galayo oo uu ka gudbayo xuduudaha qawmiyadaha iyo gobolada (aduunka), Waxa aynu ka fikiri karnaa in wax kasta oo aynu ka nidhaahno sida isku dhca loo maareeyaa uu noqonayo mid meel meelaha ka mid ah aan ku haboonayn.

Marka arinku sidaa jiq u yahay waxaa ina horyaal doorashoyin dhawr ah. Qaar ayaa ka dhibaato yar kuwa kale marka la eego wax tarka. Tusaale ahaan waxa aynu noqon karnaa qaar si guud uga hadla, ama si cilmiyaysan ama aan caddayn, arin qeexiddiisu ay dhalinayso in weerar hadal ah uu ka dhaliyo dhinacyada qaar. Sidaasi waa lagu badbaadi karaa, hase ahaatee waa qeexid nacasmimo, waxana aynu dareemaynaa in aynaan waxba soo kordhin. Mise wax kasta o aynu nidhaa waa sax.

Waxana aynu sawiraynaa in wadada noocaas ah ay ka buuxaan ereyo taxana ah oo ah “haa, hase yeeshay” “laakiin”, iyo si kasta ha ahaatee” kuwaas oo qarinaya leexsanideena, kana bilaabmayo sidii oo aad wax ictiraafayso.

Waxa aynu dooranay in waxoogaa khatar ah aynu u badheedhno oo aynu sharaxno dhawr istiraatijiyadood iyo qalabkii lagu maarayn lahaa isku dhaca, taas oo laga yaabo in ay noqoto mid wax tar ah marka aad ka fikirto siyaalaha aad hore ugu marinayso khadkaaga aad ku xalinayso khilaafka, ama aad noqonayso mid xirfad badan oo khilaafkaba inuu dhaco ka hortagaya. Marka aynu sidaa yeelno, waxa kale oo aynu qiraynaa in qalabka iyo istiraatijiyooyinka qaar aanay ku haboonayn dhaqanada iyo bulshooyika qaar qaab ahaan. Marka xaalandu sidaa tahay waxa aanu kuu soo jeedinaynaa ina aad ogolaato cudurdaarashadayada oo aad ama iska ilowdo tala xumadaa ama ka fikirto si aad uga qaadato qalabkaa adeeg ama istiraatijiyadaa wax aad u isticmaali karto maaraynta isku dhaca goobtaada. Wixaana aad heli doontaa arimo la xiganayo oo badan iyo doodo ku saabsan arimahan marka aynu soo qaadaadhigayno waxyaalaha badalka noqon kara, markaa bal hawsha aynu wadno.

***Waxa aad had iyo jeer arki qaar dadka “ESKIMOSKA” ah oo jecel in ay baraan  
dad reer “CONGO” ah sida mawjadaha kulaylka ah loola dhaqmo.  
(Eskimosku waxa ay degaan dhul qabow,  
(Congo) na waa Afrika oo kulul )***

**STANISLAUS LEC**

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Ma aha arinku, noloshaadu ma leedahay isku dhacyo waxa muhiimka ahi waa sida aad isku dhaca ka yeesho.
- Isku dhacu waxbuu burburin karaa, ama dhisi karaa, ama ku bari karaa. Sida aynu u qaadanaa inta badan waa kolba doorashadeena.
- Isku dhaca iyo kaladuwaniida waa arimo muhiim u ah geedi socodka dimoqraadiyada. Dimoqraadiyaduna waa gaadiid ogolaanaya in isku dhacyada iyo khilaafaadku noqdaan wax muuqda oo markaa la xaliyo iyada oo la marayo hab lagu heshiiyay oo la dhigay oo ah wada hadal bulsho iyo wax qabad.
- Afar qalab adeeg oo caawiya alkumyada dimoqraadiga ah iyo bulshooyinku ina ay u maareeyaan isku dhacyadooda iyo khilaafaadkooda si wax ku ool ihi waxa weeye: dhagaysi fiican, wada hadal daacad ah oo wax dhis ah, dhexdhexaad din iyo gorgortan.
- Qorshaynta ka qaybqaadashaduna waa arin kale. Wuxaanu arinkaana gaar uga dhignay buug dhan oo ka hadlaya geedi socodkeeda, waxana aanu rajaynaynaa in aad isticmaasho buugaa marka aad isku dayayso in aad maarayso isku dhacyada iyo khilaafaadka.
- Awoodda iyo dhaqanku waa arimo muhiim ah oo ay tahay in la dhawro mar kasta oo la isku dayayo maaraynta isku dhaca iyo khilaafaadka. Fahamka arimahaasi waa talaabada u horaysa ee aad kaga dhigayso qaar kuu adeega adiga, oo aan kaa hor iman, si aad isku dhaca iyo khilaafaadka ugu hesho xalal lagu heshiiyo.

## **RAAD RAAC**

1. Crum, Thomas F. Sixirka isku dhaca (New York: Simon and Schuster, 1987), p. 29
2. Lappe, Frances moore iyo paul martin dubois, dhakhsigii maraykanka (San Francisco: Jossey – bass ayaa daabacay -, 1994), p.1.
3. Shonholtz, Raymond, “tababarka maaraynta isku dhaca: gaadiid wax badal ah oo bulshooyinka is badalay ku saabsan” xagga “gorgortanka caalamiga ah 2”, (1998) p.3.
4. De Bono, Edward, isku dhacyada – hab wanaagsan oo lagu xaliyo (London: buugaga penguin, 1986), p.4.
5. Lappe iyo dubois, op. Cit.pp.237-86.
6. Mary s. Cavanaugh, “barashada noocyada awoodda bulshada” A. Kakababse iyo C. Parker, awoodda, siyaasadda iyo ururada: aragtii dhaqan cilmiyeed (New York: John Wiley iyo caruurtiisa, 1984).

Cutubka

2

# FAHAMKA DABIICADDA ISUKU DHACA

*Hadday laba qof murmayaan way yartahay  
in qof kali ihi khaldanyahay*

MAAH MAAH " SWEDISH " AH



Fikrado	29
Arimaha raadbynaya fikradaha	30
Maxaa aynu qabanaa	32
Maxaa dhaliya isku dhaca	33
Dhaqdhaqaqyada isku dhaca	35
Baadhitanka isku dhaca	37
Wadadii loo qaadayay magaalada Abilene	38
Nuqdado muhiim ah	40
Raad raac	40

Sharax

Waxaa laga yaabaa ina uu aad inoo caawiyo “ Sharaxa goobtu ” iyada oo aynu bixinayno sharaxyo ku saabsan isku dhaca, kol haddii dadkii xeradan khibrada u lahaa ay fikradda ay ka qabaan ku kala duwan yihii. Bal haddaba aynu fikradaha waxoogaa galno. Kuwaas oo ah qaar isku dhaca xaggiisa muhiim ah.

Ugu horrayn, sida ay arkaan Slaiku iyo Hasson “ Isku dhaca laf ahaantiisu mushkilad ma aha, ee isku dhaca aan la xalin ayaa mushkilad ah ”. Labada qoraa iyaga oo hadalkii sii wata waxa ay yidhaahdeen “ Isku dhacu waa qayb dhaqdhaqaqa koritaanka iyo horumarka noolaha iyo kooxaha ka mid ah. Waxana uu dhacayaa marka ay foodda is daraan danaha iyo dhaqanka laba qof ama in ka badan ama kooxo ”<sup>1</sup>.

Aragti kale waa ta John Crawley: “ Isku dhacu waa muujin khilaafaad uu mid kasta u shaqaynayo si ka kale ka soo horjeeda ”<sup>2</sup>.

Peter Block na waxa uu yidhi: “ Isku dhacu waa natijada khilaafaad jira oo u baahan maarayn... isku dhacuna waa lama huraan, waana dhexdhexaad waana wax wanaagsan marka arinka la eego ee aan qofka la eegin, waana il tamar keenaysa... isku dhacu wuxuu natijo u yahay kala duwanaan, taasi se sabab uma aha ”<sup>3</sup>.

Rensis iyo Jane Gilbert Liket, oo ah kuwii ugu horeeyay ee taageerayay baahida iyo fursadaha lagu maaraynayo isku dhacu waxa ay qabaan fikrad wax soo jiidanaysa: “ Isku dhacu waa halgan nool uu qof doonayo in wuxuu door bidayo gaadho taasi oo haddii uu helo, u diidaysa in qaar kale ay helaan iyana wixii ay door bidayeen, halkaana ay ka dhalanayso cadaawadi ” waxa ay labadaa reer Likerts kala soocayaan laba nooc oo isku dhac ah: mid dhab ah oo ku qotoma wax jira iyo mid dareen ah oo ka yimid dareen, wajiyada dareenka ee...xidhiidhka dadka ka dhexeeya ”<sup>4</sup>.

Ugu danbayn Hocker iyo Wilmot ayaa sharaxay isku dhacu ina uu yahay “ Halgan la muujiyay oo ugu yaraan dhex yaal laba dhinac oo isku xidhan oo ku fikiraya ujeedooyin aan is qabanayn, khayraadkuna ay yar yihii, oo dhinac fara galin sameeyay si uu ujeedooyinkiisii uu u fuliyo ”<sup>5</sup>.

Waxa aynu ku dari karnaa sharaxyo badan oo kale, inaga oo kordhinayna doorashooyinka (waxyaalaha lakala dooranayo ee) ina horyaal marka isku dhaca aynu ka fikirayno. Wuxuu isagu arkaa in isku dhacu ka dhashay muujinta khilaafaadyo, dhinacyo iska soo horjeeda u shaqaynaya.

Ma waxa ay ku dhex war wareegayaan xidhiidhika dhexyaal sababta iyo natiijada, mise arinku waa maxay? Sideed u ogolaan kartaa aragtida leh isku dhacu mushkilad maaha, ee waxa mushkilad ah uun isku dhaca aan la xalin?. Bal dhakhso u qorqor sharaxaaga kuu gaarka ah ee ku saabsan isku dhaca inta aanad socodka halkaa ka wadin.

Xilligii  
Milicsiga

Sidee ayuu sharaxaagu ugu dhigmaa sharaxyada kor lagu soo sheegay? Maxay kasiman yihiin? Maxay ku kala duwan yihiin?

Isku dhacu waxa weeye khilaafaad dhexyaal cid xidhiidh ka dhexeeyo. Waxa maskax ahaan suurto gal ah in xagga xidhiidhka isku dhac yimaad, haddiise qofkii ama dhinacii kale aanu rumaysnayn in isku dhac jiro, waxa suurto gal ah in aanu jirin. Wixii aanu isku dhacyo la kulmaynay, waxa maaraayntoodu ugu adkayd, kuwa aynu inagu isku abuurno iyada oo aan cid kale gacan ka gaysan. Marka aynu ka tagno isku dhacyada hoose ee aynu dhammaanba la kulano xilligiiba mar,waxa aynu dhakhso ugarwaaqsanaynaa in isku dhacyadu bulshada heer walba kajiraan.

- Dad dheddood.
- Qoysaska dheddooda.
- Kooxo urursan dheddood sida shaqaalahi iyo maamulka.
- Dheda dalalka, diinaha, fikradaha siyaasadeed, iyo
- Bulshada gudaheeda.

#### **Waxana ay ka dhashaan:**

- Ujeedooyin aan is gayin.
- Xog khaldan, xog la'aan, iyo sida warka loo dhigo.
- Kala duwani xagga qiyamka ah, sida habka nolosha,iyo fikradaha siyaasadeed iyo wax kale.
- Mabaadi' aynu rumaysan nahay in ay sax yihiin oo qasab ay tahay in la fuliyo.
- Iyada oo ay jirto ama ay u egtahay in si aan caddaalad ahayn loo qaybiyay dhammaan khayraadka.
- Iyada oo loo baahanyahay in la iska jiro " Waji gabax ".
- Awood, suldad iyo wax ku raadeeyay iyo kolba sida loo isticmaalo, ama loogu xad gudbo.
- Faragalin si aynu u xaqiijino wax aynu dareemayno in uu xaqeenii

- yahay, ama cid kale ka rabno, haba ahaado mid aynaan xaq u lahayn eh.
- Iyo ilo kale oo aad u badan.

Waxa aan shaki lahayn inaad addigu ku dari karto xaalado kale oo keenay isku dhacyo oo khibrad ahaan ku soo maray.

Isku dhacu had iyo jeer ma aha mid cudur daar leh ama ku salaysan dano muhiim ah. Dagaalo ayaa ka bilawdo waxyaalo fudfudud oo dalka ku saabsan ama wax dadka qaar u arkaan dhaqan aan haboonayn. Waxa ay isku dhacyadu ka soo jeedaan “qiyam” caado iyo dhaqan, sida hantidu u qaybsantahay.

Ama himilooyin khayaali ah. Ugu danbayntii isku dhacu wuxuu had iyo jeer helaa dhul rays ah iyo cid jecel oo garab u noqota kuna kacsan caddaalad darro xagga xidhiidhka awoodda ah, dhaqano kala duwan, iyo fikrado aynu ka qabno dadka kale iyo adduunka inagu xeeran. Dareenadaasi waa kuwa ugu wayn ee wax raadeeyaa hase yeeshi marka fidna oogayaashii isku dhaca keenay laga hadlayo aad loogama hadlo.

Bal aynu waxoogaa ku qaadano oo baadhno macnaha iyo sida ay muhiimka u yihiiin fikraduhu (dareenadu).

## **FIKRADO (AMA DAREEMO)**

Waxa la yidhi dareenadu boqolkiiba sagaal iyo sagaashan ayay ka yihiiin dhabta. Waa laga yaabaa in waxoogaa tiradu intaa ka yartahay. Markaa haddii dareenadii sidaa muhiim u yihiiin, waaba meel fiican oo laga bilaabo marka aynu qaadayno xilka u babac dhigga maaraynta isku dhaca. Haddii aynu filayno in wax dhab yahay, waa dhab, ugu yaraan inta aynu dareemayno si sidaa ka duwan. Haddaba inta taasi dhacayso, bal aynu ku shaqayno dareenadeenii aasaaska ahaa.

Waxaa loo babac dhigayaa laban laab ahaan ama in ka badanba waxa uu ku xidhan yahay tirada dadka ee ku jira isku dhaca. Waxa muhiim ah in la fahmo waxa dhinacyadu ay ka fikirayaan iyo waxa ka danbeeya sidaa ay u fikirayaan si si wax ku ool ah looga caawiyo xalinta isku dhaca. Haddii wajiga aad isticmaalaysaa uu yahay gorgortan, idinku aad tiihin kuwii gorgortamayay, waxa qasab ah ina aad isku daydo fahamka aragtida kuu gaarka ah ee ku saabsan waxa dhalinaya isku dhaca. Tani ma aha oo kaliya in aad isku dayayso bal inaad garato sida qofkaa kale isna wax u arkayo ee waxa weeye oo kale inaad waqtii qimo leh siiso inaad ishortaagto adigu sawirka jira.

Fisher iyo Ury ayaa buuggoodii caanka ahaa ee ku saabsanaa sidii khilaafka gorgortan loogu xalin lahaa, magaciisuna ahaa “sidii haa lo gaadhi lahaa”, ku sheegay:

*Inaad fahamto sida dhinaca kale u fikirayaan ma aha shaqo muhiim ah oo kaliya oo kaa caawinaysa xalinta mushkiladda, ee fikraddooduba waa mushkilada meesha taal. Khilaafka waxaa lagu sharaxaa kala duwanida u dhexaysa sida aad u fikirayso iyo sida ay u fikirayaan.... Ugu danbayn; isku dhacu ma yaalo dhinaca yoolka dhabta ah, hase yeeshi wuxuu yaalaa madaxa dadka. Runtu si fudud waa mid kale oo lagu doodi karo, oo laga yaabo in ay wax tarto, ama aanay tarin, si wax looga qabto khilaafka. Waxa khilaafkaba keenayaa ee uu u jiraa waxa weeye, wuxuu ku jiraa sida ay u fikirayaan<sup>6</sup>.*

Waxa ay qoraayaashu leeyihiin baquhu-tusaale ahaan-xataa haddii uu yahay mid aan asaas lahayn, haddana waa baqo dhab ah; rajadu, xataa haddii ay dhab tahay, waxaa laga yaabaa in gaba gabadeedu noqoto furitaan dhaca amaba dagaal. Waxyaalaha dhabta ihi, xataa haddii ay lugo ku taaganyihiin, waxa dhici karta in aanay wax ka tarin mushkilad xalinta. Haa, dareenadu waa dhabta aynu aragno ee inta badan aynu ku shaqayno. Haddii aynu goosano in aynu meel kale ka bilowno maaraynta isku dhaca, dareemadani inta ay doonaan ha inoogu muuqdaan qaar la yaab leh eh, waxaa laga yaabaa inay noqdaan qaar aan inaga hadhin.

Isku dhaca isirka ka soo jeedaa waxaa laga yaabaa ina uu si gaar ah noqdo arin u babac dhigiisu adagyahay sida Glen Fisher ina xasuusinayo, "Isku dhaca isirku waxa uu ka soo baxaa meel laga yaabo in aanu jirin heshiis ku saabsan waxa dhab ahaan macquul ah ee suurta gal ah. Halkaa oo dareemada iyo sababaha la sheegayaana aanay la socon ta caadiga ah ee la (yaqaan).... Haddaba sharaxa dareenada goobtaasi, gaar ahaan dareenada isirka u gaarka ihi, waxa uu qayb wayn ka yahay farshaxanka cudur helidda isku dhacaa isir "<sup>7</sup>. Anaga oo ah qaar shaqadoodu tahay "xaliyayaal" isku dhac, waxa kollayba raad nagu leh tii isirkayaga, waxana aanu u baahanahay in siku dhaca qolooyinka is haysta dhexyaal la tarjumo oo lagu eego aragtida iyo dhaqanka gaarka ah ee dadkaasi leeyihiin. Si kale haddii loo dhigo, sidee ayay qoladaasi wax u dareemaysaa marka la eego xidhiidhka ay la leeyihiin cidda kale ee ay isku dhaceen? Arinka isku dhaca isirka mar danbe ayaynu ku soo laaban maxaa yeelay waa arin aad u murugsan oo muhiim ku ah nolosha bulshada iyo masuuliyaadka dawladda hoose.

## **ARIMAH A RAADAYNAYA DAREEMADA (FIKRADAHA).**

Waxa jira arimo badan oo raadaynaya dareemadeena aynu ka qabno aduunka inagu xeeran. Bal afar ka mid ah aynu eegno.

### **1- *Waxa aynu doonaa in waxa aynu aragno ku eegno ishii khibradeenii hore.***

Waxa jira layli had iyo jeer lagu isticmaalo barnaamijyada tababarka e ku saabsan xidhiidhka dadka dhexdiisa ah, ama haddii aynu mawduuceena si gaara uugu xidhno ah "maaraynta isku dhaca", waxa weeye; in la waydiyo ka qaybgalayaasha qof-qof ina ay sharaxaan waxa ay ku arkaan sawir. Iyaga oo ka qaybgalayaasha cuskanaaya khibradahoodii hore, waxa ay ka bixinayaan sawirkaa ay arkayaan sharaxyo kala duwan. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa qof inuu xasuusto maalmo fiican oo fasax ah oo uu xeebta ku qaatay. mid kale ayaa laga yaabaa ina uu xasuusto saaxiibkiisii uu jeclaa oo ku qaraqmay mawjad xun oo wayn. Labadaa qof dareemada ay sawirkaa ka qaadanayaan waxa raadaynaya khibradoodii hore.

Qof kasta oo inaga mid ihi wuxuu maskaxda ku haystaa bakhaar sawiro ah, codad ah, uro ah, iyo taabashooyin dhaqaajinaya fikirkeena oo qaabaynaya dareenkeena marka aynu xaalad cusub la kulano. Fikradaha aynu dareemaynaa waxa ay xidhiidh la leeyihiin khibrado hore oo aynu la leenahay dadka, goobaha, meelaha, qaababka, ilaysyada, hadhadhka. Waxyaalaha oo dhan ayaa diyaar u ah inay dhaqaajiyaan dareenkeena oo ay raadeeyaan waxa aynu arkayno, ama daraymayno ama maqlayno ama xilgaa ina soo maraya.

Mid ka mid ah qorayaaga ayaa caruurnimadiisii ku soo koray xaafad ku reebtay arag iyo ur, kuna saabsan sawir faqri iyo uskag xun ah, inkastoo labadaasi aanay isku xidhnayn, waxase aynu doonaa ina aynu isku xidhkaa aan caqligalka ahayn samayno had iyo jeer. Urtaasi waxa ay ka imanaysay kayn yar oo bixinaysay ur xoog leh oo aan caadi ahayn. Wuxuu caadystay qoraagii in uu urtaa faqriga iyo uskaga xun uu ku xidhiidhiyo e aanu kaynta ku xidhiidhin. Markaa, ayuu maalin la kulmay isla urtii oo taala agta guri aad qaali u ah oo qilcad wayn ah. Waxa aad sawiri kartaa naxdinta uu qaadayo marka uu rumaysto in dareenkiisii guud ahaan aanu meeshaba oolin marka arinkan cusub la eego.

**2-** Taa aynu sheegnay waxa ay inoo riixaysaa arinka labaad ee raadeeya dareenkeena. Waa “fikrada u horaysa” fikradda u horaysa ee aynu qaadanaa waxa ay leedahay raad wayn oo la xidhiidha sida aynu u dareemayno aduunka inagu xeeran inaga oo ka eegayna “daaqadada” maxaa ay sidaa ugu xoog badatay?. Wuxuu rumaysan yahay john Crawley:

- In ay sido dareen xoog leh. Oo aynu ku qasbanayn xaaladda badan oo kuwaa (ina soo maray) ka mid ah in aynu go'aanno adag gaadhno, iyo
- Waa daw ka dhigayay wixii aynaan aqoonta u lahayn mid aynu aad u barano. Ama sax ha ahaado ama khalad eh, sida aynu u dareeno wixii tagay wuxuu raadaynayaa sida aynu u aragno xilliga jooga, dareenkaa u horeeyaana inta badan waxa uu dhigaa qorshaha fikradaheenna mustaqbalka.

**3-** Dareenkeenna waxa kale oo raadeeya sida aynu isugu gay-gayno waxa aynu aragno. Waxa aynu si joogta ah isugu xidhnaa sawir iyo mid kale markaas ayaynu dareenaa in labada sawir iyo xidhiidhka ka dhexeeyyaba ay dhab yihii. Tusaale ahaan, inteeна badani waxa aynu ka haysanaa sawiro nooc ah dadka dirayska xidha (sida askarta) taas oo dhaqankeena ka muuqata. Haddii khibradda aynu u leenahay tahay mid xun, had iyo jeer dhaqankeennu taasi uun buu ku xidhnaanayaa. Haddii aynu u baahanahay caawimada booliska - tusaale ahaan – waxaa laga yaabaa in aynaan jeclaysan waydiisiga caawimadiisa iyada oo aynu eegayno khibradeenii hore. Dareemadeenii ka dhashay khibradihii hore si ayay isugu tagtagayaan taasi ayaana dhaqaajinaysa dareenkeenna imika<sup>8</sup>.

**4-** Dareemadeenna marka la xoojiyo waxa ay isu bedelaan sidii “Cajalad sajilan” oo kale, iyo geedi socod aynu si guud isu raacinno koox dadka ka mid ah, inaga oo u arkayna in dhammaan xubnaha kooxdaasi leeyihii sifooyin isku mid ah, inta badana qaar xun ah. Taasina waxa ay isu badashaa nacayb aan sabab lahayn oo aad u qaado koox ama qof iyada oo aad adeegsanayso aqoon aan dhammadayn. Tanina waxa ay si xoog leh ugu xidhantahay dareemo iyo mawqifyo la xoojiyay, inta badan ilaa caruurnimadii, oo ku xidhan warar joogta ah oo ku lug leh dareemo xun oo “Caadifi” ah. Marka la eego isku dhacyada isirka waxa aynu u baahanahay in aynu si gaar ah uga digtoonaano sida aynu isugu gaygayanayno waxa aynu ka helno khibradeheenii hore, taasi oo qayb ahaan xoojisa sawirka dulmiga ah iyo cajaladda maskaxda ku sajilan ee aynu ka qabno adduunka inagu xeeran.

## Maxaa Aynu Qabanaa?

Halkan waxaad ku arki fikrado ku saabsan sidii aynu u waajiji lahayn dareemadeena, si aynu uhelno faham badan oo sax ah oo ku saabsan waxa dhabta ah ama loo qaataay in uu dhab yahay inaga oo dhinacyo kale ka eegayna, ama sidii loola qabsan lahaa si ay ula jaan qaadaan fikradaha la wadaago ee xaqiiqada ah. Mar labaad waxa aynu u mahad naqaynaa Fisher iyo Ury fursadda ah in ay inoo baadheen jeebkooda indheer garadnimo.

- **Naftaada halkooda dhig.** Dadka maraykanka ah ee degan waqooyiga Cheyenne waxa ay ku tilmaaman yihiin maah maah ah: “Jaarkaaga ha xukumin ilaa aad kabihiisa laba dayax socod ku lugayso”. Tani waa waxa inta badan aanu u argno fahamka dareenka dadka kale.
- **Baqaha aad qabtaa yaanu kugu abuurin waxaasi ayay u ujeedaan.** Imisa goor ayaad la dhaqantay xubno ka mid ah isir laga tiro badan yahay oo bulshadaada ka mid ah oo aad fikrad aad u xun ku eegtagtay ujeedooyinkooda iyo dhaqankooda? Adoo baqahaaga ku badala baadhitaan wuxuu inta badan kuu suurta galinayaa inaad u dhaadhacdo uhda dareemada noocas ah ee adag.
- **Haku eedayn mushkiladaada dadka kale.** “Gaadhigayga ayaa jabay, markaa khalad oo dhan waxaa leh makaaniga”.
- **Fadhiiso oo ka dood(eeg) dareemadaada,** labada dhinacba ka eeg.
- **Ka faa'iidayso fursadaha si aad u muujiso waxa aan waafaqsanayn dareenka ay kaa qabaan.** Haddii uu qofka kaa soo horjeedaa dareensanyahay ina aad tahay qof qandhadh ah, noqo qof jajaban adiga oo ka daacad ah. Haddii ay dareensanyihii in aad tahay qof ku madax adag dhammaan arimaha gorgortanka, bixi wax badalaya dareenkaa<sup>9</sup>.

Xilligii  
milicsiga

Dareemadu waxa weeye burushyo rinji oo awood badan waxana aynu u isticmaalnaa in aynu ku rinjiyayno xaqiiqada maalin layda ah. Bal baadh baanka xasuuusutaada oo waxa aad soo saartaa dareen aad qabtay muddo dheer oo aad haddana faraha ka qaaday maxaa yeelay waxa la arkay in uu yahay mid aan haatan run ahayn ama faa'iido lahayn. Isku day in aad xasuuusato sida aragtidaa hore ay si soo noq-noqonaysa ugu xoogaysatay “Run nimo”, oo ay fadhiisatay maskaxdaada. Waxa aad dhakhso u qortaa waxoogaa fikrado muhiim ah oo keenay inaad dareemadaa haysato, iyo mid ama laba arimood oo kugu dhiiriay ina aad faraha ka qaado.

*Way adagtahay ina aad majo  
durbaan ku tunto*  
MAAH MAAH AFRIKAAN AH

## MAXAA DHALIYA ISKU DHACA?

Isku dhacu wuxuu ka dhacaa dhammaan heerarka la iska soo galo. Xagga caalam waynaha, dalalka dhexdooda, dawladda hoose iyo xaafadaha, ururada iyo qoysaska, dad dhexdood, xataa gudaha nafaheena. Waxa ay erayadaasi qofka ku dhalinayaan inuu gaadho inaan sifadaa dadka ee faaftay aanay dhammaan wada xumayn, markaa maxaa dhalinaya isku dhaca? Barnaamijka xalinta isku dhacyada asxaabtu wuxuu u sharaxaa arinkan sababtiisa sidan: “wuxuu isku dhacu yimaadaa marka is af garansha waaga, iyo khilaafaadka, iyo cadhada, iyo tartanka iyo caddaalad daradu ay hadido wax muhiim ah (oo agtaada qiimo wayn ku leh”<sup>10</sup>. Halkaa waxaad ku arki waxoogaa tusaalooyin ah oo ku haboon shantaa darajo:

- Khilaaf ku saabsan ujeedooyinka aynu doonayno in aynu gaadhno. Mashruuc siyaasi ah oo markaa uun maskaxda ku soo dhacay. Ama waxa weeye ujeedooyin aan caddayn.
- Fikrado la aaminsanyahay. Anana waxaa ayaanu rumaysanahay, adna waxaa ayaad rumaysantahay.
- Sidii loo sharixi lahaa kaalinta qofka: “waxa aan moodayay in aad adigu masuul ka tahay nadaafadda kijinka is dhex yaal”.
- Kaalmo isku jira. “Waxaan filayay inay adiga ahayd inaad qufusho albaabka” sidaas oo loo yidhi cadho, markii faraskii laga xaday xeradii.
- Doogga iyo dhulka: “ka tag dhulkayga”. Ama dad badan oo degan meel kaliya.
- War la'aan. “Haddaad ii sheegi lahayd waxa aad iga rabto ina aan qabto...” ama war xumo. “Waxaad ii sheegtag in lacagi inoo taalo baanka”, ama warar isku qasan. Sida ay ururo badani u samaysanyihii waxa ay dhalinaysaa iska hor imaadka wararkaa badan ee kala jaadka ah.
- Dafiraadda “waxaan diyaar u ahay inaan ku garaaco, adna dafir in xidhiidhkeenii xuamaani soo gashay”.
- Doonis in aad taladayada qabsato: “xukunkaygii cid dib u dhagaysanaysaaba ma jirto”.
- Xirfaddii xidhiidhka oo kaa maqan: “iyadu waxba ma dhagaysato”.
- Habka qofka: “waad seexatay! Waxaad tahay qofkii ugu wax curin darnaa ee aan waligay la shaqeeyo”.
- Khayraadka oo yar: isku dhacyo ku saabsan lacag, dhul, biyo, goob, qalab, badeecad, dadkii shaqada u qalmayay, awood iyo suldad, iyo wax kale oo badan.
- Sida wax loo qabto: “maxaad sidaa ugu qabatay?”, “maxaa yeelay, adaa igu yidhi sidaa u qabo”. Tani waxa kale oo ay keeni kartaa in xidhiidhkii burburo.
- Cidhiidhi waqtiga ah: “uma haysto waqtii aan arinkan isku hawlo imika”.
- Naf jacayl: “yaa cunay intaydii keega ahayd”.
- Niyo xumi: “waa in aynu dadkaa xaafadda ka ilaalincaa wixii ay doonto ha ina kalifto eh”.
- Qiyamka: “arimaha qaar oo la isku dhaafsanyahay’.
- Iyo dhab ahaan, dareen xumo. Miyaynu u baahanahay in aynu dareenka wax dheeraad ah ka sheegno.

Qaado nasashadii yarayd ee milicsiga oo eeg inaad tusaalayaasha isku dhaca ee imika uun la sheegay hoos keeni kartu shanta darajo ee uu isticmaalo barnaamijkii asxaabtu si uu u sharaxo waxa dhaliya isku dhaca. Kuwee ayaa ku saabsan?

## Is af garansha waa?

## .Khilaafyo? \ milicsiga

Xilligii  
milicsiga

## .Diiqadayn?

Tartan?

## Caddaalad darro?

Imika, eeg xaaladihii aad la kulantay khilaafaa dadka kale idin dhex yaal ama aad la kulantay nooc isku dhac ah dhawaan. Haddaba waa darajadee ta uu ku haboonyahay ee uu soo hoos galayaa waxa ku soo maray ee isku dhac iyo khilaaf lahaa? Samee qoraal degdeg ah oo aad si kooban ku sharaxayso isku dhacii iyo halka uu ku haboonyahay marka la eego mashruucan ku saabsan waxyaalaha sababta u noqon kara khilaafaadka.

Waxa uu isku dhacu ka dhashaa, oo dhalinaya inta badan, waxyaaloo aan mid ahayn, waxaa jira sababo badan oo murugsan. Tusaale ahaan, maxay dawladda hoose ee (x) ay ula socon kari la'adahay dawladda hoose ee (y) ama xaafadaha qaybta suuqaasi dagani ay had iyo jeer dhuunta isu fadhiyaan. Si aynu u helno sababaha dhabta ah ee isku dhaca keena, waa in aynu calaamadaha muuqda waxa ka hooseeya

u dhaadhacnaa, si aynu isku dhaca u dhilno sida basasha oo kale ilaa aynu gunta u dhaadhacayno.

Waxaa laga yaabaa ina aad dareentay in sababaha aynu tilmaamnay ay kala duduwan yihiin xagga culayska iyo heerka adeyga marka xalintooda loo yimaad. Fahamka khaldan ee wixii dhabta ahay ee jiray, waxa suurta gal ah inuu yahay isku dhaca ugu yar xagga adayga iyo xalinta. Fahamka khaldanna inta badan way dhib yartahay in la hubsado iyada oo lamaraayo geedi socod caqli gal ah, inta badana wuu ka madhanyahay dan qofeed. Marka se isku dhacu ku xidhan yahay dan qof, iyo wax aad loo qiimeeyo iyo arin xukun (maxkamadeed), rajada xalinteedu waxa ay noqonaysaa mid adag.

Waxaa jira siyaalo badan oo looga fikiro waxa keenay isku dhaca, halka kuwa isku dhaca wax ka qora ee shaqo ka dhiglay, sidii ay u caawin lahaayeen xalinta isku dhacyadu, ay u egtahay in dhammaan ay wada sitaan khariidad u gaar ah oo sababihii ah. Waxa aynu isticmaali doonaa khariidad fikradeed oo caan baxday oo la xidhiidha sababaha isku dhaca, taas oo ku xusan buugan buuggiisa 2aad. Waxana aanu kuu soo jeedinaynaa in aad baadhid, si aad xog badan iyo fikrad uga heshid sababaha isku dhaca iyo sida aad u maaraynayo.

## **DHAQDHAQAAQYADA ISKU DHACA**

Waxaa jira heerar lagu saadaalin karo in uu isku dhac soo socdo. Haddii aynu barano in aynu tilmaano arinkaa, waxa aynu inta badan karnaa maaraynta isku dhaca inta aanu gaadhin heer maax dumis ah ama inta aanu faraha ka bixin. Dadka maaraynta isku dhaca khibradda gaarka ah u lihi waxa ay heerarkaa ku sharaxaan siyaalo kala duwan.

John Crawly waxa uu ka hadlayaa isku dhac qarxaya iyo mid wax dhisaya. Kuwa wax dhiska ihi waa kuwa la maareeyo marxaladaha (heerarka) hore ee is afgaransha waaga. Labadubana si isku mid ah ayay u bilaabmaan: wuxuu ka bilaabmayaa arinkii dhalinayay markaa ayuu libinlaabmayaa, hadana uu gaadhayaan xaaladdii uu hurayay. Waxa uu ka bilaabmayaa waa khilaafaadka ka jira xaaladaa, sida jinsiga (lab ama dhedig), da'da, isirka, xaaladda qofka, kaalinta, diinta, waxa la qiimeeyo ee "qiyam" ah iyo qaar badan oo kale. Wixii sii labanlaabayay iyo xaaladuhuna waa xidhiidhka ka dhexeeya dadka, "haykalada" ku xeeran, iyo deegaanka ay ka shaqaynayaan kuna nool yihii. Waxa uu hurayaa hadaba marka ay khilaafaadkii dhaliyaan fooda in lays daro.



“Nuqdadadaa’ markii uu sharaxay labada nooc ee isku dhaca wuxuu “Crawly” sameeyay meel wado labo u qaybsamayo. Markaa wadadaa qaybsamaysaa waxa ay ku gaynaysaa isku dhac qarax keenaya oo sii maraya fuyuus, goobtii uu isku dhacu ka holcayay, oo loo yaqaan is difaacid, weerar, arimihii oo isa sii tara iyo xalkii oo loo taagwaayo. Wuxuu qaraxu ay ku gaynaysaa in latiriyo qimihii burburka ka dibna la hagaajiyo wixii burburay. Wadada labaad waxa ay ku gaynaysaa isku dhac wax dhis keenaya, waxa wadada taagan, kulayl oo markiiba uu ka danbeeyo qabow iyadoo barafkii laga dhalaalinayo ama lagu diirinayo midba midka kale, ka dibna la xalinayo. Waxay u egtahay sidii oo safar ka bilaabmay goob lama degaan ah oo fog uu soo maray figta buur dheer ugu danbayntiina la gaadhay xeebtii. Peter Block iyo dadkii wehelinayay waxa ay isku dhacii ka mareen dhinac aan kulayl badan lahayn. Waxa ay leeyihiin isku dhac si kadis ah uma yimaad. Waxa uu soo maraa shan heer (marxaladood).

- 1. Filasho.** Kani isku dhac maaha, hase yeeshay waxaa heerkan keenay siyaasadii oo la badalay ama go'aan aan la jeclaysan.
- 2. Khilaaf aan la sheegin.** Waxaa bilaabmaya dareenka oo kaca, hase yeeshay wali isku dhacii dibada uma soo bixin, qaar kale ayaa ku sheega kan isku dhac aan wali la dareemin.
- 3. Dood.** Dadkii ay khusaysay ayaa inta badan bilaabaya inay u sheegaan khilaafaadkooda dadka la aragtida ah iyaga oo aan isku dayin qeexida ama xalinta isku dhacii. Walise diirada aad looma saarin muu.
- 4. Isku dhac laysu caddaystay.** Khilaafkii ayaa soo shaac baxay. Dadkii ay khusaynaysay ayaa leh anana waanu hagaagsanahay; kuwaasina way khaldanyihiin.
- 5. Isku dhac cad oo aan wanaag lahayn.** Labadii qoloba wax bay qodayaan. Natijadu waxa ay noqonaysaa anana waanu guulaysan, idina waydin khasaari, waxa ay u cararayaan xaggii madaafiicdii cus-cuslayd waxana ay u diyaar garoobayaan qarxinta qoladii kale marka dan laga gali waayo isku dhaca qarsoon: isku dhac laysu caddaysto ayaa ina daanwayne ah<sup>11</sup>.

## BAADHITAANKA ISKU DHACA

Hab aynu si wanaagsan ugu fahmayno isku dhacu waa in la dilaaciyo, lagu wareego, la hoos gurgurto si loo eego waxa taageeraya, oo la isku taago buurta ugu dheer si si wanaagsan loogu arko. Si kale haddii loo dhigo, waa baadhista isku dhacii adoo eegaya waxa aad hore uga ogayd iyo waxa aad ka ogaan karto adoo isku taxalujinaya lana imanaya xirfad baadhitaan. Waxa aad halkan ku arki waydiimo la rabo ina aad is waydiiso ama aad ka fikrto si aad u fahamto isku dhacii inta aanad xalintii wax ka qaban.

- **Waa ayo** cidda aad uga faa'iidaysa ama aad ugu khasaaraysa socodka isku dhacan?
- **Waa ayo** cidda aad uga faa'iidaysa ama aad ugu khasaaraysa haddii isku dhacii la xaliyo?
- **Yaa** ka danbeeya isku dhaca? Yaan si toos ah ugu jirin hase yeeshay bixinaya rasaasta?.
- **Waa maxay** arinka xudunta ah ee isku dhaca dhalinayaa? Waxa aad dhakhso u ogaanaysaa in arinkan gaadhitaankiisu adagyahay. Sida basasha oo kale, waxa jira galal badan oo kala sareeya oo dhibaatooyinkooda leh.
- **Maxaa** ay noqonaysaa natijada isku dhacu? Ma waxa imanaya nabad iyo deganaansho, maxayse kharash ku kacaysaa? Iyada oo la qirayo in aan isku dhacu had iyo jeer aanu xumaan keenin, maxaa la khasaarayaa marka xalinta la isku dayayo?
- **Waa maxay** wajiyada dhaqan ee arinkan khuseeyaa, haday jiraan, ee aanan anigu fahmaynin? Haddii taasi jirto yaa iga caawin kara?
- **Intee** ayuu isku dhacu soo socday? Ma karaa in uu muddo dheer sii jiro, mise waabu iska bakhtiyayaa is ahaantii, iyada oo aan muddo dheer la gaadhin? Looma baahna in la guda galo dagaal niyad ah oo qaadanaya waqt dheer.
- **Sidee** ayuu isku dhacu is ahaantii isu muujiyyay? Ma cid dhimatay ayaa wadada laga helay? Ma jaraa'id ayaa lagu canbaareeyay cidda kale? Mucaaridka oo si kulul oo dadban wax uuga sheegay arinkaa goob-bulsheed la isugu yimid? Dagaal la isu caddaystay?
- **Goorma** ayuu isku dhacu muuqdaa? Ma maamiln gaar ah? Ma marka uu roobku da'o? ma had iyo jeer?
- **Halkee** ayuu ka dhacay? Ma goob dukaan ah uun? Ma xuduud caalami ah? Ma dhabarka qof kale?
- Liisku wuu dheeraanayaa, hase yeeshay waydiinta ugu muhiimsan baadhis ahaan waxa weeye: maxaa uu? Maxaa uu isku dhacu u jiraa? Oo ay ku xigto maxaa uu? Maxaa uu? Maxaa uu? Oo haddana maxaa uu? Waxaa la yaab leh waxa ay waydiimahaan fududi keeni doonaan, marka waydiinta aynu wadno.

Dadka war tabiyayaasha ah iyo kuwa wax baadhaa waxa ay u arkaan su'aalaha ah kuma, maxay, goorma, meelma, sidee, iyo gaar ahaan maxaa uu, ina ay yihii asxaabtooda u fiican ee gaadhsiiya xudunta sheekadii ama gunta fal danbiyedkii. Maareeyayaasha isku dhacuna waxa ay u arkaan waydiimahaan asxaabtooda u fiican ee gaadhsiinaya xudunta isku dhacyadii iyo khilaafadkii. Marka ay jawaabuhu yimaadaan, waxa la yaab leh sida wayn ee ay inoogu dhawaynayaan xalinta isku dhacyadii iyo khilaafaadkii.

## **WADADII LOO QAADAYAY MAGAALADA ABILENE**

Waxa aynu rabnaa in aynu doodan ku gabagabayno fahamka dabiicada isku dhaca inaga oo ku xidhayna mid ka mid ah sheekooyinka gaagaaban ee xikmadda leh ee xiliyadan danbe, taas oo mid wayn oo maaraynta ku saabsan ah. Waxana ay ina gaynaysaa – sheekadu – koone la yaab leh oo isku dhca ah, mid dhamaanteen xili soo maray. Jerry Harvey, oo ah qoraha “ arinkii is burinayay ee magaalada Abilene”<sup>12</sup>, wuxuu ku doodayaa in karti la'aanta aynu maarayn kari waynay heshiis, ay u dhawdahay in ay keento bur bur u dhigma ka kadhasha karti la'aanta aynu ku maarayn kari waynay isku dhac. Haddaba sheekadan waxaa loo sheegi karaa si dhib yar: qoys ka tagay magaalada Bishkek oo tareen raacay tagayna magaalada Tokmak si ay uga qadeeyaan.

Sida uu Harvey sheegay, qoyskii ayaa sidaa goob hareereheed u fadhiiy galab kulul oo boodh badan iyaga oo jooga magaala yar oo ku taal Texas, goortaa ayuu sodoggii yidhi “ aynu kaxaysano gaadhiga oo aynu tagno Abilene si aynu uga cashayno hudheel”, Jeeri muu jeclaysan fikraddii ahayd in la kaxeeyo gaadhi “siidaan” (tagsi) ah oo gaboobay in kabaden boqol kilometer, isaga oo aan lahayn qaboojiye, kulaylkuna ka sareeyo 30°c. markii ay xaaskisu madaxa dhaqaajisay iyada oo sheegaysa ina ay ogashahay, wuxuu goostay isna ina uu ogolaado. Isaga oo si jilicsan is leh uga tag go'aankaa xun, ayuu yidhi “waxa aan rajaynayaa in hooyadaana sidaa rabto”. [Wuxuu is leeyahay maya ha tidhaahdo], markaas ayay sodohdiina jawaabitay oo ay tidhi “haa oo waan rabaa”. Halkii ayay u dhaqaaqueen magaaladii Abilene. Afar saacadood ka dib markii ay soo cuneen cunto aan fiicnayn, ayay ku soo laabteen gurigii iyada oo ay kulushahay, oo ay daaleen oo boodhkii Texas uu qariyay. Markaa ayay madbakhoodii miis ah hareero fadhiisteen, in cabaar ah markii ay aamusnaayeen, ayuu Jerry hadlay uu yidhi: “socod wayn ayuu ahaa, miyaanu ahayn?”, hadalkii ayaa laga wada aamusay, sidii oo mindi lagu taagay, halkii ayay sodohdii Jerry qiratay in aanay socodkii ka helin, dhab ahaantiina aanay marka horeba rabin in la tago. Waxa kaliya ee ay u ogolaatay ay ahayd, iyada oo dareemaysay ina ay ku qasbantahay. Jerry ayay ka dhaadhici wayday waxa uu maqlay. Maxaa yeelay waxa uu ogaa in aalu doonayn ina uu tago, waxa kaliya ee uu socodka u ogolaaday waa si qolodan xididka ah uu u raali galiyo. Haddana xaaskisii ayaa hadashay oo tidhi: “run ahaantii sababta kaliya ee aan u idhi haa aynu tagno waxa ay ahayd si aan adiga iyo labada waalid u raali galiyo”. Ugu danbayntii ayuu sodogii hadlay uu yidhi “maan jeclaysan in aynu tagno Abilene. Waxa aan is idhi uun malaha way wada qulubsanyihiin” [ee ha ku soo nafisaan].

Sida Harvey uu tilmaamayo, ururada iyo kooxuhu waxa ay inta badan qaadaan talaabooyin ka soo horjeeda waxa ay dhab ahaan doonayaan ina ay falaan, markaa ayay ujeedadii ay rajaynayeen in ay fuliyaan xagal daac ku keenaan. Waxa ay ka baqayaan khatarta is khilaafka markaa ayay qaadaan wado keeni karta isku dhac kii ka wayn. Waa imisa jeer inta aad adigu xildhibaan deegaan ahaan, ama xubin gole urur bulsheed ah, “aad qaaday wadadii Abilene” oo aad kari wayday inaad dareenkagaaga dhab u sheegto? Sida Peter Block uu sheegayo, marka uu sheegayay marxaladaha isku dhaca, marka aynu barano sidii aynu heerarka u horeeya (ee isku dhaca) u sheegikarilayn, waxaa inoo suurta galaya in aynu aragno isku dhaca iyo maarayntiisa inta aalu ina maax dumin. Mararka qaar isku dhacu waxa uu hoos galaa karti darideena aynu maarayn waynay heshiis. Markaa ayaynu tareenka u raacnaa Bishkek ama u raacnaa markabka bukhaarka ku shaqeeyaa magaalada Belgrade.

Thomas Jefferson ayaa laga sheegay ina uu yidhi “kala duduwanida ra'yigu waxa ay keentaa in wax lays waydiyo, wax is waydiintuna run ayay keentaa”.  
Harvey ayaa runtan si kale u dhigay oo soo jeediyay “ in wax is waydiintu keenayso in la helo kala duwanida ra'yiyada, runtuna waa ta kaliya ee qofku ku xasilayo”.

---

**Ka fkir socod aad dhawaan “Abilene” ku tagtay, tan oo ka dhalatay adiga oo aan karti u yeelan in aad heshiis la maarayso asaagaa iyo asxaabtaada. Maxay ahayd natijadii? Maxaad yeeli doontaa marka danbe haddii xaaladdan oo kale ay ku soo marto?.**

---



Xilligii  
Milicsiga

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Isku dhaca siyaalo badan ayaa loo sharaxaa. Wuxuu noqon karaa toos, mid dadban, mid wax tar leh, mid dhib leh, mid gudaha ah, mid dibadda ah, mid qofeed, mid la wadaago.
- Sida aynu u maaraynayno isku dhaca iyo khilaafaadku waxa ay ku xidhan tahay fikradda aynu ka qabno isku dhaca iyo kaalinta uu ka soo qaataay nolosheena.
- Arimo dhawr ah ayaa raadayanaya fikradaha aynu isku dhaca ka qabno. Iyo sida aynu isla markaa u maaraynayno isku dhaca: sida diirada aynu saarayno khibradeheenii hore, aragtida u horaysa ee aynu arinka ka qaadano, sida aynu wax iskugu gaygayno, wixii maskaxdeena ku qufulnaa, nacaybka iyo waxyaabaha galay madaxeena ee ku saabsan dadka kale.
- Isku dhacu waxa uu yimaadaa marka is af garansha waaga, khilaafaadka, cidhiidhiga, tartanka iyo dulmigu ay hadidaan wax agteena muhiim ku ah.
- Isku dhacu waxa uu la xidhiidhaa dad, iyo sida loo fikiro ama wax loo qabto, iyo mushkilado laga fikirayo.

- Maareeyaha isku dhaca saaxiibadiisa u wanaagsani waxa weeye su,aalahan: kuma? Maxay? Maxaa ay? Halkee? Goorma? Sidee? Iyo haddana maxaa uu? Maxaa uu? Maxaa uu?
- Laba goor fikir inta aanad wadada u qaadin dhinaca magaalada Abilene.

## **RAAD RAAC**

1. Slaiken, Karl A. iyo Ralph H. Hasson, sidii loo xakamayn lahaa wixii uu isku dhacu kalifi lahaa: cidda daabacday (Jossay – Bass, 1998 ), P.4-6.
2. Crawley, John, maaraynta isku dhaca wax tarka leh, (London: cidda daabacday Nicholas Brealey, 1992 )P.10.
3. Block, Peter, Tony Petrella iyo Marvin Weisbord, maaraynta khilaafaadka iyo heshiiska (Plain field, Nj: 1985), P.10.
4. Likert, Rensis iyo Jane gibson Likert, siyaalo cusub oo isku dhaca lagu maareeyo (New york: Mc Graw-Hill,1976 ), PP. 7-8.
5. Hockor, J. iyo W.Wilmot, isku dhaca qofka ee hoose (Dubuque, IA: madbacadda William Brown), 1991, P.12.
6. Fisher, Roger iyo William Ury, sidii haa loo gaadhi lahaa: gorgortanka heshiiska iyada oo aan qofku is dhiibin (Boston: shirkadda Houghton Mifflin, (1981), PP. 22-3.
7. Fisher, Glen, arinka qaab maskaxeedka ee isku dhaca isirka (Yarmouth, ME: madbacadda Inter cultural, 1998), PP. 20-1.
8. Crawley, OP.Cit., PP.21-3
9. Fisher iyo Ury, OP. Cit., PP.25-9.
10. Barnaamijyada xalinta isku dhaca asxaabta, xudunta isku dhaca: Overhead # II (1997).
11. Block, Petrella iyo Weisbord, OP Cit., P.130.
12. Harvey, Jerry, isburintii magaalada Abilene, dhaqdhaqaaqa ururka,3, 1974, PP. 63-80.

DULMAR  
ISTIRAATIIJIYADA  
MAARAYNTA ISKU DHACA

Cutubka

3

*Haddii aynaan badalin dhinaca aynu u jeedno, waxa aynu u dhawnahay in aynu gaadhno meeshii aynu u jeednay*

MAAH MAAH GABOWDAY OO SHIINA AH



Habka maaraynta isku dhaca	46
Tilmaamo eegid mudan	47
Kala duwanida dhaqanada	48
Kala duwanaanshooyin kale	49
Goob dhex ah	
53	
Diirad saarka doorashooyin kala duwan	53
Nuqdado muhiim ah	54
Raad Raac	54

Isku dhacu waa wax murugsan. Waa muhiim, inta badan wax ayuu burburiyaa, tamar ayuu ku galiyaa, waa lama huraan, wuu qarsoonyahay, waa qof ahaan, urureed, bulsheed, caalami, khatar, lagama maarmaan, waanu ku xoraynayaa kuna nasinayaa marka la xaliyo. Maaraynta isku dhaca waxa soo galaya in la badalo dhinicii loo jeeday, oo goobtii laga dhaqaaqo, si aynu wax u qabano, waxyaalaha inagu xeerana si wayn dheeli tir inoo dhex maro. Waxaa nasiib wanaag ah in ay waxyaalaha la kala dooranayo ee maaraynta isku dhacu ay si ballaadhan u fideen sanadadan danbe, wax badana laga fahmay tii faa'iido leh iyo tii aan lahayn. Inta badana haddii aanay ahayn dhammaantoodba, waxyaalaha lakala dooranayaa khatartooda ayay leeyihii. Waxana ay inooga baahantahay barashada isticmaalkoodu jajabni.u babac dhigna way uga baahantahay dadka u qalma in ay galaan arimaha isku dhaca iyaga oo ay ka go'an tahay ina ay caawiyaan qayrkood sidii ay xal u gaadhi lahaayeen.

Buugana ugu horayn waxaa loogu tala galay dadka noqonaya dhex dhexaadiyayaal, gorgortamayaal waawayn, xiisad damiyayaal, iyo qaar si hawl karnimo ah u xaliya hawl (dhibaato) maamuleedka.

**Waxa uu yidhi “kaalaya cidhifka gabiga”  
Waxa ay yidhaahdeen “waanu baqaynaa”.  
Waxa uu yidhi “kaalaya cidhifka gabiga”  
Waxa ay yidhaahdeen “waanu baqaynaa”.  
Waxa uu yidhi “kaalaya cidhifka gabiga”  
Way yimaadeen  
Wuu riixay  
Way duuleen**

#### ***GUILLAUME APPOLLINAIRE***

Arimo la kala doorto oo dhawr ah oo la xidhiidha maaraynta isku dhaca ayaa ah qaar jiray qarniyo badan, waxaana ka mid ahaa dagaal la qaado, amar boqor soo saaro, rabshad wadayaasha oo qaarad cusub loo mastafuriyo, siyaasad, iyo suldad sare oo la cuskado. Nasiib darro, istiraatijiyyadaasi waxa ay inta badan u jeedaa dhinac kaliya, waxaana ay cadaadinaysaa dadka inaga yar hooseeya heer ahaan, dhinaca xoolaha, awoodda, soo jiidashada, ama laga xidhiidho badan yahay. Markaa waxaa yimid casri xagga cilmiqa nafta wax badani kordheen. Dhab ahaantii way jireen wajijo maskax fiican lahaa oo lagu maaraynayay isku dhaca oo soo jiray illaa dabayaqaqadii “1940” nadii iyo horaantii kontonadii. Wuxaase ay u ekaayeen in aanay aad u urursanayn ama lahayn qaab alkumeed. Amaba waxa aan jirin habab ay dadku afkaartooda u soo bandhigaan una gudbiyaan.

Machadka Tavistock ee boqortooyada Britain ku yaala ayaa sanadadii (1940) nadii bilaabay baadhitaan inuu ku sameeyo arimaha awooda iyo suldada, waxyaalaha xudunta u ah isku dhacyada dadka, ururada, iyo isku dhacyada caalamiga ahba. Shaybaadhada tababarka wadaniga ah (NTL) ee dalka maraykanka ayaa bilaabay inay bixiyaan “tababar dareenka ah” oo ahaa aqoon iswaydaarsiyo la doorayo dad, kuwaas oo iskuood isugu dhacayay, kadibna eegayay sidii ay u xalin lahaayeen mushkiladaa ay abuureen. Wuxaana loo yaqaanay wax barasho ka imanaysa wax samayn. Halkaa ayay ka bilaabantay kaalinta fududeeyuhu iyada oo dadaidlkaa ay ka soo baxday istiraatijiyo qofeed oo qofku caawiyo dadka kale si ay ugaadhaan go'aan qaadasho wax ku ool ah iyo mushkilad xalin.

Talaabooyinkaa kala duduwanan ee ku saabsanaa fahamka dhaqanka qofka bani aadamka ah ayaa si dhakhso ah u kobacday oo noqotay geedi socod wadari (kooxi) ku dhaqaqdo, lana eego sida dadku uu si wax ku ool ah u wada shaqayn karo. Waxa ay dadaaladaasi keeneen in ay bedelaan habkii ay u shaqaynayeen ururadii, shaqooyinkii gaarka ahaa, bulshadii, qolooyinkii aan macaash raadiska ahayn, kuwaas oo wacyigoodu xagga shaqadooda uun uu ku waajahnaan jiray. Waxa kale oo qayb ka ahaa tiknoolajiyadaa bulsho ee cusub in ahmiyad la siiyo maaraynta isku dhacyada heerkooda kala duwan ee dadku iska soo dhex galaan (gaadhaan). In la helo habab cusub oo loo maareeyo isku dhaca, lagana dhigo istiraatijiyyadihi gabobay qaar tayo badan ayaa noqotay farsamo soo kobcaysay.

Buugaga leh "sidee wax loo qabtaa" ee ku saab sanaa gor gortanku waxa ay bilawdeen ina ay ka muuqdaan khaanadaha buugaagta sanadadii {1960} kii. Hasa yeeshii istaraatijiyyaddii ay taageerayeen waxa ay u ekayd in ay aad ugu jeeday sidii uu ugaadhi lahaa faa iido mar kaliya ah qofka gorgortamaya ee xariif ka ahi, ee xooga may saarin sidii loo gaadhi lahaa heshiis guud {dad badan} oo kafayow dhibaatadii jiitanka. mudadan danbe gorgortankii waxa uu helay ixtiraam markii ay qoraayada iyo xirfadlayda ay ka midyihin Fisher iyo Ury ka dhigeen gorgortanka mabda leh heer la raaco , dhinaca go'aan qaadashada goobaha uu hadheeyay isku dhacu. Waxase jira in qoraayadaa imika wax laga sheegayo, baaqii ay ku taageerayeen wajigoodan mabda'a leh, iyaga oo aan wax isbadal ah ku samayn si uu ula jaan qaado dhaqanada kala duduwan. Mabaadiidaana mar danbe ayaynu eegi inaka oo wadna istaraatijiyyadda iyo muranka arinkaa ku saabsan.

Sida aynu hore uuga doodnay, waxa jira xidhiih muuqda oo ka dhexeeya bulshada ka qayb qaadashadeeda iyo dhedhexaadinta, si loo helo xalintii isku dhaca. Hadaba sida ay qabto Susan Carpenter, labadan weji oo keenaya dimuqraadiyd badan iyo go'aan qaadasho tayo leh iyo istaraatijiyyadii mushkilad xalintu waxa ay soo muuqdeen sanadadii {1970} nadii iyaga oo ah xirfado isku xidhan. In kasta oo xaaladdani shaqo ahaan ay cusbayd, Hadana geedi socodka dhexdhexaadinta oo dadka is hayaa ay u yeedhan jireen cid sadexaad oo caawisa si go'aan ay ugaadhaan waxa ay ahayd mid jirtay illaa qarnigii{14}aad. In la raadsado xukun iyo heshiisiina wax badan kamay danbynin, waxaana uu taaba qaadkoodu xidido ku leeyahay qarnigii 15 naad<sup>2</sup>.


Bal aynu eegno sida istaraatijiyyado kala duwan la iskugu keenay ee ay usharaxeen qoraayo kala duwan oo casri ah iyo dad xirfadlay ah oo isku dhaca maareeyaa. Waxa xeradani ay u qaybsantahay laba qaybood oo kala duwan hase yeeshii isku xidhan. Ta hore waxa ay ka hadlaysaa arin la kala dooran karo oo aynu qaadan karno marka isku dhac aynu waajahayno, sida in laga fogaado ama iskaashi yimaad. Ta kalena waxa ay ku saabsan tahay xirfadihi iyo istaraatijiyyadii isku dhaca lagu xalinayay. Waxoogaa aya labada arin u dhexeeya, waase waxoogaa muhiim oo u baahan waxoogaa in aynu daba galno.

## HABKA LAGU MAAREEYO ISKU DHACA

Tusaalahi isku dhaca ee u eeg mid dadka kale ka caawiyay in ay isu gegeeyaan afkaartooda ku saabsan dhaqanka qofka marka isku dhac uu yimaad waxa laga soo qaaday mid laba waji leh oo qeexaya shan istiraatijiyadood oo isku dhaca lagu maareeyo.<sup>3</sup> labadaa waji waxa weeye: 1) xaq sheegasho waa heerka qofku isku dayo in uu helo danihiisa, iyo 2) Iskaashi, waa inta uu qofku isku dayo inuu raali galiyo danaha qofka kale.

Shanta arin ee la kala dooranayaa waa:

1. **Tartan**: waa xaq sheegasho iyo dhaqan aan iskaashi lahayn oo diirada saaraya danaha gaarka ah haba khasaaro qofka kale eh.
2. **Ia jaan qaad(meelayn)**: adiga oo aan arin ku dhagin oo dhaqan iskaashi muujiya, illoobana danahaaga gaarka ah si aad danaha dadka kale u daryeesho.
3. **Diidmo**: addoon xaqna doonin, dhaqan iskaashina lagaa helin oo aan dantaadana daba socon ta dadka kalena aan daryeelin.
4. **Wax wada qabad**: xaqqaagii oo aad doonto, dhaqan iskaashina lagaa helo, xoogana aad saarto la shaqaynta cidii kale si adna aad dantaadii u gaadho cidda kalena danahoodii u gaadhaan.
5. **Wax isla eegid**: in meel dhexe la istaago oo xaqqaagiina aad doonto, iskaashina yeelato oo inta badan la yidhaa khilaafkii oo la kala firdhiyo, oo la raadiyo meel dhexe oo la iskugu yimaado.



## **TILMAAMO EEGID MUDAN.**

Waxa jira dareen odhanaya ha la qiimeeyo arimahaasi la kala dooranayo, laakiin arimahaasi midba meel ayaa looga baahan yahay marka la xalinayo khilaafaadka iyo isku dhacyada. Bal aynu eegno waxa uu Thomas ka odhanayo goorta aynu eegayno isticmaalkooda iyo goorta aynaan eegayn. Xusuusnow arimahan is gad-gadigooda. Tusale ahaan tartanku waxa uu la xidhiidhaa meel ku dhag iyo iskaashi la'aan; halka la jaan qaadka ay dhinaca kale ku badan tahay wax wada qabadku kuna yartahay meel ku dhagu.

Ka fikir tartanka marka:

- Marka aad u baahan tahay go'aan deg deg ah oo kama dambayna.
- Arin aan aad loo aqoon oo u baahan fulin.
- Marka aad garanayso in aad sax tahay.
- Marka aanay jirin wax la kala doortaa.

Wax wada qabadku waxa uu macno samaynayaa marka:

- Marka laba maskaxood ay dhab ahaantii maskax kaliya ka fiican yihiin, ee wax soo saarkiina ay wada shaqayntu xoojinayso.
- Marka arimaha ay daneeyaan labada dhinacba ay yihiin qaar aad u muhiim ah in laysla eego.
- Marka aad uga baahan tahay dhammaan cidda arinku khuseeyaa in ay arinkan soo galaan.
- Marka aad doonayso in aad hore u mariso xidhiidhka shaqada.
- Marka aad ku jirto xaalad aqoon korodhsyi, sida: waxaad rabtaa inaad baadhis ku samayso fikradahaaga, oo aad fahamto qofka kale aragtidiisa iyo waliba taadana sida loo arko.

In la iska diido isku dhaca iyo khilaafku waxa ay yihiin doorasho wanaagsan, marka:

- Ay jiraan arimo kale oo ka muhiimsan oo in la eego u baahan.
- Ay fursad yari jirto oo baahiyahaaga iyo danahaaga aad ku gaadhaa.
- Aad doonayso in dadka labada dhinac ee isku dhacu ay qaboobaan (xasilaan).
- Aad u baahantahay xog dheeraad ah.
- Marka cid kale ay isku dhacii iyagu si wax ku ool ah u xalin karaan.

Isku day inaad la jaan qaado, marka xaaladaha isku dhaca iyo is af garansha waagu ay yihiin sidan:

- Aad rumaysato in aad khaldan tahay.
- Marka arimuhu ay dad kale aad muhiim ugu yihiin.
- Aad doonayso in aad samaysato taageero mar dambe wax ku tarta.
- Aad doonayso inaad khasaarahaaaga yarayso.
- Ay muhiim tahay in dadka la isku wado.

Ugu dambayntii waxa aad dooni kartaa in wax la isla eego marka:

- Ujeedooyinka aad doonayso inaad fuliso aanay u qalmin colaad.
- Dadka isku dhacu dhex yaal ay ka go'an tahay in ay fuliyaan ujeedooyin kala duwan, sida xagga maamulka, ama khilaafaad shaqo.

- Xal ku meel gaadh ah oo aad samaysaa uu kuu suurto galinayo in aad ka shaqayso arimo adag.
- Marka xal deg deg ah loo baahan yahay.

Hase yeeshee waxyalahaa la soo jeediyay waxa dhici karta in aanay ku haboonaan dhaqanka aad ka hawl galayso. Bal aynu eegno is gadgadiga dhaqanka ee raadka ku leh isticmaalka istiraatijiyadaha kala duwan ee xalinta isku dhaca.

## **KALA DUWANIDA DHAQANADA**

Waxa aynu cutubkii furitaanka ku sheegnay in dhaqanka aynu ka hawl galaynaa uu raadaynayo habka aynu u maaraynayno isku dhaca. Dhaqanka waxa aynu uga jeednaa, waxyalahaa la qiimeeyo, fikradaha, caadaadka iyo akhlaaqda, kuwaas oo sharaxaya sida aynu si haboon ula dhaqano xaaladaha nolosha ee goobo gaar ah. Si noloshu soo jiidasho u yeelato, sifaadkaasi waxa laga yaabaa in si kala duwan loo sharaxo isla bulsho kaliya gudeheeda, tusaale ahaan dhaqanka shirkad jinsiyado badan oo ka hawlgasha bulshadu, waxa laga yaabaa in ay ka duwanaato dhaqanka urur ka mid ah dawlada hoose. Halka arday wax ka baranaysa jaamacad cusub oo isla bulshadii ihi laga yaabo in ay samaystaan dhaqano iyo caadooyin duwan oo la jaan qaadaya manhaj caalami ah, iyo kuliyado iyo ururo ardaydu leedahay. (Ardayda wanaagsani dhaqanka fiican ee soo jireenka ah way dhowraan).

Marka aynu eegno tusaalahaa imika uun la sharaxay, waxa aynu rumaysanaynaa in uu qeexayo dhawr waji oo maaraynta isku dhaca ah, kuwaas oo ku kala duwan dhinaca isticmaalka iyo haboonaanta iyada oo ay ku xidhan tahay sida iyo goobta lagu isticmaalayo. Marka sidaa la yidhaa, waa in aan tusaalahan loo arag in uu yahay mid caado ah, in kasta oo qorayaashii ay u eexanayeen dhinaca wax wada qabadka. Susan Schneider iyo Jean-Louis Barsoux ayaa tusaya xaalad soo jiidad leh oo ah sida koox maamul ah oo ka kooban maamulayaal ka kala socda qaybo dhawr ah oo dunida ihi ay u maaraynayaan isku dhaca iyo is af garansha waaga. Tusaale ahaan, maamule ka socda dal awoodu aanay si siman u qaybsanayn waxa laga yaabaa in uu u jan jeedhsado in uu iska diido isku dhaca, isaga oo u celinaya sida maamulka loo kala leeyahay halkaa oo iska hor imaad uu ka dhacayo ama markaa ha dhaco ama mar dambe eh. Maamule kale oo ka socda dal wacyi ahaan xoojiya xidhiidhka waxa laga yaabaa in uu u janjeedhsado xaggaa la jaan qaadka marka isku dhaciil la eego.<sup>4</sup>

---

**Dhammaanteen arimaha la kala dooranayo waynu isticmaalnaa si aynu u maarayno isku dhaca, waana loo kala badsadaa isticmaalka arimahaa. Bal hadda eeg khibradaada gaarka ah ee isku dhac maaraynta waxana aad u qortaa si kooban mid ka mid ah shantan darajo.**

---

Xilligii  
milicsiga

Khibrad aad tartan gashay:

.....  
.....

Mid aad arin la jaan qaaday:

.....  
.....

Mida aad isku dhaca diiday:

.....  
.....

Mid aad cid wax la qabsatay;

.....  
.....

Mid aad wax isla eegid ku shaqaysay:

.....  
.....

Marka aad qorto khibradahaaga gaar ahaaneed, bal waxa aad ka milicsataa dhinaca (1) doorashada aad u malaynayo in aad xoog u isticmaasho; (2) ta aad u malaynayo in aad u yaraysato marka aad maaraynayo isku dhaca, iyo (3) istiraatijiyyada maaraynta isku dhaca ee aad u baahantahay in aad hore u mariso.

## KALA DUWANAANSHOORYIN KALE

Sida aynu hore u sheegnay, arinkan labada waji leh ee ay horyaalaan shanta arin doorasho waxa weeye goobtii cidda kale dhaqaaqa ay ka bilaabaysay. Robert Quinn iyo asxaabitii la jiray waxa ay qaateen shantan istiraatijiyyadood markaas ayay isugu ururiyeen saddex:

- Iska hor imaad la'aan:** oo ay soo hoos galayaan diidmada ama la jaan qaadku.
- Xakamayn:** waa marka tartan la qaato, iyo
- Xal doonid:** waa isku dayga in wax la wada qabto ama wax la isla eego.<sup>5</sup>

Dhawr ka mid ah tusaalayaasha aragtiyeed ee dadka kale diyaariyeen si ay inooga caawiyaan fahamka mabaadi'da iyo dhaqan galinta isku dhac maarayntu, waxa ay inta badan ku xidhiidhiyaan arimihaa la kala dooranayo istiraatijiyo rasmi ah oo xirfad ku dhisan oo gaar ah. Tusaale ahaan Karl Slaiken iyo Ralph Hasson, waxa ay sharaxayaan afar arin doorasho iyo dhawr istiraatijiyyadood.<sup>6</sup>

**1. Diidmo**

- Si aad u xalisho isku dhacii ha qaadin talaabo

**2. Wax wada qabad**

- Qofka oo xaggiisa ay ka bilaabanto.
- Dhinacyada oo wada hadla.
- Dhinac saddexaad oo dhex dhexaadiya.


**3. Suldad sare**

- In loo gudbiyo xagga sare iyada oo la marayo silsiladda kala saraynta – ambiil gudaha ah iyo baadhis rasmi ah – la helayo dhammaan noocyadii jawaabo loo baahnaa ee ururka (ama maamulka).
- Maxkamad hordhig: in la maro maxkamadaha ama hay'adaha sare ee bulshada.

**4. Awood dhinac kali ah oo la muujiyo:**

- Gacan ka hadal.
- Feedh.
- Halgan qarsoon.

Wadada ay doorteen Slaiken iyo Hasson in ay ku maareeyaan isku dhacu la yaab ma laha. Waxa ay ku talinayaan istiraatiijijo sidan u qaabaysan: Qofkii oo wax bilaaba, gorgortan, dhex dhexaadin, iyada oo suldad sare la isticmaalo, iyo ugu dambayntii xoog muujin. Waxa laga yaabaa in aad dareentay in aanay ku talin diidmo in kasta oo taasi wax la dooran karo tahay. Halkan waxa aad ku arki mid kasta oo ka mid ah arin doorashadii iyada oo si qoto dheer loo eegayo.



## DOORASHOOYIN KALA DUWAN Oo DIIDMADA LA XIDHIIDHA

Mararka qaar ayaa in la qaado talaabo ah “sug oo eeg” ama iyada oo aayar la iska jiro isku dhacii uu micno samaynayaa, laakiin waa in go’aanadaasi (labaduba yihiin) qaar aad dareensantahay (u kastay). Waxa aynu goosan karnaa, tusaale ahaan, in marka muddo ka soo wareegto uu heerkii isku dhacu isbadalayo. Dhab ahaantii waxa dhici kara in isku dhacii uu sii xumaado. Ama waxa dhici kara in siyaalihii kale ee isku dhaca loo xalin lahaa ay isa soo xidhaan sababtu waxa ay doonto ha ahaatee. Ama waxa laga yaabaa in ay tahay xog dheeraad ah oo aynu ubaahanahay. Wajiyada xun ee ka dhalan kara isku dhac diidku waxa laga yaabaa in ay bataan. Haddii aynu waxba qaban wayno waxa aynu noqonaynaa qaar ka sii gooniyooba (fogaada) xaaladii, iyadoo taasi natijadii ka dhigaysa wax aan la malaysan Karin. Iyo inaga oo laga yaabo in aynu lumino fursado aynu ku raadayn karno waxa dhacaya.

### Doorashada Wax Wada Qabadka

Doorashadan waxa ku jira dhawr istiraatijiyadood, inaguna si qoto dheer ayaynu cutubyada soo socda arinkan uugu guda gali doonaa, waxana weeye:

- **Qofka ama kooxda ama ururka oo wax bilaaba.** Tan waxa ka mid ah dooda aan rasmiga ahayn iyo mushkilad xalinta uu mararka qaar fududeeyo qof meesha ka tirsani ama dibadda ka ah ciddii arinka bilowday. Geedi socodkan oo tafa tiran waxa lagu xusay buugga qorshaynta ka qaybqaadashada.
- **Gorgortan.** Waxa weeye geedi socod la is baayacayo laga yaabo in loo baahdo kaalmo xirfadysan, ama waaba laga kaftoomi karaa kaalmadaa. Haddii ay jiraan dad xirfad lay ihi, waxa weeye qaar matalaya cid hawsha u dhiibatay oo labada dhan ee is haya midkood ah, maaha qaar labada dhinacba ama dhammaan dhinacyada isku dhaca matalaya. Gorgortanka inta badan waxaa loo arkaa xirfad dadka gudahooda khusaysa, taas oo maamulayaasha iyo qayrkoodba ay galaan si loo gaadho go’anka ugu wanaagsan ee suurta gal ah dhinaca aragtidooda. Waxana aynu u arki doonaa geedi socod khilaaf xalin ah oo habaysan, ujeedo badana leh.
- **Heshiisiin.** Waxaa halkan soo galaya cid saddexaad oo la ogolyahay, dhexna ah, cidna aan la jirin. Heshiisiintu inta badan waa heir ka mid ah gorgortanka iyo dhex dhexaadinta oo loogu talo galay ina uu xiisadda dajiyo, xidhiidhkana wanaajiy, abuurana jawi is aaminid ah. Dhab ahaantii, way adagtahay in heshiisiinta laga sooco gorgortanka iyo dhex dhexaadinta kuwaas oo ah geedi socodyo isku dhac xalin ah oo cid saddexaad kaalmayo. Way badan tahay inta la isku dayo ilaalinta is aaminkii iyo xidhiidhkii furnaa ee dhexyaalay dadka isku dhacay.
- **Dhex dhexaadin.** Waxa ay ku sifowdaa ina ay tahay geedi socodkii gorgortanka oo la sii kordhiyay lana horumariyay. Dhex dhexaadinta waxa soo galaya cid saddexaad oo caawinaysa kana dhigaysa awooddii go’aan qaadashada mid ku jirta gacanta dadka isku dhacay. Dhex dhexaadinta inta badan waxaa la adeegsadaa marka dadkii isku dhacay dareemaan in aanay imika ka dib kali ahaantood go’aan gaadhi Karin. Waxa u wayn ee

ka dhasha labadaa arin ee ah gorgortanka iyo dhexdhexaadintu waxa weeye in la gaadho xal dhamaystiran oo la wada faa'iiday.

### **Doorashooyinka Suldada Sare**

Haddii istiraatiijiyada gorgortanka iyo dhexdhexaadintu ay ku guulaysan waydo heshiis, markaa waxaa jira doorashooyin kale. Waxa weeye geedi socod dhammaan go'aankii cid saddexaad uu gacanta uuga galayo. 1)Waxaa yaraanaya in dadkii khilaafku ka dhexeeyay gacanta ku hayaan natijadii. 2)Waxaa kordhaya in cid kale go'aan qaadashadii faraha la gasho, iyo 3) Waxaa kordhaya in ay dhacdo ama guul ama khasaare (oo aan waxba ka dhaxayn) ama ciddii oo go'aankii istidhaa ma sidan ayuu noqon mise sidaa.

Ma nihin qaar farsamooyinkaa si ballaadhan u sharaxaya maxaa yeelay ma aha kuwa loogu jecel yahay marka la maaraynayo ama la xalinayo isku dhacyada, waxaa se muhiim ah in aad ogaato uun waxa ay yihiiin arimaha la kala dooranayaa. Waxa aanu rajaynaynaa in adiga iyo cidda aad wakiilka ka tahay ay iska diidi doonaan arinkan. Arimahanina waxa ay noqon karaan qaar isugu jira hab bulsho iyo mid gaar, sharci iyo xirfado sharci lagu sii fogaday ah, kuwaas oo loo adeegsanaayo sidii go'aankii isku dhaca loo maarayn lahaa, ma aha qasab in tan micnaheedu yahay xalinta isku dhacii.

○ **Gudaha:** kani waa mid ku fula go'aan maamul. Qof suldad sare haya ayaa gaadhaya go'aankii, taas oo meelaha qaar looga yaqaan arinkii oo "salaanka xaggiisa sare loo laaday". Waxaa la filayaa in go'aanadaasi ay ku dhisan yihiiin xaqiyooyin oo ay dan gaar ah ka madhan yihiiin. Kuweena leh kormeerayaal ama madax, waxa ay garanayaan in dadkaasi inta badan dan gaar ah aanay ka madhnayd. Wajiganina waa qaab maamul oo nooc ah oo isagana loo adeegsado maaraynta isku dhaca.

○ **Dibada.** In la raadsho cid idin kala xukunta (kala saarta) ayaa ah talaabada labaad inta aan xagga maxkamadda loo dhaqaaqin si go'aan loo raadiyo.

Tani inta badan waa mid tabaruc ah, ahna mid gaar ah oo dadkii isku dhacay ka codsanayaan cid saddexaad oo aan cidna la jirin dhexdhexaadna ah ina uu kaaliyo si go'aan loo gaadho. Go'aankani waxaa laga yaabaa in uu yahay mid naseex ah oo la qaadanayo. Waxa ugu wayn ee ay ku kala duwan yihiiin dhexdhexaadinta iyo "kala saarid" raadintu, waxa weeye geedi socodka go'aanka. Xagga dhedhexaadinta, ciddii saddexaad ayaa labada dhinac dhex soc-soconaysa si dadka muransani go'aan u gaadhaan. Laakiin se xagga kala xukunka, go'aankii gacanta dadka muransan wuu ka baxay waxana uu ku jirah u doortaan cidda si wada jir ah u matalaysa. Waxana nasiib darro ah in natijadu tahay (marka arinka xaakin loo dhiibto) dhinac faa'iida iyo dhinac khasaara, amaba labada dhinac oo khasaara. Waxa weeye xaaladaa hore labadii dhan dhinac ayay gartu ka qoslinaysaa, amaba qof ayaanay murugo badani hayn marka ka kale loo eego. Xaaladda labaadna, labadii dhinacba way ka xun yihiiin.

Waxa kale oo jira labada waddo oo kale oo ah suldad sare oo ay u gudbi karaan dadka is khilaafay si ay go'aan u gaadhaan. Ta hore waxa ay martaa nidaamka maxkamadaha (xaq daba galkii) halkaa oo dadka is haysta lacag iyo waqtii iyo sumcad ahaanba ay wax badani ka galayaan. Talabaadna waa geedi socodka mara sharci dajinta. Khilaafaadka noocaas ihi waxa ay galaan arimo badan iyo dad badan. Labada xaaladoodbana go'aanadu caado ahaan waa guul ama khasaare ama waji aan la saadaalin Karin.

## AWOOD MUUJINTA AMA DOORASHADA ARIN SHARCIGA KA BAXSAN

Waxa soo galaya talaabo siyaasadeed, bulshada oo diidmo muujisa, shaqaalaha oo mudaharaada, ciddii oo la qasbo, xataa gacan oo timaada, arimahaasi oo dhan oo buugani arimaha uu ka hadlayo ka baxsan.

Labada cidhif (ee arinkan xidhiidhsan) waxa yaala arimo la kala dooranyo oo ku saabsan maaraynta isku dhaca, lagana yaabo in natijadoodu noqoto, ama arin aan la saadaalin Karin, sida natijada diidmada, ama galaysa in xoog la isticmaalo, waxa labadaa cidhif u dhexeeya dhawr arin oo la kala dooranyo, waxana go'aankii la gaadhayaa iyada oo aanay dadkii is hayay raad toos ah (go'aankaa) ku lahayn, waxaa ka mid ah go'aanada suldadaha sare ka soo fula (maxkamad iyo wax la mid ah). Ugu dambayntii waxaa ina horyaala doorashadii ama istiraatiiiyadii wax wada qabsiga, tani oo siinaysa dadkii is hayay fursad ay ku xakamayn karaan ama ku maaran karaan geedi socodkii go'aan qaadashada ama mushkilad xalinta.<sup>7</sup> inakuna Doorashooyinka noocaas ah (sida wax wada qabsiga)ayaynu xoogga saaraynaa laga bilaabo halkan.

### GOOB DHEX AH

John Crawley waxa uu isticmaalaa ereyga ah "maaraynta isku dhaca ee wax dhisika ah", waa marka uu sharaxayo wajiga uu u maareeyo is afgaransha waaga iyo khilaafaadka. In kasta oo habkiisu wax wayn aanu ka duwanayn hababka kale, haddana ereyga 'wax dhis' ee uu Crawley isticmaalay ayaa fikradhiisa iyo istiraatiiiyadiisa siinaya maqaar ujeedo iyo horumarin leh. Sharaxiisa ku saabsan maraynta wax dhiska ah ee isku dhacyadu waxa uu ka koobanyahay afar mabda' ama talaabo:<sup>8</sup>

- Fikrad cad iyo xukun fiican.** Waa in uu kuu cad yahay waxa aad aragtaa, iyo sida aad u xukumaysaa iyo sida aad ula dhaqmayso dadka iyo xaaladahaba. Su'aasha muftaaxa u ah fahamkuna waxa weeye: waa maxay waxa jiraa (dhacayaa)?
- Naftaada oo wacyi qabta oo aad xakamayso.** Waa in aad fahamto oo aad gacanta ku dhigto dareenkaaga iyo dhaqankaaga. Iswaydii: arinka sidee ayaan u dareemayaa?
- Kartida aad u leedahay baadhista iyo is barbar dhiga ra'yiyada iyo mawqifyada kala duwan.** Dib u joogso oo qaado sawir dheeli tiran isna waydii: arinka ma dhamaystiray mana caddaalad falay?
- U furfurnow dadka kale.** Waa in aad diyaar u tahay in jawaabtaadu mid fiican noqoto.

**Ujeedada u wayn ee maarynta waxdhiska ah e isku dhacu waxa weeye in go'aan la raadiyo, kaas oo sida uugu wanaagsan ee suurtagalka ah isugu dheeli tiraya adiga, dadkii, xaaladii, iyo natijadii.**



**Diirada Oo La Saaro Wax Yaalaha  
Kala Duwan Ee La Kala Dooran Karo.**

Bal aynu socono si aynu si qoto dheer uugu eegno saddex istiraatiijiyadood oo waawayn oo lagu maareeyo isku dhaca: *Wada hadal, gorgortan mabda' leh, iyo dhexdhexaadin*. Waxa aynu rumaysanahay in saddexdaa waji ay keenayaan guul wayn oo caawinaya dadkii kale. Marka la sharaxayo gorgortanka iyo dhexdhexaadinta waxa inta badan laga eegaa dhinaca suugaanta iyo dhinaca ku camal falkooda. Haddaba waxa aynu dooranay ee aynu ku magacawnay “*farshaxankii wada hadalka iyo xirfado muhiim ah oo kale oo xidhiidh hoose leh*” waa arin la dooran karo hase yeeshoo ah mid isku daadsan oo ay adagtahay in aynu qaabayno una dhigno qaab talaabo talaabo ah. Wada hadalka oo ah habab iyo khibrado isku jira waxaa loo arki karaa mid uu xilligu qeexayo lana xidhiidha gorgortanka mabda'a leh iyo dhexdhexaadinta.

Taariikh ahaan, istiraatiijiyadaha gorgortanka iyo dhexdhexaadinta duruus ayaa u koradhay, laga bartay wada hadalada looga jeeday in la qaboojiyo isku dhacyada lana caawiyo dadka, kooxaha iyo bulshooyinka si ay u gaadhaan go'aano wanaagsan. Mudadan dambe ee taariikh ahaan dhawayd danaynta wajiyoo ka mid ah gorgortanka mabda'a leh iyo dhexdhexaadintu (waa sida inta badan lagu sharaxo laguna hawlgalo eh) waxa ay u fureen albaabka mawjad cusub oo wada hadal xudun u yahay oo ay dadku adeegsadaan xaaladaha isku dhaca.

Ujeedada cutubyada soo socdaa waxa weeye in si gaar ah looga hadlo arimo dhawr ah oo dawladaha hoose, ururada bulshada, iyo bulshadu kala dooran karaan oo adeegsan karaan si ay si wax dhisid ah ugu maareeyaan is af garansha waagooda iyo khilaafaadkoodda. Si loo diyaariyo goob looga dodo si qoto dheer saddexda arin ee lakala dooranayo, waxa aynu doonaynaa in aynu eegno dhinacyo qof ahaan ku saabsan oo la xidhiidha isku dhac maarynta. Wixa halbwax u ah isku dhacyada si guul leh loo maarynayo fikrado iyo xirfado inagu caawinaya ina aynu si wax ku ool ah uula xidhiidhno dadka iyaguna danaynaya xalinta khilaafaadka.

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Isku dhacu waxa uu noqon karaa mid murugsan. Sidaas oo kale ayay istiraatiijiyada maarynta isku dhaca badhkeedna u noqon kartaa mid murugsan.
- Maamulayaal hawl kar ah iyo qolooyin kale ayaa qarniyo badan waday gorgortanka iyo dhexdhexaadinta isku dhaca. Waa muddo dhaw uun markii xirfadahaa loo dhiibay xirfadlay ka dhigatay hawl nololeed.
- Iyada oo aynu eegayno heerkala xaq sheegashada iyo iskaashiga ee jira, waxa aynu go'aan san karnaa in tartan yimaad, ama jaanqaad, ama wax wada qabad ama isla eegid lala galu dadka aynu isku dhacnay amaba ina aynu farahaba ka qaadno isku dhacii, haddii sidaasi danaheena u roontahay.
- Qaabka dhaqan ayaa isna raad ku leh habka ay dadka iyo ururada iyo

bulshooyinku u maareeyaan isku dhaca iyo khilaafaadka.

- Gorgortanka iyo dhexdhedaadintu waxa ay ka mid yihiin istiraatijiyyada wax wada qabashada ee ugu caansan Aadna loo isticmaalo marka la xalinayo isku dhacyada iyo khilaafaadka.
- Dhexdhedaaddintu waxa weeye wajiga isticmaalkeedu uugu sahlanyahay ee cid saddexaad soo dhex gali karto xalinta khilaafkii.
- Marka cidda isku dhacday ama is khilaafsani ay kiiskooda u geeyaan suldada sare sida, xaakimada, garsoorayaasha, qaadiyada natijadii arinku gacantooda way ka baxaysaa.

## **RAAD RAAC**

1. Carpenter, Susan, Ceeryaanta saaran kaalmihii u dhexeeyay ka qayb qaadashada bulshada iyo hawl wadeenada khilaaf xalinta, xidhiidhka hoose: joornaalka bulsho ka qayb qaadashada sanadka 1995, mujaladka1, tirada 1, P.37
2. More, Christopher, geedi socodka dhex dhexaadinta: istiraatijiyo dhab ah oo lagu xaliyo isku dhaca (San Francisco, madbacadda Jossey-Bass, 1986), pp.19-21.
3. Thomas, Kenneth, isku dhaca iyo isku dhac maaraynta, buuga cilmi nafsiga warshadaha iyo ururada: mujaladka labaad, marvin Dunnette, Ed. (Chicago: Rand McNally, 1975), P. 234.
4. Schneider, Susan C., iyo Jean-Louis Barsoux, maaraynta dhaqanada kala duwan (New York: Prentice Hall, 1997). PP. 200-1.
5. Quinn, Robert, Sue Faerman, Michael Thompson, iyo Michael Mc Grath. Noqodkii maareeye sare (New York: John Wiley iyo caruurtiisa, 1990), PP. 223-4.
6. Shaiken, Karl iyo Ralph Hasson. Xakamaynta kharashyada isku dhaca (San Francisco: madbacadda Jossey-Bass, 1998), P. 24.
7. Arimaha la kala dooranyo oo ay murtiyeeyeen Slaiken iyo Hasson, waxa ay la mid yihiin kuwii uu ku sharaxay Christopher W. Moore . geedi socodka dhex dhexaadinta (San Francisco: Madbacadda Jossey Bass, 1986) Waxaa amaan leh fursada laysugu geeyay fikradahooda doodan lagu kala dooranayo arimaha maaraynta isku dhaca.
8. Crawley, John maaraynta isku dhaca wax dhiska ah (London: Madbacadda Nicholas Brealey, 1992) P.51.

## Cutubka

# 4

FARSHAXANKA WADA HADALKA IYO  
XIRFADO KALE OO MUHIIM AH OO  
XIDHIIDHKA GUDAHKA KU SAABSAN.

*U dhis cidda aad is haysaan biriish  
dahab ah oo dib uu ugu gurto.*

-SUN TZU



Farshaxanka wada hadalka	59
Awoodda dhabta ah ee wada hadalka	60
Hurinta dabka wada hadalku wuxuu noqon karaa geedi socod dheer oo adag	61
Dhisidda xidhiidhada	63
La dhaqanka mucaaridka	65
Xaq sheegashada	67
Nuqdado muhiim ah	70
Raad Raac	71

Inta aynaan bilaabin ka doodida istiraatijiyooyin gaar ah oo ku saabsan maaraynta isku dhaca, waxa aynu rabnaa ina aynu eegno fikrado iyo xirfado ku caawin kara si aad si wax ku oolnimo badani ku jirto ugu maarayso isku dhaca. Kol haddii aanay suurta gal ahayn in laga hadlo dhammaan aqoonta iyo xirfadaha ku saabsan tayada xidhiidhka dadka dhexdiisa ah iyo kooxaha dhexdooda ah marka laga hadlayo isku dhac maaraynta, iskuba dayi mayno arinkaa. Hase yeeshi waxa jira waxoogaa xirfada ah oo muhiim u ah xidhiidhinta fikradheena iyo waxa aynu rumaysanahay iyo dhiska xidhiidho wax soo saar leh oo lala yeesho had iyo jeer cidda inaga soo hor jeeda. Mid kuwaa ka mid ah waxa aynu ku magacaabaynaa farshaxanka wada hadalka. Dhab ahaantii, arinkaa dib ayaynu ugu soo noqon isaga oo ah geedi socod jiraya oo loo baahan yahay, si loo maareeyo khilaafaadka loona gaadho heshiis loo dhan yahay.

Laakiin ugu horayn, waxa aynu rabnaa in aynu wada hadalka doodiisa ka dhigno in uu wada hadalku yahay istaraatiji xidhiidh. Lyada oo ay jiraan wax badan oo laga qoray xidhiidhka, oo ay ku jiraan qaybo u gaar ah mawduucani buugaga kale ee taxanahan, waxa aynu iska jiri soo cel celinta. Mawduucyada kale ee laga hadli doono waxa ka mid ah: dhiska xidhiidhada, waa xirfad iskaga gudbaysa arladii istiraatijiyyada maaraynta isku dhaca; muhiimka ay tahay xaq sheegashadu; iyo sidii mucaaridka loola tacaali lahaa.

## **FARSHAXANKA WADA HADALKA**

Wada hadalku waa fikrad gabowday, oo dhab ahaantii qarniyo badan jirtay, walina xidhiidh badan ayay la leedahay aduunkan maanta ee wareersan ee xidhiidhkii aanaa micnahaa dusha sare dhaafsiisnayn. Robert A. Baruch Bush iyo Joseph P. Folger ayaa ka qoray buug “*wajiga isbadalka dhexdhexasadinta*”, kaas oo aynu u aragno in uu muujinayo ruuxdii iyo geedi socodkii wada hadalka micnaha leh ee la xidhiidha maaraynta isku dhaca. Dhab ahaantii halka ay ka abbaareen dhexdhexasadinta, waxaa laga yaabaa in ay ka leexsan tahay wadada wayn ee geedi socodka arinkan, waa sida ay ku sharaxeen dad badan oo hawshan faraha ku hayaa, waa marka aynu door bidno bal in aynu ka fikirno arinkan inaga oo adeegsanayna ereyadii wada hadalka. Cutub kale ayaynu ku soo noqon is badalka wajiga xalinta khilaafaadka, balse aynu ugu horayntii eegno farshaxanka wada hadalka.

William Isaacs, ayaa buug muhiim ah oo ahaa “wada hadalka iyo farshaxanka fikrad wadaaga”, kaga hadlay “*dabka sheekaysiga*”, halkaa oo uu haleelay xooga iyo tamarta uu leeyahay wada hadalku<sup>1</sup>. wada hadalku sida uu sheegay Isaacs waxa weeye “*wax is waydiin wadaag*”, iyo hab si wada jir ah loo fikiro oo wax loo milicsado <sup>2</sup>. Isaga oo sharaxa sii wata waxa uu yidhi:

Wada hadalku waa hab aynu khilaafaadkii tamarta ka saarayno oo aynu marinayno (tamartaa) qasabad u jeeda dhinaca arin aan wali hore loo abuurin. Waxa wada hadalku inaga kaxeeyaa goobtii aynu goonida ku ahayn inaga oo u gudbayna dareen wadaag balaadhan, halkaa oo aynu dhex galayno maskaxo iyo awoodo dad iyo kooxo oo is kaashanaya.

Wada hadalku waxa uu fuliyaa baahiyoo qoto dheer oo balaadhan ee ma aha uun "haa kaliya" oo fudud. Ujeedada gorgortanku waxa weeye in la gaadho heshiis dhex maraya dhinacyo kala duwan. Ujeedada wada hadalku waxa weeye in la gaadho faham cusub iyo – marka sidaa la yeelo – in la sameeyo asaas gabii ahaantii cusub oo fikir iyo hawlgal ka bilaabmo. Marka wada hadal yimaad, ma aha qofku ina uu xalinayo mushkiladihii oo qudha ee waliba wuu milayaa. Ujeedadu ma aha in heshiis la gaadho oo qudha ee waxa aynu isku dayaynaa in la abuuro goobtii ay ka dhalan lahaayeen heshiisyo badan oo cusubi. Waxana aynu doonaynaa ina aynu daboolka ka qaadno asaas fahamkii la wadaago, tan oo aad u caawinaysa in iskaashi iyo wada socod dhex maro falalkeenii iyo wixii aynu qiimaynaynay.

Wada hadalku waa sheekaysi ay dadku si wada jir ah u fikiraan iyaga oo xidhiidhaya. In si wada jir ah loo fikiraa waxa ay keenaysaa in aanad mawqifkaaga ka dhigin kama dambays. Waa in aad dabcisaa haysashada wax aad dhab u aragto oo aad dhagaysataa waxyaalaha suurta galka ah ee ka dhalanaya la xidhiidhka dadka kale-waxyalo suurto gal ah oo haddii aan sidaa laysugu iman aan dhaceen<sup>3</sup>.

## **AWOODDA DHABTA AH EE WADA HADALKA**

Wada hadalka sida uu sheegay Isaacs waxaa si fiican loogu sharixi karaa tusaalayaasha. Wuxuu ka sheekaynayaa laba wada hadal oo casri ah oo badalay xidhiidhki deegaanadaa ay khusaynaysay. Waxa ay labaduba ku lug leeyihii isku dhacyo muddo dheer taagnaa oo qoto dheer. Waxaa jirtay in sanado badan uu dalka Koonfur Africa, madaxwayneeedii Deklerk uu si gaar ah uula kulmayay Nelson Mandela, isaga oo wali ku jira jeelka si ay wada hadal uga galaan qaab gabii ahaantii ku cusub dhulkooda. Umay kulmeyn ina ay ka wada gorgortamaan sidii ay u xalin lahaayeen mushkiladaha markaa jiray, ee waxa ay doonayeen in ay abuuraan aragtii mustaqbal oo ay wadaagaan.

Wada hadalka kale wuxuu ahaa kii John Hume, oo ahaa siyaasi Waqooyiga Ireland ka tirsan, kaas oo sanado badan ku qaatay inuu la yeesho wada hadal qarsoodiya Gerry Adams oo ahaa hogamayihii Sinn Fein, garabkii siyaasiga ahaa ee jabhaddii " ciidamada Jumhuuriyadda Ireland". Wuxuu yidhi Hume: "shan iyo labaatan sanadood ayaanu la dagaalamaynay kacdoon. Shan dawladood oo iska dambeeyay ayaa ku hoobtay xalinteeda. Labaatan kun oo ciidan ah iyo shan iyo tobantun oo boolis ah ayaa ku hoobtay ina ay joojiyaan. Markaa ayaan ka fikiray, waxa la soo gaadhay xilgii la isku dayi lahaa wax kii hore ka duwan, waa: "wada hadal"<sup>4</sup>.

Kuwaasi waxa ay ahaayeen tusaalooyin la yaab leh oo ahaa wada hadal dhex maray madax ka faa'iidayssay wax badan, oo wax badana ku khasaaraysay ina ay isku yimaadaan, si ay u xaliyaan khilaafaadkooda gaar ahaaneed, si ay u caawiyaaan sidii ay xidhiidh cusub u dhex dhigi lahaayeen dadkooda. mid qorayaasha ka mid ah ayaa lahaa khibrad (soo martay) oo aan aad wax u soo jiidianayn, walise tusaysa tayada wada hadalku ku (leeyahay) bulshada dhexdeeda. Isaga oo isla xiliyadaa qabtay shaqo ah maareeye magaalo aan waynayn, halkaa oo uu burburay xidhiidhki magaalada iyo shan goobood oo dawlada hoose oo miyyada magaaladaa ahaa. Isaga oo ka helay ogolaansho iyo dhiiri galin saraakiishii magaalada ee la soo doortay ayuu maareeyihii ku qaatay saacado aan la tirin Karin, bilo badan shirar uu la yeelanayay saraakiishii la soo

doortay ee dawladda hoose ee goobahaa bulsho ee ku xeeran magaalada. Ujeedadu waxay ahayd ina uu dhegysto oo uu fahmo qotoda waxyaalaha ay danaynayaan, ee keenay ina ay xidhmaan albaabadii keeni lahaa in dawladaha hoose si tayo leh u xidhiidhaan oo waliba si adag u xidhmay. Markii wada hadalo qof qof la isu soo hor fadhiistay albaabadii waxoogaa ay fureen, ayay saraakiishii la soo doortay ee magaaladii wada hadaladii ka soo qayb galeen. Markii muddo ka dambaysay iyada oo aan la samayn ajande rasmi ah ama talaabooyin, ayay siyaasiyiintaasi dib u soo ceshadeen kalsoonidii dhex taalay oo ay fahmeen wixii kala kaxaynayay.

Waxa isku dhaca xudun u ahaa talaabo sharci ah oo ay qaaday magaaladu oo ay kaga darsatay dhul horumarineed oo muhiim ah tuulayowga ku xeeran. Arinkaa oo – ku meel gaadh ahaan – magaalada faa'iido u lahaa haddii uu socon lahaa, hadana natijjada fogi waxa ay wadatay kharash aad u badan oo ay kalifaysay horumarka gobolka. Markii hadaba uu yimid wada hadalkii aan rasmiga ahayn ee aan lagu xalinayn mushkiladdu waxa ka dhashay halkaa in golihii magaaladu uu ku meel gaadh ahaan joojijo dhulkii uu ku darsanayay. Talaabadaa rasmiga ihi waxa ay u furtay albaabkii wada hadal soconaya oo gobolkii isku kaashado iyo siyaalo ay u wada shaqeyyaan. Joojintii dhul ku darsigii waxa ay maanta socotay muddo 30 sanadood ah iyo isbadalo badan oo ku yimid dhammaan lixdii maamul siyaasadeed ee lixdaa goobood ee dawladdaha hoose. Wada hadalkina wali waa socdaa.

## **HURINTA DABKA WADA HADALKU WAXA UU NOQON KARAA GEEDI SOCOD DHEER Oo ADAG.**

Si fiican uga midha dhalinta wada hadalku waxa ay ku xidhan tahay sabir iyo faham wadaag, sida lagu cadeeyay tusaalayaashii layna siiyay. Tusaala kasta wada hadalku wuxuu qaatay muddo dheer oo sanado ah. Hadaba aduunkan wada degdega ah ee loo arko in talaabooyin dhakhso ah oo kama dambayn ihi ay noqotay astaamaha hogaanka cusub, yaa wada hadal waqtii u haysta? Waliba sanado ficiil muujini ay jirtay iyo degdeg iyo go'aano kama dambayn ah oo ku saabsanaa xaaladahaa mid kasta. Tan oo keentay in ay jirto xaalad aan la ogolaan Karin. Haddii aanu jirin dhiiranidaa wada hadalka iyo baadhitaanka arimo cusub oo la kala doorto, waxa uun socon lahaa shaki la'aan sanadadaa lagu jiray ficiil qaadashada. Wada hadalku sida uu ku sharaxay Isaacs laf ahaantiisu kuma siinayo wixii aad qaban lahayd. Si kale haddii aynu u dhigno inama siinayo geedi socod dhib yar oo talaabo talaabo ah oo loo qaado wada hadal tayo leh.

Daniel Yankelovich ayaa ku qaatay afartan sanadood kormeera ida isbedelka dhaqanka maraykanka iyo ra'yiga bulshada. Xiligaana waxa uu galay ama eegayay wada hadalo aan la tirin karayn oo bulsho ama gaar ahba. Muddo dabadeed waxa uu qiimeeyay wada hadalka isaga oo u arkay in wada hadalku yahay geedi socod guul badan oo dhisaya xidhiidhka, oo marka si tayo leh loo qabto, keenaya is faham dhex ah iyo ixtiraam. Waxana ku jira awoodii keenaysay guulo aan hore looga war qabin. Yankelovich, isna sida Isaacs, ayuu aad u kala saaray wada hadalka, doodaha go'aan qaadashada, iyo fadhiyada gorgortanka ee lagu raadinayo heshiisyo ficiil keena. Wada hadalku waxa uu leeyahay saddex dabeecadood oo gaar u ah oo qeexaysa.<sup>5</sup>

1. **In ay jirto sinaani oo aan qasab jirin.** Waa in dhammaan dadka wada hadalka ku jira loola dhaqmaa si siman oo aanu jirin qasab noocuu doono ha ahaadee- waa in aanay jirin gacan maroojin, darajo muujin, xayiraad adeegsi, iyo talaabooyin kale oo xoog adeegsi ihi. Wadahadalkii dhex maray Deklerk iyo Mandela, ee midna xukunka haystay midna jeelka ku jiray waxa labadaa ninba loo tirinaya in labadaa arin wada hadalkoodii laga helay (waa sinaan iyo qasab la'aan) arimaha oo gacan sare lahaa. Waxa wada hadalka bulshadu suurta galayaa oo qudha marka is aamin la sameeyo ee dadka suldada hayaa ay dhigtaan kaadhka suldada oo ay wada hadalka ka qayb qaataan iyaga oo dadka la siman.

2. **Dhagaysi faham dareen leh:** fahamka dareenka lihi, sida uu qabo Yankelovich, waxa weeye kartida aad ka fikiri karto fikradaha qofka kale, ee aad dareemi karto dareenka qof kale. Isaac waxa uu leeyahay dhagaysiga mugga lihi waxa uu xudun u yahay wada hadalka. Dhagaysiga uu ka hadlayaa "waxa uu inaga rabaa in aynaan ereyada uun maqlin, ee ina aynu qaadano oo ogolaano oo aynu si aayar aayar ah uuga tagno dareenkeena cidhiidhiga ee hoose"<sup>6</sup>.

3. **In la soo bandhigo waxa aynu fikrado qabno:** tan sida caadiga ah lagama sameeyo aqoon is waydaarsiyada ama doodaha go'aan qaadashada, hase yeeshie muhiim ayay u tahay wadahadalka caafimaadka qaba. Waxa kale oo arinkani rabaa in dadka wadahadalka ku jiraa ay iska daayaan wax xukumidda.

Muddo sanado ah ayuu Yankelovich uu marag u ahaa oo uu qoray istiraatijijyooyin badan oo uu rumaysnaa ina ay caawinayaan geedi socodka wada hadalka.

- In aad loo muujiyo sidii dadka is haya looga wada qayb galin lahaa.
- In lagu bilaabo wadahadalka daymo (eegmo) faham iyo dareen ku jiro.
- Baadh in saddexda qodob ee kor ku xusani meesha jiraan oo shaqaynayaan.
- In la yareeyo is aamin darada inta aan loo dhaadhicin nuxurka wada hadalka.
- In la kala sooco talaabooyinkii wada hadalka iyo go'aan qaadashadii.
- In la isticmaalo khibrado gaar ah si looga dodo arimaha guud.
- In la soo dhigo waxyaalaha la qabo ee fikrada ah miiska lana caddeeyo.
- In diirada la saaro isku dhacyada arimaha la qiimaynayo ee aan dadka diirada la saarin.
- Wixii aynu hore u qabnay ha lagu sameeyo baadhis waaqica la socota. Si kale haddii loo dhigo, waa in fikradaha la qiimeeyaa, iyo waxa aynu qiimayno, caadooyinka aynu ku dhaqano ee ka soo hor jeeda waxa maanta nolosha ka jira<sup>7</sup>. (Wixii wanaagsan ee aynu qabnayna halagu dhaganaado, wixii khaldanno ha la iskaga tago).

Sida uu qabo Isaacs, wadahadalku waa sheekaysi ay dadku wada fikirayaan iyaga oo xidhiidh dhex yaal. Waxa aynu rabno imiku waxa weeye in aynu baadhno arimaha xidhiidhka ee ku saabsan maaraynta isku dhaca.

## DHISIDDA XIDHIIDHADA

Gabagabada cutubkii ugu dambeeyay waxa aynu ku soo qaadanay hadalkii John Crawley markii uu sifeenayay maaraynta isku dhaca ee wax dhiska ah. Waxa uu tilmaamay afar mabda' oo asaas u ah sifooyinka liibaanta. 1) Dareen cad iyo xukun

wanaagsan. 2) Digtooni iyo naf xakamayn. 3) Karti aad ku baadhi karto iskuna ag dhigi karto aragtiyaha iyo mawaaqifta iyo 4) furfurni loo furfurnaado dadka kale.

Roger Fisher iyo Scott Brown iyaguna waxa ay xoojiyeen xaaladda wax dhiska ah ee guda galbaa maaraynta isku dhaca. Dhab ahaantii, waxa ay ku adkaysteen ina ay isticmaalaan istiraataji wax dhis ah oo aan xad lahayn si loo dhiso xidhiidhyo u jilib dhigi kara khilaafaadka iyo isku dhaca. Xad la'aantu waxa ay meel aad u yar u banaynaysa mad-madowga. Fisher iyo Brown waxa ay yidhaahdeen "wax dhiska dhamaystirani" xagga xidhiidhka dadka kale waxa weeye, in aad qabato oo qudha arimaha u wanaagsan xidhiidhka ee adigana kuu wanaagsan, dhinacyada kale waxay doonaan ha yeelaane<sup>8</sup>. Waxay adkeeyeen in natijjada hawl gaar ihi aanay ku xidhnayn oo kaliya xirfadaha gorgortanka ee waliba ay ku xidhan tahay kartida aad ku dhisayso xidhiidh shaqo oo wanaagsan, kaasi oo ah mid wax ka qaban kara khilaafaadka.

Waa maxay arimaha u wanaagsan xidhiidhka iyo inagaba? Fisher iyo Brown waxa ay qoreen lix arin oo aynu leenahay "wax dhan oon xad lahayn". Bal si degan u akhri.

**1. Macquulinimo:** waa in aad isu dheeli tirtaa dareenkaaga iyo sababaha, haba ahaadaan dadka kaa soo horjeedaa qaar dareen wado eh. Dareenku waa muhiim xagga xidhiidhka, hase yeeshi waa in sababihii "maskaxdii" aad u dheeli tirtaa. Haddii dareen badani jiro waxa uu ceeryaamo saarayaas xukunkeenii. Haddii dareenku yaryahayna waxa uu fadhiisinyaa dhaqdhaqaqeennii iyo fahamkii. Markaa aynu isu dheelitirno dareenkii iyo sababihii, si khaladkeenku u yaraado.

**Qoraalkii qoraaga:** Fisher iyo Brown waxoogaa ayay dhinaceena noqdeen qaar aan aad "xad u lahayn" xagga nuqdadhoodii ku saabsanaa xidhiidh dhiska. Waxana uu qofku ku doodi karaa in caadifinimadu muhiim tahay sida caqli galnimadu muhiim u tahay. Waxana ay ku amaanan yihiin in ay yidhaahdeen waxa loo baahan yahay in labadaa la isu dheelitiro. Dadka ka soo jeeda dhaqanada reer barigu, sida India waxa aan ku jirin shaki in "xadla'aantaasi" istraatijiyyadooda noqonayso wax murugsan. Iyada oo labada qoraa ay matalayaan Maraykan oo looga baahanyahay arin caddayn badan iyo in jihadii loo jeeday la xuso, waxase aan shaki lahayn in dadka Asian ka ihi ay shaki la'aan si fudud uugu dulqaadanayaan madmadowga had iyo jeer sharaxa xidhiidhada iyo go'aamada marka la eego dhinaca ay ka dagan yihiin caalamka

**1. Fahamka:** xataa hadii si khalad ah laguu fahmo isku day ina aad taa garato .waxa aad hoos ku arki siyaalo dhab ah oo qorayaashu inoo soo jeedinayaan si aynu u kordhino kartideena aynu wax ku fahmayno.

- Baadh sida ay u fakirayaan; malayo had iyo jeer ina aad u baahan tahay ina aad iyaga wax badan ka ogaato.
- Bilow ina aad naftaada waydiiso "maxaa aan danaynayaa?"
- Haka biqin ina aad barato wax cusub.
- Ha malaysan in dareenkaaga iyo waxyaalaha aad door bidayso lagula wadaago.

**2. Xidhiidhka:** Dhagaysi la'aantooda oo qudhii kuuma banaynayso in aanad la tashan dadka, marka aad go'aan ka gaadhayso arimo khuseeya iyaga. Wax waydii, la tasho, dhagaysi. Go'aan qaadashada lagu xalinayo isku dhacu waxa weeye had iyo

jeer arin si wada jir ah loogu badheedhayo. Xidhiidhku waxa uu bilaabmaa in uu burbur marka aad is tidhaa ee aad malaysato in aan loo baahnayn wada hadal, ee aad bilowdo ina aad u sheegto dadka kale waxa aad isleedahay way ubaahan yihii maqalkeeda, ee aad guda gasho warar isku mulaaqan, sida ina aad wax tidhaa wax kalena ujeedo.

**3. *Kalsooni:*** xataa haddii cida kale khiyaamo badan tahay adigu khaayin ha noqon. Ama sida Fisher iyo Brown ku talinayaan: "noqo dhamaantaa mid la aamino, ha noqon se mid dhamaan wax kasta aamina". Noqo mid la malayn karo, daacad ah, cad, lagu kalsoonaan karo hase yeeshie aan ahayn kas gaab.

**4. *Siyalo aan qasab ahayn oo wax loo raadayn karo:*** xataa haday isku dayaan qasab, ha u dabcin hana ogalaan waxaa oo kale. Waxa se loo baahanyahay ina aad noqoto mid qanca una furfuran qancinta. Maaraynta isku dhacu ma aha sidii loo guulaysan lahaa, ee waxa weeyi sidii mushkilad loo xalin lahaa.

**6. *Ogolaansho.*** Xataa marka ay diidaan waxyaalaha aad danaynayso, jawaabtaadu ha noqoto ina aad ogolaato in aad ka fikirto. Daryeel dadka miiska dhinaca kala ka soo fadhiya, una furfurnow ina aad wax iyaga ka barato.<sup>9</sup>

---

**Kuwani waxa weeye xilal adag, oo aan xad lahayn oo ku saabsan sidii loola dhaqmi lahaa xero uu buuxiyay kхиilaaf iyo isku dhac. Inkasta oo la arki karo in waxoogaa arimihu yihii qaar aan waaqici ahayn, waxa ay qorayaashu ina xasuusinayaan in tilmaamahaasi ay ka hadlayaan sidii wax ku ool loo noqon lahaa, bal hada ka fikir markii uugu danbaysay ee aad khilaaf ba'an aad la gashay cid kale. Si adag maskaxda ma uugu haysaa? Waa si wanaagsan. Imika marka aad dhigto mid kasta oo dhagaxda seeska ee aad ku dhisayso xidhiidh tayo leh oo lagu xaliyo isku dhaca waxa aad qiimaysaa sida fiican ee aad u dhaqantay, 1= wax laabtu diido . 10 = wanaag la yaab badan.**

---

- Isu dheelitirka dareenka iyo sababihii
- Fahamkaaga qofka kale
- Xidhiidhka iyo la tashiga
- In aad noqotay mid lagu kalsoon yahay
- In aad qanacdo oo aan lagu qasbin
- Ogolaansho
- Daryeel iyo furfurni



**Natijada aad heshay**

Maxaad yeeli si aad natijada u horamarisid marka labaad ee aad maaraynayso khilaafaadyo ama isku dhac?

.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....

## SIDA LOOLA DHAQMAYO CAABIGA

### (MUCAARADADA)

Mid ka mid ah calaamadaha is khilaafka ama keeni kara isku dhac waxa weeye mucaaradada. Mucaaradadu marka aynu ka hadlayno isku dhac maaraynta waxa weeye adoon doonayn in aad wax ogolaato. Inkasta oo mucaaradadu ay inta badan la xidhiidho geedi socodka gorgortanka marka aynu gaadhayno go'aan kama danbaysa, hadana waxa weeye jawaab aynu inta badan la kulano dhammaan dhinacyada isku dhexjira ee la xidhiidha go'aan qaadashada. Mucaaradado waa mid la filayo dhammaan wajiyada isku dayada qorshayn ka qayb qaadashada, ilaa la gaadhayo heshiis ku saabsan qorshe hawleedka. Iyada oo ay caadi tahay in caabi yimaado wajijo badan oo go'aan qaadashada ka mid ah, baadhitaan ayaynu samaynaynaa, waa dhinaca taxanahan labada qaybood ka kooban, bal aynu eegno dhammaan wajixidhyada dadku gashadaan si ay u muujiyaan caabi, iyaga oo aan caddaynayn sababta caabiga.

#### **Waji Xidhyo Caabi Ah Oo U Baahan Dib U Eegid**

- **Waji xidhka dadka cadhooda.** Kani waxa uu dhacaa marka mucaaridku yahay qof (shakhs) ahaan, sida ka dhacda in badan oo fadhiyada gorgortanka ah ee diiradda saara mawqif ee aan dano ka hadlayn, ama dad ee aan mashkalado ka hadlayn. Tan oo ballaadhan waxa aynu ka hadli marka aynu eegayno farshaxanka gorgortanka.
- **Waji xidhka sharaxa:** waji xidhkani waa mid laba waji leh. Dhinac wuxuu leeyahay “isii sharax dheeraad ah”. Halka dhinaca kale uu kugu qarqinayo sharaxaad. Waxana halkan ku dhaboobaya eray hore loo yidhi oo ahaa “waydii hebel waqtiga , wuxuu kuu sheegi sida saacada loo sameeyo eh” kaas ayaa halkan ku haboon. Wixa halkaa aad ka qaadanaysaa in uu leeyahay “anigu uma jeedo waqtiga eh, waxa aan jecelayah ina aad igala dooda noocyada kala duwan ee saacadaha waawayn iyo saacadaha gacanta ee aad heli karto”.
- **Waji xidhka waqtiga:** waxa cad in waji xidhkani uu la xidhiidho sarbeepta saacadeena. “waqtigana ma haboona ; xili dheeraad ah ayaan u baahanay si go'aan u qaato; yaynaan arinkaa ku dagdigin kuma haboona wareega miisaaniyada”iyo jawaabaha kale e “waqtiga la xidhiidha”.
- **Waji xidhka indheer garadnimo.** “Waxa dhici in ay u egtahay”, “hadaynu xaga aragtida ka hadalno”, miyaad wax dheeraada iiga sheegi kartaa hababka kala duwan ee aynu isticmaali karno si aynu go'aan u gaadhno”. Wixa ay noqon kartaa dood kasta oo hadal uun ah oo sii ballaadhata oo dhaafii go'aanka laga gaadhi lahaa.
- **Waji xidhka bilaa afka ah.** Wixa uu Peter Block leeyahay kani waxa weeye wajixidhka ay fujintisu uugu adagtahay. Dhinicii kale oo wax kasta iska ogol, oo aan dareen ka hortag muujinayn, oo u eeg mid kula socda, halka dhab ahaantii uu qofkaasi baqo la boodsan yahay, oo uu cadho darteed baalal yeeshay. Markaa aamuska ha u qaadan in lagu ogolaaday.

- **Waji xidhka “qofku wuxuu aaminsanyahay”** kani waa mid meel kasta ay ku taal “waxaasi waa waajib” waxa kala oo la xidhiidha “qolooyinkaasi waa....” “Miyaanad fahmin ...”. “Waxa aad u baahantahay ina aad ogaato....”
- **Waji xidhka xal gaadhitaanka:** “uma jeedo ina aan wixii tagay ka hadlo; maxaa aad xal u aragtaa” ama hadii si kale loo dhigo “yaynaan waqtii badan ku lumin ka hadalka arimahan. Waxa aan rabaa ina aan ogaado waxa aad xal u aragto”. Waxa halkaa laga fahmayaa hadal aanu qofku sheegin oo ah “ markaasi ayaan kuu sheegi sida arin noqonayo eh?”

Marka mid ama in ka badan oo ka mid ah waji xidhyadaasi dooda soo galaan, waxa aad isku daydaa ina aad fahamto waxa keenay ee ay u soo baxeen, iskuna day ina aad waxa ka danbeeya ogaato. Waxa dhici karta in dadka aad kala shaqaynayso in aad gaadhaan go'aan dhex ah ay baqo dareemeen wixii uu doono ha ahaadee ama dareemayaan in arinkii farahooda ka baxayo is caabintu waa jawaab caadi ah marka arin la isku seegan yahay, ama uu yimaado isku dhac. Dhammaanteen waxa aynu sidanaa sanduuqan waji xidhyada ah oo diyaar ah si aynu u isticmaalno hadii aynu dareeno in caabi loo baahanayahay. Hase yeeshi caabigu waxa uu is hortaagi karaa jidka maaraynta isku dhaca ee waxdhiska ah, isaga oo inaga fogaynaya in isku dhacii si dhakhsa ah oo tayo leh loo xaliyo. In la fahmo waxa ay yihiin waji xidhyadaasi iyo sababaha aynu u isticmaalaynaa waxa ay inaga caawinaysaa in aynu garano sababta aynu sanduuqa uugu haysano.<sup>10</sup>

**Imisa waji xidh oo kuwaa ka mid ah ayaad khasnadaada is caabiga ku haysataa?  
Kee ayaad isticmaashaa?**

**Hadii aad ka gurayso wajixidhyada khasnadaada is caabiga, waa kuwee waji xidhyada aad dhakhsu u tuuraysaa? Kuwee aya aad kartaa in muddo dabadeed aad ka tagto?**

.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....

Xilligii  
milicsiga

### Jawaabaha caabiga

Peter Block waxa uu ku talinayaas sedex talaabo in la qaado marka ay kaa horyimaadaan mid ka mid ah caabiyadaasi.

1. **La soo bax filasho:** tani waxa ay kuu soo jeedinaysaa in caabi uu ka hor imanaayo wada hadalkii midha dhalka lahaa. Waxa laga yaabaa in wararkaasi hadal ahaan u ahayn sida loo sheegayo. Ka fikir waxa aad qorshaysanayso ina aad ka tidhaa nooca caabiga ee aad filanayso ina uu ku waajahayo.

2. **Magacaw caabigii:** sheeg waxa aad kala kulmayso qofkii kale adoo isticmaalaya erayo aanad wax ku xukumayn kuna ciqaabayn. Tusaala ahaan marka laguu qaato waji

xidhka sharaxaada, waxa aad odhanaysaa “waxaad walaal isiiinaysaa sharax intii aan u baahnaa ka badan” ama marka uu qofku qaato wajixidhkii cadhada: waxa aad leedahay: “waxaad u egtahay ina aad cadhootay”. Ama haduu qaatay waji xidhkii bilaa afka ahaa, waxa aad leedahay: “aad ayaad u dagantahay”.

3. **Daganow:** sii qofka kale fursad uu ku jawaabo.<sup>11</sup>

Ugu danbayn, ha u qaadan caabiga mid adiga laguula jeedo. Ma aha milicsi qof ahaan kugu aadan. Block ayaa isna soo jeedinaya ina aynu siino cidda iska keen caabiyaysa wadahadalka laba jawaabood oo uu ku magacaabay “jawaabo niyad wanaag ah”. Si kale hadii loo dhigo ula dhaqan caabiga ina uu yahay erayo daacad ah ama su'aal, adoo wanaagaa u qaadanaya laba goor jawaabtaada ku celi. Tusaale ahaan hadii qofku uu ku waydiyo halka aad warka ka heshay, uga jawaab waxa uu danaynayo. Ma aha mar kaliya e laba jeer, adiga oo “niyad wanaag uugu jawaabaya”. Ka dib magacaw caabigii markaa daganaw. Waxa la yaab leh sida wax ku oolka ah e istaraajiyadan sedexda qaybood ihi u shaqaynayo.

## **XAQ SHEEGASHO (HAL ADAYG)**

Hal adaygu waxa weeye xirfad muhiim ah oo isku dhaca lagu maareeyo waxana weeye waliba hab wax raadeeya oo dhex u ah geedi socodka gorgortanka . waxana weeye waliba xirfad aan si fudud looga gudbin Karin xaduuda dhaqanada. Hal adaygnimadu waxa ay dhab ahaan fooda daraysaa fikrada ah “waji ilaashad” taasi oo muhiim ah xaga dhaqano badan oo aduunka ka mid ah. Hase yeesh ee baadhitaan diraasadeed oo laga sameeyay sanado badan ka hor sedex dal oo kala duwan ayaa sheegay in hal adaygnimadu ay tahay mid ka mid ah todabada istiratijiyo e uugu muhiimsan e maareeyayaashu isticmaaleen si ay ay u kordhiyaan raadayntooda. Kuwa kale waxa ay ahaayeen – waa hadii aad ogaantooda danaynayso:- sababay, saaxiibtim, taxaaluf oo la sameeyo, wax is dhaafsi, suldad sare, iyo cuna qabatayn.

Sida baadhayaashu sheegeen hal adaygnimada waxa inta badan la isticmaali karaa marka:

- Ujeedadu tahay in loo faa'iideeyo ururka;
- Guul filashadu ay yar tahay, iyo,
- Marka awooda ururku ay sarayso.<sup>12</sup>

Sababahaa oo la qoray mudo ku dhow labaatan sanadood oo tagay, waxa ay soo jeedinayaan in hal adayga loo arkay xilgaa in uu yahay il awoodeed oo kale. Iyada oo sidaa ah, waxa aynu ka baranay wax badan xidhiidhka dadka dhediisa ah iyo qaab kooxeedka sanadadii danbe iyo sida loo isticmaalo, tan oo inaga caawinaysa sidii aynu u gaadhi lahayn go'aano guud. Waana dhinacaasi ka aynu kaga hadli doono arimaha la xidhiidha in la noqdo hal adayg.

## HAL ADAYGNIMADU WAA WAX LA DOORTO

Haladaygnimadu waxa ay kuhaboon tahay qayb dabeeecada (dadka) ka mid ah oo la xidhiidha awooda iyo raadaynta. Sedexda nooc ee kale ee dabeeecadood ee inta badan la xidhiidha haladaygnimadu, hadii is barbardhig la sameeyo, waxa weeye: dabci qabow, mid xad gudub, xarfad, ama qabow iyo xadgudub ah. Dabeeecadihi oo qaar is barbardhig lagu samaynayaana waa kuwan:

1. **Dabciga xad gudubka ah** waxa uu kudhisan yahay dadka kale oo aan la ixtiraamin, iyada oo loo dhaqmo si xadgudub ku ah xuquuqda dadka kale. Kani inta badan waa dhaqan wax ciqaabid ah. Marka la fadhiyo miiska gorgortanka waxa lagu sifayn karaa isticmaalka ereyada ah “waajib waxa kugu ah” iyo “waa in aad sidaa samaysaa.” Oo si taagan afka uuga soo baxda. Dhinaca wanaagsan ee dhaqanka xadgudub nimadu waxa weeye sida badheehaha cad ah e warka qofku u gudbinayo, iyo balan adaya iyo isha oo la saaro natijjooyinka. Dhinaca xunina waxa weeye, qalafsanida, iyada oo abuurta xumaan iyo weerar celin, waxana ay u badantahay in tani ka timaado qof aan si fiican wax u dhagaysan. Akhlaaqda ah xad gudubku maaha saaxiib wanaagsan oo la kaashan karo (dhinaca qorshaynta ka qaybqaadashada) ama marka aad rabto ina aad waajahdo cid iyada oo si daacad ah loogu jeedo in la xaliyo isku dhac ama khilaafaad.
2. **Dabciga qabowga ah.** Waxa uu ka soo jeedaa adiga oo aan ixtiraamin naftaada, oo aad u dhaqanto si aad ku xadgudbayso xaqii ay naftaaddu lahayd. Waxa tan inta badan la xidhiidha “been ku noolaad” adiga oo aan waxa aad rabto ama dareemayso muujin. Dhaqanka qabowga ah waxa in badan loo arkaa mid sharaf leh, oo dareen badan, dareenka dadkana qiimeeya. Waxa kale oo loo arkaa inta badan mid ixtiraam leh oo ka imanaysa qof hoos u dhigay ixtiraamka naftiisa. Hadaba ma aha dhaqanka qabowi saaxiib wanaagsan inta badan meelaha lagu xidhiidhayo ee go’aan qaadashada, dadkaa arinku khuseeyaa haba ahaadaan qaar wada jir u shaqaynaya ama ha ahaadaan qaar isku dhac maaraynaya eh.
3. **Xariifnimada ama dhaqanka qabow iyo xadgudub isku jira ah.** Waxa uu ku dhisan yahay kani adiga oo xuquuqda naftaada iyo ta dadkaba aan ixtiraamin, u dhaqma si ku xadgudbaysa xuquuda dadka kale iyada oo hadana u eeg in aad xaqaagii inkirayso. Dhaqankani wuxuu ku cadyahay adigoo khaladka saara dadka kale, arinka faraha kala baxa ama aan dareen muujin, ay kaa fulaan erayo aan haboonayni, iyo warar qulqulaya oo isku dhafan oo looga jeedo in dadka kale gacanta lagu dhigo. Tani waxa weeye mid wayn hadii ujeedadaadu tahay ina aad noqoto kalitaliyaha soo socda ee jamhuuriyad caalamka ka go’an. Waxa se aad xaqiisataa in dadka kale ay arki doonaan in raadaynta noocaas ihi tahay mid aan la ogolaanayn.
4. **Dhaqanka haladaygnimada** (xaqsheegashada): waxa uu ku dhisan yahay naftaada iyo dadka kale oo aad ixtiraamto. Adoo u dhaqma si aad ku ixtiraamayso xaquuqdaada iyo ta dadka kaleba, oo aanad ku xadgudbin naftaada iyo ta dadkaba. Xaq sheegashadu waa adoo cadeeyaa oo muujiya waxyaalaha aad rabto, iyo danahaaga iyo dareemadaada, oo ay kuu dhib yaraato inaad gudbiso dhambaalo aad ku leedahay “anigu”, isuna dheeli tиро ixtiraamka naftaada iyo ta dadka kale.

Xaq sheegashadu waxa weeye adiga oo garta awoodahaaga, iyo xuduudaada' doortana sidii Aad u maarayn lahayd dareemadaada iyo dareemada dadka kale. Hadii aanay kuu kala cadaan arimahani oo shaki kaaga jiro, waxa aanu anaku ku talinaynaa xaqsheegasho (haladayg) taas oo ah xirfad haboon iyo dhaqan lagu gali karo istraatijiyada maaraynta isku dhaca. Waxa kale oo aanu ku talinaynaa dhaqankaa si loogala shaqeeyo dadka kale dhinaca khataraha go'aan qaadashada iyo mushkilad xalinta iyada oo la adeegsanayo dareemida awoodahaaga, isla markaana aad qiimayso dadka kale.<sup>13</sup>

Xaq sheegad oo aad noqoto waxa weeye waliba in aad waxaad rabto sheegato. Tilmaamo hadii aynu ka bixino "hadalka cad e tooska ah" waxa ka mid ah:

- Caddee waxa aad rabto
- Si gaar ah u sheeg.
- Iskaga fogow erayada aan caddayn
- Ka dhig wada hadalka mid fiican oo hore u socda.
- Baadh in aad hubiso in lagu maqlay oo lagu fahmay. Suaaluhu way haboon yihiin had iyo jeer. Sidoo kale dhagaysiga fiican.

**Haladaygnimadu waa xirfad muhiim u ah maaraynta isku dhaca waxana aanu kaa rabnaa ina aad waxoogaa is taagtid oo aad eegtid mar kale qaar ka mid ah sifooyinkii dhaqan kasta oo la barbardhigay Xaqsheegashada waxa aad hoos ku qortaa qaar ka mid ah xirfado haladaygnimo (xaqsheegasho) oo gaar ah oo aad jeceshahay in hore aad uugu marto.**

---

Xilligii  
milicsiga

**Waxa kale oo aad liis garaynaysaa dhaqamada laga yaabo ina aa isticmaasho mararka qaar ee aad jeceshahay mustaqbqlka in aad dhinto marka aad maaraynayso isku dhaca ama kala shaqaynayso dad kale si wadajirah xalinta mushkilaadka**

---

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Wada hadalka waxa lagu sharaxay suaalihii oo la wadaago iyo wada fikir iyo wax wada milicsi.
- Wada hadalka tayada lihi waxa uu dhammaadaa waqtidheer, maxaa yeelay wada hadalka ujeedada leh waxa kobciya sabirka, iyo qasab la'aanta, fahamka dareenka qofka kale, iyo faham wadaaga.
- Farshaxanka lagu dhiso xidhiidhyo tayo lihi waxa ay ku xidhan tahay waxyaalo badan, sida adiga oo isu dheelitira dareemadii iyo sababihii, kor qaada is faham wadaaga, adiga oo xidhiidhkii kalsooni ku beera, ogolaansho, xidhiidh cad iyo qasab la'aan.
- Caabiga xalinta isku dhacyada is afgarashawaagu inta badan siyaalo badan ayuu u waji-dadan yahay. Waana ay adagtahay ina aad si tayo leh uula dhaqanto isku dhaca hadii aanad garan wajixidhka markaa ku horyaal.
- Si aad waxqabad u noqoto marka aad caabiga wax ka qabanayso, Peter Block ayaa soo jeedinaya in la soo qaato mid furayaasha ka mid ah, magacaw caabiga ama wajixidhka la gashaday,markaa is daji adoo sugaya in qofkii kale jawaabo.
- Haladaygnimadu waxa weeye qalab muhiim ah oo lagu maareeye isku dhaca, waxase laga yaabaa in aanay si fudud u dhaafin xaduuda dhaqanada.
- Isku dhac xalintu waxa weeye wareeg aan dhamaanayn waxana soo galaya:
  - Adiga oo qabta sheekaysi gogol xaadh ah si loo tilmaamo loona sharaxo arimihii.
  - Sheekaysigii oo hoos loogu dhaadaco si loo tilmaamo loona qeexa arimaha.
  - Arimihii oo hoos iyo dulba laga eego, oo la rogrogo, dib loo sharaxo, dib loo qaabeeyo si si wanaagsan xaqiqada looga milicsado dhinacyo kala jaad ah.
  - Iyada oo la galo mushkilad-xalin wadaaga ah.
  - In lagu heshiyo talaabooyin caawinaya dhammaan dhinacayada si ay u helaan baahiyahooda una ilaashadaan sharaftooda, iyo
  - Dabagal si loo hubiyo natijjooyinkii la filayay ina ay qabsoomeen

## Raad Raac

<sup>1</sup> William Isaacs, **Wadahadalka iyo Farshaxanka Fikirka Wadajirka** (New York: buugaga socda, 1999), p.1.

<sup>2</sup> **Ibid.**, p.9

<sup>3</sup> **Op. cit.**, p19

<sup>4</sup> Jariidada New York times, august 24, 1994. p.24.

<sup>5</sup> Daniel Yankelovich, **Sixirka Wadahadalka** (New York: Simon and Schuster, 1999). Pp 41-44.

<sup>6</sup> Isaac, **op.cit.** p.83.

<sup>7</sup> Yankelovich, op.cit., pp. 127-8.

<sup>8</sup> Fisher, Roger iyo scott brown, **Sidii Loo Wada Jirilahaa** (Boston: shirkada Houghton Mifflin, 1988), p. xiv.

<sup>9</sup> **Ibid.**, pp. 38-40.

<sup>10</sup> Amaantii aanu u jeedinay Peter Block caawinta uu naga caawiyay in aanu waji wanaagsan udhigno doodan. Buugiisii ahaa **Wada Tashi Aan Khalado Lahayn** (San Diego:qoraal jaamacadeed 1981), cutubka 8 iyo 9.

<sup>11</sup> **ibid.**, 132-37.

<sup>12</sup> kipnis et al., **sawira ah saamaynta maaraynta, dhaqdhaqaaqa ururka**, 1984, p.43.

<sup>13</sup> Fikrada badan oo ku saabsan xaq sheegashadu waxa ay ka yimaadeen laba ilood oo fikradaha iyo xikmadaha laga qaataay. Wuxuu weeye: Block, Peter, Tony Petrella iyo Marvin Weisbord, **Maaraynta Khilaafaadka iyo Heshiisyada** (plainfield, Nj:waxbarasho la qorsheeyay, 1985) iyo Crawley, John, **Maaraynta Wax Dhiska Ah E Khilaafaadka** (London:madbacada Nicholas brealey 1992).

**GORGORTANKA:**

**SIDII LOO XAQIIJIN LAHAA NATIIJOYIN IYADA OO AAN DHINAC  
SEDEXAAD  
ARINKA SOO GALIN.**

*Yeynaan waligeen gorgortamin inaka oo baqayna  
Yeynaan waligeena ka biqin ina aynu gorgortano.*

**JOHN F. KENNEDY.**



Mabaadi	76
Abuuritaanka xaalado sax ah	77
Arimaha gorgortanka	79
Miyaynusheegnay guul labada dhinacba ah?	
82	
Aragtidii Herb Cohen	82
Marxaladaha gorgortanka	83
Wadada Harvard e gorgortanka	84
Aragtiyo kuwii la hayay ka duwan	91
Nuqdado muhiim ah	92
Raad raac	93

Gorgortanku waxa weeye mid ka mid ah labada istiraajiyadood ee guud ahaan si wayn loo xuso ee qoran ee laga isticmaalo suuqna ku le caalamka oo dhan. Haa, waa la suuq geeyaa. Hadaba sida dhakhsaha inoogu caddaatay, maaraynta isku dhacu waa shaqo wayn. Waa dhab, marka uu suuqa kalsooni ka helo, kalsoonidaas oo timid markii la arkay isticmaalkiisa iyo natijadiisa, waxa hubaal noqonaysa in loo baahanayo. Waxa ka jira aduunka isku dhacyo badan. Markaa gorgortankii hadii uu yahay xirfadii imanaysay marka khilaaf dhaco, waxa aad u haboon in laga hadlo khilaafaadka laftooda xalintoodii. Tusaale ahaan gorgortanku waxa weeye xirfad aad uuga caansan dhexdhexaadinta, mana tusayso had iyo jeer in isku dhac jiro, ilaa gorgortanku uu meel xun gaadho ama ay xaaladaha ka horeeya geedisocodka gorgortanku ay muran badan keenaan. Tusaale ahaan kooxaha shaqaalaha iyo maamulku waxa ay inta badan galaan doodo bulsho oo ku saabsan mushaharka iyo siyaalaha kala duwan ee ay u arkaan cadaaladda iyo khayraad qaybsashada, waxana jira xiliyo uu gorgortanku uu noqon karo iska horimaad. Xaalada yar ayay doodu burburi kartaa iyada oo ku qasbaysa dhinacyadii ina ay raadsadaan siyaalo kale oo wax loo xaliyo. Waxase ay u muuqataa in aynu nahay qaar doodan xilligeedii ka hormaray.

Inta aynaan sharaxin qaar ka mid ah xirfadaha gorgortanka ee loo baahan yahay iyo geedi socodka ina gaadhsiinaya go'aan qaadashada, halkan waxa aynu ku arki sharaxyo:inkasta oo shraxyadaasi waxoogaa ay cilmiyaysanyihii, hadana waxa ay ku sheegayaan qorayaagu wax badan, iyaga oo soo bandhiga fikrado iyo istaraatijiyado ay rabaan muujintooda.

**Gorgortan.** Waa hadal toos ah oo dhexmaraya dhinacyada isku dhacay, oo la qabto iyada oo loo jeedo in xal la gaadho. Waxana soocayaan waxa weeye, wadahadalku waxa uu u dhaxeeyaa dhinacyadii arinku khuseeyay iyaga oo aan taageero toos ah ka haysan cid sedexaad. Gorgortanku waxa uu dhex mari karaa ergooyin, sida wakiilada ama looyerada (Slaiken iyo Hasson: 1998, p.202).

**Waa maxay gorgortanku?** Waxa weeye isticmaalkii awooda iyo xogta si aad u raadayso dhaqan (dabcii) dhexyaal "shabakad xiisadi ka aloosan tahay". Hadii aad ka fikirto sharaxan balaadhan, waxa aad rumaysan in aad gorgortan gasho had iyo jeer, goobta shaqada iyo noloshaada caadiga ahba.

(Herb Cohen: wax kasta gorgortan ayaad ka gali kartaa, 1980,p.16).

**Gorgortan:** waa geedisocodka lagu gaadhi karo xal quruxbadan oo labada dhinacba lib soo hooyaan, taasi oo fulinaysa baahiyihii kala duwanaa ee labada dhinac ama dhinacyada badan ee arinka ku jira. (imika kaasi waxa weeye sharax rajo leh oo qiyamkii qiimaynaya) (Vanessa Helps: gorgortan: cid kasta guulaysanayso, 1992, p.1)

**Gorgortan.** Geedi socodka aynu ku meel marino arimihii aynu dad kaga heli lahayn wixii aynu doonaynay, kuwaas oo raba in ay iyana waxa ay doonayaan inaga helaan. (Gavin Kennedy: Gorgortanka wanaagsan. 1992, p.1).

**Gorgortan.** Waa arin asaasi ah oo aad kaga helayo dad kale waxa aad rabto. Waxana weeye xidhiidh hore iyo dib loo soconayo oo loo qorsheeyay si loo gaadho heshiis, marka adiga iyo dhinicci kale aa leedhiin dano aa wadaagtaan iyo qaar aa iskaga soo horjeedaan (Roger Fisher iyo William ury: sidii haa loo gaadhi lahaa, 1981,p.xi.).

Halka qaar u arkaan gorgortankii xirfad nolosha wehelisa oo lagu isticmaalo wax kasta oo aynu qabanayno, qolooyin kale waxa ay u arkaan geedi socod u badan rasmi oo dhexyaal dano tartan ka dhexeeyo xiliyo adag oo xaga xidhiidhka dadka ku saabsan. Dhab ahaantii waxa aynu ka hadlaynaa koox mabaadi ah, iyo geedi socod ku saabsan talaabooyin iyo marxalado taxana ah, iyo xirfado ina caawinaya si aynu u noqono qaar tayo leh xaga gorgortanka, go'aaminta, iyo mushkilad xalinta.

## **MABAADI**

Dhawr qof oo gorgortanka gacanta kula jira oo reer (Australia) ah ayaa xirfad nololeed gorgortanka u qaataay, iyaga oo uula dhaqmaya “wax lagama maarmaan u ah nolosha iyo la dhaqanka dadka nooc kasta”, sida ay qabaan qorayaashaasi, gorgortanku waxa uu ubaahanyahay digtooni badan, firo iyo jajabni, dareen dhakhso ah oo waqtigaa ah, iyo in si joogta ah loo fahmo kala duwanida dadka. Arinku si fudud ma aha ku guulayso hawlo ama dagaalo.<sup>1</sup> waxa kale oo ay murtiyeyeen dhawr mabda' oo ay rumaysan yihii ina ay u muhiim yihii “gorgortamaha wacan” ina uu raaco.

1. **Xidhiidhka sal uuga dhig gorgortanka.** Tan waxa ku jira in la fahmo qof kasta, qaabkiisa iyo baahidiisa, iyo door bidkooda, waxa iyaga dabada ka wada iyo danahooga, hadii aanu riboodh xog ihi jirin, gorgortanku wuu dheeraanayaa midhiisiisuna way yaraanayaan.
2. **Qorshee xidhiidhadaada.** Mabda'ani waxa uu ku dhisan yahay fikradooda ah waxa aanu rabnaa ina aanu xidhiidho samayno oo dhisno shabakado iskaga gudba xuduuda shaqada aynu ku jirno. Dhinac kale oo aynu ka eegnaa arinkani waxa weeye fikrada ah iyada oo la tilmaamo lagana qaybgaliyo dadka arinkan dantu kaga jirto. Marka laga eego dhinaca xidhiidhka dawlada hoose iyo bulshadu halka ay iska soo galaan iyo maaraynta isku dhaca, mabda'ni waxa uu leeyahay mid kasta oo arimaha waawayn e wax raadaynaya ah waa in aad loo diraaseeyaa oo la eego sidii loo dhisi lahaa xidhiidhkii inta aan la gaadhin baahiyaha gorgortanka.
3. **U daa naftaadu in ay u furnaato fikradaha iyo soojeedimaha.** Tani waxa ay yaraynaysaa in lagu boodo natijjooyinka, iyada oo aan wax la bislays waxana ay hagaajinaysaa fursadaha lagu muujinayo arimaha la kala doornayo e cusub, oo laga yaabo in labada dhinac aanay arkeyn markii ay galayeen geedi socodka gorgortanka.
4. **In laga gorogrtamo waxa yaala oo aan mawqif laga gorgortamin.** Mawqifikaygu wuu cadyahay, waxa jira laba mawqif oo kaliya, mid cad iyo mid madow, mawqifikayguna waa ka madow. Waxa tani ay fogaynaysaa dhammaan waxyaalaha kale e midabada badan e suurta gali kara.
5. **Waa in aad ogolaataa sharciyada mawqifka cidda kale:** inkasta oo dhinaca kale ay danihiisa iyo qodobadiisa aragtiyeed ay ku meel gaadh ahaan xagaaga aan laga ogolayn, hadana waa sharci. Ogolaanshuu ma hoos imanayo ina aad qaadatay.

6. **Kala saar dadka iyo mushkiladda.** Marka aad qofnimadii aad galiso gorgortankii waxa is badalaya xeerkii asaasiga ahaa. “Muu mudan in qaybtiiisii cadaalada ah uu ka qaato dhaxalka maxaa yeelay waa qof xun”.

7. **Suaalaha si haboon u isticmaal.** Tusaale ahaan, suaalaha dabada ka furani waxa ay caawinayaan in xogta iyo fikradahu u kordhaan labada dhinacba, taas oo kordhinaysa fursadaha lagu helayo arimo la kala doorto oo cusub iyo xalal. Suaalaha dabada ka xidhan, e lagu jawaabi karo si fudud “haa” ama “may”, waa in loo haystaa marka aad qodob gabagabaynayso. Markaa howshii kale halkaa aad ka sii wadayso. Qoraagu waxa uu keenay qodob dadka soo jiidanaysa oo ku saabsan suaalaha xaga danbe ka xidhan. Hadii aanad garanayn jawaabta suaasha dabada ka soo oodan e aad rabto ina aad cid waydiiso, waxa laga yaabaa in 50% fursad ah ay gabagabodu noqoto is afgaranshawaa. Suaalaha dhinaca ka soo oodani waxa ay inta badadan ka bilaabmaan “ma kartaa in ...?” “ma samaynaa” halka kuwa xaga danbe ka furani ay inta badan ka bilaabmaan “maxay...? “Sidee ?” lyo “maxaa keenay...?”

8. **Gorgortamaha ayay saarantahay sidii uu u heli lahaa arimaha la kala dooranayo e yaala.** Gorogrotanka tayada lihi waxa uu caawinayaan dadka arinku khuseeyaa ina ay helaan faham wanaagsan oo ku saabsan baahiyaha qofka kale iyo in ay soo baxaan waxyaalaha la kala dooranayo ee geedi socodku.

9. **La gorgortan qofka suldaa leh.** Arima waxoogaa ah ayaa cidhiidhi keena marka ay muuqato in heshiis la gaadhay e dhinacii kale yidhaa waxa aan jeclahay in aan bal soo helo ogolaanshaha qofka madaxda ah.

10. **Waxa aad had iyo jeer u doodaa si cad adoo fahamsan “heshiiskaaga u fiican e badalka ah.”** kani waa mawqifkaaga aad dib uugu noqonayso, oo ah goaanka labaad e u fiican (hadii kaaga hore la waayo). Waxa dhici kara in uu noqdo mid fudud oo ah in aad joojiso kulankii, halkii aad riixi lahayd in heshiis la helo aan suurta gal ahayn. Waa waxa ay Fisher iyo Ury oo ah khubara ku dheeraaday gorgortanku ay yidhaahdaan BATNA:oo ah “in la qaato heshiiska laga gorgortamayo badalkiisa u fiican”

## ABUURITAANKA XAALADO SAX AH

Gorgortanka guusha lihi waxa uu bilaabmaa waqtii dheer ka hor inta aanay wada fadhiisan dadka dooda muhiimka ah wada galayaa e aanay hadalka bilaabin. Gorgortanka guusha lihi waxa uu ku salaysan yahay baadhitaan mug leh iyo diyaarin aan wax yar la dhaafin. Shaqadan guriga lagu soo fulinayo e soo socotaa waxa ay kordhinaysaa sidii labada dhinacba u caddayn lahaayeen guul inay gaadhaan.

- **Dadkii haboonaan diyaar ma u yihiin ka qaybqaadashada?** Hadii qof arinka dani kaga jirto oo muhiim ihi maqan yahay, waxa kordhaya fursadaha fashilaada.
- **Dadka imanaya miiska gorgortanku ma yihiin qaar si iskugu xidhan, si danahooda ay u gaadhaan?** Hadii aanu arinkani jirin,maxaa laysu howlayaa? waxaba wanaagsan in dhinac kasta si gaar ah baahiyihiisa iyo danihiiisa u raadsado. Waa in uu jiraan dareen ah in la isku xidhan yahay, inkasta oo ay jiraan arima laga doodayo oo dhinac dhinacyada ka mid ah dan badani uugu jirto.

- **Dhinacyadu diyaar ma u yihiin in gorgortan ay bilaabaan?** Tusaale ahaan, ma ka fikireen su'aalahan?
- **Dhinac kastaa ma yimid gorgortanka isaga oo wata farsamooyin wax lagu raadeeyo oo fiican iyo xog mug leh iyo macluumaad taageeraya?** Hadii aanay taasi jirin, waxa uu arinku noqonayaa mid dhinac ka socda oo natijada la hubaa noqonayso dhinac guulaysta iyo dhinac khasaara, taasi oo xumaan ku reebaysa dhinaca khasaara.
- **Arimaha u horeeya e laga hadlayaa ma cad yihiin mana yihiin qaar ay labada dhinacba isku raaceen?** Si kale hadii loo dhigo, maxay u goosteen ina ay wada hadlaan?waxa ay u egtahay wax sahan, hase yeeshi arin caddayntu waxa ay kordhisaa in wax cadi soo baxo, guulina timaado. Tani ma aha in aan ajandaha wax laga badali Karin marka doodi bilaabanto. Hase yeeshi xataa arimaha waawayn ayaa la badali karaa hadii labada dhinacba ay muujiayaan ina ay galayaan goaan qaadasho khatar ah iyo mashaakil xalin dhab ah.
- **Dhinacyadu ma doonayaan inay xaliyaan khilaafaadkooda dhab ahaan, mise waxa ay aad u rabaan ina ay wadaan khudbado qurux badan labadooduba?** Waxa jira sababa keenaya isku dhaca. In la yeesho khilaaf afka uun ah ayaa badanaaba ka wanaagsan in aan laba wada hadlin.
- **Ma jiraan wax aan la saadaalin Karin oo natijadu keenaysaa?** Hadal iyo dhamaantii, hadii natijada la saadaalin karo, maxaaba u gorgortamaysaan?
- **Ma jiraan cidhiidhi xaga waqtiga ah oo loo qabtay xal gaadhista, ka dibna laga sii gudbayo?** ma jiro wax la mid ah xili u qabashada dadka gorgortamaya, taasi oo caawinaysa gorgortamayaasha ina ay xooga saaraan in heshiis la gaadho.
- **Ma yahay dareenada dadka dooda dhabta ah ku jiraan qaar aad u sareeya oo qoto dheer oo ka dhigaya doodii mid ku dhawaata meel aan waxba suurta gal ahayn?** Hadii arinku sidaa yahay, dhedhexaad ahayn ayaa laga yaabaa in ay tahay doorasho fiican, iyo malaha waxoogaa heshiisiin ah oo arinkii lagu soo daro.
- **Inkasta oo aanay had iyo jeer qasab ahayn gorogrtanka guusha leh in tanaasul yimaado, hadana dhinacyadu diyaar ma u yihiin marka ay miiska imanayaan in tanaasul la yimaadaan?**
- **Ugu danbayntii, ma yihiin kuwa doonaya ina ay gorogrtamaan qaar xirfadii iyo rabitaankii gorgortanka leh?**

Guusha u danbaysa e sheekada gorgortanku waxa ay ku xidhantahay waxyalo badan oo dhaca inta aan la soo fadhiisan si khilaafaadkii loo xaliyo oo loo sameeyo goaano wanaagsan oo cid kastaa ay guulaysato. Hadaba xaaladahaa oo dhami ma hagaagsan yihiin? Ma jiraan farsamooyinkii iyo rabitaankii gorgortanku?

## ARIMAHА GORGORTANKU WAXA AY KA KOOBAN YIHIIN

Waxa ay diyaariyeen Ellen Raider iyo Susan Coleman qaar ka mid ah qalabkii tababarka e uugu waxtarka badnaa oo ah mid ay curiyeen, kuna saabsanaa xirfadaha gorgortanka la iska kaashado waxana ay murtiyeyeen lix arin oo ay tahay in gorgortamayaashu ay eegaan.

1. **Maxaa ay tahay aragtiyahooda ay caalamka ka qabaan?** Aragtiyahaasi waxa weeye qaar ka soo jeeda waxa ay rumaysan yihii ee qotada dheer, waa mawaaqif iyo qiyam ka imanaya xididada isirka iyo dhaqanka e qofka, iyo sifaalooyinka iyo khibradaha qofka. Kolba inta xididadaa qofka iyo sifooyinkiisu ay qoto dheer yihii ayaa ay kordhaysaa in goobtaasi noqoto meel aan gorgortan gali Karin. Kolba inta ay korodho aragtiyaha caalamka laga ogyahay ee la ixtiraamaa waxa ay yaraynaysaa “muranka” marka gorgortanku socdo.

2. **Waa maxay mawaaqiftoodu?** Waa maxay dalabaadka iyo codsiyada iyo tuhumada keenaya in la gorgortamo? Si kale hadii loo dhigo, mawaaqiftooda bilowga ihi waxa weeye arimaha shidaya isku dhaca.

3. **Waa maxay baahiyahooda iyo danahoodu?** Mawaaqiftu waxa weeye inta badan diirkka uugu sareeya ee basasha, calaamadna u ah mashkalado qoto dheer iyo baahiyi iyo dano. Gorgortanka tayada lihi waxa uu xirfad u leeyahay kala saarida mawaaqifta iyo baahiyaha waxana uu diiradda saaraa baahiyaha. Waxa ka mid ah xirfado tayo leh oo mushkiladaha lagu xaliyo (iyada oo mushkiladii sidii basasha loo dhilayo) iyo kartida lagu waydiinayo suaalo baadhitaan ah oo aan tuhin u jeedin. Ogaanshaha baahiyahaa iyo danaha dhinaca kale waxa ay caawinayaan in albaabkii furmo oo xal yimaado kaas oo fulinaya baahiyaha iyo danahaa. Garo mawaaqifta, hase yeeshee baadh xididada.

4. **Waa maxay jawiga dhexyaal dhinacyada isku dhacay?** Ma mid dabayla leh baa, mise waa mid daruura kaliya leh? Ma meel tartan jiraa mise iskaashi ayaa yaal? Ka bilow ina aad baadho dareenkaaga gaarka ah: raali ma ka tahay galitaanka gorgortanka?sidee ayaad u aragtaa maskaxda iyo dareenka dadka soo fadhiisanaya dhinaca kale e miiska?

5. **Ma doonayaan dhinacyadu mana karayaan in ay dib-u-qaabayn ku sameeyaan arimaha iyo danaha?** Waa goobtii ay dadka isku dhacay ka heshiin lahaayeen si cad ama si dadban, si looga dhaqaaqo mawaaqifta oo loo gudbo baahiyaha, loona aqoonsado fursadaha uu qof kasta ka faaiidayo gorgortanka.

6. **Waa maxay waxyaalaha googa'a a ama garoocadka ah ee badalka ah ee miiska la soo dhigayaan?** Arimaha googaa ihi waxa ay qabanayaan in ay raali galiyaan ama leexiyaan baahiyihii doorka bidnaa e labada dhinacba. Iyada oo la qirayo in mawaaqifta ay soo bandhigeen dhinac kastaa ina ay yihii baahiyihii u horeeyay ee ay rabeen in la fuliyo, googo'u waxa weeye waxyaalaha aynu bixin karno si loo fuliyo baahiyaha dhinacii kale. Dhab ahaantii qiimaheedu waxa uu ku sugan yahay indhaha cidii qaadatay waxan la bixiyay. Garoocadka la dhaafsanaya – hadii is ag dhig la

sameeyo-waxa weeye hadidaada iyo cayda ka dhalata marka loo qaado wax qjimo leh dhinaca kale e miiska, ama la falo wax dhaawacaya isku dayga helitaanka baahiyahooda.

Garoocadku waxa weeye qalab muhiim ah, mase aha nooca la isticmaalo marka la isku dayayo in la helo xidhiidh gorgortan oo iskaashi ah. Waxa la isticmaalayaa marka loo baahdo si “loo simo garoonka lagu ciyaarayo” ama looga hor tago garoocad’ ka yimid dhinaca kale. Hase yeeshiee garoocadka wax lagaga hortagayaa waxa ay inta badan keenaan ina ay lumiyaan kalsoonida, ama keenaan go’ano khasaare ama faaiido (mid uun) keena. Waa la dooran karaa sidaasi, hase yeeshiee maaha ka la doorbidayo, hadii aad rabto ina aad kordhiso fursadaha guulaysiga labada dhinacba oo la dhiso xidhiidh iskaashi oo yareeya baahidii loo qabay in miiskii gorgortanka lagu laabto.”<sup>3</sup>

Hadii aynu cuskano tusaalihii Raider iyo Coleman, waxa aad halkan ku arki waxyaalahaa aad filayso ina ay ku soo maraan gorgortan kasta oo guul leh.

- Waxa lagu bilaabayaa jawiga deegaanka ama aragtiyaha caalamka laga qabo.
- Waxa loo soo daadagaa ujeedada la isu soo hor fadhiistay miiska, iyada oo la sheegayo mawaaqifta, baahiyaha /danaha.
- Waxa loo gogol xaadhayaa wax is dhaafsi khatar ah (dhab ah), iyada oo jawigii la abuurayo oo baahiyihii la qaabaynayo, iyo
- Gababgabaynta is waydaarsiga in badan oo googo iyo inta uugu yare e garoocad suurta gal ah.

Raider iyo Coleman waxa ay isticmaalaan arimahan la filan karo si ay u dhisaan qorshahooga gorgortanka waxana ay ku talinayaan in qoraalka imaka uun la sharaxay la raaco (kor lagu sheegay) si loogu diyaar garoobo gorgortanka. Gorgortamayaasha liibaanay waxa ay u qorsheeyeen gudagalka gorgortanka sidan:

- In la qeexo mawqifka bilowga ah, inta uugu badan ee la ogaan karana laga ogaado mawqifka dhinaca dhinaca kale.
- In la dabagalo taxane su'aalo ah oo leh “maxay sidaasi u dhacday?” si loo dhilo basaha oo loo ogaado danaha iyo baahiyaha dhabta ah.
- In fikrado la keeno, suaalano la iswaydiyo si ay inooga caawiyaan fahamka baahiyaha ama danaha dadka miiska isa soo horfadhiisanaya.
- Dib u qaabayn isku dhaca ah iyada oo loo dhigayo jawi mushkiladii si dhex ah loo xalinayo, tusaale: eegida sidii labada dhinacba baahiyahooda iyo danahooda loo fulin lahaa.
- Adoo habaynaya googoyadii garoocadkii, sida in la eego wado kale oo lagu fulin karo baahiyihii dhinaca kale amaba la leexiyo, hadii ay qasab noqoto, iyada oo danahoodii la fulinayyo.
- In la eego googa’ a iyo garoocadka dhinaca kale laga yaabo in uu khasnada ku haysto iyo waxa jawaabtooda la filayaa ay noqon doonto.

Goorma ayay ahayd xilligii ugu dambaysay ee aad cid kala gorgortanto arin uun? Ma waxa ay ahayd maalin fasax ah oo aad rabtay in lagu siiyo, ma in aad miisaaniyadaada kordhiso oo aad rabtay, ama mushqaayad sidii aad u heli lahayd, ama qorshe fasax oo aad cid aad isku dheertihin is raacayseen. Bal diirada saar xaalad gorgortan , oo dhakhso u qor googo iyo garoocad dhinacaaga gorgortanka laga bixiyay.

**Googo' yar yar**

Xilligii  
milicsiga

**Googo' waa wayn**

**Miyaynu Sheegtay Guul Labada Dhinacba Ah?**

Qofku waxba kama qori karo gorgortanka isaga oo aan sheegin fikradda ay labada dhinacba guulaysanayaan. Kolayba, qof ayaa soo bandhigi doona fikradaa, mana jeclin in soo qaad la'aanta arinka la inagu canaanto (waa haddii aynu arinkan tilmaami wayno). Inaga oo koobayna fikradda ah guul iyo khasaare ama guul iyo guul, waxa ay ku xidhantahay in aad ka mid tahay iskuulkii fikradda koobka biyaha ah ee uu nus buuxay ama uu nus dhinaa, oo ku dhisan dhaqaale isu gayntisu eber yahay. Haddii aynu tagno xaalad gorgortan oo aynu rumaysanahay "haddii aad adigu guulaysato, aniga ayaa khasaaraya" markaa ay noqoto in aad sidii aad u guulaysan lahayd aad saarto diirada tamartaada, dareenkaaga iyo fikirkaaga, waxa aad u dhawdahay in aad ka indho la'aato fursadaha aad ku balaadhinayso waxyaalaha la kala dooranayo ee ku saabsan xalinta khilaafka ama isku dhaca. Waxyaalaha la kala dooranayo waa in ay ku jiraan fursado labada dhinacba ay ka heli karaan iyaga oo raali ka ah in baahiyahoodii si macquul ah loo fuliyay iyo in ay heleen xal labadii dhinacba ay guulaysteen (guul – guul). Waxana ay tani ka xoog badanaysaa fikradii daciifka ahayd ee sheegaysay in marka la yimaad miiska gorgortanka arinku yahay oo qudha cid guulaysata iyo cid khasaarta (guul – khasaare).

Markii aanu tijaabo goobeed ku samaynay qalabkan waxbarasho, ayaa qof isticmaalay erey ah "ceeryaan hadhaysay mustaqbalka" isaga oo sharaxaya waxa ku dhacaya qofka guulaystay marka gorgortan laga yimaad ku dhisnaa guul – khasaare, ama istiraatiji isu gaynteedu eber tahay. Warka fiican waxa weeye waan guulaystay. Warka xumina waxa weeye mustaqbalkaygii waxbaa hadheeyay, maxaa yeelay dhinacii kale ayaa aar gudasho qorshaynaya.

## ARAGTIDII HERB COHEN

Herb Cohen waxa uu leeyahay xubnaha ugu horeeya ee gorgortanku waa saddex: Awood, waqtii iyo xog. Haddaba si natijada loo raadeeyo, waa in aad baadhaa mawqifka cidda kale, iyo kaagaba, adoo hoos keenaya saddexdaa arin ee is bad badalaya ee isku xidhan. Waxa uu ku sharaxay

Awooda “ Tamarta ama kartida wax lagu qabto... lagu maamulo dadka, dhacdooyinka, xaaladaha, naftaada. Marka sidaa la yidhaa wanaag iyo xumo toona laguma sheegi karo, ma aha mid sharaf ama sharaf daro ah. Ma aha mid akhlaaqeed ama akhlaaq daro ah. Waa dhex dhexaad”<sup>4</sup>.

Cohen oo hadalkii sii wata ayaa yidhi: “marka aad wax sababayso, waxa aad doonto oo dhan waad heli kartaa, waa haddii aad ka war hayso doorashooyinka ku horyaal, oo aad baadho fikradahaaga, oo aad u badheedho khataro aad si xirfad leh u xisaabisay (una hubsatay) adoo ka duulaya xog adag, iyo haddii aad rumaysantahay in aad awood haysato”<sup>5</sup>. Cohen ilaha uu awooda ku sheegayaa waxa ay aad u shabahaan qaar badan oo mabaadi’idii iyo xubnihii iyo xaaladihii gorgortanka ee hore aynu uga doodnay ah. Hase yeeshee waxa uu ku sharaxayaa wax dadka qaar u qaadan karaan hadal wax weeraraya. Dhab ahaantii waxa aynu ku daafici karnaa inaga oo siina calaamada ah “hadal ah hal adayg”. Maxaa yeelay habka uu wax u sharaxayaa aad ayuu uga duwan yahay ka qolooyinka maraakiibtooda joojiya biyaha goobo cilmiyedka. Waxa ay u egtahay mid faa’ido leh in aynu soo bandhigno qaar ka mid ah aragtiyihii Cohen.

Waxa uu ku sharaxayaa awooda in ay ku imanayso qaabab iyo qiyaaso badan oo kala jaad jaad ah tusaale ahaan:

- **Awooda tar tanka:** ma galno gorgortan ilaa ay cidi doonto wax aynu hore u haysanay.
- **Awooda shari:** haddii aad haysato nooc shariyad ah, bandhig. Tacliin, shaqo rasmii ah, xaalad kale oo aad haysataa way soo galaysaa halkan.
- **Awooda khatar u badheedhka:** waa dhiiranidii oo aad caqligal ku darto.
- **Awoodda Ballan qaadka:** waa in had iyo jeer aad heshaa ballan qaadka dadka kale gor gortan kasta oo dhacaya. Guda galku waxa uu keenaa ballan qaad. Ballan qaadkuna awood ayuu keenaa.
- **Awooda khibradda:** xirfadda iyo aqoonta gorgortanka.
- **Awooda garashada wixii baahi jira:** taada iyo toodaba.
- **Awooda abaalinta iyo ciqaabida:** tani waxa weeye waxa ay dad kale ugu yeedhaan “googo’ iyo garoocid.

Cohen waxa uu ku kordhiyaa liiskan sii kordhaya, awoodaha kala ah: joogtaynta, hormoodnimada, qancinta, hab dhaqanka. Waana ay u qalmaan in la eego marka aynu gorgortan u diyaar garoobayno. Aragtiyihiiisa xogta ku saabsani waa qaar gabobay, Aragtdiisa waqtigu waxa weeye in laga faa’iidysto xiliga laguu gooyay ee dadka kale gooyeen, adiga oo aan waqtugaaga muujinayn, iyo adoo ficolka la yimaada marka aad hubto in guuli imanayso. Si kale haddii loo dhigo, awooda waqtigu waa waqtiga oo aad xiligiisa go'an aad ku ekaato.

## MARXALADAH A GORGORTANKA

Siyaalo badan waxa aynu uga hadalnay marxaladaha kala duwan ee geedi socodka gorgortanka inaga oo aan iyaga toos uga hadlin. Sida hore loo sheegay, Raider iyo Coleman waxa ay ku sharaxeen gorgortanka geedi socod afar talaabo ah. Arin wadaag, arinkii oo la qeexo, arinkii oo dib loo qaabeeyo sida uu u kala mudan yahayna loo kala horaysiyo, iyo mushkiladii oo la xaliyo iyo heshiis oo la gaadho.

Aragti kale oo marxaladaha geedi socodka gorgortanka ah waxa laga soo qaataay "wax barashada qorshaysan". Sida ay u macneeyeen maaraaynta isku dhaca, iyada oo laqaadayo geedi socodkii gorgortanka, waxa ay murtiyeeyeen talaaboooyinkan soo socda, iyaga oo qeexaya xirfadaha ay mid kasta qabashadeedu rabto.

- Talaabada 1:** si cad u sheeg waxa aad rabto. Xirfaddu = xaq sheegasho(hal adayg).
- Talaabada 2::** maqal oo faham cidda kale waxa ay rabto. Xirfaddu = dhagaysi dhab ah
- Talaabada 3:** caddee goobaha la isku waafaqsan yahay iyo kuwa la isku khilaafsan yahay, labadabana qiro. Xirfaddu = taageerid iyo is waajahaad.
- Talaabada 4:** gorgortan iyo fasil : gaadh xal fulinaya inta u badan ee baahiyaha labada dhinacba intii suurta gal ah. Eeg siyaalo wax la isugu gayn karo loona wada shaqayn karo . ogolow fasil. Xirfad = mushkilad xalin/gorgortan.
- Talaabada 5:** arinka isku day, dib u eeg, dib uga dood. Marka heshiiska la fuliyo, xiligiiba mar dib u eeg, si loo eego in uu fulinayo baahiyihii dadka.<sup>6</sup>

## WADADA HARVARD EE GORGORTANKA

Sidii haa loo gaadhi lahaa, oo ah buug ku dhisan mabaadi iyo xirfado la xidhiidha mashruuca gorgortanka ee jaamacadda Harvard, ayaa noqday mid qiyaas u noqday qorshaynta iyo fulinta tababarka gorgortanka, hagana dadka taga miiska gorgortanka si ay u galaan iskaashi go'aan qaadasho ah. Habka ay Fisher iyo Ury taageerayaan laguna isticmaalo marxalado caalam waynaha ah waxaa la yidhaa gorgortan mabda' leh, waa geedi socod caawinaya dadka isku dhacu dhex yaal in ay go'aan fiican gaadhaan. Si aynu u gaadhno istiraatijiyadooda mabda'a leh ee gorgortanka ee buuga ku timid waxa ay ina soo marinayaan socdaal dhinac gooniya ah inaga oo soo marayna laba waji oo kale, mid dabacsan iyo mid adag. Ha eegin leex leexadka – socodka – arinkani waa mid wax soo jiidanaya waxana uu inagu caawinayaa in aynu goosano waxa aynu u hayno wadada balaadhan ee mabaadiida leh una socota dhinaca gorgortanka.

Labada wado ee u horeeya ee heshiiska loo maro waxa la yidhaa "iswaydaarsigii mawqifka". Mid kastaa waxa ay uga digtaa qofka socotada ah in aanu mawqifka iswaydaarsi ka galin. Si socotada socodkaa sarbeebta ah hore loogu sii riixo, ka fikir wadada jilicsan ee mawqif is waydaarsiga, sidii qof hoos ugu jeeda xeeb ciid badan, halka wadada adagi ay ku marinayso buur dhagax leh. Halkan waxa aad ku arki fikrado ku tusaya asxaabtaada kula safrysaa, xaaladaha kaa hor imanaya iyo nooca shidaalka ee aad isticmaalayso si meeshaad rabto aad u gaadho.

### Wadada Dabacsan Ee Heshiiska

- **Socotadu waa dad soo dhawayni ka muuqato.** Qof kastaa soo dhawayn labxab saar ah ayuu la imanayaa inta aanu gaadhiga fuulin.
- **Ujeedadu waa in heshiis la gaadho.** Qof kastaa ma ogol yahay? Waa si fiican, ina dhaqaajiya hadaba.
- **Socotadu waxa ay samaynayaan tanaasulaad si loo wada socdo.** “ma waxbaad ka qabtaa haddaan dhinaca fuulo” “may”.
- **Waxa loo jajaban yahay dadkii iyo mushkiladii .** “hubaal, inaadeerkaa digaagiisa suuqa ayaanu u qaadi. Waxaad saartaa uun kursiga dambe”.
- **Way is aminaan.** “ waan yara indha casaysanayaa ee i ogaysii marka aynu halkaa gaadhno”.
- **Socotadu goobahooda si fudud ayay u badalaan** “ aynu dul tagno ciidaa tuulan” waa si fiican, ina geeya.
- **Waxbaa la isa siyyaa .** “ ma waxaad doonaysaa in aan anigu gaadhiga kaxeeyo”.
- **Dhinac kasta guntiisa ayuu ka waramaa:** waa in mawqif is dhaafsi la gaadhaa shanta galabnimo ee maanta.
- **Ogolaanshaha khasaare dhinac ah si heshiis loo gaadho.** “waxa aan rajaynayaa in aan cid soo qaado waxana aan arkayay in ay ciddaasi u talaabsan doonto dhinaca mawqif iswaydaarsiga”.
- **Baadh jawaab kaliya oo markaaba qofka kale ee socotada ihi ogolaanayo.** “ ma doonaysaa in aad soo dabaalato” haa way fiican tahay.
- **In lagu adkaysto heshiiska.** “waa haddii dadka oo dhami ogolaadaan oo kaliya”.
- **Isku day in aad joojiso in waxa la rabo lagu murmo** “qofkastaa arinkan ma rabaa?”
- **U jajabnow cadaadiska.** “malee sidii socodkeenu u socon lahaa”  
Waxa uu ahaa socod wayn. Mashkalada kaliyi waxa ay ahayd may jirin “goobi”ba markii goobtii la gaadhay.

### Wadadii Adkayd Ee Heshiiska

- **Socotada muran baa dhexyaal,** “haygu mashquulin hadal liita oo kaagii oo kala ah”.
- **Yoolku waa guul.** Yaa xil ka saaranyahay haday hooyadaa dhimanayso waa in aan isdhaafsi mawqifeed gaadhnaa galabta”.
- **Rabitaan tansulaad la sameeyo oo shardi looga dhigayo wada safarka.** “adigu gaadhiga kaxee”.
- **Mushkilada iyo dadka oo lagu adagyahay.** “c id danbe oo fuulaysaa ma jirto, qadana laysu taagi maayo”.
- **Aamin daro.** “isii khariirada wadada”.
- **Mawaaqif lagu dhagan yahay.** “Haddii xagayaga laga waramo, waxa jirta waddo kaliya oo lagu gaadhayo iswaydaarsi mawqifeed.”
- **Hadidaad ayaa dhacaysa**”, istaag kaalinta batroolka e labaad, ama wax dhici …”.
- **Xog ku khaldaysa oo hoosta taal:** “Ka heli maayo marka aynu halkaa gaadhno”.
- **In qofku doono faa iido dhankaliya ah si heshiis loo gaadho.** Waan ogahay in aynu ka wada hadalnay in la qaybsado kharshka batroolka, waxan se goostay in aad adigu bixiso.”
- **Qofkoo doona jawaab kaliya oo uu qofka socotada ah ee kale uu aqbalayo,**” waa sifiican, adigu iibi batroolka ana taayirada ayaan buuxin eh”.
- **Mawqif aad ku adkaysato.** ” Wadadii loo marayey isdhaafsi mawqifeedku waa taa maskax gaabyahow”.
- **Isku day inaad ku guulaysato muranka rabitaanka ku saabsan.**” Markani waa markii uugu danbaysay e aynu socdaal wadaagno”.

- **Isticmaalka culaysinta.** “Miyaad si ka yara dhakhso badan u kaxysid”.

Socod adag ayuu ahaa, meeshii se waqtigii haboonaa ayay gaadheen. Dirawalkii ayaa bixiyay kharashka intisii badnaa waxana uu balan qaaday in aanu qofkaa dib u soo qaadin. Qofkii rakaabka ahaa ayaa yidhi: “Yaa dan ka leh, waxaan rabay anigu waan helay eh.” Hase yeeshi, marka danbe ee qofkaa rakaabka ihi uu doono “iswaydaarsi mawqif” waxaad ka heli isaga oo taagan halka basku istaago.

### **Badalka U Wanaagsan Ee Xal Lagu Gaadhayo**

Fisher iyo Ury, waxa ay dhab ahaantii bixinayaan wadiiqadii wanaagsanayd ee loo mari lahaa safarka. Mase ina gaynayso iswaydaarsi mawqifeed, xataa sii mari mayso, waxa toos ay u tagaysaa xalka, iyada oo la isticmaalayo diyaarado mabda’ leh. Socotadayada khayaalka ku nooleyd ayaa qorshihii badalay iyaga oo xaaladda fiican eegaya.

- **Socotadaasi waxa weeye qaar mushkilad xalinaya.** Waxa ay rumaysteen in ay jabantahay oo ay dhakhso badan tahay haddii xalka toos loo tago (xagiisa) iyada oo dayaarad la raacayo. Waxase jira , in markii ay goobtan joogeen, aanay sheegin ,cidda u soo iibinaysa tigidhada iyo maalinta ay safrayaan
- **Yoolku waxa weeye natijjo wanaagsan oo lagu gaadho si hawl Karnimo ah oo saaxibtinimo ah.**
- **Dadkii iyo mushkiladii ayay kala qaadeen.** “Waxba yaynaan ka warwarin imika xaaskayga iyo hooyadaa ee bal aynu dhamayno qorshyaasha safarka.
- **Waxa ay ahaayeen qaar dabciyay arimihii dadka si adagna u eegayay mushkilada.** “Waxa aan u qaadayaa reerka dhinacci cashadii adna ku booqo hooyadaa dhakhtarka. Way inoo suurta gali in aynu raacno rixladii safarka (dayuurada) ee todobada subaxnimo kacaysay.
- **Waxa ay talaabsadeen iyago oo aan wax isu dhiiban. Qof kasta wuxuu goostay in uu tigidhkiisa iibsado.**
- **Waxa xooga la saaraa danaha, oo aan ahayn mawaaqifta.** iyada oo mid socotada ihi rabo in uu gaadhi raaco ka kalana tareen, ayay dhakhso u goaamiyeen in aan midna ahayn kii u fiicnaa e lagu safri lahaa.
- **Waxa ay baadhaan dan.** “Maxaad qabtaa hadaan raaco qaybta aan sigaarka lagu cabin?”
- **Waxa ay iska jiraan in laga dido gun u dhaadhaca.** “Waxa aynu raacaynaa dayaarada todobada kacaysa ama mid kale”
- **Waxa la keenaa arimo la kala doorto si looga wada faaiido** “waxa aad qaadan Kartaa tiradayda maylalka socdaalka duulida ee biiray hadii aad ila doonato hudheelkii aan jeclaa” “waa si fiican! Waxaaba aan u baahanahay (500) oo mayl oo dheeraada si aan tigidh bilaasha u helo”.
- **Waxa xooga la saaraa ujeedada** “Waa in aynu qiimaha u eegnaa qof kasta jeebkiisa, safarkana aynu goosanaa in aynu baxno xili aan ka danbayn subaxnimada isniinta”<sup>7</sup>

Sida aad aragto, socotadayadaasi waxa ay ahaayeen qaar mabaadi leh, una furfuran arimo lakala dooranayo. Waxa ay u hogaansanaayeen mabda’ wax cadaadis ahi muu haysan, markii si wada jir ah mushkiladaha ay u xalinayeen. Waxa ay keenayeen arimo la kala doorto oo cusub si loo wada faaiido. Waxay caddaysanayeen

fulinta ujeedooyinka guud iyo kuwa gaarka ah intay safarka ku jireen. Wuxaana ay ku heshiyeen sidii loo fulin lahaa iyaga oo eegayay raadka ka dhalanaya mid kasta.

Wax kasta waa laga fikiray (sida hooyada bugta,xaas qaylo badan ,qof socoto ah oo uu ku iman karo xanuun safar hawadiid, ama qof aad ugu muraaqooda tareenka) waxa uu ahaa safarku dhinaca qorshaytiisa iyo fuluntiisaba mid aad loogu guulaystay

---

**Waxaad odhan tani dhamaanteed way fiicnayd arinku se sidaa had iyo jeer uma dhib yara mararka qaar waxa aynu la kulanaa dad aad u adag oo dhinaca kale miiska ka soo fadhiya, miyaanay ahayn? Bal waxoogaa qaado waqtii ah oo milicso sida aad ula dhaqan tay gorgortame adag xili la soo dhaafay. Maxay ahayd istiraatiijiyada aasaasiga ahi? Bal dhakhso u qor jawaabtaada, markaa buugga akhriqiisa sii wad.**

---

Xilligii  
milicsiga

#### **Marka Gorgortanku Uu Adkaado.**

Mararka qaar ayaad kala kulantaa dhib aan la rumaysan qofka aad is haysaan adoo isku dayaya in aad la gaadho iskaashi go'aan qaadasho oo lagu gaadho geedi socodka gorgortanka. Wuxa dhismi caabi waxana meesha ka baxa suurta galkii in la gaadho heshiis macquul ah iyada oo aan la adeegsan cid sadexaad. Maxaa la yeeli? Bal aynu ku laabano sheekadan ka dhacday goob caalamka ka mid ah si ay arinkaa inoogu iftiimiso:

*Qofkii waashmaanka ka ahaa jeelka ayaan nin u marti ahaa soo mar mariyay jeelkii. Wuxa ay galeen qol ay ku jiraan koox dad ah oo jeelka ku cusub oo hareera fadhiya dheri kulul oo wayn. Qof kastana waa uu gaajoonayay, waanu quustay. Qof kasta waxa uu haystay malqaacad gaadhaysa dhariga oo leh gacan dheer, oo gacanteedu dherer dhaافتay, oo aan loo isticmaali Karin in afka qofka haysta ay gaadho, waxa haystay waxa uu ahaa wax adag. "Wuxuu yidhi bal inna keen imikana" waashmaankii ayaan yidhi, waxoogaa ka dib ayay galeen qol kale (oy joogaan dad muddo jeelka ku jiray ) qolku kii ayyuu si kasta ugu egyptay. Dhariga karaya, koox dad ah, malqaacado isku mid ah oo dhaadheer. Hase yeeshi, halkan qof kasta wuu faraxsanaa waanu qadeeyay. "Ma fahmayo" ayyuu yidhi ninkii martida ahaa, maxay qoladani u faraxsan tahay halka qolada qolka kale ay dhibaato u dhamaatay, iyada oo wax kastaa isku mid yihiin?" "Golkan danbe waxa ay barteen in qofba qofka kale malqaacaddiisa ku quudiyo"<sup>8</sup>.*

William Ury waxa uu ina siinayaan istiraatiijiyad shan tallaabo ah oo lagula shaqeeyo dadka ad adag ee gorgortamaya ee labadiinii dhinac cidhifka u saaray in ay fashilmaan. Sidii sheekadii qolka cuntada, istiraatiijiyaddu waxa weeye mid ka soo horjeedda fahamka caadiga ah. Wuxa ay inaga rabtaa in aynu qabano caksiga waxa aynu is leenahay wuu shaqaynayaa ama caksiga sida aynu uga hortagno marka aynu xaaladahaas oo kale la kulano. Awoodda kaga hortag awood. Feedhkana feedh ka hor gee. Ury istiraatiijiyaddiisa uu wax ku fur furayaa waxa weeye mid aan toos ahayn. Isku day inaad caabiga hareerayso, iyo sidii aad fikrad wanaagsan u galin lahayd maskaxdiisa dhagaxa ah. Waxa aad ku dhiiri galisaa qofka aad is haysaan in uu gudaha u dhaadhaco. Ku caawi in uu jabiyo gidaarka caabiga ee uu isku wareejiyay.

Gorgortanka jiidhitaanka (caabigu) - sida Ury uu innoo sheegay - waxa weeye farshaxanka aad ka yeelayso qofkii kale mid qaada wadada aad hayso.

**Tallaabada koowaad: ficol ha muujin:** tani waxa weeye naftaada xakamee, arinkani ma dhib yara, sida aynu wada ognahay, marka aad la kulanto qof kaa soo horjeeda oo aan macquul ahayn. Waa in aad naftaada aad dabeecadahaagii caadiga ahayn iyo dareemo cusub ka fogaysaa. Fuul geed dheer – waa sarbeeb tani- goortaasi ayuu Ury soo jeedinayaa in aynu boodhka ka tuno. “Heshiiska lagu gorgortamayo badalkiisa u fiican” sidii lagu heli lahaa, wadada u fiican ee aynu ku gaadhadyno danaheenna iyada oo aan ciddii kale ogolaan. Halka fiican ee aynu ka bilaabaynaa waxa weeye farshaxanka in aanad ficol muujin. Wax yaalaha suurta galka ah ee kale waxa ka mid ah in aad hab dhaqankaa sheegto, waa arin aynu kaga soo hadalnay mar hore mawduucii caabi la tacaalka. Waqtii qaado aad ka fikirto, isla goobtaa go'aan ha ku gaadhin.

**Talaabada labaad: hubka ka dhig qofka kaa soo horjeeda.** Caawi si uu uga baxo dareenka xumi. Halkani waa goobtii aad boodhka ka tumi lahayd dhammaan xirfadhihi xidhiidhka ee aad ku baratay aqoon is waydaarsiyadii khibrad korodhsiga. Si fiican u dhagayso una maqal dadka kaa soo horjeeda, waxa aad maqasho dib u habayn ku samee , aqoonso dareenka dadka kaa soo horjeeda; waafaq mar kasta oo ay taasi kuu suurta gasho, aqoonso qofka, sida suljadiisa, u qalankiisa, iyo marka uu talaabo talaabo dib u gurto, u muuji aragtidaada si ka fog waajahaad iyo iska hor imaad .

**Talaabada sadexaad: ciyaarta badal:** ku noqo danihii idiin dhexeeyay kana fogow mawaqaifta, samee dib u qaabayn, dib u tilmaamid ujeedo, dib hub uga dhigid, dib u eeg xeerarkii aad bilowgii ogolaatay, waydii su'aalo mushkiladaha lagu xalinayo, adoo ka bilaabaya, maxay, maxay, (sidaasi u ahaatay), maxay, adeegso awoodii aamuska, ku laabo daba galkii arimaha lakala dooranayo.

**Talaabada Afraad: fudaydi in haa lagu jawaabo.** Ury waxa uu akhriyayaa odhaah uu leeyahay SUNTZU, si uu u caddeeyo sheego arinkiisa “ u dhis qofka kaa soo horjeeda biriish dahab ah oo dib uu ugu gurto”. Si taas aad u hirgaliso, waxa aad u baahantahay in aad wax ka bilowdo halka dadka kaa soo horjeedaa taaganyihiin, ma aha in aad ka bilowdo halka aad rabto in ay taagan yihiin. Waxa laga yaabaa in caabigoodu ka imanayo, dhawr illood oo qoto dheer oo shaki ah. Tusaale ahaan fikradda oo aan toodii ahayn. Waxaa laga yaabaa in dhab ahaan (fikradu” ay taadii tahay, taasi oo cadhada dhalinaysa. Waxa ay dadka kaa soo horjeedaa ka baqayaan waji gabax, marka ay cidahoodii ku laabtaan, ama talaabada la rabo ee go'aan qaadashada oo aad u wayn. Haddii mid ka mid ah arimahaasi ama qaar kale hortaagan yihiin wadadooda jid ku laabashada, ku caawi sidii ay u dhisan lahaayeen goob xidhiidh.

**Tallaabada shanaad: ka dhig mid adag in may la yidhaa.** Caawi dadka kaa soo horjeeda si ay u bartaan baahida loo qabo in tubta lagu soo laabto iyo cawaqaqbita laga yaabo inay keento arinka oo faraha lagala baxaa. Tus inaad haysato “badalka u fiican ee heshiiska laga gorgortamayo” isticmaalna. Caawi qolooyinka kaa soo horjeedaa inay xaqqiisadaan inay jirto waddo laga baxaa, caawina inay dooran karaan. Waa in xooga aad saartaa heshiis waara helistiisii, yaree khatarta ku soo gaadhaysa kuna dhis arinkaaga habkii xalinta muranka. Marka aad ka soo gurguurato god dheer oo kan oo kale ah geedi socodkii gorgortankiisa, waxa aad u baahantahay waxoogaa ballanqaad ah si aan meeshii dib laguugu riixin.<sup>9</sup>

**Mararka qaar ayaa uu gorgortanku isna qudhun noqdaa**

In uu kaa hor yimaado gorgortami adagi waa arin, markase ay u laabtaan khiyaamooyin aan cadaalad ahayn. Arinku waaba kubad gabii ahaan cusub. Halkaa waxaad ku arki waxoogaa khiyaamooyinka uskaga ah ee caanka ah ee laga yaabo inay kula kulmaan markaad hayso wadada heshiis lagu gorgortamayo.

**Xog leexin:**

Isku day kas ah sidii dhinaca kale loo khiyaamayn lahaa xagga xaqiiqada xaaladda ama suldada Wax qabanaysa, ama ujeedooyinka.

**Xaalad cidhiidhi ah:**

In la doorto jawi shaqo oo si kas ah looga jeedo In ay kugu kalifto inaad dalbato in Dhakhsa gorgortankii loo gabagabeeyo ama aad wax badan ka tanaasusho.

**Qof weerar:**

Dhaqano kala duwan ayaa u qorshaysan in uu wax yeelo sharaftaada oo aad naftaada ka Shakido ama is waydiiso kartidaada in aad si tayo leh danahaaga uga hadli karto.

**Haddidaad:**

In si sharci darro ah laysku dayo in wax la qasbo taas oo inta badan dhinaca kalena ka horyimaad, oo dhalisa in isna wax hadido taas oo wax yeesha gorgortankii oo burburisa xidhiidhkii

**Dalabyo badan:**

Soo jeedino aan waaqici ahayn taas oo dadka soo jeedinaya kalsoonidii ka qaadaysa oo dilaysa in uu suurto gal noqdo gorgortan lagu guulaystaa.

**Laba kaclayn:**

Iyadoo lala yimaad dalab cusub mar kastoo tanaasul yimaadaba, si loogu qasbo ciddii kale in dhakhsa heshiis u galaan si aan haddana dhinicii kale dalab kale oo aanay filayn ula iman.

**Saaxiib aan soo liicayn:**

Adoo kaashada saaxiib aan halkiisa ka soo dhaqaqayn, cudur daarna isaga ka dhigatay si aan hadaladii meesha yaalay aanad u ogolaan.

**Khiyaamo arin xidh xidh ah:**

Ciyaar aad uga jeedid si kas ah inaad arin maarayntiisa faraha kala baxdo uguna qanciso dhinaca kale in ayna kuu suurto galayn in aad dalabyadooda ogolaato.

Difaaca ugu horeeyaa marka lagaala horyimaad khiyaamooyin xun-xun waa in uu karaa in uu garto oo uu magacaabo. Cutubkii ugu dambeeyay waxa aynu kaga doodnay noocyada caabiga ee qofka ka hor iman kara xaaladaha isku dhaca. U arag khiyaamooyinka xun xun in ay yihiin nooc caabiga ka mid ah. Taloyinkii Beter Blok's ee caabiga ku saabsanaa ayaa iyana halkan ku haboon marka caabi kaa hor yimaad iyada oo uu wato (caabigaasi) khiyaamooyin caddaalad daro ah marka miiska wax is waydaarsiga la fadhiyo. Qaado usha, si kale haddii loo dhigo, waa in aad garato

khiyaamada, markaa magacow, iskana aamus. Haddii khiyaamadii xumayd socoto, mar kale sheeg. Block waxa uu ku sheegaa talaabooyinka “jawaabo niyad wanaag ah”. Isku dar habkan Block iyo Ury saddexiisii talaabo ee u horeeyay ee ahaa: Ha ficitamin, hubka ka dhig qofka kaa soo horjeeda iyo ciyaarta badal, markaa qolooyinka dhinaca kale miiska ka soo fadiyaa ee gogortamaya waxa yaraanaysa in ay galaan khiyaamooyin caddaalad darro ah.

### **Kaararataya lyo Gorgortanka**

Waxa aynu rabnaa in aynu ku xidhno doodan ku saabsan maaraynta isku dhaca, iyada oo aan la adeegsan cid saddexaad, in aynu eegno sidii kaaratayga baryihii hore loo ciyaari jiray. Waxaa jira dareen doonaya inuu simo oo isu dhigo isku dhaca iyo tartanka, gaar ahaan marka aynu wax ka milicsano xagga reer galbeedka maskaxdooda. Isku dhacu ma aha tartan dhacay. Wuuse taagan yahay. Thomas Crum oo wax ka qora sixirka isku dhacu, waxa uu leeyahay kaaratayga Aikido waxa uu ina siinayaa sarbeeble faa'iido leh, taas oo meesha ka dhaqaajinaysa sida aynu u fikirno una dhaqano xaaladaha isku dhaca.

Aikido, haddii aad ereyo ku tarjumto macneheedu waxa uu yahay “Habka aad tamarta isugu qasayso”. Marka sidaa loo dhigo, nolosha oo dhami, oo uu ku jiro weerarka jidhku waxa weeye tamar dhaanis weheliyo. Weerarada waxaa laga soo qaadi karaa qaar ka mid ah waxyaalaha aan dhamaadka lahayn ee tamarta bixiso taas oo si wax dhis leh oo xidhiidh fiican ah loo isticmaali karo. .... Mabda' muhiim ah oo ay “Aikido” leedahay waxaa ka mid ah in la sharfo oo la aqoonsado tamarta lagu siiyay, halkii aad ka hor tagi lahayd.... La jaan qaad jihadeeda iyo xooga weerarka.... Xubinta labaad ee Aikido la xidhiidhaa waxa weeye mabda'a ogolaanshaha... in aad joogto goob aad jhayso socodka tamarta halkii iyadu kaa riixi lahayd. Haddii qofka weerarka ihi isku soo qaado si miisaan leh, si fudud ayaan uga baydhayaa markaas ayaan tamrtaydiina sii raacinayaa tiisii ... in dareen loo yeesho tamarta qofka ku weeraraya iyo xilliga aad ka jawaabayso ayaa muhiim ah farshaxanka ciyaarta Aikido.

Waxa dhici karta in qofka weerarka ihi aanu had iyo jeer la iman wixii laga filayay ama wuxuu badali karaa qaabkii weerarka xili kasta. In aad doorato sidii aad ula dheeli lahayd tamarta qofka weerarka ihi waxay qofka u ogolaanaysaa in uu u jajabnaado ka jawaabidda qaabka cusub. Kartida dheelidu waxa ay qofka ka jiraysaa in uu istiraatijiyyad kali ah ku dheganaado, xal ahaan.<sup>10</sup>

Miyay kuu muuqdeen is barbar dhiga aan aad loo dareemayn ee u dhexeeya waxa uu Ury ka sheegay gorgortanka lala galoo dadka adadag iyo istiraatijiyyooyinka lagu isticmaalay kaaratayga Aikido? Dhab ahaantii, xilgani waa waqtigii ku haboonaa in la joojiyo akhriga laguna siiyo fursad aad ku milicsato istiraatijiyyooyinka aadka u kala duwan ee la xidhiidha la tacaalida tamarta isku dhaca, ha ahaado mid jidh, maskaxeed ama nafsiyadeed.

Dib u eeg labadii doodood ee u dambeeyay oo dhakhso u qor meelaha ay iska diidayaan ama iska shabahaan fikradaha Crum, iyada oo la cuskanayo kaaratayga Aikido ee taariikhiga ah, iyo hadaladii gorgortanka ee jaamacadda Harvard ee takhasuska ahaa.

Xilligii  
milicsiga

## ARAGTIYO KUWII LA HAYAY KA DUWAN

Ama waxaa laga yaabaa in aynu tani nidhaahno “sidii haa loo gaadhi lahaa, malaha”. Mashruucii jaamacadda Harvard iyo sida uu u waajahay gorgortanka ayaa la kulmay weerar xoog badan oo kaga yimid qoraayo kale iyo dad gacanta kula jira gorgortanada. Isla sidaa ayaa laga odhan karaa wajiyada kale ee maaraynta isku dhaca iyagana. Balse ha la eego ugu horayn waxa dadka kale ay guud ahaan ka yidhaahdaan gorgortanka, iyo waxa ay Fisher iyo Ury gaar ahaan yidhaahdaan.

Kevin Avruch ayaa “dhaqankii iyo xalkii isku dhaca” inoogu sheegay in la hilmaamay kala duwanida dhaqanka markii la baadhayay lana fulinayay fikradaha iyo istiraatijiyada maaraynta isku dhaca. Waxase uu aad uga cadhooday buugii u horeeyay ee caanka ahaa ee Fisher iyo Ury, “sidii haa loo gaadhi lahaa”. Kaas oo keenay in uu guulaysto wajigoodii ay wax u dhigeen ee mabda'a ku dhisnaa oo dhaliyay buugag daabacan oo dhab ah oo soo baxa oo ku saabsan sida loola gorgortamo cid yar iyo cid badanba. Mushkiladaha la xidhiidha “sidii haa loo gaadhi lahaa” iyo qoraaladii dhamaystirayay buugaasi waa dhawr. Ugu horayn waxa ay ahaayeen qaar qoraal ahaan isir (-xagga wacyiga-) door bidaya kuna tiirsan “maraykanka, ragga, caddaanka, iyo dadka dabaqada dhexe ee aduunka” dhinacaas oo loo xaglinayay markii la eegayay sida caalamku u shaqeeyo.<sup>11</sup> Tusaale ahaan, taladoodii ku saabsanayd in “dadka iyo mushkiladaha lakala saaro” sida ay iyagu xusuus ahaan u dhigayaan, waxa ay malaysanayaan dhul macquul ah oo dareen jiro oo kala sooc dhici karo xiliga haboon.<sup>12</sup> Ta labaad waxa ay noqdeen qaar aad u guulaystay waxana ay raadeeyeen qaybihii kale ee aduunka iyada oo aan la eegin la qabsiga dhaqanka.

Alan Tidwell ayaa si gaar ah u tilmaamay sida uu uga cidhiidhyoomay buuga “sidii haa loo gaadhi lahaa” iyo qoraalada kale ee ah “sidii.....” waxa aanu yidhi: waxa ay u jeedaan in ay qiimo ridaan jawiga iyo xaaladda isku dhaca.... lyaga oo ahmiyadooda xoogeeda siinaya dareenka iyo sida dhinacyadu u arkaan isku dhaca. Waxana uu isagu arkaa tani in aanay ahayn wado lagu fahmo isku dhaca ee ay tahay qalab adeeg oo qancin ah. Sida Tidweel hadalka u dhigayo, “tani waa nasiib daro”.<sup>13</sup> waxana uu ku dagdagayaa in uu sumcadda ka xumeeyo wajigii labada dhinacba ay ku guulaysanayeen “guul-guul”, isaga oo ka dhigaya xaalad caadi ah. “haddaynu si guud u dhisno dhammaan isku dhacyada, xalka ay labada dhinacba guulaysanayaan ma aha xal dhab ah, ee waxa weeye dariiq lagu qanciyo dadka kale in ay haystaan wixii ay

rabeen, iyaga oo aan waxba dhab ahaantii bixin. Waa xarfad,mase aha mid wax soo saar leh marka la eego xalinta isku dhacii mudada fog."<sup>14</sup>


Waxa uu kani inoola eyyahay arin uu qof ka helay buug uu iibsaday oo isku dhac xalinta ku saabsan, kaas oo inoo sheegaya waxa ay waxba inoogu shaqayn waayeen, oo aan hadana inoo sheegayn tallooyin shaqaynaya. Waanadayadu waxa weeye in aad si xikmad leh u doorato qalabka aad isticmaalayso si aad u qabato wax wax dhisaya, oo ay soo galayso isku dhac maarayntii. Waxa goob ka shaqeeyaa, dhab ahaantii, wuu ka shaqayn karaa goob kale, haddii aanu khasaare keenin. Waa in aad dhakhso u barataa siyaalo cusub oo arimaha loo qabto oo aad sidan kaga dhakhso badan tahay, iyo waliba siyaalo ka sii dhakhso badan oo aad ku garato waxa arinku u shaqeeyay ama u shaqayn waayay. Adoo adeegsanaya wax waydiin, qorshe kuu gaar ah, samee baadhis, oo sifee, dadka arin wadaag la yeelo, dhakhsana u curi mid kii hore ka cusub.

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Gorgortanku waa hadal toos ah oo dhix yaal dhinacyada is khilaafsan ee rajaynaya in ay xal gaadhaan.
- Qof kasta gorgortan ayuu galaa, sida uu doono gorgortanku ha noqdee, maalin kasta si uu baahiyihiiisa u fuliyo, ee waa lagu kala wanwanaagsan yahay uun.
- Dadka iyo mushkilada kala saar marka aad gorgortamayso.
- Diirada saar danaha iyo alaaboooyinka (hantida) ee ha saarin mawaaqifta.
- Curi xaalado haboon inta aanad guda galin geedi socodka gorgortanka.
- Garo tartanka aad galayso, cidda aad la galaysaa sida ay caalamka u arkaan, baahiyahooda, mawaaqiftooda, iyo danahooda, iyo in ay rabaan galitaanka gorgortan mabaadi' leh.
- Filo waxaan la filayn una diyaar garow in aad la tacaasho khiyaamooyinka xun xun haddii ay yimaadaan.
- U shaqee sidii xal labada dhinacba guulaystaan loo gaadhi lahaa, taas oo xisaab ahaan u dhiganta  $1+1=3$ .
- Is af garansha waaga oo lagu maareeyo gorgortan waxa weeye sidii ciyaar kaaratay oo kale. Barashada in aad la dheesho tamarta qofka aad is haysaan waxa ay kordhinaysaa jajabnidaada waxaana ay xoojinaysaa jawaab celintaada. Waa arin aan cid kasta fahmayn, miyaanay ahayn?
- Xusuuso in wax laga qoro farshaxanka gorgortanka, iyo in dadka kale laga caawiyo in ay bartaan in si wanaagsan wax u fulintu ay shaqo wayn tahay. Waxa goob ka hirgalaa waxa dhici karta in aanu goob kale ka shaqayn.
- Waxoogaaga talada ah ee xikmadda leh adeegso oo qorshee jidkaaga gaarka ah ee gorgortanka, adoo aqoonsanaya in ay tahay xirfad nolol badbaadin ah. Wax iska baadh, wax safee, dadka wax la wadaag oo dhakhso u curi wax cusub.

## **RAAD RAAC**

1. Fritz, Peter, Allen Parker, iyo Sherry Stumm, haa waxa ka dambeeyaa (Sydney: waxa daabacay Harper-Collins, 1998), p.xi.
2. Ibid. pp.87-102
3. Raider, Ellen iyo Susan Coleman, Gorgortan iskaashi ah: tababar xirfadeed (New Platz, Ny: Goobta Ellen Raider ee Duwaliga ah, 1992), pp.2-2/2-7.
4. Cohen, Herb, wax kasta waa aad ka gorgortami kartaa (New York buugaga Bantam, 1980), p.50.
5. Ibid P.54.
6. Block, Betrella iyo weisbord, op.cit, pp.122-3.
7. Cudurdaarkayaga iyo mahad naqa qorayaashii “sida haa loo gaadhayo” tusaalaha waxoogaa la yaabka leh ee aanu isticmaalnay si aanu u sharaxno waxa u dhexeeya qoraaladoodii ku saabsanaa gorgortanka adag, ka dabacsan, ka mada'a leh. Waxa dhab ahaan aanu ka hadlaynaa Fisher, Roger iyo William Ury, buugoodii ahaa sida haa loo gaadhayo (Boston: shirkadda Houghton Mifflin, 1981) bilowga ilaa dhamaadka buuga.
8. Shain, Merle, qalbiyo aynu bari hore jabinay (New York: buugaagta Bantam, 1985).
9. Ury, Wiliams, sida may looga gudbayo ( New York: Buugaga Bantam, 1991), pp.8-122.
10. Crum, Thomas, sixirka isku dhaca (New york: Simon iyo Schuster, 1987), pp.42.
11. Avruch, Kevin, go'aanka dhaqanka iyo isku dhaca (Washington, DC: machadka maraykanka ee nabada madbacadiisa, 1998), p.78.
12. Ibid, p.78.
13. Tidwell, Alan C. isku dhac la xaliyay? Qiimayn khatar ah oo ku saabsan go'aanka isku dhaca (London: Pinter, 1998).p.26
14. Ibid p.27.



## DHEX DHEXAADINTA

*Inooguma filna baadhitaankooda in aynu u eegno sidiixaar walwaal nadaarad sawirka waynaysa hoos yaal oo kale, waxa se loo baahanyahay in la ogaado wuxuu dareenkaagu noqon lahaa haddii aadxaar walwaalkaa noqon lahayd.*

FISHER IYO URY

Sawir

Qeexidda geedi socodka	98
Arinka dhex dhexaadnimada	99
Dhab u eegid	100
Halkee iyo xilima ayay dhex dhexaadintu dhacaysaa (goorma ayaase wax la dhedhexaadinayn)	101
Kaalmaha dhex dhexaadinta	102
Tusaalayaal eegmo u baahan	104
Dhex dhexaadinta: waa istaraatiji horseedaya dhiska bulsho aad u xoog badan	112
Nuqdado muhiim ah	113
Raad raac	113

Dhex dhetaadintu waxa ay leedahay taariikh dheer iyo dad badan oo dhagaysta ama gacanta kula jira. Kutubta samada ka soo degtay way ka hadashaa dhex dhetaadinta. Christopher Moore, buugiisii geedi socodka dhex dhetaadinta, waxa uu inagu siinayaa sawir dhinac taariikheed iyo dhaqanba ah oo si wanaagsan loo koobay oo dhex dhetaadinta ku saabsan. Waxana uu sharciyaynayaa geedi socodkan, isaga oo ka dhigay mid isaga gudbaya xuduudo badan oo dhaqan iyo dhulal juqraafiyeed ah. Waxa halkan soo socota ku xusan xog kooban oo ku saabsan qaar ka mid ah tusaalayaashii soo jiidashada lahaa ee Moore uu helay intii uu ku jiray baadhitaanka dhex dhetaadinta<sup>1</sup>.

- Wadaadadu muddo dheer ayay qiimayn jireen geedi socodka dhex dhetaadinta iyada oo loo adeegsanayo maaraynta isku dhacyada. Culumadu kaalin wayn ayay ka qaataan dhex dhetaadinta isku dhacyada. Qaadigu wuxuu dhex dhetaadiyaa khilaafaadka qoyska, xaaladaha fal dambiyedka, khilaafaadka siyaasiga ah ee madaxda dhex mara. Diin kastana dadkoodu sidaas ayay dhex dhetaadinta u galaan.
- Siyaasiyiintu waxa ay ahaayeen, ilaa qarniyadii dhexe intii ay ka samaysmeen dhulalkan dawladaha noqday, qaar loo isticmaalo dhinac saddexaad oo dhex dhetaadiya isku dhaca.
- Dhex dhetaadinta waxaa si balaadhan looga isticmaalaa dalka shiinaha ee maanta jira, halkaa oo la adeegsado gudida dadwaynaha ee heshiisiinta.
- Dalalka Latin America iyo dhaqanka "Hispanic"gu guud ahaan waxa ay leeyihii taariikh fog oo la xidhiidha geedi socodka xalinta khilaafaadka kaas oo ka yimid asal ahaan dalka Spain.
- Dhex dhetaadinta waxaa laga isticmaalaa dalal badan oo Afrikaan ah si loo xaliyo khilaafaadka jaararka.
- Dhex dhetaadintu waxa ay u qoran tahay oo ku dhaqma bulshooyinka carabta.
- Koonfurta "Pacific Melanesia" waxa jira la taliyayaal iyo gudiyo si joogta ah u kulma "si ay u ilaaliyaan shuruudaha dooda fiican" ee dadka is khilaafsan, si dadkaasi ugu nafisaan.
- Tiro kooxo diineed ah oo taageeray degitaanka qaarada waqooyiga maraykanka ayaa ka qayb qaatax xalinta khilaafka xubnahooda dhexdooda ah. mid ka mid ah oo layidhaa asxaabta, waa sida inta badan loogu yeedho eh, waxa ay kooxdaasi leedahay taariikh nabad iyo bulsho dhexgal lagu maareeyo isku dhaca. Barnamijyada isku dhac xalinta ee kooxahaasi iyo qaar kaleba wadeen waxa ay ka mid yihiin barnamijyo dhex dhetaadineed oo muddo ka socday dalka maraykanka. Buugii u horeeyay ee tababarka shaqooyinka dhex dhetaadinta, ee la daabacay 1982, waxaa loo isticmaalay inuu caawiyo diyaarinta dhex dhetaadiyayaal lix qaaradood ka kooban.

Taariikhda dhex dhetaadintu waa hodan, waana ay dheertayah waanay kala baxaysaa. Waxana ay iskaga gudubtaa dhammaan qaybaha bulshada , dhaqano iyo dalal badan: tacliin, diin, maamulka iyo shaqaalahaa dhexdooda, nidaamka garsoorka, xukunka fal dambiyedyada, qoysaska, deegaanka, bulshooyinka, magaalooyinka, dhammaan heerarka dawladda. Caruurta yaryar ayaa xataa barta sidii ay u noqon lahaayeen qaar asaagood dhex dhetaadiya, oo dhex gala isku dhacyada iskuulka iyo garoomada ciyaaraha.

Inta aynaan socodkan baadhitaanka ah ku sii fogaan waxa aynu dareemaynaa in loo baahan yahay bixinta tilmaame safar. Dhex dhedaadintu waa shaqo koraysa, malaha sababtu waxa weeye aduunka oo isku dhacyo badani ka jiraan. Ururo badan iyo dad ayaa u galay dhex dhedaadintu shaqo ahaan. Anana sidaas waanu amaanaynaa waxaana aanu filaynaa in dadkaasi, ururadaasi, magaalooinkaasi, dalalkaasi, iyo goboladaasi oo qayb ka ah isku dhacyo soo jiitamay oo qoto dheer oo naxli lihi, ay u baahan yihin ayna mudan yihin in loo gudbiyo wax alaale wixii caawimo la siin karo ee ay ka heli karaan qof caawinaya oo u soo dhawaanaya si uu khilaafaadkooda u xaliyo. Buugan looma qorshayn inuu diyaariyo dadka u halgamaya in ay noqdaan dhex dhedaadiyayaal xirfadlay ah. Inta ugu roon dadka himiladaa lihi halkan waxa ay ka heli wax soo jiita.

Darafka kale ee sawirka dhex dhedaadintu waxa jooga qaar ku qabta dhex dhedaadintu khilaafaadka xafiisyyada, gidaarka dambe agtiisa, asxaabta dheddooda iyo dadka arin wadaaga ah ee uu ku yimaad isku dhac ee diyaarka u ah inay ka cadsadaan qof kale in uu ka caawiyo dhex dhedaadintooda si ay heshiis u gaadhaan. Dhex dhedaadintu waana nolol waana shaqo loo baahanyahay aduunkan ay khilaafaadka iyo isku dhacyadu noqdeen caado ka mid ah dhaqanka qofka iyo ururada. Haddaba dooden dhex dhedaadintu ku saabsan waxaa loo qorsheeyay si ay u caawiso dadka dhex dhedaadintu ka sheqeeyaa sidii ay shaqada u sii hagaajin lahaayeen.

Waxa kale oo loo qorsheeyay in ay caawiso maareeyayaasha iyo xirfadlayda kale ee raba in caawimo xirfadaysan ay galiyaan sawirka isku dhaca, si ay uga caawiso in ay gaadhaan go'aano fiican oo ku saabsan adeegsiga dadka takhasuska leh ee dibada looga yeedhayo ee loo adeegsanayo wax ka qabashada isku dhaca. Doodani waxa ay caawinaysaa xaaladahan iyada oo qeexaysa kaalinta dhinaca saddexaad ee wax dhex dhedaadinaya, iyo waxa uu yahay geedi socodka dhex dhedaadintu iyo waxa looga jeedo goobaha dhex dhedaadintu.

## QEECIDDA GEEDI SOCODKA

Sida istiraatijiyyada iyo geedi socodyada kale ee go'aan qaadashada isku dhacyada, halkan waxa aanu ku siinaynaa waxoogaa sharaxyo ah oo laga soo qaaday aragtiyaha qoraayada iyo dadka ku hawlan dhex dhedaadintu.

**Dhex dhedaadin:** Waa geedi socod kasta oo lagu xalinayo khilaafaad, taas oo qof kale uu caawiyo dhinacyadii si ay uga gorgortamaan sidii xal loo gaadhi lahaa (Jennifer Beer: 1997, p.3.).

**Dhex dhedaadin:** Waxa weeye gorgortan wax ku ool ah oo uu fuliyay dhinac saddexaad oo dhex ihi una fuliyay si qarsoodi ah (Raider iyo Coleman: 1992, p. 7-2.)

**Dhex dhedaadin:** Waxa weeye dhex galka khilaaf ama gorgortan dhinac saddexaad oo la ogolyahay oo aan cid la jirin oo dhex dhedaad ihi uu dhex galoo kaas oo aan lahayn suldad go'aan qaadasho, si uu u caawiyo qolooyinka murmaya sidii si is xilqaan ah ay ugu gaadhi lahaayeen xal ay leeyihii oo dhinac kasta raali galiya marka la eego waxa lagu murmaya (Moore: 1986, p.14).

**Dhex dhedaadin:** Waxa weeye geedi socod gacanta laga fulinayo, halkaa oo qofka wax fududnayaa uu caawinayo dhinacyadu in ay dhankooda ka eegaan dhabta, dareen wadaag yeeshaan, afkaarta is waydaarsadaan, una shaqeeyaa sidii heshiis ay u gaadhi lahaayeen (Crawley: 1992, p.177).

Mar kale, sharaxyadu waxa ay inaga siinayaan fikrado kala duwan waxa uu geedi socodkani gabi ahaan yahay, arin ayaase cad oo dhammaantood isku raaceen. Dhex dhetaadinta waxa soo galaya cid saddexaad, kaas oo dhex ah ilaa la caddaynayo in aanu dhex ahayn. Hadalada kale ee ay kooxdaa khubarada ahi sheegeen waxa uun ay qeexayaan kaalinta dhex dhetaadiyaha, in aanu eexan, sir iyo kalsooni leeyahay, dhinacyadu dhammaan ogolyhiin, wax tarna yahay xagga geedi socodka, waa sir, waa arin gacanta laga qabanayo, dhex gal leh, is xil qaan ah, xaqiilo raadin loo dhan yahay, digtooni la samaynayo, go'aan la qaadanayo, mushkilad la xalinayo.

Raider iyo Coleman waxa ay dhiseen Biriish u dhexeeya gorgortanka iyo dhex dhetaadinta. Dhab ahaantii, dhagaxda ay seeskooda dhismaha ku isticmaaleen waa isku mid, marka la eego sida ay u sharaxeen labadooda geedi socod. Aragtida caalamka ama qiyamka, jawiga, mawaaqifta, baahiyaha, googo iyo garoocad la is waydaarsanayo. Dhaqanada laga filayo gorgortamayaasha iyo dhex dhetaadiyayaashu iyaguna waa isku mid. Xog qaadashada, furfurni iyo dhaqan wax ururinaya iyo sidaas oo kale oo iyagana laga filayo dadka muranku dhex yaal.<sup>2</sup>

Moore waxa uu dhexdhetaadinta ku sharaxay in ay tahay geedi socodki gorgortanka oo la dheeraynayo si fiicana loo habaynayo. Xaalad kasta go'aan qaadashadu waxa ay ku jirtaa gacanta dadka isku dhacay. Dhex dhetaadintu waxa ay ka soo baxdaa inta badan gorgortanno fashilmay, halkaasi oo labada dhinac ee is hayaa ay si is xilqaan ah isku raacaan inay dhinac saddexaad oo dhex dhetaadiya la shaqeyyaan.qofkan ama dhawrkan qof (iyaga oo dhex dhetaadiyayaashu marka ay hawlgalayaan ah koox ama kooxo dhawr ah) waa in laga ogolaado dhinacyadii dadkii murmayay waxana la rajaynayaa in ay yihiin qaar aan eexanayn oo dhex ka ah soo galida arinka. Sifooyinkaa la rabaa waxa ay noqonayaan qaar la adkeeyo lana ilaaliyo maxaa yeelay dhex dhetaadintii xirfad ayay noqotay leh qalabkeedii iyo baahiyihii tababar, u qalankii, asaaskii akhlaaqeed iyo albaabka oo ay ilaalinayaan kuwii ay u suurta gashay in ay ka gudbaan.

## **ARINKA DHEX DHEXAADNIMADA**

Waxa aad heli in sharaxyo badan oo dhex dhetaadinta la xidhiidha ay ku jiraan ereyada ah "dhex dhetaadnimo" ama "dhex dhetaad" taas oo ah qiimo wayn oo ka dambeeya geedi socodka dhex dhetaadinta. Dhab ahaantii waxa aynu wax ka tilmaamnay isticmaalka ereyadan in ay yihiin dhaqan qayb ka ah shaqada dhex dhetaadinta. Hase yeeshiee dad badan oo cilmi leh ama arinkan faraha kula jiraa waxa ay is waydiinayaan in kani dhab yahay lana xidhiidho sida dhex dhetaadintu u shaqayso, yahayna dhaqan shaqeed oo ay qasab tahay in uu hago geedi socodkan. Dood ayaa leh, way adag tahay, haddii aanay ahaynba mid aan suurta gal ahayn in dhex dhetaadiyayaashu ay ka tagaan khibrad nololeedkoodii, eexashadii, dhaqankoodii gaar ahaaneed, marka ay kaalintan galaan. Sidaa darteed ay adagtahay in ay dhex dhetaad noqdaan.

Iskuul kale oo soo muuqanaya ayaa ku doodaya in "dhex dhetaaddintu isu bedeshay qalab khatar ah oo kordhinaya awooda ciddii xoog leh kuwaas oo ka faa'iidsanaya dadka jilicda san".<sup>3</sup> doodu waxa ay u socotaa sidan: kol haddii geedi

socodkii dhex dhexaadintu yahay mid aan rasmi ahayn oo raali ku dhisan oo aanu jirin xeer la raaco oo dhab ihi, waxa ay xoojin kartaa awooda aan isu dheeli tirnayn ee dhex taal labada dhinac. Tusaale ahaan, qof xaas ah oo arin furiin ku saabsan isagu ah kii talada maroorsaday waxa dhacaysa marka xalka lagu jiro inuu ku dhaqaaqo raadaynta iyo dhaqan uu wax ku qasbayo inta ay dhex dhexaadintu socoto, tan oo qofka dhex dhexaadinta wada ku adkaynaya in uu dhex ahaado. Ama, haddii uu dhex ahaado waxa uu noqonayaa mid ogolaada xal aan caddaalad ahayn oo la jira dhinaca xad gudubka wada. Dhix dhexaadinta oo ah geedi socod xaqijinaya dhex dhexaadnimadu si tayo leh ma u badalay arimo caddaaladda bulshada la xidhiidha sida xuquuqdii madaniga ahayd, sinaantii jinsiga , xuquuqdii macmiisha?

Goobo caalamka ka mid ah, waxa jira dareen soo kordhaya oo ku dhalanaya dhix dhexaadiyayaasha oo leh dhix dhexaadnimadu ma aha dhaqan shaqaynaya. Dhinacyaga haddii aanu ka eegno waxa soo baxaya arimo ah in lagu kalsoonaan karo xagga dhinacyada arka in dhix dhexaadintu ay tahay hab bedel ah oo khilaafka lagu xaliyo. Waa arin fikir u baahan marka aad arkayo in kaalinta dhix dhexaadintu ay tahay geedi socod lagu maareeyo isku dhaca bulshadaada.

## **DHAB U EEGID**

Gabadha Jennifer Beer ayaa barnaamijka go'aan gaadhida isku dhacyada asxaabta ku tilmaamtay arin dhab ah doodii ku saabsanayd dhix dhexaadinta.

Dhinac, dhix dhexaadintu ma aha arin wayn. Dadku dhix dhexaadinta ayay ku jireen intii bani aadam dagaal uun ku jiray, inteeena badani dhix dhexaadinta nolol maalmeedkeena ayaynu khibradeeda ka helnay. Dhinaca kalena, dhix dhexaadintu waxa ay noqotay geedi socod rasmi ah, waxaana ay noqotay mid caadi ah oo imika dibada u soo baxday oo loo adeegsado khilaafaadka shaqada iyo kuwa duwaliga ahba. Iisticmaalka dhix dhexaadinta xagga isku dhacyada gaarka ah ama kuwa ururada ama kuwa bulshada iyana waa fikrad wali sii kobcaysa.

Dhix dhexaadintu mararka qaar waxa ay u shaqaysaa si fiican. Ka qayb galayaasha ayaa xaliya mushkiladahooda, iska saara dareenka dulmiga, oo soo celiya xidhiidhadii bur buray. Waxaa marar dhacda, in fadhiyada dhix dhexaadintu ay wax bur buriyaan waxna gubaan, oo dhinacyadii cadho galiyaan rajadoodana mid tii hore ka xun ka yeelaan. Sida caadiga ah natijadu waa mid aan aad loola yaabin, dadku inta u liidata goobaha dhix dhexaadinta waxa ay jawaab u helaan danahooda qaar, waxaana ay ka noqdaan iyaga oo dareen ahaan nastay haystana heshiis ay inta badan kaashan karaan.

Guusha badhkeed waxa ay ku jirtaa xirfadda dhix dhexaadiyaha, iyo waliba sida dhinacyadu ay diyaar u yihiin. Haddii qof uu u jeedo in isku dhacii uu socdo, xalalka aadka u muuqdaa waxba ka tari maayaan. Haddii qof kastaa uu rabo in isku dhacu uu dhammaado, dhix dhexaadintu waxa weeye wax qiiimo iyo tayaba leh oo la fulin karo.<sup>4</sup>

## **HALKEE IYO XILIMA AYAY DHACAYSAA DHEX DHEXAADINTU (GOORMA AYAASE AAN WAX LA DHEX DHEXAADINAYN)**

Waxa aynu hore u sheegnay goobo laga isticmaali jiray, lagana isticmaalo dhex dhextaadinta. Qaar kalana waxaa ka mid ah:

- Danaha bulshada, khilaafaadka dhinacyada ee iskaga gudba xedad siyaasadeed ama juqraafi, sida: goobo loo qoondeeyay jid wayn oo cusub, dooritaanka goobo xashiishka lagu aaso, xuquuqda biyaha.
- Khilaafka goobta shaqada heerka uu doono ha ahaado eh, shaqaalaha dhexdooda, qaybaha dhexdooda, kooxaha maamulka dhexdooda iyo gudiyada la doortay, iyo ururada dhexdooda.
- Khilaafka la xidhiidha hay'adaha dawlada ee ku saabsan ku dhaqan la'aanta xeer hoosaadyada iyo heerarka la rabo.
- Wax is waydaarsiga la xidhiidha maaraynta shaqaalaha iyo habka dacwad sheegashada.
- Khilaafaadka jinsiyadaha badan, gobolada, iyo isirka.
- Dhibanayaasha la kulmaya ciddii ku xadgudubtay, shirarka ka dambeeya shaqaqaha magaalooinka ama jidadka (suuqa) ka dhaca.
- Awooda lagu fahmayo laguna xalinayo falalka gadoodka bulshada.
- Khilaafka qoyska, furriinka, ilmo daryeelka, kala fogaanshaha jiilalka (filalka).
- Dhex dhextaadinta assaaga isku iskuulka ah, isku dhacyada waalidka – macalimiinta.
- Khilaafaadka macmiisha.
- Meel kasta oo uu ka jiro isku dhac aan la xalin oo ay qolooyinka murmayaa si is xilqaan ah u rabaan in ay ogolaadaan caawimada dhinac saddexaad oo haya rabitaankii iyo xirfaddii uu ku caawin lahaa dadka is khilaafsan si ay uga qayb qaataan go'aan qaadasho loo dhan yahay iyo mushkilad xalin.

### ***Xaaladaha caawinaya in dhex dhextaadintii ay noqoto mid haboon***

- Dareemo xoog badan oo xukun qaadashadii tashuush ku furay.
- Dhinacyada oo is yaqaana.
- Ma jiro kala duwani badan oo xagga xidhiidhka awooda ah oo dhinacyada u dhaxaysaa.
- Dadka isku dhacay oo wada nool, wada shaqeeyaa, ama waxa jira sababo kale oo keenaysa in aanay kala fogaan.
- Dhinac ayaan raali ka ahayn wajahaada dhinaca kale iyada oo aan dhinac sadexaad la joogin.
- Dadka ay khusayso ayaa raba in aan natiijadu farahooda ka bixin.
- In la daryeelo xidhiidhka ayaa muhiim ah.
- Dadka isku dhacay ayaa dareemaya in ay u baahan yihiiin xirfadaha iyo taageerada dhinac saddexaad oo khilaafaadkooda ka shaqeeyaa.
- Go'aan dhakhso ah ayaa loo baahan yahay.
- Siraysiga (gaar ahaanta) oo muhiim ah.

- Dad badan ayaa arinka soo galaya, sida khilaaf xaafadeed.
- Dhinacyada ayaan rabin jaranjaro rasmi ah oo kharash badan, sida dacwadda maxkamadaha.

***Xaaladaha ka dhigaya dhex galka dhex dhexaadinta mid aan haboonayn***

- Waxa jira waxyalo xoog leh oo tusaya in dhinac uu rabo in uu adeegsado dhex dhexaadinta si uu isku dhac u huriyo ama uu u adeegsado si uu u fuliyo dano qarsoon.
- Dhinac ayaa soo galay doodii bilawga ahayd isaga oo aan karayn inuu dhagaysto dadka kale ama dhinac ayaa aad u wareersan oo aan lala fulin karayn hawl gal iskaashi heshiis ah.
- Arin aan farax lahayn ayaa markaa dhacay oo kala gaynaya labada dhinac ama dhinac u diidaya in ka qayb qaadasho faa'lido leh uu la yimaado.
- Waxa jira isu dheeli tir awoodeed oo ka dhigaya go'aan la wadaago mid aan suurta gal ahayn.
- Mid ka mid ah dhinacyada, ama labaduba waxa fiican in ay u dhaqaaqaan ka hawlgalka goobo kale, sida maxkamadaha.
- Arinka u muhiimsan ama la isku hayo ayaa u eeg mid aan dhex dhexaadin lagu xalin karayn.
- Dhinacyada waawayn ayaan rabin inay ka qayb qaataan geedi socodka.
- Dhinacna diyaar uma aha in uu eego xal laga gaadho khilaafaadkooda.
- Marka aanu jirin qaab lagu hubinayo fulinta heshiiska.

## **KAALMAHA DHEX DHEXAADINTA**

Dhex dhexaadiyayaasha tayada lihi waxa ay gashadaan koofiyado badan waxaana ay qabtaan kaalmo badan oo ay ka mid yihiin:

- **Farsamo yaqaan qasabada ah oo wax isku xidha:** waxa uu furaa qasabado ay ka xidhiidhaan dhinacyadu, furnaanta qasabahohana wuu ilaaliyaa.
- **Sharciyeeye:** waxa uu ka caawiyyaa dhinacyada sidii ay u qiri lahaayeen xaqa arin galida.
- **Baadhe:** waxa uu caawiyyaa inuu qolooyinka ay khusayso ka caawiyo in ay helaan 43 wado ama in ka badan ama ka yar, oo mushkilada lagu waajaho.
- **Xaqiiqo raadiye:** waxa uu ka ilaaliyaa dhinacyada in ay tagaan dhul khayaali ah oo ay xal ka raadiyan.
- **Xidhiidhiye khayraad:** waxa uu raadiyaa ilaha khayraadka waxana uu ku xidhaa caawiyyayaasha kale iyo arimaha la kala dooranayo.
- **Xirfad dhise:** waxa uu caawiyyaa dhinacyadu sidii ay u dhisi lahaayeen xirfadhihi xidhiidhka fiican iyo xirfadhihi mushkilad xalinta .
- **Saajin gaardi:** Tallaabo ayuu qaadaa haddii loo baahdo si uu gorgortankii hore ugu socdo.
- **Nijaar fas ah:** Arimaha ayuu dib u qaabeeyaa.
- **Fududeeye:** Waxa uu keenaa geedi socodyo keena natijjooyin, xidhiidhadana horumariya.

- **Dawaarlaha shaadhka dhogorta ah ee canaan qaadashada:** kafaaro gud ayuu la yimaad haddii loo baahdo, canaantana wuu qaataa iyo masuuliyada fikradaha iyo arimaha la doorto ee lagu hoobto ee gaashaan noqon waaya waxna ka tari waaya isku kalsoonida dadkii arinku khusaynayay. [shaadhkaasi halkan lagu sheegay waa shaadh dhogor ah oo dad aan muslim ahayni xidhan jireen baryo hore si ay toobad keen u muujiyaan]. (looma baahna halkan).
- **Ergo:** “raali ahaada, anigu go’aan uma gaadho macmiishayda”.
- **Wakiilkii sirta:** waxa uu masuul ka yahay in uu geedi socodka sir ka dhigo. Gudashada kaalmahaasi waxa ay u baahanyihii sifooyin iyo xirfada badan in qofku leeyahay. Wuxaana laga rabaa dhex dhixaadiyaha tayada leh: inuu fahmayo dareenka qofka kale, yahay muxtaram, la aamino, degen oo taxadir leh, adag, aan eexan, dareen leh, xasiloon oo dareen leh, wax aamina, wax fahmaya, digtoon, sabir leh, wax waajahaya marka loo baahdo, jajaban, xirfad leh, lagu kalsoonaan karo, soo jeeda, baadhitaanka jecel, wax sawiran kara, caadil ah, badhaadhaysan oo dareen kaftan leh [waa la yaab miyaanay ahayn].

**Dib u eeg 12 ka kaal mood ee kor ku xusan oo naftaada ku qiimee (1) ilaa (10) sida aad ugu fiicantahay fulinta kaalin kasta . 1= kuma lihi wax tayo ah kaalintaa fulinteeda; 10= tayo badan ayaan kaalintaa fulinteeda ku leeyahay. Isu gee natijadaada guud ahaaneed, markaa samee go’ano ku saabsan goobaha aad rabto in aad hore u mariso xagga tayadaada dhex dhixaadiye.**

Xilligii  
milicsiga

**Farsamo yaqaan qasabadaha ah oo wax isku xidha:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Sharchiyeye:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Baadhe:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Xaqiiqo raadiye:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Xidhiidhiye khayraad:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Xirfad dhise:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Saajin gaardi:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Nijaar fas ah:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Fududeeye:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Dawaarle shaadh canaaneed:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Ergo:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Wakiil sir haye ah:**

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10

**Natiijada guud** \_\_\_\_\_

Haddii aad keento natijo ka badan 100, waxa aad diyaar u tahay in aad ku biirto dhex dhixaadiyayaasha bulshada ee heerka caalamiga ah. Haddii natijadaadu tahay mid u dhaxaysa 50 iyo 100, waa xilgii aad ka fikiri lahayd barnaamij wax barasho oo adiga kugu wajahan oo xooga saara goobaha aadka ugu baahan horumarin. Haddii natijadaadu 50 ka yartahay, ka fikir wax kale oo aad waqtigaaga dheeraadka ah ku qaadato. Waxa dhici kara inaad tababar ku siiso asxaabtaada wax dhex dhixaadinaya farshaxanimada fiican ee tolida shaadhka dhogorta ah ee canaan qaadashada.

## **TUSAALAYAAL EEGMO U BAAHAN**

Dhex dhixaadintu, faafida ay faafsto iyada oo ah hab la doorto oo isku dhaca lagu xaliyo waxa ay qaadanaysaa is gadgadiyo iyo nidaam. Wuxuu ka hooseeya dhammaan jalasyada iyo siidhiyada cusub ee hawl wadeenada iyo dadka aragtida leh ee casrigani ay ku kordhiyeen geedi socodkii dhex dhixaadinta muddo sanada ah, in dhex dhixaadintu ay ilaashatay halbwale ka kooban qiyam iyo istiraatijyooyin. Waxa aynu halkan ku bixin doonaa eegid tusaalooyinka aad loo yaqaan, adna waxa aad go'aamin doontaa waxa macnaha samaynaya iyo waxa aan macno samaynayn, adiga oo eegaya kaalintaada geedi socodka nabada waxa aan shaki ku jirin in aad dareemi doonto shabah ku soo jiita oo u dhexeeyaa dhex dhixaadinta iyo gorgortanka. Dhex

dhexaadiyaha tayada lihi waxa weeye gorgortame guulaysta oo aragti ciyaar “tennis” leh iyo muruqyo tun oo dhismay.

**Qoraalkii qoraha:** waxa aynu cutubka xiga kan kaga hadlaynaa wajiyoo loo wareegi karo si khilaafka go'aan looga gaadho oo inta badan lagu magacaabo dhex dhexaadin. Iskuulada fikradaha ee maaraynta isku dhacu waxa weeye – sida tan loo qoray – qaar ku jira dhaq dhaqaaq iyo isbedel aan istaagayn. Sidaa darteed tusaale kasta oo la keeno si looga fikiro waxa uu shaki la'aan noqonayaa mid cidi wax ka sheegto. Iyada oo ciddaasi keenaysa ama aan keenayn badal la qaadan karo. Haddana waxa aanu rumaysanahay in saddexda tusaale ee soo socdaa ay bixinayaan fikrado iyo aragtiyo hodan ah oo isku jira oo ku saabsan geedi socodka dhex dhexaadinta. Waxana aanu kugu dhiirinaynaa in aad qaadato waxa u fiican ee aad is leedahay wuu kuu shaqayn karaa. Tusaalayaashan mid kasta iskugu habee wajiga adiga kuu gaarka ah ee aad is leedahay khilaafaadka iyo isku dhacyada ayaa lagu dhex dhexaadintu karaa.

## **TUSAALAH RAIDER IYO COLEMAN**

Layli is diyaarin ah: dhex gal kasta oo dhex dhexaadintu ku saabsan waxa ka horeeya arimo gogol xaadh ah sida ay Raider iyo Coleman qabaan waxa ka mid ah:

1. In dhinacyadii la ogolaysiyo in la dhex dhexaadiyo.
2. In dhinacyadii laga yeelo qaar ku kalsoonaada dhexdhexaadiyaha, iyo
3. In dhex dhexdhexaadiyayaashii laga dhigo qaar ku kalsoonaada geedi socodkii.

Talaabooyinka gogol xaadhka ihi waxa ay matalayaan wajigii arin galidda ee lagaga dooday buugii qorshaynta ka qayb qaadashada kaas oo mararka qaar lagu tilmaamo “dhisidda xidhiidh mushkiladda lagu xaliyo”. Wawaana ka mid ah, qofkii oo la aqoonsado, in la isla fahmo geedi socodkii dhex dhexaadinta; iyo waxyaalaha ay rabaan, iyo baahiyaha dhammaan ka qayb galayaasha arinka ay dani kaga jirto, tilmaamihii lagaga qayb qaadanayay, sida: arimaha sirta ah iyo cidda go'aaminaysa, qiyamka, caadooyinka, saadka. Raider iyo Coleman waxa ay ku soo daraan tiro arimahan ka mid ah, labadooda heer (marxaladood) ee u horeeya geedi socodka dhex dhexaadinta.

### **HEERKA KOOWAAD: Furitaanka dhex dhexaadinta.**

- Abuur jawigii haboonaa ee dhex dhexaadinta adoo diyaarinaya deegaankii dabiiiciga ahaa, keenayana qalabkii adeega ee haboonaa, sida: waraaqihii qorshaha, qalabkii wax lagu qori lahaa, kaafgii, iyo adoo hubinaya in gaarnimadii (sirtii) la ilaaliyo.
- Qaado ereyada furitaanka, adiga oo ku soo daraya hordhac, hubinayana magacda, sida loo qoro magacda iyo qof kasta magaca uu jecelyahay in loogu yeedho, iyo xeerkii goobta, tusaale ahaan:
  - Si fiican u dhegayso. Iska jir inaad hadalka qofka ka goyso.
  - Qof kasta si sharaf leh ula dhaqan: magacyo ha sheegin, cid ha dulayn, ha canaan.
  - Daacadnimo dadka ula xidhiidh, beeni waxba ma tarto.
  - Aad uga shaqee sidii mushkiladda loo xalin lahaa.
- Gorfee waqtiga laga yaabo in arinku qaato, su'aalahana qayb ugu tala gal.

- Yaa horraynaya? Ama, haddii qof ay cadhadiisu ka badan tahay ka kale, sii in uu hadalka ku horreeyo, hubso se in dhinicii kalena raali yahay. Dadka cadhaysani waxay doonaan in ay nafisaan ama hadalka ayay dhabqiyaan haddaan laga neefin.

**HEERKA LABAAD: Qeexidda arimihii:**

***In la fahmo sawirka dhinac kasta.***

- Si degan u dhagayso dhinac kastaa sida uu wax u arko.
- Tus dhegeysi wanaagsan, su'aalo xaqiijo raadis ah, soo koob xirfadaha adoo abbaaraya xudunta khilaafka aragtiyaha kala duwan.
- Muuji arimaha la wadaago ee aasaaska ah.
- Qorshee si aad u xaqiijiso saddex natijo:
  - Cidda hadlaysa in ay dareento in la maqlay oo uu dhex dhedaadiyuhu fahmay.
  - Dhinaca dhegaysanayaa waxa uu aad ugu dhawiyahay in uu maqlo werwerka dhinaca kale marka dhex dhedaadiyuhu ku cel celiyo, iyo ,
  - Si tayo leh u tus dhaqanka furitaanka ee qof kasta laga rabo in uu isticmaalo marka hawlahan dabagal lagu samaynayo

**HEERKA SADEXAAD: Xal helista:**

Caawi iyagu si ay u fahmaan aragtida qof kasta

- Kormeer dhinacyada si ay u isticmaalaan dhaqan war bixin ah oo fur furan.
- Caawi in ay qaabeeyaan hadalka mawqifyada ku saabsan si ay uga dhigaan hadal baahiyoo sheegaya.
- Caddee waxyaalaha aad ku fikirayso.
- Caawi dhinacyada si ay u curiyaan arimo la kala doorto adoo isticmaalaya xirfaduhii curinta fikradaha deg dega ah.

**HEERKA AFRAAD: Xidhitaanka dhex dhedaadinta:**

***Imtixaanida xalkii iyo qoritaanka heshiiskii.***

- Ku dhiiri dhinacyada in ay ka hadlaan sida ay u maarayn doonaan nafahooda, xidhiidhkooda iyo arimahooda ku xeeran goobtii khilaafka, xiliyada mustaqbalka (soo socda).
- Qor heshiiska labada dhinac, hubina in uu isu dheeli tiran yahay, dhinacyaduna ogolaadaan .
- Fadhiga gabagabee oo xidh.<sup>5</sup>

## **GEEDI SOCODKA DHEXDHEXAADINTA ASXAABTA (SIDA UU KU SHARAXAY JENNIFER BEER)**

Sida aad dhakhso u dareemi doonto, dhex dhedaadinta fulinteeda iyo falsafadeedu way kala duduwantahay, min barnaamaj ilaa barnaamaj iyo dhex dhedaadiye iyo dhexdhedaadiye kale. Sifooyinkii barnaamijkii xalinta isku dhaca asxaabta, waxa ka mid ahaa arimahan ku saabsan geedi socodka dhex dhedaadinta:

- Dhinaca ka qayb galayaasha: waa shaqo is xil qaan ah; dhex dhedaadiyayaal kala duwan, ma jiraan wakiilo talo siinaya macmiishii, iyo dhex dhedaadiyayaal kaaliyayaal ah. Dhex dhedaadiyayaasha asxaabtu waxa ay u shaqaynayaan lamaane.

- Dhinaca dhiska. Geedi socod jajabni leh, yeesha had iyo jeer fadhiyo dhammays tiran oo ah 1.5- 2.0 saacadood. Qabta shirar gooni ah marka loo baahdo, u halgama heer wada hadal oo aan rasmii ahayn.
- Ujeedada iyo arinka diirada la saarayo. Dhinacyadu ha ka wada hadlaan xaaladda guud, ma aha in cabashoooyinku dhan uun ay eegaan, waana in ay gudbiyaan dareenkooda weerar se aanay samayn, xalku waa kooda maxaa yeelay dhex dhexaadiyayaashu uma farsameeyaan dhinacyada wixii xal ah. guushu way ka wayntahay mushkilad xalin, waxaana ay waliba wax ka tartaa wanaajinta xidhiidhka mustaqbalka iyo kalsooni siin maaraynta isku dhacyada, iyo qiimaynta heshiisiinta.

Halkan waxa aad ku arki baadhitaan ku saabsan todobadii talaabo ee geedi socodka dhex dhexaadinta ee ku yimi barnaamijkii asxaabta:

## **XILIGA DIYAAR GARAWGA (WAA TALAABO TALAABOOYINKA KA HORAYSA)**

Arinka dib u eegid ku samee. Kaalay goor hore si aad qolka u diyaariso, qoraalada dib ugu eegtid, Goob ugu diyaarisid shirarka goonida ah. Wada hadal kala yeelo kaaliyayaasha dhex dhexaadinta sidii loo qaybin lahaa shaqooyinka, iyo hababkii dad dhex dhexaadinta, iyo sida shirarka goonida ah loo qabanayo, sidii loo fadhiisanayay, dhibaatooyinka la filayo ee dhex dhexaadinta. La kulan dhinacyadii, fadhiisi dadka ka qayb qaadanaya. Qolada asxaabtu aad ayay u adkeeyeen diyaarinta sida loo fadhiisanayo, waxa laga helayaa buugooda sideed sawir oo kala duwan oo ku saabsan siyaalaha kala duwan ee loo fadhisano, waxaana ay raaciyeen sharax sheegaya waxa mid kasta loo doortay iyo goorta uu haboon yahay.

### **TALAABADA KOOWAAD: Weedhaha furitaanka.**

Dhex dhexaadinta waxa lagu qabanayaa goob dhex ah iyo xili u munaasib u ah dhinacyada. Fadhiyadu waxa ay dhamaanayaan in ku dhaw laba saacadood. Dhex dhexaadiyayaasha oo sida caadadu tahay laba ah ayaa ku furaya fadhiga soo dhawayn iyo sharax arinka ku saabsan. Arimaha soo galaya waxaa ka mid ah:

- Soo dhawayn iyo ereyo dhiirin ah.
- Ujeedada dhex dhexaadinta iyo kaalinta dhex dhexaadiyaha.
- Foomamka la buux buuxinayo iyo saadka.
- Sir ilaalinta dhex dhexaadiyayaasha.
- Waxa dhici doona oo lays waydiyo?
- Sharax in fadhiyo gooni gooni ihi ay dhex mari doonaan dhex dhexaadiyayaaha ama dhex dhexaadiye iyo mid macmiil ah , adoo sheegaya in ay tahay qayb caadi ah oo ka mid ah geedi socodka dhex dhexaadinta.
- Baadh su'aalo ama wax ay danaynayaan, waydiina in dhinacyadu jecelyihii in fadhigu sii socdo. Ka hel ogolaansho dhinac kasta inta aanad bilaabin.

### **TALAABADA LABAAD: Xilliga oo aan lagu samayn googoyn.**

Qof kastaa waxa uu qaadanayaa xili uu hadlo, halka dadka kalena ka dhegeysanayaan, oo dhex dhexaadiyayaashii ay ku jiraan: tani waxa ay ka bixinaysaa xaaladdii sharax guud iyo in la dareemo dadka iyo shakhsiyadahooda.

Tilmaamaha guud waxa ka mid ah

- U daji cod ixtiraam leh oo aan deg deg lahayn.
- Waydiiso dhagaystayaasha in qofba qofka kale ixtiraamo xaqa uu hadalka u leeyahay, oo uu dhagaysto fikradaha cusub.
- Waydii dadka hadlaya in sheekadooda dhinaca ay ka arkaan ay u sheegaan, iyo wixii dhacayay iyo sida uu u saameeyay.
- Door cid bilowda, inta badan ka bilow dhinaca aadka u doodaya.
- Ilaali qof kasta xiliga hadalkiisa .
- Si rasmi ah u gaba gabee hadalka qof kasta oo hadlaya. Xiligaa dhex dhexaadiyuhu hadalka la yidhaa yaanu waxba ku darsan, faalo ama soo koobid ama su'aalo toona.

**TALAABADA SADDEXAAD: Is waydaarsi.**

Murankii iyo doodii ayaa bilaabmaysa . waa in dhex dhexaadiyayaashu dooda xuduuddeeda ku ilaaliyaan, iyaga oo hubinaya in qof kasta la maqlo, qof kastana la daryeelo oo la ilaaliyo. Iswaydaarsigu waxa weeye in ugu horrayn la caawiyo dhinacyada in ay u dhaq dhaqaaqaan dhinicci heshiisiinta, waa marka ay garawsadaan qof kasta dhinaca uu wax ka eegayo iyo baahiyihiisa. Iswaydaarsiga sida loo hagayo waxa ka mid ah:

- In la bilaabo is waydaarsi.
- Fadhigii oo la xakameeyo.
- Qof kasta oo arinka lagu daro.
- Qaado dareenka, culays se ha saarin.
- Waydii su'aalaha loo baahan yahay.
- Dhagayso danaha iyo arimaha.
- Iska jir inaad markaa xal raadiso.
- Is waydaarsigu yaanu kala dhinnaanin.
- Eeg xiliyo la is fahmi karo oo la heshiin karo.
- Soo koob danaha iyo waxyaalaha la rabo.

***Kulanada gooni goonida ah***

Kulanadaasi waxa ay dhici karaan xili kasta waxana ay leeyihiin isticmaalo badan; baadhitaan qofku waxa uu danaynayo; in laga hortago dhaqanka aan wax tarka lahayn, ama in dadka lagu caawiyo in fikirkoodu ahaado mid ku salaysan arimaha la kala dooranayo ee hor yaal. Istimaal shirar gooni ah si aad:

- U taageerto dadka.
- Gacanta ugu hayso geedi socodka.
- U xaliso mushkiladaha.
- Ula tashato dhex dhexaadiyayaasha kula jiray.

***Marka ay socdaan shirarka gooni goonida ihi:***

- U xaqiiji dadka sir ilaalinta.
- Dheh "waxa aanu rabbay in aanu idinkala hadalno".
- La joog adoo dareenkaagu soo jeedo.
- Faham yeelo hase eexan.
- Baadh waxa kuu bannaan in dadka kale aad ku tidhaa.
- Marka aad miiskii ku soo laabato ku dhiiri dadka in ay toos u hadlaan, ama u hadal iyaga oo sug, si kor ah adiga oo u hadlaya, sheegna waxa hadda ka dib la yeelayo.

**TALAABADA AFRAAD: Dajinta ajandaha.**

Doodu waxa ay u jeedsanaysaa mustaqbalka iyo waxa ka dhici doona marka imika laga bilaabo. Marka aad ajandaha dajinayso yeel sidan:

- Soo koob wixii la qabtay ilaa imika.
- Liis garee arimaha laga gorgortamayo.
  - Sheeg mawduucyada laga doodayo.
  - Iisticmaal hadal wanaagsan oo aan eex lahayn.
  - Milicso qof kasta waxa uu danaynayo.
  - U sheeg mushkiladuhu in ay yihiin dano la wadaago, mar kasta oo ay taasi kuu suurto gali karto.
  - Si cad oo kooban oo la qabsan karo u sheeg ereyadaada.
- Ogolow in ajandaha la baadho si uu sax u noqdo una dhamaystirmo.
- Ogolow tilmaamaha, sida: sida arimaha looga doodayo, aasaas loo dajiyo go'aamada la qaadan karo.

**TALAABADA SHANAAD: Dhiska heshiiska.**

Dhinacyadii ayaa ka shaqaynaya arin kasta oo ajandaha ku jira iyaga oo isticmaalaya geedi socodka soo socda:

- Arin oo laga doorto ajandaha.
- Xog ka hel arimaha la kala dooranayo.
- Qiimee oo sifee arimaha la kala bad badalan karo.
- Baadh heshiis eegna natijjooyinka.
- Qor heshiisyo ku meel gaadh ah.

**TALAABADA LIXAAD: Qoritaankii heshiiska.**

Heshiis la qoraa waxa uu caawiyaa in balamadoodii xidido yeeshaan. Marka lagu jiro geedi socodka:  
ku dhaqaaq sidan:

- dib u eeg qodob kasta oo heshiiska ka mid ah. Ma shaqaynayaa? Ma la akhriyi karaa? Ma la ogolaan karaan?
- Qor nuskhaddii kama dambaysta ahayd; korna u akhri.
- Qof kasta oo joogaa ha saxeexo heshiiska . dhinac kasta nuskhad (nuql) sii.

***Heshiis si fiican u qoran***

- Waxa uu qeexaa arimaha gaarka ah: cidda, waxa, goorta.
- Waxa uu aad u ilaaliyaa caddaalad buuxda oo aan shuruudi ku xidhnayn.
- Waxa uu isticmaalaa ereyo cad oo la yaqaano.
- Waxa uu xoojiyaa wax qabashada fiican.
- Waxa uu la tacaalaa wax kasta oo laalan.
- Waxa uu u diyaar-garoobaa mustaqbalka.

**TALAABADA TODOBAAD – ereyga xidhitaanka**

Waa xilgii la garawsan lahaa dareemadaa ee fadhiiga si fiican loo gabagabayn lahaa.

- In la qiro wixii la qabtay.
- In wax la bixiyo ama la diyaariyo sidi wax loo bixin lahaa .
- In la eego talaabooyinka xiga tan iyo dabagalka loo baahanyayah.
- In loo rajeyo kooxaha wanaag<sup>6</sup>

## TUSAALIHII CHRISTOPHER MOORE

Moore waxa uu inoo sheegayaa in “dhex dhexaadiyaha dhaqdhaqaaciisu uu u egyahay mid isku qasaya wax yaala xidhiidhsan oo aan lakala sooci karayn oo isa soo galaya”<sup>7</sup>.

Marka intaa uu sheego, waxa isagu uu murtiyaynayaa laba iyo tobant marxaladood oo gaar ah: oo shani ay ku saabsan tahay shaqada dhex dhexaadiyuhu qabanayo inta aanu dhinacyada fadhi ay udhanyihiin isugu keenin, todobina ay ku saabsanyihiin marka dhex dhexaadiyuhu uu bilaabo la shaqaynta dadka is khilaafsan.

### ***Marxaladda 1aad: la xidhiidhka u horeeya ee dhinacyada is khilaafsan.***

- In la sameeyo xidhiidhkii bilowga ahaa ee dhinacyada.
- In la dhiso kalsooni.
- In xidhiidhka saaxiibtinimo kor loo qaado.
- Dhinacyada oo lagu wacyi galiyo geedi socodka.
- In la kordhiyo u nidar galka hab socodka.

### ***Marxaladda 2aad: in la doorto istiraatijiyyado lagu hago dhexdhexaadinta .***

- In la caawiyo dhinacyada si ay u qiimeyaan wajiyada badan ee isku dhaca loo maarayn karo loona xalin karo.
- In lagu caawiyo dhinacyada in ay doortaan waji.
- In la isla socodsiyo wajiyada dhinacyadu qabaan.

### ***Maraxaladda 3aad: Ururinta iyo baadhitaanka xog asaasi ah,***

- Ururinta iyo baadhitaanka maclumaad la xidhiidha dadka, dhaqdhaqaqa jira, waxa isku dhacu yahay.
- Hubinta maclumaadku in ay aad sax u yihiin.
- In la yareeyo saamaynta maclumaadka aan aadka loo hubin ama aan la hayn.

### ***Marxaladda 4aad: Qorshaynta qorshe qeexan oo dhexdhexaadin ah.***

- In la dooro istiraatijiigii iyo wixii iman kara ee lama filaan ah, si dhinacyadii ay ugu jeedsadaan xaggii heshiinta.
- In la xadido wixii la filayo in lagaga jawaabo xaaladaha si gaar ah uula xidhiidha isku dhacan.

### ***Marxaladda 5aad: dhisida kalsoonida iyo isla socodka.***

- In xagga nafta laga diyaariyo dadkii is haystay si ay arimaha dhabta ah ee jira uga qayb qaataan.
- In lala tacaalo dareenka xooga ah.
- In la baadho fikradaha lana yareeyo saamaynta fikradaha dadka ku qufulan.
- In la dhiso garawsiga sharcinimada dhinacyada iyo arimaha yaala.
- Kalsooni dhisid.
- In la caddeeyo xidhiidhka.

### ***Marxaladda 6aad: bilowga fadhibii dhexdhexaadinta.***

- In gorgortankii loo furo dhinacyada.
- In la sameeyo cod furan oo wax wanaajinaya.

- In la sameeyo xeerar la raaco iyo tilmaamo dhaqameed.
- In lagu caawiyo dhinacyada in ay dareemadooda ka neefiyaan (muujiyaan).
- In la xadeeyo waxyaalaha iyo arimaha mawduucu ku saabsanyahay ee laga doodayo.
- In lagu caawiyo dhinacyada in ay baadhaan arimaha lagu nidarsanyahay, kuwa ugu doorka roon, waxa wax raadayanaya.

**Marxaladda 7aad: qeexidda arimaha iyo ajanda dajinta.**

- Caddaynta mawduucyada ballaadhan ee dhinacyadu doonayaan.
- In lagu heshiyo ka hadalka arimahaa.
- In la gooyo sidii arimaha loo kala horumarin lahaa.

**Marxaladda 8aad: Dabool ka qaadka danaha qarsoon ee dadka is haysta.**

- In la muujiyo danaha muhiimka ah ee dhinacyada, hab socodkooda, danahooda naf ahaaneed.
- In lagu wacyi galiyo dhinacyada wixii dan ah ee dhinac kastaa leeyahay.

**Marxaladda 9aad: Abuuridda arimo la kala dooranayo oo wax lagu xaliyo.**

- In lagu wacyi galiyo dhinacyada baahida loo qabo in ay jiraan arimo la kala doortaa.
- In hoos loo dhigo nidarka mawaaqifta loogu jiro iyo badalada (arimaha is ag yaal) ee kaliya ee meesha yaal.
- In la abuuro arimo la kala doorto iyada oo la isticmaalayo is dhaafsi mawaaqif ama dano.

**Marxaladda 10aad: Qiimaynta arimaha la kala dooranayo si xal loo gaadho.**

- Dib u eegis danaha dhinacyada.
- Qiimayn sida danahaa loo fulin karo iyada oo la adeegsanayo waxyaalaha aynu haysano ee la kala dooranayo.
- Qiimayn kharashka iyo faa'iidata doorashada arimaha ina horyaal.

**Marxaladda 11naad: Wax is waydaarisiga ugu dambeeya.**

Iyada oo heshiis la gaadho inta mawaqaqiftii ay meel talaabo talaabo iskugu biyo shubtaan oo la isku keeno, talaabooyin kama dambays ah oo loo qaado sidii wax loo xalin lahaa, diyaarin asaas la isugu iman karo, ama in la dhigo hab lagu gaadho heshiis dhab ah.

**Marxaladda 12naad: Gaadhitaanka xal rasmi ah.**

- In la tilmaamo talaabooyin la qaadayo si heshiiska loo hirgaliyo.
- In la dhigo qiimayn kormeerna lagu sameeyo hab socodka .
- In rasmi laga dhigo xalka lana abuuro farsamo lagu xoojiyo laguna nidar gal<sup>8</sup>.

Wadadaa Moore u qaaday dhexdhixaadintu waxa ay inaga dhigaysaa qaar waxoogaa yara ad adag oo aad sharciga ugu dhag dhagan. Waxaa laga yaabaa in jidkiisaa ay raadaysay shaqadiisii ahayd xaakinnimadu. Tusaale ahaan, Moore waxa uu ku qaatay waqtii badan u diyaar garowga dhexdhixaadinta, ururinta xogta iyo aragtiiyahaa isku dhaca, hubinta xaqiqiada macluumaaadka, iyo hawlalka sidii loo yarayn lahaa raadka xogta aan saxa ahayn ama inaga maqan (waa marxaladda 3aad ee geedi socodka).

Sida uu xil iskaga saaray in aad wax loo qeexo iyo adkida wadada uu qaaday waxa ay tusaysaa geedi socod aad uga dheer oo uga kharash badan labada tusaale ee halka hore lagu murtiyeeyay. Laba sawir oo miisaaman oo dhedhexaadintu leedahay waxa weeye: 1) kartida loogu dhaadhacayo halbawlaho isku dhaca si dhakhsa ah iyada oo waqtiga ugu yar lagu luminayo geedi socodkii, iyo 2) kharash yarida adeegaa marka waxyaalaha kale ee la dooran karo la barbar dhigo. Haddaba haddii habkaa uu soo jeediyay Christopher Moore sidiisa toos loogu qaato waxa dhici kara in labadaa sifo ee dhedhexaadinta laga rabaa ay meesha ka baxaan.

Waxa dhici karta in aad la yaabantahay waxa aanu tusaalihiisa ugu soo darnay halkan anaga oo sidaa uga digayna. Haddaba waxa aanu rumaysanahay in uu isagu u baaqo in lagu baraarugo arimo aanu kugu dhiirinayno in aad shaqo kasta oo dhex dhexaadintu ah ku dhisto. Tusaale ahaan, marxaladda shanaad ee geedi socodka uu soo jeediyay waxa ay la tacaalaysaa sidii loo dhisi lahaa is aaminaad iyo is kaashi. Halka dhammaan tusaalayaashii sifooyinkaa laga helayo, hadana Moore waxa uu xoog u daneeyay isku dayga raali galinta.

Inta aynaan xidhin albaabkan dooda dhedhexaadinta, waxa aynu rabnaa in aynu ka hadalno qof kale oo ku takhasusay dhedhexaadinta. J. Haynes waxa uu rumaysan yahay in dadka ay soo mareen isku dhacyadu inta badan ay ku adkaato in ay ku heshiiyaan waxa mushkilada isku dhaca keenaya. Markaa haddii aan mushkiladii si la isku waafaqsanyahay loo sharixin, way adag tahay in xal la raadiyo. Dhedhexadiyaha shaqadiisu xaaladahan waxa weeye:

1. In la tilmaamo meelaha la isku waafaqsanyahay ee mushkiladda ku saabsan.
2. In uu ku caawiyo dhinacyada inay fahmaan in mushkiladoodu aanay ahayn mid kaligeed adag ee ay tahay mid la xalin karo, iyo
3. In xooga la saaro aasaaska dhexda ah ee ay wadaagaan dhinacyadu oo ay mushkilada jirtana ku heshiiyaan.

Saddexda xirfadood ee uu isticmaalo si uu u fuliyo shaqooinkaasi waa kuwan:

- **Dareen wadaag:** kani waa geedi socod lagu siinayo dhinacyadii isku dhacay wixii arimo iyo fikrado iyo dareemo ah ee labada dhinacba dhab ahaan uqabaan. Tani waxa ay yaraynaysaa heerka cadaawadda iyo is caabiga laga yaabo in uu ka horyimaad sharax mushkiladii ku saabsan oo loo dhan yahay.
- **In arinka caadi laga dhigo:** tani waxa ay imanaysaa marka war laga bixiyo khibradda bani aadamka ee la xidhiidha una eeg arimaha qolada isku dhacday. Waxaana weeye mid sugar oo si fiican u xusuusinaysa in mushkilad dhab ihi jirto, hase yeeshee aanay qasab ahayn in ay tahay mid adag.
- **Soo koobid xul ah:** tani waxa weeye in la gudbiyo oo kaliya xogta, iyo fikradaha iyo arimaha khilaafka ku saabsan ee dhedhexadiyuhu uu rumaysan yahay in khilaafka ay u dhaqaajinayso dhinicii xalinta.

Fulinta xirfadahaasi waxa ay ka rabtaa dhedhexadiyaha in uu ka haysto faham hufan, goobta dhexda ah ee dadka is khilaafsani ay wadaagaan. Tan micneeedu waxa weeye in laga helo waydiimo balaadhan dhinaca dhedhexadiyayaasha inta ayna ku dhiirin labada dhinac wada hadal dheddooda ah<sup>9</sup>.

## **DHEXDHEXAADIN: WAA ISTIRAAJIJI HOR SEEDAYA DHISKA BULSHO AAD U XOOG BADAN.**

In cid saddexaad soo dhex gasho maaraynta isku dhacii waxa weeye qalab adeeg oo xoog badan oo loo isticmaalo dhiska bulsho xoog badan, oo guulaysata, xidhiidh wax soo saara leh. Wawa uu caddeeyay geedi socodka dhexdhexaadintu helitaanka mid ka mid ah istiraatijiyooyinka ugu waxtarka badan, taas oo dadka da' kastaa baran karto heer kasta oo tacliin rasmi ah lagu gudanayo. Iyada oo dhexdhexaadintii noqonayso mid la garawsanyahay, xirfad adeeg ahaan, oo la heli karo iyada oo ah geedi socod si rasmi ah loo diyaariyay, haddana waxa weeye dhexdhexaadintu xirfad nololeed qiimo leh oo inoo wada adeegi karta nolol maalmeedka aynu dadka is dhex galayno. Dhexdhexaadintu dhab ahaantii waxa ay dhex martaa had iyo jeer dadka iyo kooxaha dhammaan aduun waynaha. Dadka daneeya dadka ee naxariista badan ee nabadda iyo wada noolaanshaha qiimeeya ee aan is lahayn wax ayaad dhexdhexaadisaan ayaa dhexdhexaadinta ugu badan qabta.

Isku dhacu waa il awood badani taalo waxaana halkaa ka iman kara: wax soo saar ama wax dumin. Dhexdhexaadintuna waxa weeye qalab adeeg oo caawinaya kuwii aadka isu khilaafay in ay tamartii isku dhaca ujeediyaan dhinacii is af garashada mar kale.

Sida hore loo sheegay, waxa aynu kaga doodaynaa cutubka soo socda tusaalayaal kale oo lagu maareeyo isku dhaca oo inta badan laga soo qaatay deegaanadii dhexdhexaadinta.

Waxana weeye qaar leh kala du-duwani u baahan in si gaar ah loo eego inta aynaan gabagabayn doodan ku saabsan siyaalah loo maareeyo isku dhacyada iyo khilaafaadka

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Dhexdhexaadintu waxa ay leedahay taariikh dheer oo ah geedi socod lagu xaliyo khilaafaadka iyo isku dhacyada.
- Dhexdhexaadintu waxa ay soo galinaysaa isku dhacii dhinac saddexaad oo dhinacyadu dhamaantood raali ka yihiin, kaas oo aan eexanayn oo dhexdhexaad ah, oo aan lahayn awoodo rasmi ah oo go'aamin ah.
- Arinka ah in qofku dhex yahay marka uu wax dhex dhetaadinayo weerar badan ayaa kaga yimid dhinacyada qaar, murankaasina wax ayuu yeeli karaa kalsoonidii ay dhex dhexaadintu sanado badan oo tagay soo urursatay (heshay).
- Dhexdhexaadintu ma aha qalab adeeg oo lagu isticmaalo xaalad kasta oo isku dhac ama is afgaransha waa. Haddii aad qodobkan muhiimka ah ku wareerto, ku noqo doodii ahayd goorma ayaad wax dhex dhetaadinaysaa goorma ayaanadse wax dhex dhexaadinayn.

- Dhex dhedaadiyayaasha wax ku oolka ihi waxa ay gutaan kaalmo badan marka ay ku hawlanyihiin caawinta dadka kale.
- Dhex dhedaadinta waxa ku jira geedi socod dhisan oo ku caawinaya dadka isku dhacay inay baadhaan xaqiqada, dareenka wadaagaan, fikradaha is waydaarsadaan iyo ra'iyada una hawl galaan sidii heshiis loo gaadhi lahaa.
- Geedi socodkaa ballaadhan ee la ogolyahay waxa ku jira arimo badan oo kala duduwan oo fiiro kaaga baahan.
- Dhex dhedaadintii waxa ay noqonaysaa xirfad, hase yeeshoo tani u diidi mayso dadka doonaya in ay caawiyaan cid is khilaafsan ama isku dhacday ina ay galaan geedi socod dhex dhedaadin ah oo aan rasmi ahayn.
- Hase gartaan xadkooda marka ay libaax badeedyo la dabaal galayaan.

## **RAAD RAAC**


1. Moore Christopher W., geedi socodka dhex dhexaadinta: istiraatijiyo gacanta laga fulinayo oo lagu xalinayo isku dhaca (San Francisco: Jossey-Bass, 1986), p.19-24.
2. Raider, Ellen iyo Susan Coleman, Gorgortan wax wada qabad ah: Tababar xirfadeed (New platz, NY: madbacadda Ellen Raider ee caalamiga ah, 1992), p.7.3 ilaa 4.
3. Moore, op.cit., p.6.
4. Bush, Robert A. Baruch iyo Joseph p. Folger, Rajada dhexdhexaadinta (San Fransisco: Jossey – Bass, 1994), p.22.
5. Beer, Jennifer iyo Eileen Stief, buuggii dhex dhexaadiyaha: waxaa diyaariyay barnaamijyada asxaabta khilaafaadka xaliya (Gobiola Island, BC, Canada: madbacadda New Society, 1997),P.iii.
6. Raider, Op.Cit., P.7.4 ilaa 8.
7. Beer, Op.Cit., P.4 – 61
8. Moore, op. Cit, p.29
9. Haynesk J. iyo G. Haynes, Dhexdhexaadinta furriinka (San Francisco: Madbacadda Josse-Bass), P. 193-207.



MAWDUUCYO KALE OO KU SAABSAN MAARAYNTA ISKU DHACA

*Intay doonto ha xoog badato fallaadha llayska ihi  
ee aqal udub taageera uma noqon karto*

**MAAH MAAH SHIINE AH**



Urur horumarinta iyo badalka qorshaysan	117
Kaalinta iyo sawirka oo la isweydaarsado	118
Is bar bar dhig	119
Tusaalahi, tilmaamidda, ka hortaga, raali galinta,	120
Badalka nabadaynta keenaya	121
Awood siin iyo aqoonsi	122
Tusaalihii Lederach ee xog qaadashada dhex dhexaadinta	123
Dhugasho	125
Nuqdado muhiim ah	126
Raac raac	127

Halka ay gorgortanka iyo dhex dhixaadintu sida aynu ku sharaxnay wajiyoo kala duwan oo cutubkii u dambeeyay ah, ay ka yihiin marxaladaha xudunta ah marka talaabo laga qaadayo is af garansha waaga iyo isku dhaca ka aloosma qaybo badan oo caalamka ka mid ah, hadana dhab ahaantii ma matalayaan dhammaan siyaalaha isku dhaca lagu maareeyo. Hadaba waxa aynu cutubkan ku eegaynaa wajii isku dhac maaraynta ku saabsan oo la fulinayay xiliyo ka horeeyay, intii aanay soo bixin tiro badan oo buugag iyo qoraalo ku saabsan gorgortanka iyo dhex dhixaadinta oo bilaabmay sanadadii 1980kii, waxana aynu tan raacinaynaa codad dhawaan la yidhi oo wax ka odhanaya wajiyadii hore u jiray ee ku saabsanaa isku dhac maaraynta.

## **URUR HORUMARINTA IYO BADALKA QORSHAYSAN**

Mawduuc gacan wayn ku lahaa suugaanta iyo fulinta istaraatijiga badalka qorshaysan iyo urur horumarintu waxa weeye maaraynta isku dhaca.

Xudunta khilaaf maarayntu, sida ka muuqatay fikradahan gaarka ah, waxa weeye inta badan mid maamuleed: sidii loo hagaajin lahaa wax ku oolnimada iyo tayada ururada. Marka aynu qoraalada eegno, waxa isku dhaciintu badan lagu sharaxaa mid yaal dad dhexdiis, kooxo dhexdood, ururo dhexdood. Halkan waxa aad ku arki sida Richard Walton uu ku macneeyay kaalinta isku dhaca iyo sida loo maareeyo heer dad gudihii ah iyo heer ururba.

“Fikradu ma aha isku dhaca dadka ururada ku jiraan wuu xun yahay ama wax ayuu burburinayaa, markaa ama waa in dadka toos ugu lug leh isku dhaca, ama cid saddexaad oo arinkii soo gashaa, ay isku dayaan in ay tirtiraan ama yareeyaa isku dhaci. Khilaafaadka dadka dhexdiisa ah, iyo tartanka, wax u kala dheeraynta, iyo waxyaalaha kale ee isku dhacu uu wataa, inta badan waxa ay u leeyihiin qiimo fiican ka qayb qaatayaasha isku dhaca iyo nidaamka bulsho ee arinkaasi ka dhacayo. Ugu horrayn isku dhac heekiisu yahay dhex dhixaad oo dad dhexdiis yaala waxaa laga yaabaa inuu kordhiyo dardar galinta iyo tamarta. Ta labaad, isku dhacu waxaa laga yaabaa inuu keeno wax cusub maxaa yeelay waxa uu tilmaamayaa aragtiyo kala duwan. Ta saddexaad, dadka hormoodka ah ayaa laga yaabaa in uu u kordho faham dheeraad ihi oo la xidhiidha mawaaqiftooda, maxaa yeelay isku dhacaa ayaa ku qasbaya in ay sharaxaan fikradahoodii oo ay soo bandhigaan dhammaan wixii dooda taageeraysay”<sup>1</sup>.

Walton waxa uu murtiyeeyay tiro farsamooyin iyo istiraatijiyo ah oo lagu maareeyo isku dhaca ururka ka dhex dhaca. Waxaa soo galaya wada hadal ay dhinacyadii toos u xidhiidhaan oo diirada saaraan isku dhaca dhex yaal, tan oo ay ku jirto wajiyada xidhiidhkooda: is waydaarsi arimo laysla garanayo, mushkilad xalin, iyo dhis xidhiidh.

Isaga oo Walton sheegaya in wajiyadaa mid kasta la fulin karo iyada oo aan dhinac saddexaad soo galin, haddana waxa uu si cad u arkaa faa'iidada in dhinac saddexaad lagu soo daro waji kasta oo kuwaa ka mid ah.

Haddaba sida uu dhinaca saddexaad u gali lahaa arinka, in uu shaqadiisa u badiyo hawl fududayn iyo inuu u badiyo dhex dhixaadin waxa ay ku xidhan tahay

qaabka isku dhacu uu yahay. "Marka geedi socodyada muhiimka ihi ay yihiiin is baayacaad adag ama ay iskugu jiraan is baayacaad iyo mushkilad xalin, markaa dhex dhexaadintu waa kaalintii dhinaca saddexaad"<sup>2</sup>.

## **KAALINTA IYO SAWIRKA Oo LA IS WAYDAARSADO**

Farsamo caan ah oo lagu xaliyo isku dhaca ama khilaafaadka dadka ama kooxaha ururadu waxa weeye waxa loogu yeedhay kaalinta gorgortanka. Qoro isticmaalka ereyga gorgortan. Ugu horrayn, dhinacyadii isku dhacay ayaa tilmaamaya isha uu ka soo jeedo isku dhacu, iyaga oo liis garaynaya is badalada ay rabaan in lagu sameeyo xidhiidhkooda. Sidoo kale, waxa soo galaya in dhinac kastaa uu sheego waxa uu ka rabo dhinaca kale in uu kordhiyo, ama hoos u dhigo ama si duwan u sameeyo , iyo waxa ay iyagu diyaar u yihiiin in ay kordhiyaan, ama yareeyaan, ama si duwan u sameeyaan. Isbadaladaa ayaa hadana laga gorgortamaya lagana heshiinaya. Mararka qaar isbadalada si qoraal ah ayaa loo muujinaya iyada oo la raacinayo heshiis sheegaya sidii loo kormeeri lahaa geedi socodka lagu fulinayo xidhiidhkooda cusub. Siyaala badan, kaalinta gorgortanku waxa ay kala mid tahay qaar ka mid ah farsamooyinka lagu murtiyeeyay cutubkii hore ee dhex dhexaadinta.

Duwanida kaalin "iswaydaarsiga" waxaa soo galaya sawiradii oo la is waydaarsado, taas oo inta badan ay isticmaalaan kooxaha yar yar ee ururada ka midka ihi ama laga isticmaalo xagga ururada dhexdooda ay soo galaan khilaafaadku. Tusaale ahaan saraakiisha la soo doorto ee dawladda hoose iyo shaqaalahooda maamulka oo uu caawinayo dhinac saddexaad oo hawsha u fududaynayaa (waxa laga yaabaa ina ayna isticmaalin ereyga dhex dhexaadiye) oo baadha xidhiidhkoodii kana gorgortama siyaalo cusub oo shaqada ay u qabtaan.

Mid ka mi ah qorayaasha ayaa galay hawsha ah "Hawl fududeeye" si uu u caawiyo laba maamul oo magaalo sidii ay u xalin lahaayeen isku dhacyo qoto dheer oo heerar kala duwan leh oo dhex yaalay ururadooda. Magaaloooyinkaasi in kasta oo uu kala qaybinayay wabi, haddana waxa ay kala lahaayeen dhaqano urur iyo bulsho oo kala duwan, waxyaalahaa oo ka qayb qaatay kor u kaca khilaafaadkooda. Isir tiro yar oo dhaqan gaar ah leh ayaa bulsho ku badnaa. Muwaadiniintooda dhaqaalaha soo gala iyo heerka tacliintooduba way hooseeyeen, waxana ay ku Wadeen dawladdoda hoose geedi socod adag oo siyaasadeed oo tartan badan. Bulshada kalana waxa ay ahayd qoysas xoolo badani soo galaan oo tacliin leh, waxa ay ahaayeen koox wayn oo mid ah, si xirfad lehna loo maamulo, dawladdoda hoose waxay sheeganaysay in aanay dhinac ama koox u xaglinay xagga xidhiidhkooda siyaasadeed iyo sida ay isu xukumaan.

Labada magaalaba waxa ay kala kulmeen tartan isa soo tarayay oo dhaqaale gobolada kale. Maxaa yeelay waxa ay kari waayeen in ay ka wada shaqeeyaan arimo la xidhiidha dhaqaalaha iyo bulsho horumarinta, taas oo keentay in tartankay gali lahaayeen hoos usii dhaco xagga suuq waynaha.

Markii ay xaqiisadeen in mustaqballoodu isku xidhan yahay, madaxdii magaaloooyinka ku kala yaalay labada dhinac ee wabigu waxa ay goosteen in ay u baahanyihiin in ay waajahaan khilaafaadkooda iyo isku dhacooda oo ay bartaan sidii ay u wada shaqayn lahaayeen.

Machad dadka u adeega oo jaamacad goobtaa ah ku yaal oo leh hawl fudaydiyayaal urureed ayaa kontaraag lagu siiyay in uu sameeyo aqoon is waydaarsi laba cisho iyo badh ah oo isku dhaca xal iyo qorshe u raadiya isaga oo kasoo qayb galinaya hogamiyayaashii u waawaynaa ee labada dawladeed ee hoose iyo bulsho. Geedi.

Sawiradii la kala qabay oo la is waydaarsado meelaha ay iskaga midka yihii ama ku kala duwanyihii oo aad loogu dheeraaday, iyo wixii talaabooyin gaar ah ee ay qaadi karaan, iyaga oo wada shaqaynaya, si ay usoo ceshadaan heerkoodii tartan galka ahaa ee dhaqaale.

Aqoon iswaydaarsigii waxa uu keenay natijjooyin muhiim ah, oo kooxdii jaamacaddu ay dabagal ku samaysay muddo dheer. In kasta oo dhammaan isku dhacyadii aan la xalin, haddana labada bulsho waxa ay kareen in ay u badalaan tamartii sida xun loo adeegsanayay awood wax dhista, iyaga oo iska kaashaday barnaamijyo shaqo oo taxane ah.

Geedi socodka iswaydaarsiga sawirka aragtiyed waxaa laga yaabaa in dani ugu jirto dadka ay haystaan isku dhacyo sidaa oo kale ah oo ururo dhexdood ah ama bulshooyin. Waxaa koox bulsho oo kasta laga codsaday In ay diyaariyaan saddex liis oo xoog leh. 1) sida ay u arkayeen dawladahoodii hoose iyo bulshadoodii

2). Sida ay u arkayeen dawladda hoose ee kale. Iyo bulshada kale. Iyo. 3). Sida ay moodayeen in ay iyaga kooxda kale u arkayo dawlad hoose ahaan iyo bulsho ahaan. Waxa markaa liisaskaa lagu dhajiyay waraaqo waawayn markaas ayaa meel kooxdii dhammaan ay joogaan lagu soo bandhigay.

Labadii kooxood ayaa wixii ay soo bandhigeen ee liisas ahaa is waydaarsaday markaa ayay qaateen su'aalihi si ay wax u cadeeyaan. Riboodhadaa ka dib, waxa yimid wada hadal la fududeeyay oo dheer si uu u caawiyo fahamka kala duwanaanshaha fikradaha, lana arko sida taasi u keentay korodhka isku dhacyada iyo xurgufaha labada bulsho.

Doodahaasi waxa ay tilmaameen goobaha isku dhaca ee u baahan in laga hadlo si kor loogu qaado wada jirkooda dhaqaale ee tartan galka ah. Waxa la diyaariyay kooxo hawleed yaryar si ay u diyaariyaan qorshe hawlgal ah oo kooxdu dhamaan eegto.

## **IS BAR BAR DHIG**

Marka aynu eegno aragtiyaha iyo khibradaha lagu qeexayo xalka badalka ah ee khilaafka shan iyo labaatankii sanadood ee u dambeeyay iyo wixii ka dhacayay dhinacyada ururada lagu horumarinayo iyo dhinacyada isbadaladda qorshaysan, waxa aynu qirynaa isdul fuul la arki karo dhinaca fikradaha asaasiga ah, oo wata tiknoolajyo bulsheed. Xalka khilaafka ee badalka ihi waxa weeye, sida uu ku sharaxay John Burton: "xal dhex dhexaadid ku yimid oo maxkamada dibada ka ah, ama maxkamda horteeda la dhex galay dhinacyada khilaafka ama isku dhacu ka dhexeeyo" <sup>3</sup>. Dhab ahaan, waxa arinka kalifay wuu kala duwan yahay. Xalka badalka ah ee khilaafka waxaa loo qorsheeyay si loo raadsho habab cusub oo lagu xaliyo khilaafaadka qolooyinka ay colaadoodu soo jiitantay iyo in culayska laga qaado nidaamka sharci ee rasmiga ah dhinaca kiisaska loo xalin karo si wax ku ool ah oo siyaalo badan nidaamka rasmiga ah uga tayo badan.

Dadka qaba aragtiyaha urur horumarinta iyo isbadalka qorshaysan iyo dadka ku shaqeeyaaaba waxa ay aad u danaynayaan sidii ay u caawin lahaayeen maamulayaasha iyo ururadu sidii ay u noqon lahaayeen qaar tayo badan oo wax ku ool ah iyaga oo

fulinaya fikrado cilmi dhaqameed iyo istiraatijiyo. Xalka badalka ah ee khilaafaadku waxa uu toos xooga u saarayaa isku dhaca aan la xalin ee dhexyaal dadka iyo kooxaha iyada oo ujeedadu tahay sidii loo caawin lahaa xalinta mushkiladaha dhinacyadaa. Halka qorshaha urur horumarintu uu aad u danaynayo wax soo saarka qofka iyo guutada. Dadka ku takhasusay urur horumarintu waxa ay ugu horrayn u jeedsadeen geedi socodyada iyo nidaamyada go'aan qaadashada iyo mushkilad xalinta, waxana ay u arkeen isku dhaca arin ka hadal u baahan marka uu faraha la soo galo go'aan qaadashadii iyo mushkilad xalintii.

Goob kasta oo ka mid ah goobaha bixiya taageerada wax fududaynta ama dhexdhexasinta, dadkii hawshaa gacanta ku hayay waxa ay ka faa'iidaysteen (shaqadii) culimadii hab dhaqanka ee danaynay arimo badan oo ay ka mid yihiin kobaca arimaha dadka dhexdooda ah iyo horumarintooda, iyo isbadal qorshaysan oo ku saabsan nidaamyada bulshada ee murugsan.

Inta badan waxyaalahan fiican ee ka kooban cilmi bulsheed la jabiay lana dhaqan galiyay waxa la iskugu soo ururiyay magac ah "tababarka xidhiidhka bulshada". (si aad u hesho fikrad taariikhed aad u fiican oo ku saabsan mawduucyadan sidii loo hirgaliyay muddo afartan sanadoo ah oo isku dhacyo dad u dhexeeyay la xalinayay, eeg buugga Ronald J.Fisher ee magacan sita )<sup>4</sup>.

## **TUSAALAH TILMAAMIDDA, KA HORTAGA, RAALI GALINTA**

Isku day kasta oo la is yidhaa "faqrado" (ama weedho yar) ku soo kooba nuxurka dhaq dhaqaaqa isku dhac-maaraynta ee "dugsi fikradeedka xidhiidhka dadku" waxa weeye badheedhe khatar ah. Hadaba bal aynu khatartaa u badheedhno waxoogaa. Kol haddii isku dhac maarayntu yeelatay khabiro u gaar ah kuwaasi oo ay ku yartahay inta ay ka doodaan waxa dadka la midka ihi ay goobaha la gudban goobtooda ka yidhaahdeen, bal doodeena waxa aynu ku soo koobi wixii khabiiradaasi ay keeneen oo kaliya.

Buh iyo Folger waxa ay dhigeen afar hab oo sharaxaya dabiicadda wadareed ee shaqada dhex dhexasinta. Hadaba ta sida wayn ula xidhiidha xirfado badan oo ku jira xerada horumarinta ururka iyo maamulka guud waxa weeye mid lagu magacaabo "sheekkada raali noqodka". Iyaga oo wax qabashada isku dhac maaraynta si kas ah uga badbadinaya waxa ay dhex dhexasinta ku macneeyeen "qalab adeeg oo xoog badan oo raali galinaya baahiyihii bani aadam ee kooxaha ilaa wax ka qabashadii khilaafaadka dadka ..... dhex dhexasintu waxa ay sahli kartaa wax wada qabsigii, iyada oo si loo dhanyahay dhibtii loo xalinayo, halkii iska hor imaad ka dhici lahaa, waxna la is waydaarsanayo. Markaa waxa tani keenaysaa wax abuur iyo natiijo labada dhinacba faa'iidaan oo ka shishaysa xuquuqda rasmiga ah kaligeed, taasi oo lagu xalinayo mushkiladii laguna raali galinayo baahiyihii asaasiga ahaa ee dhinacyada, xaalada gaar ah"<sup>5</sup>. Ma u odhan lahaa talo bixiye ururada horumarintooda ka shaqeeya sidaa si ka qurux badan?

John Paul Lederach, oo heer caalami ku shaqeeyaa dhex dhexaadiye iyo tala bixiye xaliya isku dhacyada, ayaa ku sheegay habkaa isku dhac xalinta tusaalihiisii wax sharaxayay: "waxa uu kani ka dhigayaa isku dhac xalintii tiknoolajiyad – iyo farsamo iyo xirfad, tan oo noqotay wajiyo muhiim ah oo ka muuqda tababarkii iyo fulintii tusaalahaa"<sup>6</sup>. Tusaalahaa sharaxa ihi waxa uu aqbalayaa gudbin (goobo kale in loo gudbiyo) iyo caalamiyeen. Haddii si kale loo dhigo, micnuhu waxa weeye: waxa arinkan laga fulin karaa meel kasta iyo xaaland kasta oo isku dhac xalintii dadka, kooxaha, ama alkumyadu ay u baahanyihii in si balaadhan loo sharaxo. Guud ahaan geedi socodkan waxa inta badan loola dhaqmaa sidii tababar oo kale, halkaa oo ugu horayn tababarihii/dhex dhexaadiyihii uu qeexayo qaabkii iyo ajandihii, si uu u fuliyo baahiyo hore loo qeexay.

Kavin Avruch waxa uu ku doodayaa in "aqoon is waydaarsigii mushkilad xalintu" uu aad ula jaanqaaday tusaalihi sharaxaada ee Lederach. Istiraatiijigan isku dhac maaraynta "dhinac sadexaad ayaa isugu keenaya dhinacyadii isku dhacay meel dhex ah oo la diyaariyay oo aan hadidaadi jirin, si looga caawiyo in ay baadhaan xidido fogaaday iyo sababaha ka dambeeya isku dhacooda; si loo fududeeyo xidhiidh dhex mara dhinacyada oo aan waxba ku gudbanayn; iyo in la dhiiriyo fikir curinta si xal loo raadiyo, si kale haddii loo dhigo, si mushkiladii loo xaliyo"<sup>7</sup>.

Waxa ay Avruch iyo Lederach iyo khubaro / iyo hawladeeno kale oo soo kordhaya oo isku dhaca ka shaqeeyaa dhammaantood danaynayaan gudbinta iyo caalamiyantu tusaalahaa isku dhac xalinta ah ee ka kooban sharaxaad, wacyi raaligalineed, mushkilad xalin.

Sida uu Avruch leeyayah, "isku dhac xalintii waxa ay noqotay badeecad la dhoofin karo"<sup>8</sup>. Faah faahintaa waxa ka dambeeya baqo ah in aan badeecadani ku habboonayn dhaqanka iyo baahiyaha cidda iibsanaysa. Halka uu Avruch uu u egyptay mid bixinaya fikrad kooban oo ah sidii arinkaa si dhab ah loogu fulin lahaa goobahana loo waafajin lahaa, Lederach isagu waxaa uu isku dayayaa in ay fikradihiisaa isku dhac xalintu goobo kala duwan oo caalamka ah ka fulaan.

## **BADALKA NABADAYNTA KEENAYA**

Eray sharax ah oo cusub ayaa soo galay suugaanta qolooyinka daneeya helitaanka wadooyin lagu caawiyo dadka kale sidii ay u xalin lahaayeentu isku dhacyada noloshooda gaar ahaaneed iyo bulshooyinkooda iyo bulshooyinka caalamka.

Waxa weeye isku dhaci oo badal lagu sameeyo, ama si macquul ah oo loo sawiro (koobi gareeyo) erayga wax isku dar. Lederach waxa uu u sharaxayaa, sida uu qayrkiiba u sharaxayo, kobaca wajigan isku dayga nabadaynta.

Sanado hore ayaa ay maaraynta isku dhacu gashay qaab uu isticmaalo qofka gacanta ku hayaa. Waxana ay noqotay mid fikrad ahaan aad u reer galbeedaysan, maaraytiina waxa ay tilmaamtay fikrada ah in isku dhacu marayo jid gaar ah oo la saadaalin karo iyo dhaq dhaqaaq la fahmi karo oo la maarayn karo. Sida birijka laga dul dhisayo wabi kacsan, ama la xidhayo wabiga si loo dhaliyo koronto, waxa aynu marin karnaa tamartii isku dhaca wado si natijada dambe u noqoto wax soo saar. Fikradan kobcaysay waxa ay ahayd mid xisaabta lagu darsanayay, dabiicada iyo kaalinta uu isku dhacu ku leeyayah xidhiidhyada, waxana weeye (isku dhaci) mid dabiici ah waana in la maareeyaa. Maarayntu fikrad ahaan waxa ay qirtay in isku dhaca aan lagu xalin dareen

ah ha laga takhaluso, hase yeeshii xooga la saaro in la raadeeyo (lana badalo) natiijooyinkii iyo xubnihii wax burburinayay<sup>9</sup>.

Wuu sii wadaa isaga oo sharaxaya in aanay haboonayn in loo maareeyo ficiinka dadka iyo dhaqankooda si kamid ah sida aynu u maarayno waxyaalaha aduunka ka jira ee la taaban karo. Markaa maarayntii ma koobi karayso micnaha balaadhan ee nabadaynta, ee waxa ay ku koobantahay uun dhinaca farsamo ama hawleed ee arinkan.

Sanado badan oo tagay ayaa fikradda badalka isku dhacu ay soo baxday iyada oo ahayd hadal fiican oo haboonaa oo lagu sharaxay badheedhaha nabadaynta. Badalaaddu waxa ay keenaysaa faham guud, kaas oo qeexideeda heerar dhawr ah laga dhigayo. Iyada oo ka duwan maarayntii iyo xalintii isku dhaca, ayay fikradan badalaadu aanay soo jeedinayn in si fudud uun loo tirtiro ama loo xakameeyo isku dhacii, hase yeeshii waxa ay u tilmaamaysaa si qeexan dabeeecada gudaha ee dhabta ah ee isku dhaca. Isku dhaca bulshadu waxa uu maraa wajijo go'an oo la saadaalin karo oo bedel ku keenaysa xidhiidhadii iyo ururadii bulshada<sup>10</sup>.

Sida uu qabo Lederach, isku dhacu waxa uu badalaa sawirka xidhiidhka, isaga oo raadbynaya xidhiidhadii iyo urur bulsheedkii. Cidhiidhiga oo kordhaa waxa weeye in uu yaraado iswaydaarsigii tooska ahaa ee dadka uu haysto isku dhacu iyo in uu kordho xidhiidhka aan tooska ahayn ee dadka kale keeneen, tan oo badalaysa xidhiidhkii aasaasiga ahaa iyo qaab bulsheedkii balaadhnaa ee isku dhacu ka aloosnaa. Isku dhacu waxa kale oo uu badalaa fikradaha qofka, dadka kale, iyo arimaha la iswaydinayo. Bal waxoogaa aynu ku laabano Lederach si aynu u eegno sida uu u qabanayo badalka nabadaynta, hase yeeshii ugu horayn bal aynu eegno fikrad kale oo wajigan ah oo ina gaynaysa dhex dhetaadin.

## **AWOOD SIIN IYO AQOONSI**

Qofna kuma eedayn karo Bush iyo Folger in ay meel ku gaadh uga jeedeen nidor galkoodii ku saabsanaa badalka dhex dhetaadinta. "Geedi socodka dhex dhetaadintu waxa uu wataa horseed u gaar ah oo badalka dadka ah tan oo keenaysa garaadkii oo kora- oo ku caawinaya dadka in ay la lagdamaan xaaladaha ad-adag oo birriish la dhex dhigo dadka kala du-duwanidooda, marka isku dhicci gudaha loogu jiro"<sup>11</sup>. sida ay qabaan qorayaagaasi, awooda badalku waxa ay ka imanaysaa miisaanka dhex dhetaadinta, si loo curiyo laba raad oo muhiim ah: Awood siin iyo Ictiraaf.

Awood siintu waxa weeye iyada oo loo celiyo dadka dareenka qiimahoodii iyo awoodoodii iyo miisaankoodii ay kula tacaali lahaayeen mushkiladiihii nolosha.

Ictiraafku waxa weeye marka dadkii ay qiri karaan, dareemina karaan xaalada iyo mushkilada dadka kale. Bush iyo Folger waxa ay rumaysanyihii in marka ay sifooyinkaasi noqdaan qaar xudun u ah shaqada dhex dhetaadinta, waxa ay dhinacyadii arkayaan isku dhacii in uu yahay fursad dareen korin ah, iyo horseedkii isbadalka dhex dhetaadinta oo la xaqiijiyay.

Ujeedooyinka lagu xaqiijinayo dhex dhetaadinta oo ah mushkilad xalin, aragti, waji raali ahaansho, waxa weeye (ujeedooyinkaasi) qaar si wayn uga duwan kuwa lagu

xaqijinayo wadada isbadalka. Nuxurka mushkilad xalintu waxa weeye heshiis siinaya raali ahaansho ay wadaagaan dhammaan dhinacyadu oo xaaladii dhinacyada ka hagaajinaya sidii ay hore u ahayd. Isbadalka dhex dhexaadinta xudunta ujeedadeedu waxa weeye hagaajin dhinacyada laftoodii la hagaajinayo si ay uga fiicnaadaan sidii hore. Gaar ahaan, waxa ay qorayaashu inoo sheegayaan in isbadalka dhex dhexaadintu uu guulaysanayo marka dhinacyadii ay helaan koboc dhinaca tayada awooda naftii iyo tayadeedii la xidhiidhka dadka kaleba. Haddii si kale loo dhigo marka naftii hesho awood siin iyo ictiraafid (dadkii kale ah)<sup>12</sup>.

Labadan istiraatijiyo ee ku jira geedi socodka isbadalka dhex dhexaadintu, ma aha qaar ka duwan sheegashooyinka xayaysiisyada siminaarada qof korinta. Inaga oo amaanayna ujeedada fiican iyo qiyamkaa, hadana waxa inagu adag in aynu argno sida Bush iyo Folger dhab ahaan u keenayaan isbadal inta lagu jiro geedi socodka dhex dhexaadinta. Haddaba waxa ay la kulmeen laba cabasho oo shaki lahaa oo waajahay maaraynta imika ee isku dhaca: awood qaybinta iyo xidhiidhka dhaqan. Waxase nasiib darro ah in ay alaabka dambe ka soo galeen markii ay isku dayayeen ka hadalka labadan arimood.

## **TUSAALIHII LEDERACH EE XOG QAADASHADA DHEX DHEXAADINTA**

Lederach oo ah qof ku dhagan wajiga badalaada ee loo maro dhex dhexaadintu, kuma ekaanayo uun hadalkiisaa. Wawa uu arimahaan uu danaynayo ee ku saabsan (xidhiidhka dhex dhexaadintu la leedahay dhaqnka) la maray wadooyin tagaya meelaha caalamka ugu dhibta badan si uu arimahan uu u tijaabiyo, waxana meelaha ka mid ahaa Cambodia, Somalia iyo Nicaragua. Waxana uu sameeyay Lederach waji dhex dhexaadin ah oo uu ku magacaabo tusaalihii xog qaadashada. Arinkaa aasaaska laga guda galayaa waxa uu ka muuqdaa magaca. Wuxuu “qaadanayaa xog”, ama waxa uu ka helayaa dhinacyada isku dhacay, dareenkooda ah sida loo waajahayo khilaafaadka iyaga kala fogaynaya.

Sida Lederach uu u sharaxayo, waxa uu ka bilaabayaa nuqdad uu wax ku milicsanayo, oo ah in tababarku yahay fursad looga jeedo ugu horayn in la helo, oo la abuuro, oo la sameeyo tusaalayaal la taaban karo oo ka soo burqanaya khayraadka yaala goob gaar ah, iyo in la fuliyo baahiyaha halkaasi<sup>13</sup>. Haddii si kale loo dhigo, waxa uu ka bilaabayaa gudagal isaga oo dhisaya tusaalihii lagu guda gali lahaa isku dhaca kuna dhisaya qalabka ay ka qayb galayaashu ay la yimaadaan aqoon is waydaarsiga, ugu mudnaan xirfad nololeedkoodii iyo khibradoodii.

Xalinta isku dhacu, iyada oo la isticmaalayo wajiga xog qaadashadu, waxa weeye inta badan geedi socod kooxeed, waqtii badana qaadanaya oo ka badan ka tusaalahu mushkilad xalinta ee toos arinka loo guda gal. Waxa ay ku kala duwan yihii waa aragtida loo baahanayahay in la dhisoo doonidii inta aan safarkii la galin. Faa'iidata ah in wax laga bilaabo meesha ay dhinacyadu taagan yihii fikrad ahaan oo aan laga bilaabin meesha aynu rabno in ay joogaan waxa weeye inta u liidata arin laba duub leh. Doonida isku dhac maaraynta waxa lagu dhisayaa qalab la hubsaday oo loo qorsheeyay si guul badan loo bad maro arlo la garanayo. Khasaaruhu waxa weeye iyada oo laga

yaabo in safarku aanu qaadan wajiga aad u jeedo maxaa yeelay dadka kula socda ayaa ama ka baqaya waxyaalaha aanay garanayn amaba dhadhan ayaanay u samaynaynba. Waxase khatar ah tusaalayaasha dhaqan kaliya ka soo wada jeeda ee isku dhac xalinta ah, kuwaas oo suuqa imika aynu ka helayno waxase taa sahlaya in maanta arimahaasi dib u eegid joogta ah ay ku samaynayaan dadkii iyaga soo saaray.

Tusaalaha xog qaadashadu waxa uu ku dhisanyahay qaab ka qayb qaadasho ah oo abuuraya tusaalayaashii haboonaa ee badalaada isku dhaca. Qorshahaa waxa ka mid ah shan nooc oo dhaqdhaqaaqyo ah oo isku xidhan. Inkasta oo aynu u dhigdhigi doono si muuqata oo ah xubno isku xig xiga, waxaa la fahamsanyahay in geedi socodka si hawl baadhitaan ah, booqasho la samayn karo, iyada oo loo baahnaan karo in hore loo boodo ama dib loo gurto marka talaabo kasta oo tallaabooyinka isku xig xiga la qaado. Talaabooyinka wajiga xog qaadashada ee Lederach u qaado maaraynta isku dhacu waa kuwan:

1. **Helitaanka:** ka qayb galayaashu waxa ay guda galayaan oo eegayaan fahamyadooda gaarka ah ee isku dhaca iyo talaabada ay (isku dhaca) ka qaadaan sida ay uga shaqaysso goobtooda. Layliyadana waxa looga jeedaa in ay noqdaan caawiye, taageeraya dadku si ay uga fikraan in ay aqoontoodu tahay kayd (khayraad). Si taasi u dhacdo, waxa ay u baahanyihiin in ay baadhaan oo gartaan aqoonta caadiga ah ee ay leeyihiin, kartina u leeyihiin in ay sharaxaan. Maxaynu samaynaa si aynu u xalino isku dhaca goobteena? Sidee se aynu u qaban karnaa arinkaa ?

2. **Magacaabida iyo darajo siinta:** Talaabadani waxay dhigaysaa ka qayb galayaashii xaalad ay ku curin karaan aragtiyahooda gaarka ah iyaga oo adeegsanaya khibradii iyo fahamkii hore. Waxa ay ina xusuusinaysaa qaybtii uu ku darsaday Paulo Freire fahamka aynu ka qabno geedi socodka waxbarashada. Freire waxa uu saadaaliyay isbadalka bulsho, sida maaraynta isku dhaca isirka, inuu yahay geedi socod isbadel qof ahaaneed iyo nidaameedba. Qaabkii uu ku fuliyay fikradhiisa si uu u keeno isbadal bulsho waxa uu caawiyay dad baahan iyo dadka tabaalaysani sidii ay u baran lahaayeen akhriga iyo wax qorista. Geedi socodka uu Freire ku magacaabay “dareensanaan”, naftaada oo wax dareenta, waxa dhacday in dadkii aan helin fursad ay wax ku bartaan, si tayo lehna wax ula xidhiidhaan ay arkeen iyaga oo laba jid qaaday oo ah isbadal shakhsiyadeed iyo mid bulsho. Geedi socodku waxa uu ahaa mid xoojinaya awood siinta, halkaa oo Freire isla markiiba ka fikiray kalitaliskii milatari ee awoodda buuxda gacanta ku haystay xilligaa in uu yahay muwaadin khatar ku ah wadankiisa Brazil.

3. **Qiimayn:** Marka ka qaybgalayaashii ay ka shaqeeyaan sidii ay u heli lahaayeen waxa uu isku dhacu yahay iyo sida loogu xalinayo khibradda ay leeyihiin iyo marka ay khibradoodii isku dhaca ka dhigaan mid cad oo si fudud loo fahmi karo, waxa ay bilaabi karaan in ay qiimeeyaan wixii waxtar u leh iyo waxa aan wax tar u lahayn iyaga oo adeegsanaya khibradoodii ay u lahaayeen maaraynta isku dhaca.

4. **La qabsi/dib u noolayn:** Tani waa fursad lagula qabsanayo hababka imika lagu maareeyo isku dhaca ama loo raadinayo habab cusub iyada oo la eegayo wax qabashada dhaqanada iyo goobaha kale.

**5. Fulin dhab ah:** Tallaabandan u dambaysa ee tababarku waxa ay leedahay layli lagu tijaabinayo (dadka tababarka qaata) fikradahooda iyo aragtiyahooda cusub. Halkan waxa ay bilaaabayaan in ay ku isticmaalaan aqoontooda iyo xirfadahooda cusub goobaha layskaga hor imanayo.

Habka Lederach waxa uu u qorshaysan yahay in uu ixtiraamo kala duwanida dhaqanka ee dhixyaal tababaraha iyo ka qayb qaatayaasha iyo in uu kala duwanaanta ka dhigto aasaas uu ka raadin karo fikrado iyo istaraatijiyooyin cusub oo isku dhaca lagu maareeyo. Kaalinta tababaruhu halkan waxa ay ka gudbaysaa, bixinta tababarkii iyo xirfad dhiskii ku saabsanaa tusaale la garanayo oo isku dhaca lagu xaliyo, waxaana loo gudbayaa fududaynta geedi socodkii wax cusub lagu heli lahaa, tababarna loo qaadan lahaa ku dhisan khibrada bulshada wax baranaysa.

Mid digtooni ah oo Lederach uu ka dhawaajinayo oo ku saabsan isticmaalka tusaalahan waxa weeye dabciga {fudaydiyayaasha xagga dhaqnka u caban} ee ay ka joog sanayaan soo qaadashada tusaalayaal kale oo lagu maareeyo isku dhaca iyaga oo ka cabsanaya in ay qaadaan awood lagu xidhiidhinayo khibrad dibadeed. Lederach waxa uu rumaysanyahay in isku darka tusaalayaashii sharaxaadda iyo xog ururintu ay aad ugu haboonyihii marka lala shaqaynayo ka qaybgalayaal ka socda goobo iyaguna leh xaalado u gaar ah.

“Haddii wajiga xog ururintu uu qaato mawqif ku dhegan waxa sax loo arko oo aan ku dhiiranayn is bar bar dhiga iyo la wadaaga aqoonta dadka kale iyo fikradahooda iyo wajiga ay wax u arkaan, waxaa dhici kara in tamartii hoos u dhacdo noqotana mid kooban oo dhinaca kale u shaqaynaysa, dadkiina jahli ku sugnaado”<sup>14</sup>.

## **DHUGASHO**

Arimaha isku dhac maaraynta, khilaaf xalinta badalka ah, iyo calaamad kasta oo aad jeceshahay in aad arimaha ku magacawdo waxa waajahaya tartan kaga imanaya jabhada badan markaa isbadal ayay ku jiraan. Dhex dhixaadinta oo laga yaabo in ay iyadu degan tahay nidaam iyo geedi socod ahaan, oo ka hadasha khilaafaadka ayay u bilaabmaysaa in ay dib u habayni ku timaado, iyada oo ka bilaabmaysa fikradaha aasaasiga ah iyo qiyamka ilaa laga gaadho habkii fulinteeda.

Marka aynu ka bixinay fikrad sida wax isku badalayaan, waxa aanu dareensanahay in imika aad heshay awood aad ku abuuri karto istiraatiji kuu gaar ah, adoo adeegsanaya aydkaaga gaarka ah kana faa'iidsanaya fursadaha adeeg ee ay keenaan khilaafaadka jooga ee degenida u diida wada noolaadka dhexdiina .

Qaado waqtii waxoogaa ah markaa milicso kala duwanaanshaha istiraatiijiyadaha isku dhac maaraynta ee aynu imika uun helnay waa maxay waxa aad baratay ee raadbynaya wajiga kuu gaarka ah ee aad ku maaraynayo isku dhaca ciddii wax iska kiin galaan, ururkaaga gudhiisa iyo bulshada gudaheedaba isticmaal halkan banaan (ee soo socota) si aad u qorto jawaabtaada xogogaalnimo. Markaa haddana, sheeg sida aad is leedahay in aad wax u badali karto, si aad fikradahan cusub u fuliso (waxaa loo yaqaan dareen galin)

---

Xilligii milicsiga	..... ..... .....
-----------------------	-------------------------

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Laba ka mid ah xididada taariikhiga ah ee isku dhac maarayntu waxa weeye isbadalka qorshaysan iyo urur-horumarinta .
- Kaalinta iyo aragtida oo lays waydaarsadaa waxa weeye laba qalab oo xiliyo hore jiray hase yeeshee wali ah istitaatiijiyoojin lagu maareeyo khilaafaadka dadka dhexdooda iyo ururada ka dhaca.
- Wax lagu magacaabay isbadalkii nabadaynta ayaa ka soo baxay isku darkii istiraatiijiyooinka maaraynta khilaafaadka iyada oo la isku dayayo buuxinta ban banaanada dhaqanka ka imanaya ee yaraynaya wax tarka tusaalayaal hore u jiray.
- Awood siinta iyo aqoonsigu waxa weeye laba natijo oo aad muhiim u ah dhinaca dadka ku hawlan dhex dhexaadinta badalka keenta.
- Dhex dhexaadinta xog qaadashada ihi waxa weeye mid ka mid ah wajiyadii ugu cusbaa kana timid gacanta ma daalayaasha raadinaya jidad cusub, oo ay ku caawiyaan dadka kale, maaraynta isku dhaca noloshooda ku yimaad.

## **RAAD RAAC**

1. Walton Richard, maarynta isku dhaca: wada hadal dadka dhexdooda ah iyo kaalinta dhinaca sadexaad: Dabcadii labaad (akhriga, madbacada MA: Addison-Wesley, 1987), P.4.
2. Ibid., P.11.
3. Burton, John, isku dhac xalinta : Afka iyo geedi socodka xalinta isku dhaca ( Lanham, Mary Land: madbacadda Scarecrow 1996), P.15.
4. Fisher, Ronald J., dadka isku dhaca dhexdooda ah xalintiisa (Syracuse, NY: madbacadda jaamacada Syracuse, 1997).
5. Bush, Robert A. Baruch iyo Joseph P. Folger, rajada dhex dhexaadinta San Fransisco: Madbacadda Jossey-Bass, 1994), P.16.
6. Lederach, John Paul, u diyaar garowga nabadda: Badalka isku dhacu sida uu ugu kala gudbayo dhaqanada (Syracuse, NY: Madbacadda Jaamacadda Syracuse 1995), P.52.
7. Avruch, Kevin, Dhaqanka iyo xalinta isku dhaca (Washington DC: Madbacadda machadka maraykanka ee nabadda 1998), P.85.
8. Ibid, P.102.
9. Lederach, op. Cit., P.16-7.
10. Ibid. P.17.
11. Bush iyo folger, op.cit., P.2.
12. Ibid., P.84.
13. Lederach, op.cit., P.55.
14. Ibid, P.70.

XAGGA MUSTAQBALKA LOO JEEDO  
IYO TALAABOOYIN SOO JEEDIN AH

*Haddii maskaxihii simanyihii wixii meeel  
dheer jira Ayaa inoo soo dhawaanaya.*

MAAH MAAH BARIGA AFRIKA AH.



Koritaanka, baahida, iyo caan oo la noqdaa waxa ay keenaan waxyaalo kale	131
Maslaxaad: waxa weeye qalab kale oo muhiim ah oo lagu maareeyo isku dhaca	133
Maaraynta isku dhacu: waa shaqo hore u socota	135
Talaaboojin la soo jeedinayo	136
Nuqdado muhiim ah	139
Raad raac	140

Maaraynta isku dhacu waxa ay noqotay sanadadan dambe “shaqo kobcaysa”, sababo badan awgeed, ugu horayn, waxa aad u badan isku dhacyada caalamka ka jira.

- Dagaalo sokeeye oo gacan ka hadal leh.
- Iyada oo laga guurayo nidaamadii xukunka ee aasaasiga ahaa, oo kuwa cusub iyo kuwii hore la is bar bar dhigayo.
- Khilaafaadka xuduuda ka gudubsan.
- Isku dhaca isirka ee ka bilaabmaya gurigaaga intiisa dambe ee soconaya ilaa umad dhani isku madhato (wax yar iyo wax wayn).
- Xumaan isir ama midab ka dhalanaysa.
- Gacan ka hadalka sokeeye iyo khilaafaadka qoyska.
- Isku dhacyo jinsi ama diineed ama filal (jiilal) nooc kasta ha ahaadeene.

Liiskuna wuu soconayaa

Ta labaad, bahalkan isku dhaca ah ee sii kordhaya ee wajiyada badan ee meel kasta ka jira waxa uu ku dhiiriay dadka, ururada, bulshada, dawladaha hoose, ururada aan dawliga ahayn ee dalka iyo wakaaladaha caalamiga ah in ay ama arinkan talaabo ka qaadaan (yeeshaan barnaamij) ama kolba marka ay wax dhacaan uun wax qabtaan. Mararka qaar ayay arinkan muranka leh galaan iyaga oo aan ku qanacsanayn, mararka qaar waxaa dhaqaajiya dareenka dadnimada oo ku qasba. Markaa sababta ku kalifaya dadku waxa ay doonto ha ahaatee waxa dhakhso u kordhayay sanadadan dambe tirada iyo miisaanka dadka danaynaya ama faraha kula jira maaraynta isku dhaca.

Ta saddexaad ee sabab u noqotay in maaraynta isku dhacu noqoto shaqo koraysa waxa weeye tiknoolojiyada taala ee lagu gali karo isku dhac maaraynta iyo hawlahaa xal raadinta iyo dhib yarida uu qofku ku heli karo xirfadii tiknoolajiyada. Marka ay suurta gal tahay in ardaydii dugsiga hoose lagu tababari karo in asaagood ay dhex dhixaadiyaan, waxa ay ina galinaysaa rajo in dadka waawayn ee khibradda leh ee cilmiga lihi ay barankaraan sida loo galo dhex dhixaadin iyo gorgortan gaadhaya heer wanaagsan oo macquul ah.

### **Koritaanka Iyo Baahida Iyo Caan Oo La Noqdaa Waxa Ay Keenaan Waxyallo Kale.**

Fursadaha ay madaxda bulshada iyo dadka kaleba ay xirfad iyo khibrad ku helayaan xaga istiraatiijiyoyinka la kala dooran karo ee khilaaf xalinta sida dhex dhixaadinta oo kale, ayaa si tayo leh ugu kordhay qaybo badan oo caalamka ka mid ah tusaale aad u fiican oo tusaya sida fursadahaasi sanadadan dambe u kordheen waxa laga dareemi karaa awooda ay muujiyeen asxaabta isbadalka dimoqraadi doonka ah (asxaabta). Asxaabta oo ah urur aan duwali ahayn oo caalami ahi waxa uu nidar ku galay dhisida awood bulsho oo waarta si loo horumariyo ururada bulshada loona helo badel hab dhaqanka ah iyo maarayn isku dhaca caalamka oo dhan. Ilaa xilgii la bilaabay ee sanadkii 1989kii waxa ay xarumaha dalka gudihiisa ah ee asxaabtaasi maamulaan bixiyeen xog, gorgortan iyo xirfado iskaashi oo qorsheed, iyaga oo siiyay taasi kumanaan ururada bulshada ah oo aan dawli ahayn, dawladha hoose iyo hoggaamiyayaal qaran oo ah in ku dhaw afartan dal. Asxaabtaasi waxa ay si gaar ah ugu xoog badan yihiin badhtamaha iyo bariga yurub, halkaa oo ay ka sameeyeeem xarumo qaran oo ay ku qalabeeyeen shaqaalihii xirfado, si ay uga caawiyaan, sidii loo samayn lahaa isbadal aasaasi ah oo xaggii geedi socodkii go'aan qaadashada dimoqraadiyadeed iyo maaraynta isku dhaca.

Fiditaanka isticmaalka iyo caan bixidda tiknoolajijo cusub oo bulsho, sida maaraynta isku dhaca waxa ay sii hurinaysaa awoodaha lagu horumarinayo tiknoolajigaasi. Sida aynu kaga doodnay cutubyo hore aqoonta geedi socodka gorgortanka iyo xirfadhi looga baahnaa in si tayo leh loo gorgortamo isbedel wayn ayaa ku yimi sanadadii dambe, markii jaamacadaha waawayn iyo xarumaha baadhitaanka laga fuliyaa ay soo galeen arinka dhex dhexaadinta, inkasta oo lagaga dhaqmayay boqolaal sanadood dhammaan qaybaha caalamka oo waliba ay u badnaayeen dadka muuqda ee ehlu diinka ah iyo siyaasiyiintu kuwa mudooyinkii hore ku dhaqma, waxa ay sanadadan dambe qaadatay ahmiyad cusub. Fursadihii laga baranayay xirfadaha dhex dhexaadinta ee lagu isticmaalayay ayaa dhex qaaday ururada iyo bulshooyinka. Amaani ha ka gaadho ururada ay ka mid yihiin asxaabta isbedelka dimoqraadi doonka ah.

Waxaana sidaasi oo kale u kobcay farshaxanka maslaxaada, taas oo ah iyana waji isna soo jireen ah oo lagu xalin jiray khilaafaadka laguna maarayn jiray isku dhaca. Maslaxaada waxaa lagu micneeyay “taagtig nafta ah oo la fuliyo loogana jeedo in la saxo fikrado, hoos loo dhigo baqo aan sabab lahayn iyo in xidhiidhka hore loo mariyo ilaa xad suurta galinaya dood macquul ihi in ay dhacdo, isla mar ahaantiina ka dhigaya wax iswaydaarsi macquul ahna suurta gal.”<sup>1</sup>. Waxa la yaab leh in xooga buugaagta ka hadla isku dhac maarayntu ay sheegaan oo inta badan sharaxaan geedi socodka maslaxaada oo ay yartahay in ay ka hadlaan dib u heshiisiin. Cidda kaliya ee ka duwanayd ee tilmaamtag waxa weeye Bush iyo Folger oo ku sharaxay dhinacyadii oo “xidhiidhkoodii u dhexeeyay si buuxda u soo ceshaday”<sup>2</sup>. Dib u heshiisiinta waxaa lagu sharaxay soo ceshadka xidhiidh xumaaday. Gudidii dib u heshiisiinta ee ka hawl gashay Koonfurta Afrika waxaa loo qorsheeyay in ay daweeyaan nabaro gabobay oo ay dhaliyaan wado noolaansho isir iyo midab.

Sanadadan dambe maslaxaadii waxa ay yeelatay ahmiyad iyada oo noqotay qayb muhiim ah oo dhammaystiraysa gorgortankii iyo dhex dhexaadintii marka loo baahdo, si hoos loogu dhigo dareenka kulaylka ee inta badan isku dhacu keeno. Waxa kale oo maslaxaadu bilaabantay iyada oo ah geedi socod gooni u taagan oo dhisaya is aaminaad iyo xidhiidho wax soo saar leh, waa laba arin oo laga tilmaami karo. Iyada oo ah bedel kale oo ka mid ah istaraatiijiyadaha isku dhac maaraynta ee dhinaca saddexaad kaaliyo, iyo habkan oo aynu rumaysanahay in uu mustaqbalka uu aad caan u noqonayo. Bal haddaba aynu si dhakhso ah u eegno maslaxaada:

**MASLAXAADDA:  
QALAB KALE Oo MUHIIM AH Oo LAGU MAAREEYO ISKU DHACA.**

Maslaxaadu waxa weeye geedi socod dhinac saddexaad uu maareeyo oo uu ku caawiyo qolooyinka isku dhacu dhexyaal arimo caqli gal ah, oo aan ahayn raali galin xagga danaha ah. Moore waxa uu ku sheegay maslaxaada “ Xubin nafsi ah oo dhexdhexaad ah oo uu dhinacii saddexaad isku dayayo in uu abuuro jawi is aamin iyo iskaashi oo sahla gorgortan”<sup>3</sup>. Maslaxaadda waxa loo qorsheeyay in ay caawiso hoos u dhiga kacsanida, horumarinta xidhiidhka, iyo raadinta xedad suurta gal ah. Dadku inta badan cid ayay u yeedhaan caawisa si ay iyaga iyo dhinacii kale u noqdaan qaar u jajaban maslaxaad dhex marta, si ay go'aan uga gaadhi karaan danaha meesha yaal. Way ka sokaysaa maslaxaadu dhex dhexaadinta hase yeeshay waxaa laga yaabaase in ay u gogol xaadho xaaladihii ay dhex dhexaadintu ku iman lahayd.

Mushkilado badan ayaa la xidhiidha isku dhaca dadka dhexdiisa ah. Dhibaatooyinkaa xagga xidhiidhka ahi inta badan waxa ay rabaan digtooni inta aan horumar laga samayn wajiyada dhabta ah ee khilaafaadka.

Arimaha iyo waxyaalaha muhiimka ah ee xidhiidhka ku saabsan waxa ka mid ah shanxaaladood.

**1. Caadifad xoog leh.** Waxaa soo galaya tan cadhada, shakhsiyad dhaawac, qulub, fogayn, rajo li'i, quus, aamin daro, baqo IWM. Doodaha macquulka ah ee arimaha dhabta ah lagu guda jiro, waa in caadifadahaasi oo kale laga hadlaa oo si uun loo dajiyaa. Louis Coser ayaa in ku dhaw nus qarnigii tagay ku dhaqaaqay in uu kala saaro isku dhacyada xaqiiqiga ah iyo kuwa aan xaqiiqada ahayn. Wuxuu yidhi isku dhacyada aan xaqiiqiga ahayn waxa weeye marka dhinacyadii u dhaqmaan sidii oo ay is khilaafsanyihiin. Iyada oo ujeedo dhab ah oo la taaban karo oo isku dhac keentaa meesha oolin. Isku dhacyada xaqiiqada ihi waxa ay ka yimaadaan isku dhac dhab ah oo dano la isku hayo<sup>4</sup>. Dadka galaya gorgortanka iyo dhex dhexaadinta waxa muhiim ah in ay kala saaraan isku dhaca xaqiiqada ah iyo ka aan xaqiiqada ahayn.

**2. Dareemo khaldan iyo fikrad qofka ku qufulan.** Dareemada khaldani waxa ay sii ahaanayaan qaar dhab ah xagga indhaha maskaxda, ilaa la xaqijinayo in ay khalad yihiin, siday doonto haw ekaato fikraddu eh. Fikradaha qofka ku qufulan “haddaad mid ka aragtay, waxba kuuguma dhina ee waad wada aragtay” – waxa qof maskaxdiisa degaa way adag tahay in laga xoog roonaado maxaa yeelay waxa dhoqeeeyay inta badan wax nacayb iyo karaahiyo. Wuxaana weeye gidaar adag marka la isku dayayo in arimihii dhabta ahaa lagu dhammeeyo xidhiidh gorgortan iyo dhex dhexaadin.

**3. Mushkilada sharciyada.** Haddii dhinac aanu u arag dhinaca kale iyo waxa uu dano sheeganayo wax sharci ah. Suurta galkii la wada fadhiisin lahaa labada dhinac ayaa yaraanaya. “Xaq uma laha in ay mudaharaadaan” hadalada caynkaasi oo kale ahi waxa ay tusayaan gidaar sharci inuu meesha yaal.

**4. Aamin darro.** Arimuhu waxaa la rabaa in ay u bislaadaan xirfadda qofka wax maslaxaya, guntana waxa yaal aamin daro. Marka aanay aaminaadi jirin ee la la'yahay karti la iskugu haleeyo ama lagu kalsoonaado in dhinaca kale run sheegayo waxa uu noqonayaa geedi socodki gorgortanku ama dhex dhexaadintu mid fananaya buur aad u taagan si loo gaadho arimihii dhabta ahaa ee isku dhaca. Aaminaada waxaa la dhisaa aayar aayar muddana way qaadataa.

**5. Xidhiidh liita.** Hadalka cad ee nadiifta ah ee daacada ihi waxa uu badbaadinaya boqolkiiba (90) waqtigii loo baahnaa dhex dhexaadinta, ama ka gorgortanka isku dhaca, ama la raadsan lahaa go'aan ah noocii loo baahnaa in dhinac saddexaad la kaashado. Arinkan waxa laga yaabaa inuu u muuqdo xayaysiis baayac mushtar, balse waxoogaa ka fikir. Haddii ay dhinacyada isku dhacay ay u xidhiidhayaan si nadiif ah oo cad oo daacad ah oo aanay ku jirn ceeryaamo dareen xumo iyo aamin daro ihi iyo arin caadifadeed, sida baqe ama cadho, (tan oo shaqo siinaysa in dhex dhexaadide yimaado) dad badan oo gala arimaha gorgortanka iyo dhex dhexaadintu waxa ay ku qasbanaan lahaayeen in ay hore shaqada uga fadhiistaan<sup>5</sup>. Guddiyada bulshada, waa urur aan macaash raadinayn oo laga sameeyay magaalada San Francisico, sanado ka hor ayaa waxa ay balaadhiyeen fikraddii asalka ahayd ee maslaxaada “In laga gudbo cadaawadii, shakigii iyo gaabsigi in laga hadlo khilaafka idin kala qaybinaya”.

Halka u horaysa ee ay gudiyada bulshadu diirada saaraan waxa weeye dhisida ama dib u dhiska xidhiidka si dadkii is khilaafsanaa ay laf ahaantoodu uga heshiyyaan ka wada hadalka khilaafaadkoodii. Waxana aanu aad u rumaysanahay in sida ay labadii dhinac isku dhacii iyagu u leeyihiin (oo uu yahay isku dhacu mid iyaga dhexyaal ) in uu xalkiina yahay masuuliyadooda.

Maslaxaadu waxa ay aad u haboontahay marka qolooyinka khilaafku dhexyaal ay leeyihiin ama rabaan xidhiidh jiriya. Marka maslaxaadu ay fuliso u jeedadeeda waxa ay u gogol xaadhaysaa xalinta dhibaatada taagan iyo mid soo socotaba, dadkii is khilaafsanaa waxa ay ka tagayaan fadhiga (maslaxaada) iyaga oo wata xirfado iyo aqoon awood ku siinaysa sidii ay si wax ku oolnimo ah u wada dhaqmi lahaayeen waxna uga qaban lahaayeen xiisadda iyo isku dhaca ku yimid xidhoodhkoodii. Dhab ahaantii maslaxaadu kuma ekaanayso uun khilaaf xalintii, ee waliba waxa ay xoojinaysaa xidhiidhadii bulshada waxana ay hagaajin kartaa nooca nolosha ee bulshada<sup>6</sup>.

#### **Gudiyada bulshada waxa lagu dhisay qiyamkan soo socda.**

- In la ogolaado dhinaca wanaagsan ee isku dhaca.
- In si fiican loo tabiyo isku dhacii xagga xaafadaha.
- In qofkii iyo bulshadiiba ogolaadaan masuuliyada isku dhaca.
- In is xilqaan lagu xaliyo isku dhacii, iyo
- Kala jaad jaadkii xaafada iyo in dul loo yeesho kala duwanida.

Wajiga ay gudiyada bulshadu u galaan maslaxaada haddii si dhaw loo eego waxa ay aad ugu egtahay dhex dhexaadinta. Lixda talaabo ee geedi socodkuna waa kuwan:

**Talaabada 1:** Isku dhacii xaafadu waxa uu keenayaa in la codsado kaalmadii gudida bulshada.

**Talaabada 2:** Shaqaalihii iyo xubnihii bulshada ayaa waraysanaya qof kasta oo arinka lug ku lahaa.

**Talaabada 3:** Haddii cid kastaa ogolaato, waxaa la balaminayaa shir gudi.

**Talaabada 4:** Shirkii gudida ayaa qabsoomaya.

**Talaabada 5:** Inta badan dadku heshiis ayay gaadhaan, iyo

**Talaabada 6:** Shaqaalihii ama cid gudidii ah ayaa arinkii daba gal ku samaynaya si ay u eegaan sida heshiiskii u shaqaynayo.

Faraqu waxa weeye dhiska xidhiidhada iyo xirfadaha isku dhac xalinta oo ah arinka aasaasiga ah ee shaqadan. Looma jeedo uun xalinta isku dhac gaar ah, in kasta oo tan qudheedu natijjo la rabo tahay. Dadka qaar ayaa awoodaha noocan ah yidhaa awood dhisid, waa awoodii bulshada oo la dhisayo si si wada jir wax ku ool ah loo wada shaqeeyo.

## MAARAYNTA ISKU DHACU: WAA SHAQO HORE U SOCOTA

Waxa aynu ka doodnay sida tiknoolajiyada isku dhac maarayntu isu badalaysay isuna sii badali doonto. Waxa kale oo aynu si dadban ula soconay dhaq dhaqaaqa ka dhigaya maaraynta isku dhaca aasaas xirfadeed iyo aqooneed oo dimoqraadiyada xageedii jira oo micno siinaya dad aad usii badanaya. Hase yeeshi dareenka koraya ee muhiimka ah loona baahan yahay in lagu kordhiyo istiraatijiyoooyinkii aad looga shaqeeyay ee isku dhac maaraynta ahaa xagii horumarinta bulshada iyo daryeelkeedu waxa ay culays iyo nooc xeer ah ku soo kordhisay qolooyinka arimahan ku hawlan. Labada dhaq dhaqaaq ee ah: 1) in la kordhiyo tirada kuwa u maarayn kara isku dhaca si wax ku ool ah iyaga oo ah dhinac sadexaad iyo 2) in xeer loo dhigo oo ay yihiin qaar u qalma shaqada dadka bixinaya adeega dhex dhexaadintu, labadaasi waxa aad moodaa in ay toos isaga hor imanayaan (waa haddii ereyga iska hor imaadku halkan ku haboon yahay).

Inta aynu sheegi karno, heerar ayaa loo dajiyay waxa laga rabo dhex dhexaadiyaalka deegaamada siyaasadeed qaarkood, waxa se ay ku shaqeyyaan is xil qaan. Tusaale ahaan, gobolka nidaamku ka socdo, oo mid qorayaasha ka mid ihi uu degan yahay, waxaa ka jira gudi dhex dhexaadiyayaal ah, kuwaas oo u shaqeeya sidii urur xirfadlay ah, oo ay leeyihiin kuwa ka shaqeeya dhex dhexaadintu, dadka qaar waqtii yar ayay hawshan siyyaan qaarna waqtii badan, qaar lacag bay ka qaataan qaarna waa is xil qaan. Waxana gudidani ay sabab u ahayd dejinta xeer akhlaaqeed iyo heerar dhaqan oo haga xubnuhu sidii ay u bixin lahaayeen adeegyada. Waxa kale oo goluhu uu dhigay heerar u dajisan u qalanka dhex dhexaadiyaha, waxase weeye heerarkaasi qaar is xilqaan ah.

Si aad u noqoto dhex dhexaadiye is xilqaama oo u qalma shaqada gobolkaa nidaamku ka jiro, waxa qofka laga rabaa inuu qaato tababar rasmi ah oo ah 22 saacadood oo uu ku baranayo mabaadiida iyo shaqada ku saabsan wixii xalal khilaafaa ah ee bedel noqon kara. Ta kale qofka loo sharaxayo dhex dhexaadiyuhu waa in uu ka qayb qaataa isaga oo (dhex dhexaadiye) kaaliye ah (khilaafaa xalin) dhinacyo dhex yaal in ay ugu yar tahay lix xaaladood, oo guud ahaan noqonaysa 12 saacadood oo xidhiidhyo la sameeyo. Waxa kale oo jira waxyaalo kale oo la rabo si aad u noqoto macalin dhex dhexaadineed, oo tababari kara dadka kale, iyo tacliin sanad kasta ah oo ay u yartahay 6 saacadood si aad u heshid heerkii aasaasiga ahaa ee u qalanka dhex dhexaadiyaha. Waxa aanu rumaysanahay in kani yahay dhaqan kori doona mustaqbalka soo socdana uu kaalintiisa yeelan doono, maxaa yeelay dadka hawshan wada ayaa raba in shaqadoodu noqoto xirfad la aqoonsan yahay lagana abaal mariyo iyo in arinkaasi gaar u noqdo. Ta kale gaar u yeelashadaasi qiyamkii iyo caadooyinkii dadka ayay ka hor imanaysaa maxaa yeelay qolooyin kale ayaa raba in xirfadahan isku dhac maarayntu ay noqdaan qaar fida.

Waxa cad in ay jiraan wax badan oo aynu ka odhanayno farshaxanka iyo shaqada isku dhac maaraynta, waxase aynu rabnaa in hadalkan aynu gabagabayno anaga oo ku xusuusinayna arimahan soo socda, kuna siinayna tilmaamo fulin u baahan:

*Innagu had iyo jeer ma abuurno isku dhaca nolosheena ku yimaad  
Waxase aynu had iyo jeer karnaa, in aynu doorano talaabada aynu ka qaadayno isku  
dhacyadaa.*

## TALLAABOOYIN LA SOO JEEDINAYO

Dadkii ku guda jray doodan, waa in jawaabtooda ay ku jirtaa kaalin wax ku ool ah oo lagu maareeyo isku dhaca xal guul leh oo khilaafaadka ku saabsan oo la keeno, iyo dadka kale oo loo gudbiyo aqoontii iyo xirfadhihi loo baahnaa si ay iyana u galaan maaraynta is af garansha waaga, iyo khilaafaadka, iyo isku dhacyada goobaha ay ku sugar yihin ka dhaca.

Adiga oo ah hoggaamiye urur aan duwali ahayn ama hoggaamiye urur bulsheed ama dawlad hoose, waxa aanu kuu soo jeedinaynaa inaad ka fikrto talaabooyinkan soo socda, adoo adeegsanaya fikradhihi lagu xusay buugan.

**1. Kordhi kartidaada hoggaaminta iyo maaraynta adiga oo hore u marinaya xirfadahaaga gorgortanka.** Waxa aad aqoonsataa in wax badan oo laga sheegay xirfadhihi gorgortanka, dhex dhexasdinta iyo kuwa kale ee la mid ahi ay u janjeedhaan dhinaca dhaqanka dalkaa cidda qoraalka samaysay. Hase yeeshee waa in aanad fikradahaah dhakhso u diidin. Qaado fikradaha wanaagsan iyo taaktikada aad rumaysan tahay in ay kuu shaqaynayo, meelana ka bedel si ay baahiyahaaga gaarka ah u fuliso. Ka fikir gorgortanku in uu yahay qalab shakhsii oo awood siin ah iyo in uu yahay mid aad dadka la wadaagi karto. Peter Block waxa uu ina xusuusinayaa in awood siintu marka la isticmaalo ay badal u tahay siyaasadaha khaldan iyo nidaamka fadhiidka ah (bayroqraadiyada). Marka aynu nahay hoggaan bulsheed waxa aynu u abuuri karnaa fursado dadka kale, awood la siiyo iyo masuuliyado badan si waxa ay falaan ay xilkiisa u qaadaan heer kasta oo ururka ka mid ahba, iyo dhammaan qaybaha bulshada. Waxaba dhici kara in adna aad isticmaasho xirfadahaaga cusub ee gorgortanka si aad fursado ugu abuurto dadka kale.

Block, hase yeeshee waxa uu u dhigayaa xuduud kaalintaada awood siinta dadka kale.

Ma siinaysid awood dadka kale. Ma siinaysid xoriyadooda dadka kale. Ma sharciyayn kartid isku kalsoonni. Ilaa aad naftaada kaga bilowdo. Maxaa yeelay wax aanad adiguba haysan dadka ma siin kartid. Adigu sug gooni isu taagaaga, aragtidaada, u codee ururka (iyo bulshada, in aad wax soo kordhinaysaan) oo aad rabtaan in wax samaysaan oo wax noqotaan. Waa in fikradaasi il bidhiqsi kasta kugu jirtaa. Markaasi oo kaliya ayay dadka kalena u dhib yartahay in ay sidaasi oo kale sameeyaan. Awood siintu waxa weeye wax la doorto ee ma aha qalab<sup>7</sup>.

Dhammaanteen waxa aynu ku isticmaalnaa xirfadaha gorgortanka wax kasta oo aynu qabanayno. Waxa aynu ku isticmaalnaa gorgortanka si aynu u hubino in qaybinta badeecadaha iyo adeegyada bulshada dhexda u ahi si caddaalad ah u wada gaadhaan. Waxa aynu u isticmaalnaa in aynu aragtiyo cusub siino kuwa ku dhagan habkii hore uun. Marka aad horumariso xirfadaada gorgortanka ee dadka kalena aad ka caawiso in ay iyana tooda hore u mariyan waxa dhismaya tamartii bulshada. Awood siintu waa wax la

doorto, dimoqraadiyaduna waa sidaasi oo kale (waa wax aad dooranayso oo aad qaadanayso). Way isku maran yihiin.

**2. Deji geedi socod badel ah oo khilaafka lagu xaliyo oo ay leedahay bulshadu, haddii aanu hore u jirin.** Kani waxa weeye dhex dhedaadinta la sameeyo si maxkamadaha looga maarmo, ama maxkamadaha ba ka hor si loo dhex dhedaadiyo dhinacyada is khilaafsan ama isku dhacay (Burton:1997). Adoo eegaya baahiyaha bulshadaada, dhex dhedaadintu waxa ay noqon kartaa qalab geedi socod oo faa iido badan oo lagu xaliyo khilaafaadka ka dhaca goobaha ay ka mid yihiin: Dugsiyada, xaalandaha qoysaska, xaafadaha, iska hor imaadyada maamulka iyo shaqaalaha, khilaafaadka deegaanka, ilmaha yar xanaanadiisa cidda yeelanaysa, iyo qaar kale.

Waxa jira tusaalooyin kala duwan oo hore loo soo sheegay oo dhex dhedaadinta ku saabsan. Haddii haddaba midina dhaqankaaga baahiyiisa aanay ku haboonayn. Soo jeedi waji cusub adigu. Marka aad aragto in geedi socod dhex dhedaadin ihi uu ka shaqayn karo una adeegi karo danaha bulshadaada iyo muwaadiniinta, tababar sii dhex dhedaadiyayaashii, waxana aad dajisaa nidaam habkan badalka ah ee khilaaf xalinta ah loo dhaqan galiyo.

**3. Ku dhaqaaq taxane wada hadal ah oo wax badalaya.** Waxa aynu hore uga hadalnay farshaxanka wadahadalka iyo sida uu u yahay geedi socod muhiim ah oo lagu maareeyo isku dhaca laguna keeno isbadal wayn. Iyada oo aan buugan loo qorin dadka doonaya in ay u dhaqaaqaan si ay u xaliyaan isku dhacyo waawayn oo deegaan – juqraafi – ama siyaasadeed , haddana waxa jira isku dhacyo iyo khilaafaad badan oo bulshooyinka inta badan dhex yaal oo daba dheer, xididana leh. Waana ay tiro badan yihiin waxana la hubaa qof kasta oo raba in xirfadiisa uu halkaa ku isticmaalo si wada hadal iyo heshiisiin uu u keeno in aanu micno la'aan iyo daal dareemayn. (ee shaqadiisaa dadkuna way mahadin isna wuu mahadin).

Markaa taladu ma aha in aad raadsato – marka aad buuga akhrisato – mushkiladaha ugu ad-adag, ee qawmiyado badan dhex yaal ee u dhaw in la isku khilafo ama qaar deegaamo siyaasadeed khusaysa, ee waxa aanu kugula talinaynaa in aad qaado xil kaa ka fudud oo loo baahan yahay kaagana baahan adkaysi. Waxa kamid noqon kara isir tiro yar oo bulsho wayntiina ku dhex nool oo si nidaamsan go'aanka looga fogeeyay iyo ka qayb qaadadka khayraadka mudo dheer kuwaas oo bulshada inteeda kale laga takooray.

Ama waxa soo gali kara in la waajaho warshad jiritaankeedu uu hawada kharibayo oo laga baqayo in xidhitaankeeduna keeno dad badan oo muwaadiniin ah oo shaqo beela. Ama waxa weeye nacayb raagay iyo is aamin la'aan dhex taal dawladda hoose iyo ururada bulshda (NGO/CBO). Waxyaalaha ka suurta gali kara bulshada gudaheedu way badan yihiin, sharax sii badan uma baahna.

## WADA HADALKA: FARSHAXANKA SUURTA GALINAYA FIKIR WADAAG.

Haddaad xusuusantahay waxa aynu isticmaalnay sharaxii William Isaac uu ka bixiyay wadahadalka isaga oo qeexaya geedi socodka, sida aynu buuga halka hore ku sheegnay:

“Wadahadalku waxa weeye waydiimo wadaag, hab loo wada fikiro waxna lays milicsiyo. Ma aha wax aynu qof kale u gudayno, waa wax aynu dadka la gudanayno. Run ahaan, qayb wayn oo barashada arinkan ihi waxa ay ku xidhantahay sida aynu u badalayno aragtideena ku saabsan xidhiidhka dadka kale, ee aynu talaabo talaabo uga tagayno isku daygii aynu islahayn dadka kale ha ina fahmaan, oo aynu gaadhayno is faham ballaadhan oo nafteena iyo dadka kalaba fahamno”<sup>8</sup>.

Hadalka wuu sii wadaa isaga oo leh “ in badan oo inaga mid ah ayaa lumiyay dareenkii ololka wada hadalka. Marka aynu wada hadlayno, xeel dheeridu way inagu yartahay. Waxa aynu u aragnaa wadahadalkeena ama fursad xog is waydaarsi ah, ama xero nuqdado lagu kala korodhsanayo”. Ka fikir Nelson Mandela, oo maxbuus siyaasiya ahaa xiliga hore iyo madaxwaynihii hore ee taliskii midab takoorka ahaa ee Koonfur Afrika Deklark, oo wada fadhiistay oo galay wadahadal dab ah sanado badan, taasi waa mid rajo ina galinaysa. Waxa iyana la mid ah sheekadii John Hume iyo Gery Adams iyo wadahadalkoodii dabka ahaa ee qaataay sanadada badan, ee ka qarsoonaa bulshada, oo ay ka wada hadlayeen sidii loo joojin lahaa rabshadii ka taagnaa waqooyiga Ireland. Tani waxa ay tusaysaa sheekooyin aan la rumaysan Karin oo ku saabsan dad aragti iyo dulqaad leh, waa dad u xaadhaayay danbaskii karaahiyada si tartiib ah iyaga oo rajaynaya in ay dhisaan is aamin iyo in loo nidar gallo wanaag loo dhan yahay.

Duruusta sheekooyinkan laga qaataay way cad yihin. Ugu horayn dadku badal ayay keeni karaan. Ta labaad, isku dhacyo ka beermay shini (seeds) nacayb ah tobanaan sanadood, lama fagi karo lamana xalin karo mar kaliya, inta la qabto fadhiyo taxane ah oo dhex dhexaadin ah, ha eegin niyada wanaagsan iyo talo bixiyayaasha lacagta badan qaadanaya. Ta saddexaad, halka hadalada inta badan aynu galnaa si loogu abuuro isku dhac iyo kala duwanaansho ay u dhacaan si fudud oon qiimo ku fadhiyin dabkii wadahadalka ee soo maray wadahadaladii Koonfur Afrika iyo Waqooyiga Ireland iyaga lacag laguma qiimayn karo (wax lagu qiimayn karaa ma jiro).

Ugu dambayn, isaga oo dabka wadahadalku shidaalka gudaha ka helo, farshaxanka fikir wadaagu waxa uu ka faa'iidaysan karaa in yar oo qalab wada hadal ah iyo akhlaaq. Isaacs ayaas isagu soo jeedinaya afar talo.

- **Sheegid:** Adoo runta ka sheega awooda dhabta ah ee qofka, waxa uu qofku run ahaantii yahay iyo waxa uu ku fikirayo.
- **Dhagaysi:** Adoo aan caabi samayn oo aan qofkana culaysin.
  - **Ixtiraamid:** Ka war qabida qofka kale toosnida mawqifkiisa iyo in ay adagtahay in aad si buuxda u wada fahamto.
  - **Joojin:** Waa in aad joojiso wax malysiga, go'aan qaadashada, wax aad tidhaa waa dhab.

Afartaa arin ee wadahadalka ku saabsani waxa ay cuskanayaan mabaadi'da soo socota:

- **Muuqasho:** Waxa si joogta ah u dhacaya in arin kasta oo lagu jiraa xageena iyo hareereheenaba uu muuqanayo.
- **Ka qaybqaadasho:** Haddii aad aduunkii dul joogto aduunkii waa qayb kaa mid ah.
- **Isku xidhni:** Wax kastaaba waa wax isku dhan, waa in sida uu yahay aan u aragnaa.
- **Digtooni:** Waa in aan ka war qabaa codadka badan ee aniga iga dhextu guuxaya.

## **NUQDADO MUHIIM AH**

- Maarataynta isku dhaca, khilaafaadka iyo muranadu waxa ay ahaan doonaan qaar mashquuliya maskaxaha iyo khayraadka dad badan oo aragti leh iyo qaar badan oo hawl wadeeno yaal ah iyaga oo raadinaya siyaalo fiican oo ay u galaan sidii looga xaqiijin lahaa nabad qaybo badan oo caalamka ka mid ah.
- Maslaxaadu waxa weeye istiraatiji dhinac sadexaad u baahan oo loo qorsheeyay in uu caawiyodha dadka ay xaaladahooda isku dhac ka imanayaan inta badan dano isku xidhaya oo dhextu yaal ee aanay ka imanayn arimo kale oo gaar ah.
- Maslaxaadu waa in inta badan ay la tacaashaa caadifada xooga badan, ra'yiga xun ee la iska qabo, arinka qofka ku qufulan, mushkilada xaga sharciyada, aamin darrada, iyo xidhiidhka xun, inta aan arimaha dhabta ah ee yaala aan la guda galin.
- Huri dabka wadahadalka ee ujeedada leh. Baro in aad qabato wadahadal ku saabsan arimaha muhiimka u ah bulshooyinkeena iyo mujtamacaadkeena.

**Xilligii milicsiga**

**Waxa aynu soo gaadhnay gabagabadii safarkeena. Haddaba inta aan qofba wadadiisa gaarka ah qaadin, bal waqtii waxoogaa ah qaad oo milicso sida aad uga bilaabi karto wadahadal bulshadaada si aad u xaliso isku dhac soo jiitamay oo xididaystay. Waa maxay isku dhaca aad ka bilaabaysaa? Waa ayo cida ka mid ah dhinacyada muranku dhextu yaal dhammaan ee aad wadahadalka ku martiqaadaysaa? Diyaar ma u tahay ina aad waqtii galiso arinkan, oo u baahan - doona dhammaystirka safarkan lagu raadinayo wax lagu heshiiyo? Ma jeceshahay in aad barato farshaxanka wada jirka loo fikirayo oo Dadka kalena aad ku caawiso in ay sidaa bartaan? Ma ogolaan kartaa mabaadiida ku jirta in la huriyo dabka wadahadalka, arinkan oo murankii meel ka shishaysa adiga kuu raraya? Haddii aad su'aalahaa ka jawaabi karto adiga oo aan libiqsanayn, waxa aad haysaa jidki aad nabada ku heli lahayd.**

*Qofku haddii uu midho heli karo,  
Waa in geedka uu fuulaa.*

**THOMAS FULLER**

## **RAAD RAAC**

1. Curle, A., Samayntii nabada (London: Tavistock, 1971), p.177.
2. Bush iyo folger, op.cit., p.97.
3. Moore, Christopher W., Geedi socodka dhex dhexaadinta: istiraatijiyo dhab ah oo isku dhaca lagu xaliyo (San Fransisco: Jossey-Bass, 1986), pp.124-52.
4. Coser, L., hawlaха isku dhaca bulshada (Glencoe, IL: madbacad madax banaan, 1956), p.42.
5. Moore, op.cit.
6. Buug yarihi maslaxaada (San Fransisco: gudiyada bulshada, 1993), p.1.
7. Block, Peter, Agaasimaha awooda la siiyay (San Francisco: Jossey-Bass, 1987), p.xv.
8. Isaacs, William, wadahadalka iyo farshaxanka fikir wadaaga (New York: Buugaga socda, 1999), p.9.
9. Ibid. p.47.

<b>GLOSSARY</b>	
<b>ENGLISH</b>	<b>SOMALI</b>
1. Accountability	- Xisaabtan - Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	- Qorshe hawleed - Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan - Dhegaysi Darban - Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho - Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji - Codsi - Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid - Qiimayn
7. Authority	- Suldada - Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin - Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe - Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad - Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check list	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani - La xiriira magaalo - Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin - Wada shaqayn - Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiiye - Isgaadhsiiye
18. Community	- Beel - Jaaliyad

19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad
23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiijo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi - Wada shaqayn
27. Council	- Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan - Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29. Counter productive	- Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Democraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidii la rabay wax u tarid
39. Effective leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh
41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin - Awood u fasaxid

43. Enabler/Enable	- Awood siin - Karti siin
44. Essay	- Qormo - Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan - Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin - Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar
53. Goal	- Hadaf - Gool
54. Good Governance	- Hab Xukun Wanaagsan - Hab Maamul
55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid - Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye - Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha - Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin - Fulin
62. Information	- Xog - Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise
65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar - Wax barasho - Wax barid

67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah. - Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho - Wax Barasho - Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada - Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyyad - Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulan - Shir
75. Minority	- Inta Yar - Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor - Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo - Risaalo
78. Monitoring	- La socod - La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siiye - Wada Hadal siiye - Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha
85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan
88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad

92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah
95. Quorum	- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
96. Rational	- Maan-gal/Macquul
97. Reactive	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
98. Reference	- Tixraac/Raad raac
99. Reflection	- Ilays noqod/Humaag noqod
100. Resources	- Khayraad
101. Revenue	- Dakhli
102. Role play	- Door-jelid/Door ciyaarid
103. Session	- Fadhi/Kulan
104. Shared Vision	- Aragti wadaag
105. Simple Majority	- Aqlabiyyad hal dheeri ah
106. Simulation	- Iska yeelid/U ekeysiin
107. Slums	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
108. Solution	- Furdaamin/Xal
109. Stakeholders	- Daneeyayaal
110. Strategic Plan	- Qorshe istaratijiyyadeed
111. Strategy	- Istaratijiyyad/Tab/xeelad
112. Summary	- Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	- Astaamo/ Calaamado
114. Systematic	- Habaysan/Nidaamsan
115. Technique	- Farsamo/Xeelad
116. Training Design	-Jaanjooyada Tababarka/Naqshadeyn ta Tababarka
117. Training Material	- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
118. Training Need Assessment	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinayn.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm up exercise	- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
<b>Priority two words</b>	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garaawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi
127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeeyn/Taxliil

128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaseed/Bartilmameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluuush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaan/Kala gedisnaan
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. <i>Insight.</i>	- Aragtii Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud
160. Regulation	- Xeer Hoosaad
161. Self Governance	- Isxukumid
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya
166. Technical	- Farsamo/Farsamayn

167. Training needs	- Baahi tababar
<b>Priority three Words</b>	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan
171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction.	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement.	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon
183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer
192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siiye
200. Overseer	- Korjooge



**DHISKA BIRIISHYADA - U DHEXEEYA MUWAADINIINTA IYO DAWLADDAHA HOOSE SI AY SI TAYO BADAN  
U WADA SHAQEELYAAN**

---

201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise
204. Leader	- Hogaamiye
205. Leadership	- Hogaamin

**UN-HABITAT  
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)  
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES  
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya  
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7  
E-mail: [infohabitat@unhabitat.org](mailto:infohabitat@unhabitat.org); Website: <http://www.unhabitat.org>

**EUROPEAN COMMISSION**